**SHARCI LR.008**

**Taariikh: 20 Maarso 2023**

**OGOLAANSHO ANSiXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA HORUMARINTA IYO MAAREYNTA KALLUUMEYSIGA SOOMAALIYEED**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/0254/B11/23**, ku taariikheysan **19/03/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed.**

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliya.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
22 MAR 2023
BY: Liban Xasan Cflaah
SAACAD 08:00 SAXIIX

REPUBLIC OF SOMALIA — OFFICE OF THE PRESIDENT

**Madaxweynaha J. F.S**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**Tix:** XGGSH/02-54 /B11/23:الرقم

**Mogadishu,** Maarso 19, 2023 التاريخ

**Ku:** **Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Ujeeddo:** **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed**

M.ne Madaxweyne;

Waxaan si waafaqasan Qodobka 82aad Faqaradda 3aad ee Dastuurka KMG halkan kuugu soo gudbinaynaa Nuqulka Rasmiga ah ee ***Hindise Sharciyeedka Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed*** oo Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare mid walba gaarkiisa u soo ansixiyey.

***Hindise Sharciyeedka Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed*** wuxuu Golaha Shacabka soo gaaray taariikhdu markay aheyd ***Febraayo 8, 2023*** wuxuuna maray dhammaan habraacyada kala duwan ee akhrinta 1aad, 2aad iyo 3aad. Golaha Shacabka wuxuu si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG hindisahan ansixiyey ***Maarso 11, 2023,*** isla taariikhdan waxaa loo gudbiyey Golaha Aqalka Sare si ay waajibaadkooda Dastuuriga ah uga gutaan. Golaha Aqalka Sare wuxuu dhankiisa ku ansixiyey isla nuqulkii Golaha Shacabka oo aan waxba laga beddelin si waafaqsan Qodobka 82(2)(a) ee Dastuurka KMG, waxayna dib ugu soo celiyeen Golaha Shacabka ***Maarso 18, 2023.***

Haddaba, M.ne Madaxweyne, waxaan si waafaqasan Qodobka 90(f) ee Dstuurka KMG kaaga codsanaynaa in ***Hindise Sharciyeedka Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed*** ku meelmariso Xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah una noqdo sharci, si waafaqsan Qodobbada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

Naga Guddoon Salaan Qiimo Badan.

**M.ne Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA · THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · THE HOUSE OF THE PEOPLE · GOLAHA SHACABKA · OFFICE OF THE SPEAKER · XAFIISKA GUDDOOMIYAHA · مكتب الرئيس

Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka.
Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Og: Hantidhowrka Guud Qaranka.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og: Waaxda Shuruucda Golaha Shacabka.

# BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
## GOLAHA SHACABKA

# SHARCIGA HORUMARINTA IYO MAAREYNTA KALLUUMEYSIGA SOOMAALIYEED

| Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS |
| --- |
| M.ne Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" |

| Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Golaha Shacabka BJFS |
| --- |
| Marwo Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar |

| Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad Golaha Shacabka BJFS |
| --- |
| M.ne Cabdullahi Cumar Abshir "Abshirow" |

Maarso 19, 2023

Jamhuriyada Federaalka Soomaaliya
Aqalka Sare
Xafiiska Guddoomiye ku
Xigeenka Koowaad

جـمـهـوريةالصــومـــال الفيــدرالية
مجلـــس الشـيـوخ
مكتب نائب الرئيس الأول

Federal Republic of Somalia
The Upper House
Office of The First Deputy Speaker

Ref: XGK1/25/B11/2023 :الرقم

Taariikh: 18/3/2023 :التاريخ

✓ Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS =Muqdisho=
Og:-Guddiga Khayraadka Aqlka Sare ee BFS =Muqdisho=
Og:- Wasaaradda Kalluumeysiga X.F.S. =Muqdisho=
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda =Muqdisho=
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**Ujeeddo:**

**Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Horumarinta iyo Maareynta Kaluumaysiga Soomaaliyeed.)**

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran kadib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay **Tix: GAS/B-11/KF2/ 10 /2023** kuna taariikheysan **16 Maarso 2023** kuna ansixiyay Goluhu Sharciga **Horumarinta iyo Maareynta Kaluumaysiga Soomaaliyeed:**

- Waxaa codeeyay **32 Senatar.**
- Waxaa oggolaaday: **31 Senatar.**
- Waxaa diiday: **0 Senatar.**
- Waxaa ka aamusay: **1 Senatar.**

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay.

Iga guddoon qadarin.

**Sen. Cali Shacbaan Ibraahim**
**Ku Xigeenka 1aad Ahna Kusimaha**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 18-3-2023
TIX: 67
SAXIIX:
GELID

# ANSIXINTA SHARCIGA HORUMARINTA IYO MAAREYNTA KALUUMAYSIGA SOOMAALIYEED

| Senatarrada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 32 | 31 | 0 | 1 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka Koowaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cali Shacbaan Ibraihim | Taariikh: 16 Mar, 2023 |

| Ku-xigeenka Xoghayaha Guud ahana ku-simaha Xoghayaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Cabdullaahi Xaaji Geeddi | Taariikh: 16 Mar, 2023 |

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA AQALKA SARE
## BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# QARAAR GOLE
# ANSIXINTA SHARCIGA HORUMARINTA IYO MAAREYNTA KALUUMAYSIGA SOOMAALIYEED

**Muqdisho,**
**16 Maarso, 2023**

**Tix**: GAS/B-11/KF2/10/23
Kalfadhiga 2aad
Kulankiisa 26aad

**Taariikh**: 16 Maarso, 2023

## GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**MARKUU AKHRIYAY:**

Sharciga "**Hormurinta iyo Maareynta Kaluumaysiga Soomaaliyeed** oo ay nuqulkiisii kowaad soo curisay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya soona gaaray Golaha Aqalka Sare 12 **Maarso 2023** si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.82aad** iyo **Qod.83aad** ee Dastuurka KMG ah iyo **Qod.50aad** iyo **Qod.51aad (4)** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.61aad (1) (3)** ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU TIXGELIYAY:**

Soo jeedinta in Sharciga **Hormurinta iyo Maareynta Kaluumaysiga Soomaaliyeed** loo ansixiyo sida uu uga soo gudbay Golaha Shacabka ee B.F.S.

**MARKUU GAROWSADAY:**

In danta guud ee Dalku ku jirto in la meel mariyo Sharciga **Hormurinta iyo Maareynta Kaluumaysiga Soomaaliyeed.**

**ISAGA OO KU KULANSAN:**

Kalfadhiga **2aad**, kulankiisa **26aad**, oo ay soo xaadireen **33 Senatar** (Soddon iyo Seddex Senator).

## WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:

### Qod.1aad

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay Sharciga **Hormurinta iyo Maareynta Kaluumaysiga Soomaaliyeed** isaga oo aan waxba ka beddelin.

### Qod.2aad

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

**Sen. Cali Shacbaan Ibraahim**
**Ku Xigeenka 1aad Ahna Ku simaha**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

**JamhuuriyaddaFederaalkaSoomaaliya**
**AqalkaSare**
Guddiga Kheyraadka Qaranka,
Kaabayaasha Dhaqaalaha &Gaadiidka

جـمـهـورية الصـومـال الفيـدرالية
مجلـس الشـيوخ

لجنة الموارد الوطنية والبنية التحتية
والاقتصاد والنقل

**Federal Republic of Somalia**
**The Upper House**
National Resources Committee,
Infrastructure, Economy & Transport

---

**Ref:GKHQKDH&G/B-11/09/2023** **Taariikh:** 16 Maarso , 2023

Ku: Guddoonka Golaha Aqalka Sare

Ku: Xubnaha Golaha Aqalka Sare

**Ujeeddo: Soo-jeedinta Warbixinta Akhrinta 3aad ee Hindise-sharciyeedka Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliya.**

Mudane Guddoomiye,
Senatorrada sharafta leh,

**Senatorrada Sharafta leh**

Guddiga oo tixgelinaya waqtiga yar ee ka harsan kalfadhiga 2aad ee Golaha wuxuu idinka codsanayaa in aad Hindise-sharciyeedkan ku aqbashaan sida uu guddigu u arkay kuna ansixisaan sida uu yahay.

**Mahadsanidiin**

**Xubnaha Guddiga**

Sen. Zeynab Ismaaciil Maxamed

Sen. Xasan Iidow Muxumad (Kobac)

Sen. Zamzam Daahir Maxamuud

Sen. Axmed Maxamed Saciid (Cirbad)

Sen. Abwaan Axmed Ibraahim Maxamed (Qorane)

Sen. Abdirisaaq Maxamed Cusman

Sen. Zamzam Daahir Maxamuud
Xoghayaha Guddiga

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

**Ref:** XGGSH/0230/B-11/23 :الرقم

**Mogadishu,** March 11, 2023: التاريخ

**Ku:** **Guddoomiyaha Aqalka Sare.**
**Og:** **Madaxweynaha Jamahuuriyadda Federaalka Soomaaliya.**
**Og:** **Ra'iisal Wasaaraha Xukuumada JFS.**
**Og:** **Wasaaradda Kaluumaysiga iyo Dhaqaalaha Buluuga**
**Og:** **Garyqaanka Guud ee Dawladda.**
**Og:** **Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.**
**Og:** **Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka.**

**UJEEDO: ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA "SHARCIGA HORUMARINTA IYO MAAREYNTA KALUUMAYSIGA SOOMAALIYEED"**

Mudane Guddoomiye,
Mudanayaal,

Waxaan halkaan idinkugu soo gudbinayaa, si aad waajibaadkiina uga gudataan Ansixinta Hindise Sharciyeedka **"Sharciga Horumarinta iyo Maareynta Kaluumaysiga Soomaaliyeed".** Goluhu wuxuu ku ansixiyay Hindise Sharciyeedkaan kalfadhigiisa 2aad, kulankiisa 29aad taariikhdu markay ahayd **11/03/2023,** codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

| | |
|---|---|
| **Koramka:** | **143** |
| **Oggol:** | **142** |
| **Diiday:** | **0** |
| **Ka aamustay:** | **1** |

Naga guddooma Salaan diiran iyo qadarin gaar ah

**M.ne Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS**

# ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA "SHARCIGA HORUMARINTA IYO MAAREYNTA KALUUMAYSIGA SOOMAALIYEED"

**Tirada Xubnaha Codeysay: 143**

**Oggol: 142;**

**Diiday: 0;**

**Ka Aamustay: 1;**

| Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| M.ne Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" | Tar: 11/03/2023 |

| Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | |
|---|---|
| M.ne Cabdiraxmaan Maxamed Cabdulle (Jaabiri) | Tar: 11/03/2023 |

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Tixraac:XRW/065/02/2023**

**Taariikh: 06/02/2023**

**Ku: Guddoonka Golaha Shacabka JFS** **=Muqdisho=**

**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** **=Muqdisho=**

**Ujeeddo: Soo Gudbin Hindise-sharciyeedka Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed.**

**Mudane Guddoomiye,**

Iyada oo la tix-raacayo Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.21.02.23 ee 06/02/2023,** kuna saabsan ansixinta "**Hindise-sharciyeedka Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed** " oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Sidaa awgeed, Mudane Guddoomiye, waxa aan halkan idin-kugu soo gudbineynaa **"Hindise-sharciyeedka Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed "** si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah, waxa aan idinka codsaneynaa in aad fududeysaan ansixintiisa maadaama baahi weyn loo qabo.

**Xiriir iyo wada shaqeyn wacan.**

Hala badiyo
06/02/2023

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

Villa Somalia, Telephone +252-61523303 6-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR:........8-2-2023

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Tixraac:XRW/02/02/2023** **Tariikh: 06/02/2023**

**Ku: Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga** **=Muqdisho=**
**Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada** **=Muqdisho=**
**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** **=Muqdisho=**

**Ujeeddo: Go'aan Gole, Ansixinta "Hindise-sharciyeedka Horumarinta Iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed"**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS,**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (c) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.21.02.23 ee 06/02/2023, kuna saabsan ansixinta "**Hindise-sharciyeedka Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda uu dalka u leeyahay Hindise-sharciyeedka Horrumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed.

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.21.002.23** ee **06/02/2023,** kuna saabsan ansixinta **Hindise-sharciyeedka Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Qodobka 2aad**

In **"Hindise-sharciyeedka Horumarinta iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed "** si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka, si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA KALLUUMEYSIGA IYO
DHAQAALAHA BULUUGA AH
XAFIISKA WASIIRKA

جمـهـو رية الصـومـا ل الفيدراليه
وزارة الثروة السمكية
والاقتصاد الازرق
مكتب الوزير

FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA
MINISTRY OF FISHERIES AND BLUE ECONOMY
OFFICE OF THE MINISTER

SUMMAD: WKDHB/XW/008/23

Tr: 24/01/23

**KU: RA'IISUL WASAARAHA XFS**
**MUQDISHO,SOMALIA**

**Ujeeddo: Soo gudbin Hindise Shareiyeed**

Salaan diiran kadib, Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah, waxay, si rasmi ah kuugu soo gubinaynaa hindise shareiyeedka hoos ku xusan si loo ansixiyo.

1. ***Hindise Sharciyeedka Hormarinta Iyo Maareynta Kalluumeysiga Soomaaliyeed.***

Mudane Ra'iisul Wasaare, Hindise Sharciyeedkan oo horey uu u ansixiyey golaha Wasiirada ayuu golaha shacabka dib ugu soo celiyey xukuumadda maadaama mudda xileedkii golaha shacabku uu dhammaaday ka hor inta aan la dhammeystirin.

Mudane Ra'iisul Wasaare, baahi weyn ayaa loo qabaa meel marinta hindise sharciyeedkan si looga howlgalo arrimaha hormarineed iyo siyaasadeed ee hortabinta u leh kaabaha dhaqaale ee kalluumeysiga dalka

Mahadsanid.

XUKUUMADDA FEDERALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA KALLUUMAYSIGA IYO KHEYRAADKA BADDA
MINISTRY OF FISHERIES AND MARINE RESOURCES
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Md. Axmed Xasan Aadan
Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah

**SUMMAD: XGG/028/2023**

**21/01/2023**

**Ku: Wasaaradda Kalluumaysiga & Dhaqaalaha Buluugga ah** — **Muqdisho**
**Ku: Agaasimaha Golaha wasiiradda** — **Muqdisho**
**Og: Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Dastuurka** — **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul wasaaraha JFS** — **Muqdisho**

**Ujeeddo: Talo Sharci**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda asaga oo tixraacaya Warqadda **Tixraac WC&AD/XAG/134/2023,** ee taariikh 11/01//2023, Ujeeddadeeduna ahayd **GUDBIN HINSIDE-SHARCIYEEDKA HORMARINTA KALLUMAYSIGA** kana Soo baxday Wasaaradda Caddaaladda & arrimaha Dastuurka

Hadaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, asaga oo gudanaaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci Lr. 18 ee 29 janaayo 1976, ayaa waxa uu idiin soo gudbinayaa:

**HINSIDE- SHARCIYEEDKA HORMARINTA KALLUMAYSIGA** oo uu Wasaaradda Caddaaladda & arrimaha Dastuurka horay ugu soo gudbiyay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa Shaqo, uguna bixiyo Talo Sharci.

Sidaa darteed, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda markuu darsay, kuna sameeyay hagaajin iyo sixid kuna biiriyay farsamo aan looga maarmin sameynta Hindise-sharciyeedkan, ayaa waxa uu Xafiiska Garyaqaanka Guud ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha wasiirada, maadaama aysan ka hor-imaanayn Dastuurka, Shuruucda Dalka iyo Danta Guud, uuna Xafiiska ka gutay waajibaadkiisa Shaqo ee kaga aadanaa, si waafaqsan Shareiga.

Salaan qadarin leh

**Avv. Maxamed Salaad Xasan**
**Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dowladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA * OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL * مكتب المحامي العام

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA SHACABKA

# SHARCIGA HORUMARINTA IYO MAAREYNTA KALLUUMAYSIGA SOOMAALIYEED

GOLAHA AQALKA SARE
THE UPPER HOUSE
12 MAR 2023
SOO GELID/RECEIVED

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Tusmo


Qodobka 1 Magaca Sharciga....................10
Qodobka 2 Erey Bixin....................10
Qodobka 3....................15
Ku Dhaqmid....................15
Qodobka 4 Aagagga Kalluumeysi....................15

*UJEEDOOYINKA iyo MABAADI'DA SHARCIGA 16*

Qodobka 5 Ujeeddo....................16
Qodobka 6 Mabaadi'ida Guud....................16

*CUTUBKA 2-AAD MASUUULIYADAHA HAY'ADAHA MAAMULKA KALLUUMAYSIGA 17*

Qodobka 7 Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah....................17
Qodobka 8 Howlaha iyo waajibaadka Wasiirka....................18
Qodobka 9 Howlaha iyo waajibaadka Agaasimaha Guud....................18
Qodobka 10 Awoodaha, mas'uuliyadaha iyo waajibaadka Dawlad-goboleedyada....................19
Qodobka 11 Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kallumaysiga....................19
Qodobka 12 Dano is diidan:....................20

*CUTUBKA 3-AAD ILAALINTA, MAAREYNTA, HORUMARINTA IYO ISTICMAALKA WAARA 21*

QEYBTA 1AAD QODOBO GUUD....................21
Qodobka 13 Hannaanka Ilaalinta Iyo Maaraynta....................21
Qodobka 14 Abuurista Urur Iskaashi Maamul....................22
Qodobka 15 Hirgelinta Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta caalamiga ah....................23
Qodobka 16 Horumarinta Kalluumaysatada iyo Kalluun Beerista....................23
Qodobka 17 Qorshayaasha Horumarinta Maamulka Kalluumaysiga....................24
Qodobka 18 Cilmibaaris Ku Saabsan Ilaalinta Iyo Maarayn Wax Ku Oolka Ah....................24
Qodobka 19 Soo Saarista Digniino Ku saabsan Noocyada Kalluun Ee U Baahan ilaalinta ama Khatar ugu Jira Inay Dabar-Go'an....................25
Qodobka 20 Cayimida Goobo Ama Aagaga....................25
Qodobka 21 Bedqabka Deegaan Badeedka....................26
Qodobka 22 Mamnuucista Burburinta Geedka Maanguruufka iyo Dhirta Kale, Si Loo Ilaaliyo Deegaan Xeebeedka Kheyraadka Kalluumaysiga....................26




JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 23 Mamnuucista Burburinta Shacaabiga (Qara-dhagaxeedka) iyo Bocoolaha Badda, Si Loo Ilaaliyo Deegaan Xeebeedka Kheyraadka Kalluumaysiga....27

*TALLAABOOYINKA MAAMUL IYO WAXYAABAHA REEBAN 27*

Qodobka 24 Maareynta Kalluumaysiga Aan Loo Qasdin....27

Qodobka 25 Aaladda Gabbaadka kalluunka....28

Qodobka 26 Mamnuucidda Ka Kalluumaysiga Aagga Booyadda Xog Uruurinta....28

Qodobka 27 Mamnuucidda Jillaabashada iyo Ka Ganacsiga Nibiriga Iyo Ilaalinta Carjowleyda, iwm. 29

Qodobka 28 Mamnuucidda La Xiriirta Qubo Badeedka....29

Qodobka 29 Mamnuucidda Goynta Dhegaha Libaax-Badeedka Iyo Ka Ganacsiga Dhegihii Lagu oo jaray sifo sharcidarro ah....29

Qodobka 30 Mamnuucista Hababka Kalluumaysiga Loo Adeegsado Qaraxyo Iwm, Iyo Ka Ganacsiga Kalluunka Lagu Soo Jilaabto Hababkaas....30

Qodobka 31 Mamnuucidda Hababka Kalluumaysiga Jariifka Ah....30

Qodobka 32 Hababka Kalluumeysi Ee La Mamnuucay – Cabbirka Ugu Yar Agabka Kalluumeysiga 31

Qodobka 33 Hababka Kalluumeysi Ee La Mamnuucay – Shabaagta Waaf-Qabadka Sabbaysa ee Masaafada Dheer 31

Qodobka 34 Mamnuucid Isticmaalka Diyaaradaha Iyo kuwa Aan Duuliyaha Lahayn....31

Qodobka 35 Mamnuucidda Isticmaalka Nalalka Macmalka Ah Si Looga Soo Jiito Kalluunka Masaaafooyin dhaadheer....32

Qodobka 36 Mamnuucidda Faragalin Ama Burburin Hanti Qof Kale oo dhex taal Biyaha Soomaaliya 32

Qodobka 37 Isticmaalka, Markab Ku Haysashada, Soo Dejin, Soo Gadasho, Sii Iibin Qalab La Mamnuucay 32

Qodobka 38 Mamnuucidda Bad uga Tagista Ama ku Tuuridda Qalab, Kalluun ama Wax Soo Saar Kalluun 32

Qodobka 39 Mamnuucidda Wax ka Badelka Cadeemaha Kalluunka Iyo Wax Soo Saar Kalluun Ee La Soo Baaray 33

Qodobka 40 Mamnuucid Haysasho, Ka Ganacsi, Dhoofin Kalluun Ama Wax Soo Saar Kalluun Ee Lagu Helay Ama Lagu Qabtay Si Ka Hor Imanaysa Sharcigan Ama Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga Ah. 33

Qodobka 41 Mamnuucid Ka Ganacsi Kalluun iyo Wax Soo Saar Kalluu oo ka Hor Imaaneya Sharci Dawlad Kale 33

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

Qodobka 42 Mamnuucid Maraakiibta Ku Jirta Liiska Maraakiibta Kalluumeysiga Sharci Darrada Ah (IUU), oo Ay Gacanta Ku Hayso Hay'adda Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga....................................34
Qodobka 43 Mamnuucidda Maraakiib Aan Dalna Ka Diiwaan Gashaneyn....................................34

*CUTUBKA 4-AAD SHURUUDAHA GUUD EE KALLUUMEYSI, KALLUUN BEERIS IYO HAWLAHA KALE 35*

Qodobka 44 Sharci U Hoggaansamidda Dadka Haysta Ruqsad, Ogolaansho Ama Fasax Kale ........35
Qodobka 45 Shuruudaha warbixinada ........................................................................35
Qodobka 46 Masuuliyadaha Dawlad Goboleedyada Ka Saaran Maaraynta Kalluun Beerista ...........36
Qodobka 47 Bandhigid, wareejin, dhoofin, soo dejin iyo sii deyn kalluun nool...............................36
Qodobka 48 Awood Baaritaan Iyo Qabasho Kalluun Jirran Ama Qaba Cudur Faafa, Kaas Oo Loogu Talagalay Soo-Dejin Ama Dhoofin.........................................................................37
Qodobka 49 Keydinta Agabka........................................................................37
Qodobka 50 Shuruudaha Looga Baahan Yahay Muwaadiniin Soomaliyeed Iyo Maraakiibtooda Ee Ku Sugan Meelaha Ka Baxsan Xeer-Xeyndaabka Qaranka..........................................37
Qodobka 51 Shuruudaha Xaaladaha Shaqada Ee Shaqalaha saaran maraakiibta qaarkood ..............38
Qodobka 52 Mamnuucidda Shakhsiyaad Ka Tirsan Ama Xiriir La Leh Koox Dambiilayaal Caalami Ah Oo Ku Howlan Jabinta Xeyndaabka Sharcigaan ..........................................38
Qodobka 53 Badeecad Ku Kala Wareejin Maraakiib Dekadaha Soomaaliya, Biyaha Soomaaliya Iyo Meelaha Ka Baxsan Biyaha Soomaaliya Ka Taliso..........................................38

*CUTUBKA 5-AAD SHURUUDAHA OGGOLAANSHAHA KALLUUMEYSIGA 39*

Qodobka 54 Shuruudaha Laga Doonayo Dhammaan Maraakiibta Shisheeye Ee Kalluumeysiga Si Ay U Soo Galaan Una Joogaan Biyaha Soomaaliya..........................................39
Qodobka 55 Oggolaansho Kalluumeysi..........................................39
Qodobka 56 Shuruudaha Oggolaanshaha Kalluumaysi..........................................40
Qodobka 57 Shuruudaha Wada Lahaansho Iyo Heshiisyo Kiro ..........................................41
Qodobka 58 Kireynta Maraakiib Si Waafaqsan Hannaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamiga Ah..42
Qodobka 59 Dib-U-Eegis Ogolaansho Kalluumeysi..........................................44
Qodobka 60 Heshiiska Maareynta kalluumeysiga..........................................44
Qodobka 61 Wakiilada ..........................................44
Qodobka 62 Mudnaanta Wax Soo Saarka Soomaaliya ..........................................46
Qodobka 63 Damaanad Qaadis..........................................47

*CUTUBKA 6-AAD Macluumaad, Xog Iyo Tirakoob 47*

Qodobka 64 Aasaasidda Nidaam Xog-Uruurin ..........................................47
Qodobka 65 Macluumaad Loo Baahan Karo, Lana Baari Karo..........................................48




JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

Qodobka 66 Macluumaad Run ah, Dhammaystiran Oo Sax ah, Ayna Reeban tahay in la Baabi'yo.49
Qodobka 67 Isdhaafsiga Xogaha Laba-Geesood Ahaan, Gobol Ahaan, Caalami Ahaan ..................49
Qodobka 68 Macluumaad Qarsoodi Ah ..................................................................................49
Qodobka 69 Qarinta Macluumaadka La Xiriira Xarunta La Socodkas Kalluumeysiga......................50
Qodobka 70 Lahaanshaha Macluumaadka..................................................................................51
Qodobka 71 Gaarsiinta Dadweynaha Macluumaadka.................................................................51

*CUTUBKA 7-AAD RUQSADO, OGGOLAANSHO, FASAXYO KALE IYO DIIWAANGELIN 51*

*QEYBTA 1^AAD 51*

*SHURUUDAHA XAALADAHA LAGA RABO RUQSADAHA, OGGOLAANSHAHA, FASAXYADA KALE IYO DIIWAANGELINTA LAGU SOO SAARAYO WAAJIBAADKA WASAARADDA51*

Qodobka 72 Ruqsadaha, Oggolaanshaha, Fasaxyada Kale Iyo Diiwaangelinta Loo Baahan Yahay ...51
Qodobka 73 Xaaladaha Iyo Shuruudaha Laga Rabo Ruqsadaha, Oggolaanshaha, Fasaxyada Kale Iyo Diiwaangelinta 52
Qodobka 74 Shuruudaha Rar isku Wareejinta (Transhipment) ......................................................53
Qodobka 75 Shuruudaha Cilmibaarista......................................................................................54
Qodobka 76 Shuruudaha Aaladda Gabbaadka Kalluunka (AGK) ..................................................54
Qodobka 77 Shuruudaha Diiwaangelinta Nidaamka La Socodka Maraakaiibta (NLM) ..................55

*QEYBTA 2^AAD 56*

*HANAANKA BIXINTA RUQSADAHA, OGGOLAANSHAHA, DIIWAANGELINTA IYO FASAXYADA KALE EE KU CAD WAAJIBAADKA WASAARADDA56*

Qodobka 78 Habraacyada, Masuuliyadaha iyo Hannaanka Ruqsad Bixinta......................................56
Qodobka 79 Codsasho Ruqsad, Oggolaansho, Diiwaangelin Iyo Fasax Kale......................................56
Qodobka 80 Heerarka Lagu Ansixinayo Diiwaangelinta Maraakiibta ..............................................57
Qodobka 81 Baaritaano lagu Hubinayo Markabka ka hor Diiwaangelinta Iyo Ruqsad siinta ............58
Qodobka 82 Hababka Bixinta , Cusboonaysiinta Ruqsadaha, Oggolaanshaha, Diiwaangelinno Iyo Fasaxyada Kale 58
Qodobka 83 Sababaha Diidmada Cusboonaysiin La'aanta Ruqsadaha, Oggolanshaha Iyo Diiwaangelinta. 59
Qodobka 84 Racfaan...................................................................................................................60
Qodobka 85 Ujuuro, Kharashaad Iyo Canshuur..........................................................................60
Qodobka 86 Muddada ruqsadaha, oggolaanshaha, diiwaangelinta Iyo fasaxyada kale......................61
Qodobka 87 Hakin, ka noqosho ruqsad,Baabi'in oggolaansho diiwaangelin Iyo fasaxyada ...............61

*CUTUBKA 8-AAD KORMEER, XAKAMEYN IYO IIAALIN 62*





*QEYBTA 1AAD 62*

*MAAMULKA 62*

Qodobka 88 Iskaashiga Mas'uuliyadaha ilaalinta Iyo Xakamaynta ....................62

*QEYBTA 2AAD 62*

*SARAAKIIL KALLUUMAYSI, BAARAYAAL IYO KORMEERAYAAL IDMAN 62*

Qodobka 89 Magacaabista Saraakiisha Kalluumeysi Ee Idman ....................62

Qodobka 90 Magacaabista Baarayaasha ....................63

Qodobka 91 Magacaabista kormeereyaasha Iyo Shaqadooda....................63

Qodobka 92 Isticmaalka Awoodaha Iyo Howlaha Loo Idmay Saraakiisha Kalluumaysiga, Baarayaasha iyo Kormeerayaasha....................63

Qodobka 93....................63

Awoodaha guud ee Saraakiisha Idman Ee Kalluumaysiga ....................63

Qodobka 94 Awoodda Gelista Iyo baarista....................64

Qodobka 95 Awoodda Baaritaanka Ama Codsiga Baaritaan Ka dhan ah Shaqsiyaad ka Howlgala Aag ka Baxsan Xeer-xeyndaabka Qaranka....................65

Qodobka 96 Awoodda Qabasho, Xiritaan, kala Wareegid Macluumaad Iyo Sugidda Cadeymaha ..65

Qodobka 97 Awoodda Lagu Xirayo Dadka, Maraakiibta, Qalabka, Iwm ....................65

Qodobka 98 Awoodda Soo Qabashada....................66

Qodobka 99 Awoodda Bixinta Amarka Dekad Kusoo Xirashada Markabka....................66

Qodobka 100 Awoodda Tilmaan Bixinta....................66

Qodobka 101 Qabasho Maraakiibta, Diyaaradaha iyo Agab kale ....................66

Qodobka 102 Qeybo Ka Saaridda Qalabka Makabka La Qabtey....................67

Qodobka 103 Raacdeyn ama Ku-dabajir (Hot Pursuit) ....................67

Qodobka 104 Mas'uuliyadaha Kormeerayaasha....................68

Qodobka 105 Kharashaadka Kormeeraha ....................68

Qodobka 106 Waajibaadka Ka Saaran Howlgeliyaha iyo Xubnaha Shaqaalaha Gacan-siinta Kormeeraha 69

Qodobka 107 Wargalin Kormeeraha Lagu qoray Markabka....................69

Qodobka 108 Kormeerayaal Iyo Baarayaal Ku Howlgalaya Qorshaha Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga 69

*QEYBTA 3AAD 70*

*ILAALINTA IYO CAQABADAHA DADKA SHAQADA U IDMAN 70*

Qodobka 109 Qeexidda Qofka Shaqaada U Idman ....................70

Qodobka 110 Qaan Ka Dhowrista Dadka Idman....................70



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

Qodobka 111 Ishortaaga Iyo U Hogaansamid La'aanta Sarkaalka Idman....70

*QEYBTA [AAD] 71*

*HABRAACYADA BAARAHA 71*

Qodobka 112 Habraacyada Baarista Ka Hor Ruqsad Siinta Iyo Dejinta....71

Qodobka 113 Habraacyada Kormeerka Badda....72

*QEYBTA 5[AAD] 72*

*HABKA LA SOCOSHADA MARKABKA IYO HABKA AQOONSASHADA TOOSKA AH 72*

Qodobka 114 Habka La Socoshada- Farsamada Laga Rabo....72

Qodobka 115 Habka La Socodka Markabka- Waxa Laga rabo Howlwadeenada....72

Qodobka 116 Habka Aqoonsiga Tooska Ah....73

Qodobka 117 Xarunta La Socodka Kalluumeysiga....73

*QEYBTA 6[AAD] 74*

*HANAANKA DEKADDAHA DALKA 74*

Qodobka 118 Hanaanka Dekadaha Dalka ; Codisga iyo Fulinta....74

Qodobka 119 Dekad U Cayimid....74

Qodobka 120 Ogolaanshaha Ka Horeeya Soo Gelidda Iyo Isticmaalka Dekadda....74

Qodobka 121 Diidmada Gelidda Iyo Adeegsiga Dekadda....75

Qodobka 122 Masiibo Dabiici Ah iyo Dhib Culus....75

Qodobka 123 U Diidid Adeegsiga Dekadda Soo Gelitaanka kadib....76

Qodobka 124 Baaris Ku Sameynta Maraakiibta Dekadda Taagan....76

Qodobka 125 Baarista ka Dib,Diidmada Adeegsiga Dekadda....77

Qodobka 126 Mamnuucidda Adeegsiga ama Gacansiinta Adeegsiga Dekadda Diidmada kadib....77

Qodobka 127 Shuruudaha laga Rabo Maraakiibta Soomaaliyeed....78

*QEYBTA 7[AAD] 78*

*QODOBBO KALA DUWAN 78*

Qodobka 128 U Qaadashada Kalluumaysiga Sharcidarrada Ah Mid Ka Hor Imaanaya Hanaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamiga Ah....78

*CUTUBKA 9-AAD AWOODDA GARSOORKA, HABRAACA IYO MASUULIYADAHA 79*

Qodobka 129 Garsoorka Iyo Heerarkiisa....79

Qodobka 130 Masuuliyadda ka Dhalanaysa Bixin La'aanta Ganaaxyada Lacageed....80

Qodobka 131 Masuuliyadda Ka Dhalanaysa Khassaaro Ama Waxyeello....80

Qodobka 132 Masuuliyadda Lagu Qaadayo Shirkadaha Iyo Howlwadeenada Shirkadaha....80

Qodobka 133 Masuuliyadaha lagu qaadayo Howlwadeenada....81



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
الجمهورية الصومالية الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

Qodobka 134 Masuuliyadaha Maamulaha Kasoo Gaaraya Falalka Wakiilkiisa ....81
Qodobka 135 Racfaanada Laga Qaadanayo Go'aanada Lagu Gaaray Sharcigan ....81

*CUTUBKA 10-AAD SOO KOOBIDDA DACWADAHA MAAMUL EE ISA SAARAN 81*
Qodobka 136 Dacwadaha Maamulka Oo Kooban ....81

*CUTUBKA 11-AAD 82*

*CADDEYN 82*
Qodobka 137 Caddeymaha Aaladda La Socoshada Markabka ....82
Qodobka 138 Caddeynta Laga Helay Dayax-gacmeed ....83
Qodobka 139 UQAADASHO ....83
Qodobka 140 Mas'uuliyad Adag ....84
Qodobka 141 Culeyska Cadeymaha ....84
Qodobka 142 Carqaladeynta Caddeynta ....84

*CUTUBKA 12-AAD DAMBIYO, GANAAXYO IYO CIQAABYO 84*
Qodobka 143 Dambiyo, Ganaaxyo Iyo Ciqaabyo ....84
Qodobka 144 Tilmaamaha Lagu Caddeynayo Ganaaxyada ama Go'aannada ....85
Qodobka 145 Dambiyo Guud ....85
Qodobka 146 La Wareegid ....86
Qodobka 147 Bixin iyo Qaadasho Laaluushka ....86
Qodobka 148 Ka Xayuubinta Faa'idooyinka Lacageed ....86
Qodobka 149 Maxkamaddu Waxay Soo Rogi Kartaa Magdhawyo Iyo Ganaaxyo Dheeraad Ah ....86
Qodobka 150 ....87
Qodobka 151 Xaddiga Ugu Sarreeya Ee Lagu Kordhin Karo Ganaaxa Shirkadaha ....87
Qodobka 152 Dambiyo Soo Laalaabta Iyo Dambiilayaal Soo Noqnoqda ....87
Qodobka 153 Amar Xayiraad ....87
Qodobka 154 Xariga Dadka Aan Dalka U Dhalan ....87

*CUTUBKA 13-AAD QODOBBO GUUD 87*
Qodobka 155 Xiriirka Kala Dhexeeye Shuruucda Kale Ee Soomaaliya ....87
Qodobka 156 Wargalinada ....87
Qodobka 157 Xeer-hoosaadyo ....88
Qodobka 158 Burin Iyo badalid ....89
Qodobka 159 Awoodda Fullinta Sharcigaan ....89
Qodobka 160 Dhaqangal ....89
JADWALKA HEERARKA UGU SARREEYA EE GANAAXYADA. ....89

*Lifaaqa Koowaad89*



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

*DAMBIYADA, GANAAXYADA IYO CIQAABAHA: 89*

*QEYBTA A 89*
TILMAAMAHA LOO RAACAYO GANAAXYADA UGU YAR........................................................93

*QEYBTA B 93*

*QIIMAHA LACAGEED EE HEERARKA GANAAXYADA 93*

*QEYBTA C 93*



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## CUTUBKA 1-AAD

## HORDHAC

Waa Sharci lagu ilaalinayo Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga, kalluun beerista iyo howlaha la xiriira Kalluumeysiga waara ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, xeer-xeyndaabkeeda gaarsiisan yahay, iyo Maamulka howlaha Kalluumeysi ee muwaadiniinta ka baxsan jamhuuriyadda,sidoo kale wuxuu sharcigan waajibaad fulin siinayaa dhammaan heshiis-yada heer gobol iyo kuwa caalamiga ah.

### Qodobka 1
### Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa **Sharciga Horumarinta iyo Maaraynta Kalluumaysiga Soomaaliyeed.**

### Qodobka 2
### Erey Bixin

(1) Sharcigan, Haddii aan si kale loola jeedin ereyadiisu waxa ay lahaan doonaan macnaha soo socda:

"***Sharci***" waxaa loola jeedaa Xeer, ay ku jiraan shuruuc iyo nidaamyo kale iyada oo loo adeegsanayo si sharci ah;

"***Diyaarad***" waxaa loola jeedaa aalad kasta oo awood u leh in ay hawada sare ku duusho, aaladahaas oo ay ku jiraan kuwa duuliyaha leh iyo kuwa aan duuliyaha laheyn;

"***Hannaanka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah***" waxaa loola jeedaa nidaamka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee uu ansixiyay Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga iyada oo la raacayo habraacyadiisa, kaas oo si sharci ah Soomaaliya qeyb uga tahay;

"***Codsade***", marka la eego codsi ruqsad, oggolaansho ama fasax, waa qof kasta oo arji soo qorta isaga oo ku hadlaya magaciisa, magaca ururkiisa ama shirkadiisa'

"***Kalluun-beeris***"waxaa loola jeedaa abuuridda, beerista ama beerashada kalluunka, waxaana ka mid ah beeridda ukumo, ugxan ama abuur, ama keenidda kalluun meel kale laga soo qaaday ama Soomaaliya laga dhoofiyay, ama habab kale oo la mid ah, iyo ururinta iyo hayinta kalluunka nool, waxaana ka mid ah ku-tallaalidda xayawaan badeedka badda dhexdeeda;

"***Kalluumeysatada yaryar***" waxaa loola jeedaa kalluumeysi dhaqameed ay muwaaddiniin Soomaaliyeed ku leeyihiin soohdinta Kalluumeysiga u xiran, ama aag Kalluumeysiga u go'an;

"***Doonyaha Yaryar ee kalluumeysiga***" waxaa loola jeedaa doon kasta oo kalluumeysi, huuri, doon yar ama mid aan mug weyn laheyn, kana yar 12 mitir, taas oo matoor leh ama aan lahayn loona adeegsado farsamada kalluumeysiga;

"***Qalab elektaroonig ah oo isku xiran***" waxaa loola jeedaa qalab ama nidaam kasta oo loo isticmaali karo in lagu helo, lagu raadsado ama si kale loola socdo gabbaad-kalluumeedka (Fish Aggregated Device) – FAD

"***Markab Ruqsad Haysta***", Waa markab kalluumeysi oo ka diiwaan gashan ruqsadna ka haysta Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah iyo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga iyo kuwa caalamiga ah.

"***Sarkaal idman oo kalluumeysi***" waxaa loola jeedaa qof loo xilsaaray howl gaar ah oo kalluumeysi;

"***Nidaamka Aqoonsiga Tooska ah (Automatic Information System -AIS)*** waxaa loola jeedaa Aalad elektaroonik ah oo lagu aqoonsado maraakiibta kalluumeysi ee badda kujirta oo ku xiriirsan dayax gacameedka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

"***Mulkiile***" waxaa loola jeedaa qofka ama shirkadda iska leh markabka ama doonta.

"***Kala duwanaanshaha noolaha***" waxaa loola jeedaa kala duwanaanta ka jirta dhammaan noolayaasha oo ay ka mid yihiin, berri-ku-nool, biyo-ku-nool iyo qaababka kale ee noolaha ku jira badda iyo kuwa berriga ku nooli isugu xiran yihiin;

"***Baaris cilmiyeed***" marka la eego waxqabadyada hoos **imaanaya** sharcigan waxaa loola jeedaa raadin nidaamsan oo loogu talagalay horumarinta ilaha cusub ee isku-darka kiimikada, hiddo-wadayaasha, noolaha yaryar, nafaqeeyayaasha yar yar, iyo badeecooyinka kale ee qiimaha leh ee kalluunku ka mid yahay iyo raadinta ilaha wax soosaar qiime leh ee kalluunka.

"***Gadasho***" ama "**soo gadasho**" waxaa ka mid ah:

(a) beddelasho ama isku day inaad wax ku beddelato;

(b) Soo gadasho ama isku day inaad wax soo gadato;

(c) ganacsi ama isku day inaad ganacsato;

(d) Guddoomid si loo diro, loo gudbiyo ama loo iib-geeyo;

"***Kalluun Aan Loo Qasdin***" waxaa loola jeedaa qaar ka mid ah kalluun ama xayawaan badeed kale oo si lama filaan ah dabinka u soo gala inta hawsha kalluumaysigu ay socoto, waxaana ka mid noqon kara:

a) Xayawaan badeed ka duwan noocyada la doonayey;

b) Xayawaan badeedka aan la dooneyn waxaa lagu sheegay Hannanka Maareynta iyo Ilaalinta caalamiga ah, ruqsadda la adeegsan karo ama qorshaha maaraynta kalluumaysiga;

c) xayawaan badeedka aan qaan-gaarin ama dheddig oo jillaabashada laga mamnuucay;

d) kalluun si lama filaan ah ugu waxyeeloobay qalabka kalluumeysiga inta hawshu socotay oo aan la qaadan karin;

e) kalluun loo qasday balse warshadaha kalluunku ay diideen sababo la xiriira;

i. Xajmiga kalluunka oo aad uga yar daasadahooda ama cabbirka laga rabo suuqyada kale ee dibedda;

ii. waxyeello gaartay inta lagu jiro raridda iyo dejinta, taas oo keeni karta in laga diido suuqyada maxaliga ah arrimo la xiriira tayadiisa

"***Cad/Hilib***" marka laga hadlayo libaaax-badeedyada waxaa loola jeedaa dhammaan qaybaha libaax-badeedka marka laga reebo dhagaha, madaxa iyo uur-ku-jirta;

"***Agaasime Guud***" waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah ee JFS;

"***Kireyn Markab***" waxaa loola jeedaa markab sifo sharci ah ku diiwaangashan oo mulkiilihii/shirkadda lahaa markabka uu ku wareejiyey kireyste muddo cayiman.

"***Maxkamad***" waxaa loola jeedaa maxkamad awood sharciyeed ku leh Soomaaliya;

"***Aalad xog ururin***" waxaa loola jeedaa Aalad kasta oo biyaha dul sabbaysa, ama meel ha ku xirnaatee, taas oo ay hawlgeliyaan hay'ado dawladeed ama hay'ado la aqoonsan yahay cilmibaaris oo ujeeddadeedu tahay inay qaab elektiroonig ah xog u ururiyaan una cabbiraan xogta deegaanka, taas oo aan loogu talo gelin hawlo kalluumeysi;

"***Xoorid***" waxaa loola jeedaa qayb ka mid ah wixii la soo jilaabtay oo xumaada baddana lagu tuuro;

"***Qalab***" marka laga hadlayo Aalad kasta oo ku xiran markabka;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

"***Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah*** "waxaa loola jeedaa aagga badda ee 24nm ku xigga marka xariiqda asaasiga lagasoo tiriyo xeebta dalka oo gaareysa 200 mayl-badeed.

"**Kalluun**" waxaa loola jeedaa noole kasta oo badda dhexdeeda ama biyo ku nool ah.

"**Aalad Gabbaad kalluunka**" ama waxaa loola jeedaa Aalad ka kooban **walxo** badan oo la isku xirxirey loona ekeesiiyey qar-badeed si kalluunka ugu soo ururo **ugana** dhigto gabbaad.

" ***Wax soo saarka kalluunka***" waxaa loola jeedaa wax kasta oo ka yimaada kalluun, qayb ahaan ama gebi ahaanba la habeeyay/diyaariyay;

"***Aagga dhaqaalaha Gaarka ah ee Kalluumeysiga***" waa aag dhaqaaleedka Gaarka ah ee Soomaaliya oo ku teedsan aagga u xadaysan Kalluumeysiga wuxuuna ku fidsan yahay badda ilaa 200 mayl-badeed.

"***Aagga Dhawran ee Kalluumeysiga***" waa biyaha aag dhaqaaleedka gaarka ah ee Soomaaliya ee ku xiga biyo xeebeedka ama aagga xaddidan, isla markaana ku fidsan ilaa 24 mayl-badeed.

"***Aagga Xaddidan ee Kalluumeysiga***" waa biyo xeebeedka Soomaaliya oo ka bilaabanaya xariiqda asaasiga ah ee toosan gaarsiisanna 12 meel-badeed.

"***Kalluumeysi***" waxaa loola jeedaa ka kalluumaysiga:

a) hal ama in ka badan oo badeeco kalluun ah, ama qaybahiisa, taas oo ujeeddadu tahay maareyn iyo ilaalin, iyada oo la tixgelinayo juqraafi ahaan, cilmi ahaan, farsamo ahaan, dhaqan ahaan, madadaalo ahaan, dhaqaale ahaan iyo astaamo kale oo la xiriira ama
b) kalluumeysi kasta oo badeeco ah.

"***Kheyraadka kalluumeysiga***" waxaa loola jeedaa kalluun, kalluumeysi, badeecooyin kalluun, noocyo kalluun, degaan kalluun iyo kalluunka qeybihiisa kala duwan;

"***Badeeco Kalluun***" waxaa loola jeedaa tiro kalluun ah, oo isugu jira sinjiyo kala duwan oo negi ama dool ah.

"***Markab kalluumeysi oo Weyn***" waxaa loola jeedaa markab kalluumeysi oo sagxad leh oo gudaha ku wata matoor ama matooro markii la isu geeyo aan ka xoog yarayn 100 faras(HP-Horse Power), markabkaas oo dhererkiisu gaarayo ugu yaraan 24 mitir ama ka weyn.

"***Calan Dawladeed***" waxaa loola jeedaa dowladda uu markabku sharciyadda ka haysto,

"***Markab kalluumeysi shisheeye***" waxaa loola jeedaa markab kasta oo aan Soomaaliya laga laheyn;

"***Agab Kalluumeysi***" marka laga hadlayo kalluumeysiga waxaa loola jeedaa qalab kasta, ama iskugeynta aalado badan oo loo adeegsan karo kalluumeysiga; kuwaas oo ay kamid yihiin; shabaagta, xargaha, dabinnada, maqaalinta, gabbaad kalluumeysi, wiish-gacmeedka, doonta, qalab-farsamooo markabka ama diyaradda la saaro, diyaarad duuliye leh ama aan laheyn ama gawaari loo adeegsado hawlaha kalluumeysiga;

"***Hidde-side***"( **Genetic resource)**waxaa ka mid ah unugyada walxaha noolaha ah ee kujiraan astaamo waxtar u leh isirka noolaha.

"**Dowlad**" waxaa loola jeedaa Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

"***Kalluumeysi sharci darro ah***" Waxaa loola jeedaa kalluumeysi aan sifo sharci ah loo marin jilaabashadiisa.

"***Markab kalluumeysi oo Weyn***" waxaa loola jeedaa markab kalluumeysi oo sagxad leh oo gudaha ku wata matoor ama matooro markii la isu geeyo aan ka xoog yarayn 100 faras(HP), markabkaas oo dhererkiisu gaarayo ugu yaraan 24 mitir ama weyn.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

"***Baare***" waxaa loola jeedaa qof kasta oo lagu magacaabay ogaansho tirada iyo noocyada kalluunka ee markabu jilaabtey.

"***Booyad qalabaysan***" waxaa loola jeedaa booyad heehaabaysa oo uu ku xiran yahay gabbaad kalluumeed, taas oo leh lambar tixraac oo lagu aqoon

sado una qalabeysan hab daba-gal oo dayax gacmeedka ay kula haysato si loogala socdo meesheeda;

"***Heshiis caalami ah***" waxaa loola jeedaa is **afgarad** ama **heshiis** ka dhaxeeya dowlado iyo ururo caalami ah qaybna ka tahay Jamhuuriyadda Fedaraalka Soomaaliya.

"***Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta caalamiga ah***" waxaa loola jeedaa talaabo kasta oo sharci ahaan waajib ah in la ilaaliyo ama la maareeyo mid ama in ka badan sinjiyada noole biyoodka ah ee ay ansixiyeen ayna fuliyeen ururo goboleed iyo kuwa caalami ah oo maareeya noole biyoodka.

"***Markab shirko ah***" waxaa loola jeedaa markab ay wadaagaan labo qof iyo in ka badan.

"***Dejiin***" waxaa loola jeedaa in deked ama marso laga soo dejiyo kalluun ama wax soosaar kalluun.

" ***Wasiir***" waxaa loola jeedaa wasiirka Wasaaradda kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah ee Dawladda Federaalka ee Soomaaliya;

" ***Wasaarad***" waxaa loola jeedaa Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah ee Dawladda Federaalka Soomaaliya;

" ***Qalabka xog-gudbinta ee guurguura***" waxaa loola jeeda; aalad lagu rakibo markab dushiis oo loogu talagalay in si toos loogula socdo, ha ahaato aaladdaasi mid madax bannaan ama mid ku xiran qalab kale, keenaysana macluumaad ama xog ku saabsan aagga uu joogo markabku, kalluunka uu qabtay iyo hawlaha kale ee loo baahdo, sahlayana markasta in la ogaado aqoonsiga markabka;

"***Qaran***", marka laga hadlayo xeer-xeendaabka biyaha Soomaaliya waxaa ka mid ah muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo maraakiibta ka diiwaangashan Soomaaliya oo qaatay calanka Soomaaliya;

"***Korjooge***" waxaa loola jeedaa qof kasta oo loo xilsaaray in uu korjoogteeyo howlaha markabka kalluumeysi.

"***Hawlwadeen***" waxaa loola jeedaa qof kasta oo mas'uul ka ah howlo, haga ama maamula markab, wuxuuna noqon karaa milkiilaha, kiraystaha, kabtanka.

"**Dambiilayaal abaabulan**" waxaa loola jeedaa sida ku qeexan Heshiiskii Qaramada Midoobay ee ka dhanka ahaa dembiyada abaabulan ee caalamiga ah ee soo baxay sanadkii 2003dii

"**Qof**" waxaa loola jeedaa shakhsi kasta oo caadi ah ama sharci ah, metela dowlad ama hay'ad gaar ah, sida; shirkad, iskaashato, urur ama ganacsi kale, koox ka kooban shaqsiyaad, bulsho, garsoor ama hay'ad dawladeed;

"**Jideeyey**" waxaa loola jeedaa sida sharcigu banneeyey;

"**Habeyn**" Marka kalluun laga hadlayo waxaa loola jeeda googoynta, kala-saaridda, nadiifinta, kala-soocidda, xirxiridda, baakadeynta, wasladeynta, qaboojinta, cusbaynta, qasacadaynta ama ilaalinta kalluunka;

"**Wargalin Dadweyne**" waxaa loola jeedaa gaarsiinta dadweynaha wargalinada ka soo baxa Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah.

"**Hawlaha la xiriira**", marka laga hadlayo kalluumaysiga, ama "hawlaha la xiriira kalluumaysiga" waxaa ka mid ah hawlgal kasta oo lagu taageerayo, ama loogu diyaar garoobayo, kalluumeysiga, oo ay ku jiraan soo dejinta,



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

baakadeynt, hagaajinta, markab saaridda ama daabulidda kalluunka aan hore dekedda looga soo dejin, iyo sidoo kale diyaarinta shaqaale, shidaal, qalab iyo agab kale oo badda ah;

"**Urur Goboleedka Maaraynta kalluumeysiga**" waxaa loola jeedaa Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee dowladaha gobolka, kaas oo awood u leh dejinta Hannaanka Maareeynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah.

"**Kalluunka aan guur guurin**" waxaa loola jeedaa sinjiyada/noocyada kalluunka ee negi ee ku nool badda, kuwaas oo gaaray heer la daban karo, ha ahaadeen kuwo aan ka dhaqaaqin korka ama hoosta gunta badda ama aan awoodin in ay guuraan marka laga reebo in ay joogto u tagaan badda gunteeda ama carrada hoose;

"**Iibin**" waxaa loola jeedaa kala gadasho sharci oo dhexmarta laba qofood iyo kabadan,

"**Markab yar oo Kalluumeysi**" waxaa loola jeedaaa markab yar oo kalluumeysi oo guud ahaan dhererkiisu u dhexeeyo 12 ilaa 24 mitir.

"**Markab Soomaaliyeed**" waxaa loola jeedaa markab ay leeyihiin shakhsiyaad Soomaaliyeed iyo markab ay leedahay dowladda Soomaaliya oo heysta diiwaangelin sharci ah iyada oo la raacayo sharciyada khuseeya Soomaaliya iyo mid kasta oo aan diiwaan gelin laga dhaafey.

"**Biyaha Soomaaliya**" waxaa loola jeedaa biyo kasta oo hoos yimaada xeer-xayndaabka qaranka Soomaaliyeed ayna xaq u leedahay si madax-bannaan u maamusho.

" **Soomaaliya** " waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

"**Isticmaalka waara**" waxaa loola jeedaa u adeegsiga qaybaha noolaha kala duwan qaab iyo heer aan hoos u dhac horseedeyn muddada fog kala duwanaanshaha noolaha, si loo daboolo baahiyaha iyo himilooyinka jiilasha hadda jira iyo kuwa mustaqbalkaba;

"**Noocyada la beegsanayo**" waxaa loola jeedaa howlaha jilaabashada ee lagu bartilmaamaysanayo noocyo gaar ah oo kamid ah noole biyoodka.

"**Sahmin kalluun**" waxaa loola jeedaa jilaabasho cilmibaaris oo lagu ogaanayo noocyada kalluunka ee jiray ama kuwa cusub.

"**Dembiyada caalamiga ah**" waxaa loola jeedaa dembiyada laga galo in kabadan hal dal iyo kuwa ka dhaca dal laakiin laga qorsheeyo dal kale, dembiyada ay geystaan kooxo ka shaqeeya in ka badan hal dal iyo dembiyada laga galo hal dal oo saameyn ku yeesha dalal kale.

"**Rar-wareejin**" waxaa loola jeedaa markab ka wareejinta rar kalluun ama waxsoosaar kalluun oo lagu wareejiyo markab kale, ama lagu rogo xarun dhulka ku taal.

"**Isticmaalka dekedda**" waxaa loola jeedaa in wax laga dejiyo, wax lagu kala wareejiyo,lagu baakadeeyo, ama lagu qabto hawlaha lagu hagaajinayo kalluunka u socda meela kale, iyo hawlo kale oo ay ka mid yihiin, shidaal-qaadashada markabka, dib-u-hagaajinta, dayactirka iyo markab xiridda.

"**Markab**" waxaa loola jeedaa gaadiid badeed kasta oo loo isticmaalo howlaha kalluumeysiga sida; markab, doon, huuri.

"**Nidaamka La socodka maraakiibta**" waxaa loola jeedaa hab ama nidaam ku xiran dayax-gacmeed si loola socdo dhaqdhaqaaqa maraakiibta kalluumeysiga iyo howlaha ay hayaan.

"**Markab aan dalna ka diiwaan gashayneyn**" waxaa loola jeedaa markab loo adeegsado kalluumeysi ama howlo la xiriira, aanse sidan calan dowlad u gaar ah ama qaata laba calan iyo wax ka badan oo uu hadba kii anfacaya isticmaalo.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

(2) Marka laga soo tago farqada (1aad) ee qodobkan, fasiraadda laxiriirta erey, Hannaanka maaraynta iyo ilaalinta caalamiga ah iyo eray lagu qeexay xeer ama qaamuuska qeexitaannada la adeegsan karo oo ah midka uu qaatay Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga; qeexitaanka noocaan ah waa la tixgelinayaa iyada oo la adeegsanayo fasiraadda lagu bixiyay sharcigan, gaar ahaan marka kan hore uu ka adkaan karo ama si fiican looga fahmi og yahay macnaha guud.

## Qodobka 3

### Ku Dhaqmid

1) Ilaa Sharci kale oo ka soo horjeeda laga helo; Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa;

a) Dhammaan dalka iyo dadka Soomaaliyeed meelaha ay ka jirto madaxbannaanida, xukun ama xuquuq madax-bannaan, iyada oo la tixgelinayo aagagga kalluumeysiga iyo maamulka dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka sida ku xusan qodobka 4-aad iyo kan 10aad;

b) Dhammaan kalluunka, kalluumeysiga iyo hawlaha la xiriira ama wax kasta oo hoos imaanaya sharcigan, oo ay ku jiraan noocyada kalluunka negi ee ku nool biyaha qolfoof qaaradeedka Soomaaliya.

c) Dhammaan dadka, maraakiibta, gawaarida, diyaaradaha, hawlaha lagu hagaajinayo kalluunka, hawlaha dhoofinta ama soo dejinta ama hawl kasta oo ku saabsan ama hoos imanaysa sharcigan ama xeerka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah;

d) Qof kasta iyo maraakiibta ku jirta ama ka baxsan meelaha ay ka jirto awoodda xeer xeyndaab badeedka qaranka:

(i) Iyada oo la raacayo heshiiska biyaha hoos yimaada Soomaaliya loona maamulo si waafaqsan sharciga caalamiga ah; ama

(ii) iyada oo la raacayo Sharcigan ama Hanaanka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah, ama uu oggol yahay sharciga caalamiga ah ama heshiis kasta oo caalami ah; iyo

e) Dhammaan maraakiibta Soomaaliyeed iyo dadka saaran oo dhan, ee lashaqeeya ama la macaamilaya ama xiriirka la leh, inta lagu guda jiro ama laga baxsan yahay meelaha ay ka jirto awoodda xeer xeyndaabka biyaha qaranka illaa iyo inta aanay khilaafsaneyn awoodda sharci ahaaneed ee dal kale.

2) Markabka waxaa loo arkayaa in aanu ahayn markab Soomaaliyeed haddii laga diiwaangaliyo dal aan Soomaaliya aheyn halkii laga diiwaangelin lahaa ama lagu dari lahaa liiska diiwaan galinta Maraakiibta Soomaaliya, marka laga reebo in uu yahay markab kireysan oo ku shaqeynaya nidaam diiwaangelineed oo barbar socoda si waafaqsan heshiiska kireynta iyo shuruueda ku habboon, iyo xeerar waddamada ku jira heshiisyada caalamiga ah.

## Qodobka 4

### Aagagga Kalluumeysi

1. Aagagga dhul-badeedka ayaa la jaangooyey iyadoo laga cabirey dhanka xeebta ilaa biyaha sare, kuwaas oo kala ah;

a) Aagga Xaddidan ee Kalluumeysiga wuxuu gaarayaa 12 mayl badeed, waxana uu u xaddidan yahay kalluumeysiga yaryar iyo doomaha dhererkoodu ka weynayn 12 mitir ee ay leeyihiin muwaadiniinta Soomaaliyeed, Maraakiibta waaweyn iyo kuwa yaryar waa ka mamnuuc inay ka kalluumeystaan Aaggan. Maamulka ay khusayso ee xubinta ka ah Dowladda Federaalka ayaa ka mas'uul ah maamulka iyo diiwaan gelinta kalluumeysata yaryar ee Aaggan;

b) Aagga dhawran ee kalluumeysi waa kan xiga aagga xadidan wuxuuna gaarayaa 24 mayl badeed, Aagan waxa loo dhawray howlaha la xiriira kalluumeysiga iyo Doonyaha kalluumeysi ee aan ka wayneyn 24 mitir ayna leeyihiin muwaadiniin Soomaaliyeed, waxaana diinwaangalinaya Dowladaha xubnaha ka ah DfS, iyagoo latashanaya Wasaaradda Kalluumeysiga & Dhaqaalaha Buluugga ah DFS.

c) Aag dhaqaaleedka Gaarka ah ee Kalluumeysiga, kaas oo ah Aagga u dhexeeya 24 illaa 200 mayl-badeed, si waafaqsan Sharcigan aaggan waxaa maamulaya Wasaaradda Kalluumeysiga & dhaqaalaha buluugga ah ee XFS.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2. Wasiirka ayaa leh masuuliyadda iyo awoodda Aaga Dhowran iyo Aagga dhaqaalaha gaarka ah ee kalluumeysi isagoo la shaqaynaya dawladaha xubnaha ka dawlada federaalka ah si waafaqsan sharcigan iyo meelmarintiisa.

3. Kalluumeysiga iyo howlaha la xiriiraba ee aag kasta, waa in loo maamulaa sida sharcigan uu farayo, kaas oo siinaya masuuliyada koowaad Wasaaradda si waafaqsan dastuurka, waajibaad kasta ee heer gobol ama mid caalami ah iyo heshiis kasta oo ay wada galaan DFS iyo **dowladaha** xubnaha ka ah DFS iyo daneeyayaasha.

## UJEEDOOYINKA iyo MABAADI'DA SHARCIGA

### Qodobka 5

### Ujeeddo

Ujeeddada sharcigan waa in la xaqiijiyo maaraynta, horumarinta kheyraadka kalluumeysiga, kalluun beerista iyo wixii la jinsi ah, iyada oo sidoo kalena in la ilaalinayo jiritaanka Dhaqaalaha Buluugga ah ee Soomaaliya, noola biyoodka, deegaanka iyo nidaamyada wada noolaanshaha si ay uga faa'iideystaan dadka Soomaaliyeed.

### Qodobka 6

### Mabaadi'ida Guud

Dhammaan howlaha, waajibaadyada iyo mas'uuliyadaha ku xusan Xeerkan waxaa loo fulin doonaa hab waafaqsan mabaadi'da soo socota:

a) Dhammaan kalluumeysiga iyo beerista kalluunka, iyo sidoo kale deegaanka ay ku nool yihiin, waa hanti dabiici ah oo dhaxal u ah dhammaan ummadda Soomaliyeed oo ay waajib ku tahay ka qeybgalka ilaalinta jiritaankooda, maaraynta iyo horumarinta kheyraadkan dabiiciga ah iyo deegaankooda; si waafaqsan sharcigaan, siyaasadda qaranka, qorshayaasha iyo ujeedooyinka horumarka;

b) Hanaanka ilaalinta iyo maaraynta waa in uu ku saleysnaadaan aqoon iyo farsamo tan ugu wanaagsan ee la heli karo si loo joogteeyo ama loo ilaaliyo keydka nooleyaasha, si loo awoodo in la gaaro wax soo saar heer sare ah oo waara, kaas oo u qalma arrimaha dhaqaalaha iyo deegaanka;

c) Hanaanka ilaalinta iyo maareynta wuxuu dabaqayaa waajibaadka Soomaaliya ee heshiisyada caalamiga ah sida ugu habboon iyo heshiisyada Dowliga ah.

d) Waa in si taxaddar leh loo dabbakho habka maareynta iyo horumarinta kalluumeysiga;

e) Waa in habka wada noolaanshaha loo adeegsado maaraynta iyo horumarinta kalluumeysiga iyo beerista kalluunka si kor loogu qaado bedqabka guud ee deegaan biyoodka, waana in lagu talagalaa isbeddelka cimilada iyo baaqyada caalamiga ah ee la xiriira horumarka dunidda;

f) Hawlaha iyo Xeerarka ku xusan sharcigan waa in ay ilaaliyaan isla markaana daryeelaan kala duwanaanshaha noolaha, kuwaas oo ay ka mid yihiin noocyada kalluun ee khatarta ku sugan iyo deegaannada xasaasiga ah;

g) Xog sax ah oo dhameystiran iyo macluumaadka ku saabsan hawlaha iyo khayraadka ku xusan Sharcigan waa in la raadiyo, la uruuriyo , iyo waqtiga ugu habboona loola wadaago dhinacyada ay khuseeyso.

h) Hanaanka Ilaalinta iyo maaraynta waa in si wax ku ool ah loo meelmariyaa loona dhaqangeliyaa iyada oo lala soconayo, lana kormeerayo lana dabagalayo;

i) Danaha kalluumeysatada yaryar waa in ahmiyad la siiyaa, iyadoo lagala shaqaynayo lagana qaybgalinayo maaraynta kalluumaysigooda;

j) waa in sare loo qaadaa fahamka ka qaybgalinta daneeyayaasha ilaalinta, maareynta, horumarinta waarta ee kheyraadka kalluumeysiga.

k) Sida ku xusan sharcigan, wadashaqeyn wax ku ool ah ayaa lala yeelan doonaa dawladaha iyo urur goboleedyada.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## CUTUBKA 2-AAD
## MASUUULIYADAHA HAY'ADAHA MAAMULKA KALLUUMAYSIGA
### Qodobka 7
### Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah

1) Wasaaradda ayaa yeelanaysa mas'uuliyadda koowaad ee dhaqangelinta iyo meelmarinta qodobbada ku xusan sharcigan;

2) Hawlaha iyo waajibaadka Wasaaraddu waa:

a) In ay maamusho howlaha laxiriira kalluumeysiga iyo beerista kalluunka iyo arrimaha kale iyadoo la raacayo sharigan, lana dhiirri gelinayo ilaalinta, maareynta, horumarinta iyo isticmaalka waara ee kheyraadka kalluumeysiga, lana tixgelinayo xuquuqda iyo waajibaadka dalka si waafaqsan sharciyada iyo heshiisyada caalamiga ah;

b) In ay daryeesho oo maamusho kalluumaysiga iyo bey'ada kalluunka, sida tayada biyaha iyo kala duwanaanshaha noolaha, ee deegaanka ku wada nool, iyada oo lala tashanayo hay'adaha ay khuseyso, Dowladda Soomaaliya iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka;

c) In ay **Dawladaha xubnaha ka ah DFS** sida ugu habboon ugala-tashato dejinta iyo fulinta qorshayaasha, siyaasadaha, xeeladaha iyo farsamooyinka la xiriira horumarinta iyo maaraynta kalluumeysiga iyo wixii kale ee sharcigani dhigayo, kor u qaadista iswaafajinta ilaa xad intii suurto galka ah guud ahaan Dalka.

d) In ay ku metesho Dowladda wixii heshiis ama qorshayaal caalami ah ee la xiriira Kalluumeysiga iyo hawlahiisa, beerista kalluunka iyo wixii kale ee ku qoran sharcigan, taas oo Soomaaliya ay qeyb ka tahay ama ka mid noqon doonto;

e) In ay heshiis la gasho isla markaana isku dubariddo howlaha kala dhaxeeya **dowladaha xubnaha ka ah DFS**, hay'adaha kale ee dowladda, urur goboleedyada iyo hay'adaha kale ee shaqada kala dhaxayso.

f) In ay go'aan ka gaarto bixinta ruqsadaha, ogolaanshaha ama fasaxyada kalluumeysiga islamarkaana dhaqan-galiso habraacyada ruqsad bixinta si waafaqsan sharcigan.

g) In ay ururiso ayna falanqeyso xogta iyo macluumaadka la xiriira hawl kasta oo ku xusan Sharcigan, si habboona u ilaaliso macluumaadka diiwaanka ku jira, xaqiijisana in macluumaadka la baahiyey si fududna loo heli karo;

h) In ay kormeer, xakameyn, dabagal iyo dhaqan gelinba ku samayso sharcigan, iyada oo kaashanaysa hay'adaha dawladda, **Dowladaha xubnaha ka ah DFS**, iyo ururada kale ee ay khusayso,

i) In ay dhiirrigeliso isla-maaraynta dhammaan kaydka iyo kheyraadka ku jira badda, iyadoo la horumarinayo iskaashatooyinka,ururada kalluumeysiga iyo guddiyada maaraynta **dowladaha xubnaha ka ah DFS**.

j) In ay dhiirrigeliso maalgashiga si loo horumariyo loogana faa'iideeysto kalluumeysiga;

k) In ay dhiirrigeliso hababka kalluumeysiga casriga ah, loogana faa'iideeyo bulshooyinka xeebaha ku nool;

l) In la raaco sharci kasta ama xeer kasta oo laga soo saaray Soomaaliya, kaas oo xakameynaya oo ilaalinaya bedqabka kalluunka iyo wax soosaarka kalluunka ilaa iyo heerarka kala duwan ee nidaamyada kalluunku marayo;

m) In ay diyaariso Qorshe Sanadeed Shaqo iyo Warbixin Sanadeedka Wasaaradda si uu Wasiirku u ansixiyo dadweynahana u gaarsiiyo;

n) In ay hagto hawlaha la xiriira soo dejinta, dhoofinta iyo qiimeynta kalluunka hadba sida ay lagama maarmaan u tahay taageeridda maaraynta kalluumeysiga;

o) In ay oggolaato, qorshayso ama fududeyso cilmibaaris ku saabsan arrin kasta oo sharcigan waafaqsan, taas oo ay ku jirto iskaashi cilmibaariseed oo heer gobol ah;

p) In ay Dhiirigeliso tababarro ku saabsan kalluumeysiga iyo beerista kalluunka;

q) In ay hoggaamiso kana qaybqaadato qorshaynta iyo fulinta mashaariicda, barnaamijyada ama howlaha kale ee laxiriira qodobbada ku xusan sharcigan;

r) In ay dejiso habraac kasta oo lagama maarmaan u ah dhaqangelinta Sharcigan; iyo

s) In ay fuliso hawlo iyo waajibaadyo kale, wixii hadba loo baahdo si loo fuliyo ujeeddooyinka, mabaadi'da iyo qodobbada Sharcigan.

3) Wasaaraddu waxay wax ka bedel ku samayn kartaa qaar ka mid ah hawlaheeda iyo waajibaadkeeda iyadoo la tashanaysa **Dowladaha xubnaha ka ah DFS** gaar ahaan horumarinta siyaasadaha iyo farsamooyinka lagu horumarinayo kalluumeysiga.

4) Dhammaan Wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee Dowladdu waa inay si buuxda ula shaqeeyaan wasaaradda si loo xaqiijiyo hadafka iyo waajibaadka wasaaradda ee horumarinta kalluumeysiga.

5) Wasaaraddu waxay dhisi doontaa Hay'adda Kalluumaysiga Qaranka iyadoo la tashanaysa wasaaradaha kalluumeysiga ee Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka.

**Qodobka 8**

**Howlaha iyo waajibaadka Wasiirka**

1) Wasiirka ayaa fulinaya hawlaha, awoodaha iyo waajibaadka la siiyay sida ku xusan Xeerkan, gaar ahaanna waxa uu:

a. Jiheyn doonaa, xakamayn doonaa oo hagi doonaa siyaasadda iyo arrimaha ku xusan xeerkan, oo ay ka mid yihiin ansixinta, ka tala bixinta, wax ka beddelka ama ka noqoshada:

i. Heshiisyada caalamiga ah, nidaamyada, siyaasadaha, qorshayaasha, istaraatiijiyadaha, miisaaniyadaha, kharashaadka iyo warbixinnada ku xusan Sharcigan ama sharciyada la xiriira ee Dalka, si ay u saxiixaan ama u meelmariyaan Golaha Wasiirada ama Baarlamaanka;

ii. Wixii heshiis ah, nidaamyo ah ama qorshe ah ee hoos imaanaya sharcigan, kuwaas oo u dhexeeysa ama ay galeen Dawladda Federaalka ah iyo dhammaan Dawlad-goboleedyada, ayna ka mid yihiin qoondaynta,maaraynta, horumarinta, maalgashiga iyo maamulka la xiriira kalluumeysiga iyo kalluun beerista si waafaqsan Sharcigan;

iii. Heshiis kasta ama nidaam kasta oo khuseeya kalluumaysatada shisheeye ee ka kalluumaysata kheyraadka biyaha Soomaaliya; iyo

iv. Heshiis kasta ama nidaam kasta oo ku xusan sharcigan oo lala galo hay'ad kale oo Dawladeed;

b. Ansixin doonaa shuruucda wuxuuna taageeri doonaa iswaafajinta maamullada kalluumaysiga iyo kalluun beerista, iyo heshiisyada ay galayaan Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada, oo ay ka mid yihiin;

i. Masuuliyadaha hay'adaha;

ii. Iswaafajinta sharciyada;

iii. Horumarinta Nidaamyada isla-maareynta;

iv. Kormeerka, la socoshada iyo dabagalka;

v. Wadaagista macluumaadka;

vi. Cilmibaarista;

vii. Hagidda maalgashiga iyo horumarka; iyo

viii. Heshiiska qaybsiga dakhliga kalluumeysiga iyo xaqiijinta dakhligaas qayb kamid ah waa in lagu horumariyo arimaha kalluumeysiga.

c. Bixin doonaa ruqsado ama oggolaansho kale si waafaqsan xeerkan;

d. La gelayaa heshiis dakhli wadaag dawladaha xubnaha ka Dawlada Federaalka;

e. La socon doonaa horumarada caalamiga ah ee arrimaha kalluumeysiga,wuxuuna xaqiijin;

f. doonaa gudashada waajibaadka Soomaaliya ka saaran heshiisyada caalamiga ah;

g. Soo saari doonaa wareegtooyinka, xeerarka iyo ogeysiisyada kale ee dadweynaha ee lagama maarmaanka u ah hirgelinta Xeerkan iyo maaraynta kalluumaysiga iyo kalluun beerista;

h. Ansixin doonaa xeer-hoosaadyada si waafaqsan Qodobka 158aad ee sharcigan.

2) Wasiirku wuxuu magacaabi karaa guddiyo madaama ay lagama maarmaan noqon karto inay ka soo talo bixiyaan dhinac kasta oo ka mid ah sharcigan, isagoo tixgelinaya talooyinka iyo soojeedinnada guddiyadaas;

3) Wasiirku wuxuu qoraal ahaan ugu idman karaa agaasimaha guud howlo gaar ah, markii ay lagama maarmaan noqoto arrimaha muhiimadda gaarka ah leh wuxuu la tashanayaa wasiirka.

**Qodobka 9**

**Howlaha iyo waajibaadka Agaasimaha Guud**

1) Agaasimaha Guud waxa uu mas'uul ka yahay maamulidda hawl-maalmeedka Wasaaradda iyada oo Wasiirkuna ku kormeerayo.

2) Iyada oo aan wax loo dhimayn guud ahaan arrimaha aan soo xusnay, Agaasimaha Guud waxa uu:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

a) Mas'uul ka noqon doonaa fulinta howlaha, maareynta arrimaha iyo socodsiinta awoodaha, shaqooyinka iyo waajibaadka Wasaaradda;

b) Dhiirrigelin doonaa fasiridda, dhaqangalinta iyo hirgelinta Xeerkan, si wax ku ool ah, isaga oo la-tashanaya oo kaashanaya Dowlad-goboleedyada;

c) Hubin doonaa hab-sami usocodka maamulka Wasaaradda, oo ay ka mid tahay diyaarinta iyo horumarinta miisaaniyad-sanadeedka, qorshayaasha shaqada, warbixinnada iyo horumarinta istaraatiijiyadaha, iyo sidoo kale shuruucda, wareegtooyinka iyo faafinnada rasmiga ah ee dowladda sida ku xusan Sharcigan;

d) Ka shaqaynta horumarinta, suuqgeynta iyo dadaallada maalgashiga kalluumeysiga iyo kalluun beerista;

e) Raaci doonaa awaamiirta Wasiirka, isaga oo wakiil uga ah Wasaaradda wada-xajoodyada heshiisyada,kuna matalaya arrimaha ku xusan Xeerkan oo ay mid yihiin maaraynta, ilaalinta, horumarinta, manaafacaadka kalluumeysiga iyo kalluun beerista;

f) Qaban doona waqti iyo shaqo kasta oo uu Wasiirku uga baahdo si waafaqsan Xeerkan.

3) Agaasimaha Guud wuxuu qoraal ahaan ugu idman karaa sarkaal Wasaaradda ka tirsan howlihiisa gaarka ah iyo waajibaadka ku xusan Xeerkan.

## Qodobka 10
## Awoodaha, mas'uuliyadaha iyo waajibaadka Dawlad-goboleedyada

1. Dawlad-goboleed kasta wuxuu lahaan doonaa Awoodo, mas'uuliyado iyo waajibaadyo la xiriira kalluumeysiga iyo kalluun beerista deegaanadooda sida uu qabo sharcigan, waxayna heshiisyo kale la geli karaan Dowladda Federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah DFS, si waafaqsan siyasadaha Dowladda federaalka iyo qaababka horumarineed, waxa ayna leeyihiin:

a) Mas'uuliyadda ilaalinta Aagga Kalluumeysiga u Xaddidan oo gaaraya ilaa (0-12mayl-badeed) iyo Aagga Kalluumeysiga u dhawran oo gaaraya ilaa (12-24 mayl-badeed) sida lagu qeexay qodobk 4-aad;

b) Mas'uuliyadda maareynta iyo ruqsad siinta kalluumeysiga iyo howlaha la xiriira Aagga u xaddidan Kalluumeysiga, iyada oo ruqsadaha ama oggolaansho la siinayo keliya muwaadiniinta Soomaaliyeed ama maraakiibta aan ka weynayn 24 mitir ee ka shaqeysa kalluumeysiga ama howlaha la xiriira oo ay leeyihiin muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ka hawl gala aagga Kalluumeysiga u dhawran;

c) Mas'uuliyadda maareynta iyo ruqsad siinta kalluumeysiga iyo kalluun beerista biyaha-macaan sida webiyada iyo kalluunka lagu beero aagga u Xaddidan Kalluumeysiga

d) Socodsiinta mas'uuliyadahooda iyo waajibaadkooda iyaga oo kaashanaya lana tashanaya Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada kale wixii ay isaga baahdaan oo ku heshiiyaan si waafaqsan sharcigan, iyada oo la is-waafajinayo maaraynta iyo horumarinta kalluumeysiga iyo kalluun beerista, la iskana kaashanayo:

i. Masuuliyadaha hay'adaha;
ii. Iswaafajinta sharciyada;
iii. Horumarinta Nidaamyada isla-maareynta;
iv. Kormeerka, la socodka iyo dabagalka;
v. Xog ururinta iyo wadaagista macluumaadka;
vi. Cilmibaarista;
vii. hagidda maalgashiga iyo horumarka;

## Qodobka 11
## Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kallumaysiga

1- Waxa la dhisayaa Gole maamul iyo horumarin Kalluumeysi si ay go'aan ugu gaaraan arrimaha la xiriira;

a) Maamulidda, Horumarinta iyo isticmaalka waara ee wax soo saarka kalluumaysiga iyo deegaankiisa la wadaago

b) Isku xirka, ka wadatashiga waajibaadka lagu sheegay sharcigan khaastana arimaha la xiriira wadashaqeyn, Maamul, Macluumaad, Cilmi-baaris iyo ilaalinta deegaanka Kalluumeysiga iyo noolaha biyoodka

c) Hirgalinta hab-raacyo tilmaamaya wadashaqeynta isla markaana xoojinaya xiriirka, si loo hirgaliyo talooyinka golaha ee ku saabsan maamulidda kheyraadka la wadaago iyo masuuliyadaha.

d) Horumarinta iyo hirgalinta shirciyo is-waafaqsan.

e) Horumarinta iyo hirgalinta hal-beegyo iyo shuruudo la xiriira maalgashiga arimaha kalluumeysiga iyo noole biyoodka oo ay ka mid yihiin maalgashiga shisheeyaha



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

f) Qaybsiga wax-soo saarka kheyraadka dowladda dhexe iyo dowladaha xubnaha ka ah

g) Dhaqangalinta siyaasad kasta oo uu wasiirka go'aamiyey isagoo kala tashaday maamul goboleedyada xubnaha ka ah DFS.

2- Xubnaha Golahu waxay ka koobnaanayaan Wasiirka oo ah shir gudoonka iyo wasiirada ugu magacaaban kalluumeysiga maamul goboleedyada.

3- Goluhu wuxuu dalban karaa xog cilmi-baaris iyo warbixinada si go'aan loogu gaaro.

4- Goluhu wuxuu kulmayaa sanadkii afar jeer ugu yaraan ama marka uu u yeero shir gudoonka golaha ama ay codsadaan ugu yaraan laba xubnood.

5- Shirarka golaha waxaa kasoo qayb-gali kara masuuliyiinta sarsare ee ka tirsan wasaaradaha heer federaalka iyo maamul goboleed ee kalluumeysiga iyo korjoogto kale marka lagu martiqaado shirka inay ka soo qaybgalaan.

6- Go'aanada waxaa loo qaadanayaa wadar ogol.

7- Xubin kasta oo golaha ka tirsan ah waxay soo magacaabaysaa qof xiriiriye ah oo u matasha qaban qaabada shirarka iyo maamulka golaha.

8- Golaha wuxuu yeelanayaa xeer hoosaad ay isku dhaqaan

9- Hay'adda Kalluumeysiga Qaran ayaa sharci lagu dhisayaa si ay u qabato shaqada loo idmay sida uu sheegayo sharcigan qodobkiisa 7aad taas oo wax ka maamulaysa kheyraadka kalluunka dalka iyo go'aanada golaha horumarinta uu gaaro.

## Qodobka 12
## Dano is diidan:

1) Marka Qof xil haya uu ku fulinayo mas'uuliyadaha, hawlaha iyo waajibaadka ku xusan xeerkan qof isaga ama iyada iyo xubin kasta oo isaga xigto ama qaraabo la ah, Qofkaasu waxa uu yeelan karaa dano dhaqaale ama mid qaraabannimo,waa inuu fuliyaa shaqooyinka ama waajibaadka soo socda:

a) In uu si dhakhso leh ugu soo bandhigo qoraal isaga oo cadaynaya danaha iska hor imanaya;sida ku qeexan faqrada labaad ee hoose (2); iyo

b) In aanu qaban wax howlo ah sida uu qabo sharcigan isaga oo ugu danaynaya.

2) Qof kasta oo ku sifooba arrimaha ku xusan faqrada koowaad (1) ee qodobkan waxaa loo gudbinayaa:

a) Agaasimaha Guud, waana in uu wasiirka u caddeeyaa danaha kala dhaxeeya isaga ama iyada; ama

b) qof kasta oo kale, waana in uu Agaasimaha Guud u caddeeyaa danaha kala dhaxeya isaga ama iyada.

3) Marka la shaaciyo sida ku xusan farqada (2aad), Wasiirka ama Agaasimaha, midkii ay noqotaba; wuxuu magacaabayaa sarkaal kale si uu u qabto shaqooyinka la xiriira arrintaas.

4) Ujeeddooyinka qodobkan awgii, qofku wuxuu dan ka yeelan karaa haddii uu ama ay;

a) ka soo galayso dan dhaqaale ama mid maaddi ah;

b) Is-qabaan, wadda nool yihiin, carruur ama waalid isu yihiin qofka, kaas oo dano dhaqaale arrintu ugu jirto.

c) Dano dhaqaale ka leeyahay qofka ama kuwa arrintu la xiriirto;

d) Dano qaraabanimo ka leeyahay qofka ama kuwa arrintu la xiriirto;

e) Yahay ama yihiin, agaasime, sarkaal, xubin guddi, ama wakiil shirko la ah qofka, kaas oo dano dhaqaale arrintu ugu jirto.

f) Dan ka helayo ama ka helayso sharciyadda la bixiyey awgeed;

5) Qofkii jebiya qodobkan wuxuu galayaa dambi wuxuuna muteysan doonaa xukun Ganaax ah oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee ku qoran Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale ee ku xusan sharcigan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## CUTUBKA 3-AAD
## ILAALINTA, MAAREYNTA, HORUMARINTA IYO ISTICMAALKA WAARA
## QEYBTA 1AAD
## QODOBO GUUD
### Qodobka 13
### Hannaanka Ilaalinta Iyo Maaraynta

1) Sida ku xusan Sharcigan,dhaqan gelinta waajibaadyada kala duwan ee Hannaanka maaraynta iyo ilaalinta kalluumaysiga; wasaaradda iyo Dowlad-goboleedyada waa inay horumariyaan, kormeeraan, hirgeliyaan oo ay fuliyaan, hannaanka maareynta iyo ilaalinta lagama maarmaanka u ah hubinta isticmaalka Kheyraadka kalluumeysiga muddada dheer, sida shuruucda ku habboon kalluumeysiga, kalluun beerista iyo howlaha la xiriira, iyo wixii hawlo kale ah oo hoos yimaada sharcigan.

2) Marka laga hadlayo hannaanka maaraynta iyo ilaalinta kalluumaysiga, iyadoo la tixgelinayo waajibaadyada ay kala leeyihiin, Wasaaradda iyo Dawlad-goboleedyadu sida ugu habboon waa inay la yimaadaan hanaanka maareynta, horumarinta kalluumaysiga iyo kalluun beerista, ayna hirgelinayaan heshiisyada caalamiga ah iyo hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah, waxaana ka mid noqon kara;

a) In sameeyaan qoondayn, aag, qalab, xaddidaad hawlceed, xaddidaad xilliyeed, baaxadda kalluumeysi, saami-goyn, mamnuucid, xuquuqo ka qayb qaadasho iyo warbixinno

b) In ay amraan ama mamnuucaan, adeegyada kala ah; soo dejinta, daabulida, rar-kala gudbinta, qaadashada, ganacsiga iyo kalluun haysashada iyo diyaarinta qaab dhismeedyo lagu maamulo goobaha wax laga soo dejiyo.

c) In ay baaraan ayna hubiyaan tayada kalluunka iyo waxyaalaha ka yimaada;

d) In ay nidaamiyaan hawl kasta oo hoos imanaysa xeerkan, taas oo saamayn taban ku yeelan karta kheyraadka noole, ma-noole ama deegaan biyood;

e) In ay diyaariyaan maareynta howlaha kalluun beerista si loo hubiyo tayada kalluunka, oo ay ku jiraan arrimaha la xiriira qalabka, sinjiyada kalluunka, cudurrada iyo deegaanka;

f) Sida ugu habboon looga shaqeeyo soo-kabashada keydka kalluunka;

g) Dhiirigelin dheeraad ah oo loogu talagalay horumarinta ganacsiga waara ee warshadaha kalluumeysiga si buuxdana loogu hoggaansamo; iyo

h) In ay diyaariyaan hawl kasta oo hoos imanaysa sharcigan oo la xiriirta ilaalinta iyo maaraynta kheyraadka kalluumeysiga.

3) Marka laga reebo in loola jeedo macne ka duwan midka ku xusan Sharcigan, Hannaanka ilaalinta iyo maaraynta wuxuu yeelan doonaa awood sharci iyo dhaqangal iyada oo loo marayo waajibaadka Wasaaradda ee kala ah:

a) Ansixinta xeerka wasiirka, isaga oo tixgelinaya soo jeedinta Wasaaradda, waxaana lagu baahinayaa faafinnada rasmiga ah ee dowladda ee uu wasiirku tilmaami doono waxaana lagu daabacayaa barta rasmiga ah ee Wasaaradda;

b) Shuruudaha ruqsadaha, oggolaanshaha ama fasaxyada kale ee lagu bixiyo si waafaqsan sharcigan;

c) Habraacyada lagu xusay qodobka 15aad ee khuseeya Hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah; ama

d) Ansixinta Qorshayaasha Maareynta Kalluumeysiga sida ku cad qodobka 17aad.

4) Iyadoo aan wax loo dhimayn awoodda iyo xuquuqda madaxbannaanida Soomaaliya ee kheyraadka kalluumeysiga iyo xukunkeedaba, si ku habboon hannaanka maareynta iyo ilaalinta ayaa loo fulin doonaa hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah iyo qorshaha waxqabadka cilmiyaysan, kaas oo uu ansixiyey Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee arrimahan ku shaqada leh; iyada oo la eegayo:

a) Markab kasta ama qof kasta oo jooga aagaga hoos yimaada Soomaaliya; iyo

b) Muwaadiniinta Soomaaliyeed oo ay ku jiraan shakhsiyaadka iyo maraakiibta joogta goobaha uu ka shaqeeyo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysig;

5) Hannaanka Maaraynta iyo ilaalinta ayaa la sameyn doonaa iyada oo la tixgelinayo ujeeddada iyo mabaadi'da Sharcigan, la-tashiyana lala yeelanayo daneeyayaasha ilaa xad intii suurtagal ah.

6) Qofkii ka horyimaada hannaanka maareynta iyo ilaalinta ee sharcigan ku xusan, kaas oo u dhaqan galay si waafaqsan farqada (3) (a), (b), (c) ama (d) waxa uu galay dembi, haddii aan si kale loo saamixinna waxaa

lagu xukumayaa ganaaxa lacageed ee ku xusan jadwalka koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigan.

## Qodobka 14
## Abuurista Urur Iskaashi Maamul

1) Ururada Iskaashatada Kalluumaysiga ayaa lagu dhisayaa heshiis qoraal ah oo waafaqsan sharcigan, ujeedkiisuna yahay gudashada xuquuq iyo waajibaad ka jira goobo cayiman; si loo ilaaliyo, maareeyo, nidaam waarana loogu horumariyo kalluumyesatada yaryar, si waafaqsan qorshayaasha iyo habraacyada Wada-maareynta ay ku heshiiyaan Wasaaradda iyo maamul goboleedyadu.

2) Aagga loo cayimayo wada-maareynta kalluumeysiga, waa in uu u dhaw yahay degmo (deegaanada xeebaha) ama bulsho kalluumeysato ah oo si caadi u isticmaasho; ayadoo la tixgelinayo aagagga kalluumaysiga ee sharcigan, waa in aan laga gudbin Aagga Xaddidan.

3) Ururka wada-maareynta kalluumeysiga waxa ka mid noqonaya wakiillo ka kala socda Wasaaradaha Kalluumeysiga ee dowlad goboleedka, Degmada, xubnaha iskaashatooyinka, ganacsatada kalluunka iyo daneeyayaasha kale ee kalluumeysiga.

4) Heshiiska lagu aasaasayo ururka wada-maareynta kalluumaysiga waa in la wargaliyo cidda ay khuseyso, waana in loo diyaariya arrimahan;

a) Hawlaha iyo ujeeddooyinka;

b) Aaggiisa maareynta kalluumeysiga;

c) Kala mudnaysiinta maareynta kalluumeysiga, sida sinjiyada kalluunka;

d) Waajibaadka iyo mas'uuliyadaha, iyo

e) Wixii kale oo lagama maarmaan ah oo waafaqsan Sharcigan, iyo habraacyada ay ku heshiiyaan Wasaaaradda iyo dawlad goboleedyadu.

5) Heshiiska nidaamka wada-maareyntu:

a) Wuxuu dhaqan galayaa marka Wasiirka kalluumeysiga dowlad-goboleedka ay khuseyso wareegto ku ansixiyo; iyo

b) Lana ogeysiiyo Wasaaradda Kalluumeysiga DFS.

6) Aagga loo cayimay wada-maaraynta kalluumaysiga waa laga noqon karaa:

a) Haddii Qeexidda iyo xudduudda labada dhinac kala qeybisa ay is beddesho codsi ka yimid bulshada deegaanka awgeed; iyo

b) Haddii aanay waafaqsaneyn shuruudaha heshiiska la samaynayo, ama haddii danta ilaalinta iyo maareynta kalluumaysiga ay ku jirto in la joojiyo cayimidda.

Baahinta ka noqoshada waxa leh Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga dowlad-goboleedka ay khuseyso iyadoo la ogeysiinayo Wasaaradda Kalluumeysiga DFS.

7) Wasaaradda iyo Wasaaradaha Kalluumeysiga Dawlad-goboleedyada ilaa xad intii suurtagal ah, mid kasta waa inuu gacan ka geystaa:

a) Hagidda ilaalinta iyo maareynta kalluumeysiga, iyo diyaarinta qorshayaasha maareynta kalluumeysiga

b) taageero xagga farsamada ah, oo ay ku jirto caawimaadda diiwaangelinta iyo keydinta xogta;

c) Gacansiinta iyo hagitaanka xog ururinta, iyada oo la adeegsanayo macluumaadka ay isku raaceen xubnaha Ururka iyo Wasaaraddu;

d) Waxyaabaha xagga sharciga kalluumaysiga la xiriira iyo wax ka beddelkiisa; iyo

e) tababaro iyo tayeyn ku aaddan maaraynta kalluumeysiga.

8) Wasiirka Dowlad-goboleedka ay khuseyso wuxuu ansixinayaa ergada iyo macluumaadka soo socda iyo go'aan-qaadashada mas'uuliyiinta iyo waajibaadka ururka ama nidaam ku dhisan qodobkan, waxa uuna uga baahan karaa in la isku dubbarido, ama oggolaansho uga helo arrimaha ay ka midka yihiin:

a) Qaadashada hannaanka maareynta kalluumaysiga ee la tilmaamay;

b) Magacaabida dadkii ay kaashan lahaayeen kormeerayaashaa kalluumeysiga ama booliska si kor loogu qaado fulinta hannaanka maaraynta, oo ansixintu ay qeyb ka tahay;

c) Kormeerida howlaha kalluumeysiga; iyo

d) Sida awoodaha kale, waxa uu oggolaanayaa wixii waafaqsan ujeeddada iyo mabaadi'da Xeerkan iyo sharciyada kale ee Soomaaliya.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

9) Qofkii Jebiya xeerarka maaraynta ee qorshaha Horumarinta ama soo gala aagga wada-maareynta kana hor yimaada qorshaha ama heshiiska ama nidaamyada ururka u samaysan, qofkaasi:

a) Marka laga reebo dadka ku hawlan kalluumeysiga yaryar wuxuu galayaa dembi ciqaabtiisu tahay ganaax iyo / ama ciqaabta u soo baxda, sida ku xusan heshiiska ama nidaamyada ururka;

b) Dadka ku hawlan Kalluunka badwaynta, Kalluumeysiga heerka dhexe iyo kalluumeysiga yaryar, ama hawlaha la xiriira waxaa lagu ciqaabi karaa inaanu u hoggaansamin sharcigan, hase yeesheein laga qaado qaar ka mid ah lacagihii lagu ganaaxay, ama si kale looga qaanbaxo dembiyada noocan ah waa go'aamada maamulka, kaas oo lagu sheegi karo ama ku jiri kara heshiiska ama nidaamyada ururka;Waxaana la siinayaa ururka ay khusayso, waxaa intaa dheer, magdhow laga bixinayo wixii khasaaro maaliyadeed ah ee ka dhasha sharci jebinta noocaan ah.

**10)** Ganaax kasta ama ganaaxyo kale oo lacageed oo uu soo helo ururku ama nidaamku waxa uu noqon doonaa mid la ururiyey, la maamulay, lagu kala wareegay laguna xisaabtamey si waafaqsan heshiiskiisa.

### Qodobka 15
### Hirgelinta Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta caalamiga ah

1) Shuruudaha ku saabsan maaraynta iyo Ilaalinta caalamiga ah ee la adeegsado, marka loo eego:

a) Milkiile kasta, howlwadeen kasta iyo / ama kabtanka markab Soomaaliyeed oo haysta ruqsad ay soo saartay Wasaaraddu laguna qoray diiwaanka Maraakiibta Idman ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga loona idmay inuu ka kalluumeysto noocyada kalluunka iyo meelaha ruqsadda loo siiyey in uu ka hawlgalo;

b) Milkiile kasta, howlwadeen kasta iyo / ama kabtan, waa in uu raacaa sharcigan iyo xeerka maareynta iyo ilaalinta caalamigah; iyo / ama

c) Muwaadin kasta oo Soomaaliyeed, Saamayn buuxda ayuu ku yeelanayaa sharcigaan marka lagu dhawaaqo oo si rasmi ahna loogu soo daabaco bogga Wasaaradda taas oo ah shuruudaha xeerarka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee uu ansixiyay Wasiirka, sida ku xusan farqada(2aad) ee hoose, waajibaadkaana waa in uu u hoggaansamaa haddii uu yahay milkiilaha, Naaquudaha iyo / ama kabtanka markab kasta ama muwaadinka soomaliyeed.

2) Marka laga soo tago faqrada (1aad), marka aanay suurtagal u aheyn markabka in uu buuxiyo shuruudaha oo uu u hogaansamo sababo farsamo oo loo qaateen ah , Agaasimaha Guud waxa uu u kordhin karaa waqti macquul ah si loogu oggolaado in uu soo dhammaystirto waxyaabaha ka dhiman.

3) Agaasimaha Guud waxa uu ogeysiinayaa dhammaan dadka haysta ruqsadaha iyo oggolaanshaha waajibaadyada la xiriira Hirgelinta hannaanka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee ku saabsan tariikhda la baahiyey.

4) Qof kasta oo ka hor yimaada fulinta xeerarka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah sida uu qabo qodobkan ama sida ku xusan xeerkan waxa uu galay dembi waxa uuna mutaysanaya xukun ciqaabeedka ku xusan jadwalka koowaad iyo/ama ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro Xeerkan.

### Qodobka 16
### Horumarinta Kalluumaysatada iyo Kalluun Beerista

Wasaaradda oo kaashanaysa Wasaaradaha Dowlad-goboleedyada ee u xilsaaran kalluumeysatada waxa ay horumarin doonaan kalluumeysiga iyo kalluun beerista, oo ay ka mid yihiin ganacsiga kalluumeysiga waaweyn, dhexe iyo yaryar iyada oo la waafajinayo siyaasadda qaranka iyo qorshayaasha horumarineed iyo Sharcigaanba, lana soo saarayo xeerar iyo hawlo la

xiriira sida:

a) Horumarinta maalgashiga, shaqada iyo tayeynta shaqaalaha;
b) Horumarinta suuqyada iyo suuqgeynta wax soosaarka kalluunka iyo kalluun beerista.
c) Dhiirrigelinta iskaashiga kalluumeysatada iyo beerista kalluunka ee ka jira dalka.
d) Kor u qaadista xirfadaha iyo hufnaanta kalluumeysiga iyo beerista kalluunka;
e) Horumarinta kaabayaasha iyo gacan siinta kalluumeysatada.
f) Ilaalinta bii'ada kalluunka; iyo
g) Sameynta iyo isku dubaridka cilmibaaris ku saabsan kalluunka

## Qodobka 17

## Qorshayaasha Horumarinta Maamulka Kalluumaysiga

1) Wasiirku waxa uu mudnaan siin karaa horumarinta kalluumeysiga iyada oo ujeeddadu tahay hirgelinta maareynta kalluumeysiga iyo qorshayaasha horumarineed, laguna xisaabtamayo talooyinka Wasaaradda, latashiga Dowlad-goboleedyada, daneeyeyaasha, hay'adaha kalluumeysiga ee gobolka iyo xeerarka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee ay qaateen ururrada maareynta kalluumaysiga ee gobolka.

2) Maareynta kalluumaysiga iyo qorshaha horumarintu waxa uu dhaqangelayaa markii uu oggolaado wasiirka iyo wasiirada u xilsaaran kalluumeysiga ee Dowlad-goboleedyada, laguna daabaco Faafinta rasmiga ah iyo bogga Wasaaradda, xeerarka maareyntuna waxa ay ahaan doonaan sharci marka loo eego faqrada (8aad) ee hoos ku xusan.

3) Maareyn iyo qorshe kasta oo kalluumaysi waa inay ahaadaan mid waafaqsan ujeeddada iyo mabaadi'da Xeerkan laguna dhaqaa dadka, maraakiibta, kalluunka iyo kalluumeysiga iyo howlaha la xiriirasida uu qabo Xeerkan.

4) Maareynta kalluumeysi kasta iyo qorshaha horumarineed waa in:

a) Lagu caddeeyaa kalluumeysiga iyo sifihiisa, sida:

i. Xaaladda kalluumaysiga iyo kheyraadka ee markaa jirta sida; aagga, sinjiyada kalluunka iyo wax dheefkiisa;

ii. Saameynta taban ee kalluumeysigu ku yeelan karo kheyraadka iyo deegaanka;

iii. Xaaladda kheyraadku ku sugan yahay sida sinjiyada dhawran, kuwa loo baqo ama kuwa khatarta ku jira marka loo eego sharciga kalluumaysiga Soomaaliya iyo heshiisyada caalamiga ah;

iv. La jaanqaadi kara xeerarka heer gobol iyo heer caalami;

b) lagu caddeeyaa ujeeddooyinka maamulka iyo istiraatiijiyadda kalluumaysiga, iyadoo laga eegayo dhinacyada bayoolojiga, deegaanka iyo dhaqan-dhaqaalaha;

c) Lagu muujiyaa habsami u socodka iyo hirgelinta maaraynta kalluumeysiga iyo qorshaha horumarinta, sida la tashiyada lala yeelanayo daneeyayaasha, kuwaas oo saameyn ku leh qorshaha la soo jeediyey;

d) Lagu cadeeyaa xeerarka maareynta iyo horumarinta si loogu dabbaqo kalluumeysiga;

e) Lagu qeexaa qorshayaal xilleedka la socodka iyo dib u eegista kalluumeysiga iyo qorshaha Maareynta Kalluumeysiga;

f) Loo sameeyo sida ugu habboon qodobbo la xiriira arrin kasta oo lagama maarmaan u ah ilaalinta, maaraynta iyo isticmaalka joogtada ah ee kalluumeysiga;

g) La soo bandhigo qabyo qoraalka qorshaha si dib u eegis loogu sameeyo;

h) In ay Wasaaraddu keydiso si ay u noqoto xog dhexe oo la wadaagi karo;

i) Wasiirku waxa uu fari doonaa in Qorshaha lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Dowladda;

5) Magdhaw lama bixin doono marka maareynta kalluumaysiga iyo qorshaha horumarinta la sameeyo ama wax laga beddelo ama wax walba oo hore loo oggolaaday la mamnuuco ama lagu sharciyeeyo qorshahan, laakiin tani kama hortagi doonto qorshaha ama shuruucda lagu bixinayo magdhawga.

6) Wasiirku waxa uu amar ku bixin karaa ama sharci ku sameyn karaa xeerarka maaraynta, ganaaxyada, ciqaabaha iyo sidoo kale fulinta awoodaha, maamulka iyo shuruudaha kale ee ku saabsan qorshaha Maareynta Kalluumeysiga.

## Qodobka 18

## Cilmibaaris Ku Saabsan Ilaalinta Iyo Maarayn Wax Ku Oolka Ah

1) Daraasad kasta oo ku saabsan arrimaha ku xusan sharcigan waxaa fulinaysa Wasaaradda ama ciddii kale ee buuxisa shuruudaha cilmi-baaris, ama iyada oo la haysto:

a) Oggolaansho cilmibaaris ay soo saartay Wasaaraddu sida ku qoran qodobkan;

b) Fasax lagu bixiyey shuruudaha ruqsadda lagu soo saaray sida uu qabo sharcigan; ama

c) Qoraal uu saxiixay Agaasimaha guud laguna daabacay bogga rasmiga ah ee wasaaradda.

2) Dhammaan macluumaadka, xogta iyo natiijooyinka ka soo baxa cilmibaarista uu oggolaaday Xeerkan waxay noqon doonaan:

a) Hanti dowladeed; oo

b) Si dhakhso ahna loogu soo tebiyo Wasaaradda qaabka iyo waqtiga uu Agaasimaha Guud u dalbado.

3) Qofna ma daabici karo natiijooyinka cilmibaarista arrin kasta oo Xeerkan ku xusan iyada oo aan la soo ogeysiin Wasaaradda.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

4) Wasaaradda, oo gudaneysa waajibaadkeeda la xiriira cilmibaarista, waa inay:

a) Taageertaa oo dhiirigelisaa tayada aqoonta muwaaddiniinta Soomaaliyeed si ay u sameeyaan cilmibaaris wax ku ool ah.

b) Ka qeyb galaan khubaro Soomaaliyeed ilaa xad intii suurtagal ah marka cilmibaarista shisheeye hoggaaminayaan; iyo

c) Meesha ay khusayso, lagu biiriyo cilmibaaris ama talo cilmi ah oo ay bixisay hay'ad kasta oo ay khusayso oo ka tirsan Dawladda ama Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee heer gobol.

5) Qof kasta oo jebiya faqrada (1) (a), (b) ama (c), (2) (b) ama (3) ee qodobkan waxa uu galay dembi waxa uuna mutaysanayaa in lagu xukumo ganaax aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad ama xarig aan ka badnayn 6 bilood, ama labadaba, weliba waa in la keenaa Wasaaradda dhammaan macluumaadka, xogta iyo natiijooyinka.

## Qodobka 19

## Soo Saarista Digniino Ku saabsan Noocyada Kalluun Ee U Baahan ilaalinta ama Khatar ugu Jira Inay Dabar-Go'an

1) Wasiirku waxa uu Faafinta Rasmiga ah ama bogga rasmiga ah ee Wasaaradda ku baahin karaa ama ku soo saari karaa nooc kasta oo kalluun ah oo ku jira biyaha Soomaaliya:

a) In uu yahay mid dhawran, loo baqo ama khatar ku jira marka loo eego heshiiska caalamiga ah ama xeerka ururka maareynta heer gobol ee ay khusayso; ama

b) In Agaasimaha Guud uu caddeeyo in uu yahay noocyada dhawrsan, loo baqo ama khatar ku jira marka loo eego caddeynta ugu wanaagsan oo cilmiga ku dhisan ee la heli karo.

2) Qofna ma qaadi karo, ma dejin karo, ma iibin karo,macaamil kama geli karo, ma daabuli karo, ma qaban karo, ma gadi karo, ma haysan karo, ma soo dejin karo mana dhoofin karo wax kalluun ah ama waxsoosaar kalluun ah ee la caddeeyay inuu yahay mid dhawran,loo baqo ama khatar ku jira si waafaqsan qodobkan.

3) Qof kasta oo soo qabta sinji kalluun dhawran,loo baqo ama khatar ku jira waa inuu siidaayaa isaga oo noolna biyaha ku soo celiyaa.

4) Qof kasta oo jebiya faqrada (2) ama (3) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa in lagu xukumo ganaax aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad ama xarig aan ka badnayn 6 bilood, ama labadaba,weliba kalluunka ama wax soo saarka kalluunka waxaa la wareegaya Dawladda

## Qodobka 20

## Cayimida Goobo Ama Aagaga

1) Wasiirka oo la tashanaya Wasiirrada Dowlad-goboleedyada ee kalluumeysiga, waxa uu cayimi karaa aag ama goob kasta oo ka mid ah biyaha Soomaaliya isaga oo ku soo daabacaya Faafinta Rasmiga ah, ama bogga wasaaradda ama xeer, iyada oo ay ujeeddadu tahay;

a) Ilaalinta, maaraynta, dhowrista ama soo kabashada kalluunka ama kalluun beerista;

b) Horumarinta warshadeynta kalluumeysiga ama kalluun beerista Soomaaliya; iyo

c) Ujeeddo kasta oo kale oo la jaanqaadaysa hadafka iyo mabaadi'da Xeerkan.

2) Qofna waxba kama qaban karo, umana oggolaan karo qof kale inuu wax hawl ah ka qabto; taas oo:

a) Ah Goobta ama aagga la mamnuucay sida ku xusan faqrada(1aad) ee qodobkan;

b) Keeneysaa burbur ama saameyn taban oo ku timaad kheyraadka kalluumeysi ee goobta ama aagga ku xusan faqrada(1aad) ee qodobkan; ama

c) Sababi karta in ujeeddada loo sameeyey goobahaas la gaari kari waayo.

3) Qof kasta oo jebiya faqrada (2aad) ee qodobkan waxa uu galay dembi, waxa uuna mutaysanayaa in lagu xukumo ganaax aan ka yareyn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad ama xarig aan ka badnayn saddex sano ama labadaba. Sidoo kale, jebinta faqrada (2aad) xarafka (b) waxaa lagu muteysan doonaa magdhow buuxa sida ay maxkamaddu go'aamiso, wixii burburin ama saameyn taban ah ee loo geysto goobtana sideedii hore ayaa lagu soo celinayaa.

## Qodobka 21
## Bedqabka Deegaan Badeedka

1) Qofna iskuma dayi karo, qof kalena uma suurto gelin karo in uu adeegsado, si toos ah, si dadban, kas ah ama si kama' ah, walax kasta oo dhibaato u keeni karta biyaha Soomaaliya kuwaas oo:

a) sun leh, khatar ah ama waxyaabo kale oo waxyeelo u keeni kara kalluunka ama deegaankiisa, shimbiraha, aadanaha ama noole-biyoodka ama bay'ada badda, oo ay ka mid yihiin wasakhda warshadaha ama qashinka nugliyeerka;

b) Carqaladeyn kara ama khatar gelin kara howlaha kalluumeysiga; ama

c) Caqabad ama khatar ku noqon Kara marinnada badda.

2) Naakhuudaha markab kasta waa inuu isticmaalaa agab aan waxyeelayn kalluunka iyo deegaankiisa marka loo baahdana Wasiirku ku soo saarayaa faafinta rasmiga ah ama bogga wasaradda ama shuruudda ruqsad siinta.

3) Qofna ugama tegi karo goob ama meel ka mid ah biyaha Soomaaliya qalab kalluumeysi oo dhibaato u keeni karaya noole-biyoodka iyo deegaanka, haddii ay dhacdo xaalad shil degdeg ah waa in naakhuuduhu soo wargaliyaa Agaasimaha Guud.

4) Agaasimaha Guud waxa uu amri karaa in qalabka ama shay kasta oo kale oo aan dhibaato keenayn l sida ku xusan faqrada (3aad) in uu ka qaado meesha qof loo idmay, haddii ay u keenayso deegaanka khatar ama caafimaad-darro ku timaadda kalluunka, wixii kharash ah ee ku baxaya qalabka ama shayga qaadistiisa waxaa lagu dallacayaa qofka ama dadka meesha uga tegay.

5) Marka laga soo tago faqrada (1aad), haddii ay dhacdo in walxo waxyeello leh ama wasakh ah uu markab si kama' ah ama aan ku talagal aheyn u geliyo deegaanka badda; Naakhuudaha markabku waa inuu si dhakhso leh dhacdada ugu soo wargeliyaa Agaasimaha Guud, isaga oo soo gudbinaya macluumaadka soo socda:

a) Magaca Naakhuudaha;

b) Magaca, calaamadda iyo lambarka uu ku diiwaangashan yahay markabku;

c) Nooca iyo waxa ay wasakhda ka samaysan tahay;

d) Qiyaasta xaddiga wasakhda;

e) Taariikhda iyo waqtiga; iyo

f) Goobta.

6) Qofkii jebiya Faqrooyinka (1), (2), (3) ama (5) wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa xukun ciqaabtiisu tahay ganaax aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad iyo magdhaw buuxa oo laga bixiyo wixii khasaaro ama waxyeelo ah ee ka dhasha arrinkaas iyo sidoo kale wixii qarash ah ee ku baxa in sideedii hore lagu soo celiyo deegaankii ay dhibaatadu saameysey.

## Qodobka 22
## Mamnuucista Burburinta Geedka Maanguruufka iyo Dhirta Kale, Si Loo Ilaaliyo Deegaan Xeebeedka Kheyraadka Kalluumaysiga

1) Ujeeddo kasta oo la xiriirta horumarinta ganacsi aag xeebeed iyada oo aan oggolaansho laga helin Wasiirka sida ku xusan qodobka 74-aad; Qofna waa in uusan:

a. goynin ama ka ganacsan geedka loo yaqaan mangrove-ka ama noocyo kale oo geedo ah oo kheyraadka kalluunka u leh manfac ama cunto iyo ilaalinta nabaad-guurka carrada;

b. degin, ku qaban howlo ganacsi ama howlo kale oo saameyn ku leh kalluumeysiga iyo deegaan xeebeedka badda.

2) Qofna cilmibaaris kuma sameyn karo aag xeebeed kasta, taasoo la xiriirta meelaha xeebta ah ee deegaanka u ah khayraadka kalluumeysiga iyada oo aan oggolaansho laga helin Wasiirka sida ku xusan qodobka 74-aad.

3) Qofkii jebiya faqrooyinka (1) (a) ama (b) ama (2) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa xukun ciqaabtiisu tahay ganaax aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad iyo magdhaw buuxa oo laga bixiyo wixii khasaaro ama waxyeelo ah ee ka dhasha arrinkaas iyo sidoo kale wixii qarash ah ee ku baxa in sideedii hore lagu soo celiyo deegaankii ay dhibaatadu gaartay sida ay maxkamad sharci ah go'aamiso.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 23
### Mamnuucista Burburinta Shacaabiga (Qara-dhagaxeedka) iyo Bocoolaha Badda, Si Loo Ilaaliyo Deegaan Xeebeedka Kheyraadka Kalluumaysiga

1) Qofna ma burburin karo kamana ganacsan karo Qar-dhagaxeedyada badda ee manfaca ama cuntada u ah kalluunka badda, sidoo kale ma burburin karo kamana ganacsan karo aleel badeedda:

a) Iyada oo an oggolaansho laga helin Wasiirka sida ku xusan qodobka 74-aad: ama

b) Ilaa ay ku taal aag ay Wasaaraddu u aqoonsatay hawlaha horumarinta si dib loogu soo celiyo ama loo abuuro qar dhagaxeedka ama hawlo kale oo la mid ah waxqabadyadaas.

2) Qofna ma isticmaali karo qalab sababi kara burburin inta uu ka kalluumeysanayo dusha ama agagaarka qar badeedyada ku yaal biyaha soomaaliya, qalabkaas oo ay ka midka yihiin:

a) Biraha looga soo jiido aargoostada meelaha ay ku gambato; iyo

b) Maqaalinnada waaweyn oo lagu soo qabto kalluunka hoose.

3) Qofkii jebiya faqradaha(1) (a) ama (b) ama (2) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa xukun ciqaabtiisu tahay ganaax aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad iyo magdhaw buuxa oo laga bixiyo wixii khasaaro ama waxyeelo ah ee ka dhasha arrinkaas iyo sidoo kale wixii qarash ah ee ku baxa in sideedii hore lagu soo celiyo deegaankii ay dhibaatadu gaartay sida ay maxkamad sharci ah go'aamiso.

# QEYBTA 2$^{AAD}$

# TALLAABOOYINKA MAAMUL IYO WAXYAABAHA REEBAN

## Qodobka 24
### Maareynta Kalluumaysiga Aan Loo Qasdin

1) Naakhuudaha markab kasta oo warshad leh ama aan laheyn, kaasoo kusoo dejiya ama iska roga kalluunka laga jilaabtay biyaha Soomaaliya sida; Tuunaha iyo Tuuna-u-eke, waxa uu ku dajinayaa dhammaan kalluunka aan loo qasdin ( By Catch ) meel laga heli karo kaabayaal dhaqaale, Agaasimaha guudna uu jiheeyo dejintaas; iyada oo la tix-raacayo xeerarka Hay'adda Cunada iyo Beeraha ee (FAO) oo ku saabsan Calaamadeynta agabka Kalluumeysiga, milkiilaha ama Naakhuudaha agabkaas waa inuu u hoggaansamaa shuruudahaas.

2) Howl-wadeenka markab kasta oo ka shaqeeya biyaha Soomaaliya, ama markab kasta oo Soomaaliyeed oo ka shaqeeya meelaha ka baxsan dalka iyo meelaha uu kataliyo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee gobolka waa inuu hubiyaa in qalabka badda ku jira si sax ah loo calaamadeeyay iyada oo la raacayo ugu yaraan xeerarka iyo shuruudaha kale ee Wasaaraddu soo rogto, marka laga reebo cafiska uu wasiirku u fidiyo markab kasta ama qalab kasta:

a) Darafyada shabaagyada, xargaha iyo agabka badda ku dhex jiraa; waa in lagu rakibaa calan ama raadaar ifbixiya habeen iyo maalinba iyo booyad si fudud u muujinaysa qalabka ama shabaqa booskiisa iyo baaxaddiisa;

b) Booyadda iyo walxaha la midka ah ee dul sabbeeynaya biyaha, ee loogu talagalay in lagu muujiyo meesha uu yaallo agabku, waa in markasta si sax ah loogu calaamadeeyaa xarafka (xarfaha) iyo / ama lambarka (lambarada) markabka ay ka tirsan yihiin;

c) Booyad kasta oo loo isticmaalo dhigidda Shabaqa waafi-qabadka, jeestada iyo shabaq dhigga kale, waa in lagu suntaa lambarka ruqsadda ama calaamadda aqoonsiga markabka isticmaalaya qalabka;

d) Calaamadaha aqoonsigu waa inay ku jiraan xarfo iyo lambaro;

e) Xarfaha iyo lambarradu waa inay weynaadaan si ay meel fog uga muuqdaan sida booyadda;

f) Calaamadda aqoonsigu waa inay ahaataa caddaan ama madow middood, hadba midabka ay ahaataba waa in uu muujiyaa farqi weyn oo ka duwan midabka booyadda;

g) Rinjiga badda loo isticmaalo oo tayo wanaagsan leh waa in loo adeegsadaa qorista calaamadaha aqoonsiga;

h) calaamadaha aqoonsiga iyo derbigiisa gadaaleba waa in markasta si wanaagsan loo hagaajiyaa; iyo

i) Calaamadeyntu waa in ay waafaqsanaataa shuruudaha uu dejiyey Wasaaradda.

3) Howlgeliye kasta oo u hogaansami waaya shuruud kasta oo ku xusan farqada (1) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi wuxuuna mutaysanayaa xukun ciqaabtiisu tahay ganaax aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigan.

## Qodobka 25
## Aaladda Gabbaadka kalluunka

1) Howl-wadeenka Markab kalluumeysi:

a) Waa in aanuu dusha ku hayn, dhigin ama ku hayn Aaladda gabbaadka kalluunka gudaha Biyaha Soomaaliya;

b) Markab waa in aanu dhigin ama aanu oggolaan, Aalad gabbaadka kalluunka ee sabeysa ayadoo ay la socoto booyad xog uruurin meelaha ka baxsan xeyr-xeyndaabka Qaranka si uusan u soo galin Biyaha Soomaaliya.

c) Markab soomaaliya ka diiwaan gashan waa in aanu dhigin ama aanu oggolaan in la geeyo Aaladda gabbaadka kalluunka oo ay la socota qalabka xog uruurinta badda meelaha Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee gobolka uu ka shaqeeyo;

Marka laga reebo oggolaanshaha Wasaaradda, kaas oo waafaqsan shuruudaha u yaal si waafaqsan sharciga iyo xeerka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah.

2) Howl-wadeen markab uu tilmaamaayo qodobka (1) waa in uu hubiyaa in Aaladda Gabbaad-Kalluumeedka:

a) si sax ah loogu calaamadiyey magaca milkiilaha markabka, qalabkaas oo lagu dhigay lambarka aqoonsiga ee markabka u gaarka ah ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga, lambarka diiwaangelinta Aaladda Gabbaad-kalluumeedka, iyo lambarka Markabka ee Ururka Badaha Aduunka.

b) uu ku qalabeysan yahay Raadaarka ifbixiyaha ah, iyo nalal si fiican habeenkii looga arki karo masaafo dhan ugu yaraan hal mayl badeed; iyo

c) Uu leeyahay qalab kale oo la socda iyo calaamadaha la sheegay ama shuruudaha uga degsan Wasaaradda iyo xeerka ilaalinta iyo maareynta caalamiga ah.

3) Haddii aan si kale loola jeedin sharcigan ama sida ku qeexan ogolaanshaha Wasaaradda ee geynta Aaladda Gabbaad-kalluumeed aag cayiman, xuquuq gaar ah ma siineyso in laga kalluumaysto agagaarka aaggaas qofna kuma andocoon karo xaq uma yeelan doono in uu ku andacoodo.

4) Howl-wadeen markab kasta oo dhigaya Aaladda Gabbaad-kalluumeed waa inuu ku wargeliyaa Wasaaradda afar iyo labaatan saac gudahood qaabka dhigista iyo meesha la dhigayo sida uu dhigayo qodobka 27 ee faqrada 1aad xarafaha (a,b).

5) Oggolaansho ha u haysto ama yaanu u haysane, qofna uma isticmaali karo umana dhigi karo Aaladda Gabbaad-kalluumeed, qaab aan ka ahayn sida uu qabo sharcigan ama shuruudaha Wasaaradda u degsan.

6) Wasaaraddu waxa ay diyaarin doontaa qorshe maamul oo ku saabsan Aaladda Gabbaad-kalluumeedka, iyada oo tixgelinaysa shuruudaha ama tilmaamaha Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga.

7) Qofkii jebiya farqada (1) (a) (b) ama (c), (2) (a) (b) ama (c), (4) ama (5) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa xukun ciqaabtiisu tahay ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad marka loo eego Aaladda Gabbaad-kalluumeedka ama xabsi aan ka badnayn saddex sano ama labadaba, Aag Gabbaad-kalluumeed kasta oo lagu isticmaalo ama laga helo Biyaha Soomaaliya oo ku xadgudba Sharcigan waa lala wareegayaa, shirkadda keentay Aalad Gabbad-kalluumeedkana waa lagala noqon karaaa ruqsadda kalluumeysiga, haddii markab uu Aaalad Gabbaad kalluumeedka uga tago biyaha Soomaaliya waxaa markabkaas laga la noqonayaa ruqsadda waxaana lagu dalacayaa kharashaadka ku baxaya qaadista, nadiifinta, dib u celinta iyo dhammaan howlaha hagaajinta goobta, waxa ay dushiisa tahay howl-wadeenka ama mulkiilaha markabka uu qalabku ku xirnaa.

## Qodobka 26
## Mamnuucidda Ka Kalluumaysiga Aagga Booyadda Xog Uruurinta

1) Looma ogola hawlwadeen kasta oo ka shaqeeya maraaakiibta ku jirta biyaha Soomaaliya ama ka shaqeeya markab Soomaaliyeed meelaha uu ka shaqeeyo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga;

a) In uu keeno booyadda xog ururinta biyaha Soomaaliya ilaa Wasaaradda lagu soo wargeliyo howshaas isla markaana loo gudbiyo macluumaad kasta, sida waqtiga iyo qaabka loo rabo;

b) Inuu faragaliyo ama qaado booyadda xog ururunta ilaa uu oggolaasho ka helo Wasaaradda ama milkiilaha booyadda;

Waana inuu u hoggaansamo shuruudaha dheeriga ah ee ku saabsan booyadda xog ururinta sida hadba sharcigu u qeexo;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2) Hawlwadeen kasta oo aan u hoggaansami waaya faqradaha (1), (a) ama (b) ee qodobkan waxa uu galay dembi waxa uuna mutaysanayaa xukun ciqaabtiisu tahay ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigan.

**Qodobka 27**
**Mamnuucidda Jillaabashada iyo Ka Ganacsiga Nibiriga Iyo Ilaalinta Carjowleyda, iwm.**

1) Qofna kama shaqeysan karo, lagumana caawin karo ka ganacsiga iyo jillaabashada nibiriga iyo noocyadiisa biyaha Soomaaliya, muwaadinka Soommaaliyeed ama markab Soomaaliyeed xitaa ugama ganacsan karo nibiriga meelaha ka baxsan biyaha qaranka.
2) Qofna kama kalluumeysan karo, ma waxyeeleyn karo, ma dili karo, kamana ganacsan karo carjowley.
3) Hawlwadeen markab ka shaqeynaya biyaha Soomaaliya waa inuu hubiyaa in dhammaan kalluumeysiga iyo howlaha la xiriira, sida agabka kalluumeysiga loo dhigo inuusan wax yeelaynaynin ama dhibaateynaynin bahda carjowleyda.
4) Hawlwadeenka markab kasta oo ku jira biyaha Soomaaliya ama maraakiibta Soomaaliyeed ee ku sugan meelaha uu ka shaqeeyo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga , waa in aanu si ula kac ah u sababin una oggolaan in la dhigo shabaagta wareegta agagaarka ama meelaha ay ku nool yihiin bahda carjowleyda iyo nibiriga.
5) Markii xayawaanaadka bahda carjowleyda si aan ula kac ahayn ugu dhaco dabinka ama qalabka kalluumeysiga, hawlwadeenku sida ku xusan farqada (4aad) waa inuu si deg deg ah u siidaayaa oo uu ku celiyaa badda, oo uu qaadaa talaabooyinka kale ee uu ka qabo Hannaanka Ilaalinta Iyo Maareynta Caalamiga ah.
6) Qofna looma oggola in uu hawlo kalluumaysi ka qabto aagagga sharcigani u aqoonsaday in uu yahay aagagga taranka bahda carjowleyda,
7) Markii xayawaanaadka bahda carjowleyda uu ku dhaco dabin la dhigay xeebta agteeda, bulshooyinka xeebtaas ku nool waxaa waajib ku ah inay sii daayaan oo ay dib ugu celiyaan biyaha Soomaaliya.
8) Qof kasta oo aan u hoggaansamin wax kasta oo looga baahan yahay faqradaha(1), (2), (3) (4) (5) ama (6) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi, waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcign ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba.

**Qodobka 28**
**Mamnuucidda La Xiriirta Qubo Badeedka**

1) Qofna kama jillaaban karo, ma waxyeeleyn karo, ma dili karo, kamana ganacsan karo qubo badeedda.
2) Hawlwadeenka markab ka shaqeynaya biyaha Soomaaliya waa inuu hubiyaa in dhammaan kalluumeysiga iyo howlaha la xiriira, sida agabka kalluumeysiga loo dhigo hab dhibaateyn kara qubo badeedda.
3) Hawlwadeenka markab kasta oo ku jira biyaha Soomaaliya ama maraakiibta Soomaaliyeed ee ku sugan meelaha uu ka shaqeeyo Urur Goboleedka Maareynta kalluumaysiga , waa in aanu si ula kac ah u sababin una oggolaan in la dhigo shabaag agagaarka ama meelaha ay ku nooshahay qubo badeeddu.
4) Markii qubo badeed si aan ula kac ahayn ugu dhaco shabaqa ama qalabka kalluumeysiga, hawlwadeenku sida ku xusan farqada (3aad) waa inuu si deg deg ah u sii daayaa oo uu ku celiyaa badda, oo uu qaadaa talaabooyinka kale ee uu ka qabo Hannaanka Ilaalinta Iyo Maareynta Caalamiga ah.
5) Ujeeddo kasta oo la xiriirta horumarinta ganacsi ee aag xeebeed kasta, sida uu qabo qodobka 74aad; Qofna ma dhisi karo, kama shaqeyn karo, cilmibaarisna kama sameyn karo aagagga taranka ee qubo badeedda, iyada oo aan oggolaansho laga helin Wasaaradda.
6) Qof kasta oo aan u hoggaansamin faqradaha (1), (2), (3) (4) ama (5) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcign ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba.

**Qodobka 29**
**Mamnuucidda Goynta Dhegaha Libaax-Badeedka Iyo Ka Ganacsiga Dhegihii Lagu oo jaray sifo sharcidarro ah**

1) Hawlwadeenka markab kasta oo ka kalluumeysanaya biyaha Soomaaliya ama markab Soomaaliyeed oo ka kalluumeysanaya meelaha ka baxsan Soomaaliya:
a) waa inuu hubiyaa in dhammaan libaax-badeedyada la qabtay si buuxda looga faa'iideystay, iyada oo lagu hayo markabka dushiisa dhammaan qaybaha libaax-badeedka, marka laga reebo madaxa, calooshа iyo hargaha, ilaa laga soo gaaro marsada ugu soo horraysa ee lagu dejinayo;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفيدرالية

b) waa in:

i.Aan libaax-badeedka maraakiibta dushooda dhegaha looga goynin; iyo

ii.Aan la dejin, lagu sii heyn markabka dushiisa, markab kalena lagu wareejin, ama aan la keenin dhego-libaax oo aan ku dhegganeyn libaax-badeedkii marsada ugu horreysa ee lagu dejinayo;

c) Marka libaax-badeedka la dejinayo uu yahay mid la qaboojiyey waa in:

i.Aanay saarneyn dhego libaax oo wadarta culeyskoodu ka badan yahay 5% marka loo eego Culayska guud ee libaax-badeedka ilaa iyo marsada ugu horreysa ee lagu dejinayo, iyada oo shuruudaha ku xusan faqrada (b) aanu hawlwadeenku dhaqan gelin;

ii.Aan loo dejin hilibka iyo dhegaha libaax-badeedka si gooni gooni ah marsada ugu horreysa ee lagu dejinayo, ilaa iyo inta la waafajinayo 5% caddaynta kormeeraha, ama xeerarka kale ee ku habboon ee Wasaaraddu ogolaatey.

2) Si loo beekhaamiyo mugga qolka qaboojinta ee markabka sida ku cad faqrada (1) xarafka (c) ee qodobkan; dhegaha libaax-badeedka qayb ahaan waa la jarjari karaa oo lagu laabi karaa hilibka libaax-badeedka korkiisa, laakiin waa inaan laga goyn ilaa marsada ugu horeysa ee lagu dejinayo.

3) Hawlwadeenka markabku waa inuu sii daayaa ama fududeeyaa sii deynta sida ugu dhaqsaha badan sinjikasta oo libaax-badeed ah oo aanu sharciga kalluumeysigu oggoleyn si aan ula kac aheyna loo qabto, markii la keeno markabka dhinaciisa asaga oo nool; waana inuu ku sameeyaa arrinkaas sida ugu macquulsan ee loo yareyn karo waxyeelo loo geysto libaax badeedka.

4) Qofna ma soo gadan karo mana iibin karo dhegaha libaax-badeedka laga gooyey oo la soo raray, la sii hayey, la soo wareejiyey ama lagu dejiyay si ka hor imanaysa Sharcigan.

5) Qof kasta oo jebiya farqada (1) (a), (b) ama (c), (2), (3) ama (4) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcign ama xarig aan ka badnayn labo sano, ama labadaba. Weliba, kalluun ama wax soo saar kalluun ee kasta oo aan waafaqsaneyn shuruudaha ku xusan farqada (1) waxaa la wareegaysa Dowladda.

## Qodobka 30
## Mamnuucista Hababka Kalluumaysiga Loo Adeegsado Qaraxyo Iwm, Iyo Ka Ganacsiga Kalluunka Lagu Soo Jilaabto Hababkaas

1) Qofna waa in:

a) Aanu isticmaalin, oggolaanshana loo siin in uu isticmaalo ama isku dayo in uu isticmaalo wax kasta oo qarxa, sun ah ama walax kale oo waxyeello leh, ujeeddadeeduna tahay in lagu dilo, lagu daandaamiyo, lagu naafeeyo kalluunka ama si kasta oo sahali karta in kalluunka lagu soo qabto;

b) Aanu la raacin markab, gaadiid ama wax kasta oo uu leeyahay ama gacanta ku hayo walxaha qarxa, sun ah ama walax kale ah oo waxyeello u geesan kara noole-biyoodka ujeed kasta oo ku xusan xarafka kore ee (a);

c) Aanu dejin, iibin, qaban ama haysan wax kalluun ama wax soo saar kalluun ah, iyada oo la ogyahay ama loo hayo sabab macquul ah oo la rumaysan karo in lagu soo jillaabtay iyada oo lagu xadgudbay xarfaha kore ee (a) ama (b).

2) Waxyaabaha qarxa, sunta leh, ama walxaha kale ee halista ah ee laga helo markabka dushiisa waxaa loo qaadanayaa, in loola jeedo ujeeddo kasta oo ku xusan farqada (1) (a) haddii aan la caddaynin ujeeddo taas ka duwan,

3) Qofkasta oo jebiya faqrada (1) (a), (b) ama (c) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcign ama xarig aan ka badnayn labo sano, ama labadaba. Weliba, kalluun ama wax soo saar kalluun ee kasta oo aan waafaqsaneyn shuruudaha ku xusan farqada (1) waxaa la wareegaysa Dowladda.

## Qodobka 31
## Mamnuucidda Hababka Kalluumaysiga Jariifka Ah

1) Qofna ma isticmaali karo mana dhigan karo shabaagta jariifka isaga oo ka kalluumaysanaya biyaha Soomaaliya.

2) Qof kasta oo jebiya farqada (1) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn labo sano, ama labadaba. Weliba,



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

kalluun ama wax soo saar kalluun ee kasta oo aan waafaqsaneyn shuruudaha ku xusan farqada (1) waxaa la wareegaysa Dowladda.

## Qodobka 32
### Hababka Kalluumeysi Ee La Mamnuucay - Cabbirka Ugu Yar Agabka Kalluumeysiga

1) Wasiirka ayaa xeer hoosaad ku qeexaya shuruudaha cabbirka ugu yar ee agabka kalluumaysiga, wuxuuna ku soo saarayaa faafinta rasmiga, waxaa lagu baahinayaa bogga wasaaradda.

2) Qofna ma isticmaali karo shabaag kalluumeysi oo cabbirka ishiisu ka yar tahay 50mm.

3) Qofna uma adeegsan karo kaluumeysiga agab nooc kasta oo cabbirkoodu ka yar yahay inta uu wasiirku u qeexay si uu u soo qabto kalluunka tarmaya ee jooga aagga taranka.

4) Qof kasta oo jebiya faqrada (1), ama ku xadgudba farqadaha (2) ama (3) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn labo sano, ama labadaba. Weliba waxaa intaas dheer, kalluun ama wax soo saar kalluun ee kasta oo aan waafaqsaneyn shuruudaha ku xusan farqadaha (1), (2) ama (3) ee qodobkaan waxaa la wareegaysa Dowladda.

## Qodobka 33
### Hababka Kalluumeysi Ee La Mamnuucay - Shabaagta Waaf-Qabadka Sabbaysa ee Masaafada Dheer

1) Ujeeddooyinka qodobkaan:

a) "Shabaagta Waaf-Qabadka Sabbaysa ee Masaafada Dheer" micnaheedu waa waafi-qabad ama shabaagyo kale oo la isku xiriiriyay, kuwaas oo dhererkoodu gaaro in ka badan laba kilomitir iyo bar (2.5 km), ujeedadooduna tahay in lagu qabto ama lagu margiyo kalluunka, shabaagtaas oo ku dul sabbeysa biyo sare ama biyo dhexe;

b) "Habeynta" adeegsiga Shabaagta Waaf-Qabadka Sabbaysa ee Masaafada Dheer macnaheedu waa in la soo raro qalab isku xiran oo si wada jir ah markabka ugu oggolaanaya inuu dhigo ama soo ceshado Shabaagta waaweyn ee sabbaysa.

2) Hawlwadeenka markab kasta oo ku jira biyaha Soomaaliya, ama markab kasta oo Soomaaliyeed oo ka hawlgala meelaha ay ka shaqeeyaan Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga amaba haddii kale meelaha ka baxsan biyaha Soomaaliya ma isticmaali karo Shabaagta Waaf-Qabadka Sabbaysa ee Masaafada Dheer.

3) Hawlwadeenka markab waxaa loo arkayaa in uu adeegsaday Shabaagta Waaf-Qabadka Sabbaysa ee Masaafada Dheer marka laga helo markabkiisa dushiisa, isaga oo ka hawlgalaya biyaha Soomaaliya ama meelaha ay ka shaqeeyaan Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga.

4) Sida uu qabo Sharcigaan hawlwadeenka markab loo qaabeeyey inuu adeegsado Shabaagta Waaf-Qabadka Sabbaysa ee Masaafada Dheer, waa inuu hubiyaa in shabaagtaas iyo qalabka kalluumaysiga ee la xiriiraba lagu xareeyo ama loogu xiray markabka qaab aan si fudud loogu kalluumeysan Karin.

5) Hawlwadeenka markab u hogaansami waaya faqradaha (2), (3) ama (4) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn shan sano, ama labadaba. Weliba waxaa sii dheer, qalabka la mamnuucay waxaa la wareegaysa Dowladda, wixii ciqaab kale ah ee Sharcigani ka qabana waa korkiisa.

## Qodobka 34
### Mamnuucid Isticmaalka Diyaaradaha Iyo kuwa Aan Duuliyaha Lahayn

1) Hawlwadeenka markab kasta, ha haado mid taageero, mid saad ama mid gargaar ee ku jira biyaha Soomaaliya ama markab kasta oo Soomaaliyeed oo ka hawlgala meelaha ay ka shaqeeyaan Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga , waa in aanu kalluumaysi u adeegsan diyaarado, sida diyaaradaha aan duuliyaha lahayn, iyo dayax gacameedka ilaa Wasaaraddu oggolaato.

2) Diyaaradaha iyo gaadiid cireedka aan duuliyaha lahayn waxaa loo isticmaalaa ujeeddooyinka la socoshada, xakamaynta ama dabagalidda hab cilmi ah kumana jirto waxyaabaha lagu mamnuucay faqrada (1aad) ee qodobkan.

3) Hawlwadeen kasta oo u hogaansami waaya sharuud kasta oo ku xusan farqada (1), marka laga reebo farqada (2), ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo sharcigan lagu soo saaro.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 35

### Mamnuucidda Isticmaalka Nalalka Macmalka Ah Si Looga Soo Jiito Kalluunka Masaaafooyin dhaadheer

1) Hawlwadeenka:

a) Markab kasta oo ku jira biyaha Soomaaliya oo ku qalabaysan shabaagta wareegsan iyo jeestada kalluumaysiga;

b) Markab taakuleyn, saad ama markab gargaar oo ku jira biyaha Soomaaliya; ama

c) Markab Soomaaliyeed oo ku sugan aagagga ka baxsan biyaha Soomaaliya ee uu ka shaqeeyo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga.

Waa ka mamnuuc isticmaalka, ku rakibidda ama ku shaqeynta nalalka macmalka ah ee biyaha dushooda ama hoostooda lagu ifiyo, oo ay ku jiraan aaladaha gabbaad kalluumeedka, iyada oo ay ujeeddadu tahay isu-geynta ama isu soo ururinta nooc kasta oo kalluun ah.

2) Nalalka badmaridda iyo nalalka lagama maarmaanka u ah hubinta xaaladaha bedqabka shaqada qaybtani ma saamaynayso.

3) Hawlwadeen kasta oo u hogaansami waaya shuruud kasta oo ku xusan farqadda (1) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo sharcigan lagu soo saaro.

## Qodobka 36

### Mamnuucidda Faragalin Ama Burburin Hanti Qof Kale oo dhex taal Biyaha Soomaaliya

1) Marka la joogo biyaha Soomaaliya Qofna kalluun kalama bixi karo shabaag haddii uusan ahayn mulkiilihii, ama uu qofkaasi ku shaqeynayo oggolaansho uu ka helay milkiilaha.

2) Qofna ma faragalin karo, ma burburin karo, ma waxyeelayn karo, si ogaal ama ula kac ahna uma cuuryaamin karo qalab kasta oo shaqeynaya, xarun kalluun beeris ama hanti kale oo uu leeyahay qof kale ama Dowlad, iyada oo aan ogolaansho laga helin milkiilaha ama dowladda, ama haddii loo arko lagama maarmaan in meesha laga qaado si aysan kalluunka iyo deegaankaba khatar ugu keenin, waana in si dhaqso ah Wasaaradda loogu war geliyaa.

3) Qodobkani ma xaddidayo awoodaha qof loo idmaday inuu ka saaro badda walxaha hoos u dhigaya tayada deegaanka badda, ama looga hortagayo daadinta aaladaha ama qalabka aan si aan waafaqsaneyn sharcigaan.

4) Qof kasta oo ku xadgudba farqada (1) ama (2) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn hal sano, ama labadaba.

## Qodobka 37

### Isticmaalka, Markab Ku Haysashada, Soo Dejin, Soo Gadasho, Sii Iibin Qalab La Mamnuucay

1) Wasiirku waxa uu soo saari karaa sharci uu ku mamnuucayo isticmaalka, markab ku haysashada, soo dejinta, soo gadashada, sii iibinta qalabka la mamnuucay.

2) Qofna ma isticmaali karo, markabka korkiisa kuma haysan karo, ma soo dejin karo, ma soo gadan karo, ma sii iibin karo qalabka wasiirku uu sharcigan ku mamnuucay sida ku cad farqada (1).

3) Qofna ma isticmaali karo, ma abaabuli karo umana oggolaan karo in la isticmaalo, hawlwadeen markab kuma qaadi karo qalab ilaa iyo inta looga fasaxayo ama looga oggolaanayo shatiga qalabka la xiriira, oggolaansho ama fasax aan ka aheyn qalabka mamnuuca ah waa lagu qaadi karaa Markabka marka uu hawlwadeenku qalabka u soo sheego Agaasimaha Guud ka hor inta aanu soo galin biyaha soomaaliya isla markaana uu qalabka ku haysto markabka oo aanu dhigin inta uu ku jiro biyaha soomaaliya.

4) Qof kasta oo ku xadgudba farqada (2) ama (3) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba. Waliba qalabka la mamnuucay waxaa la wareegaysa Dowladda.

## Qodobka 38

### Mamnuucidda Bad uga Tagista Ama ku Tuuridda Qalab, Kalluun ama Wax Soo Saar Kalluun

1) Qofna si kas ah ama kama' ah ugama tagi karo ugumana tuuri karo qalab, kalluun ama wax soo saar kalluun oo la nacay biyaha Soomaaliya ama meelaha ka baxsan xeer-xeyndaab qaranka, ha ahaado muwaadin Soomaaliyeed ama markab Soomaaliyeed hala socdee;.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2) Qof kasta oo ku xadgudba farqada (1) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysnayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba.Weliba qalabka la mamnuucay waxaa lawareegaysa Dowladda.

**Qodobka 39**

**Mamnuucidda Wax ka Badelka Cadeemaha Kalluunka Iyo Wax Soo Saar Kalluun Ee La Soo Baaray**

1) Marka laga reebo Oggolaansho Qoraal ah oo Agaasimaha guud uu soo saaro; Qofna looma oggola;

a) In uu ka gooyo, beddelo ama farageliyo faahfaahinta la socota badeecada ganacsiga, Sajalka, shaabbadda, ama calaamadaha kale ee loo adeegsado kontaneerka ama nidaamka kontaneerada ay ku jiraan kalluun ama wax soo saar kalluun, kaas oo uu soo baaray sarkaal kalluumaysi oo idman;

b) in uu wax ku daro, wax ka reebo, ama haddii kale uu wax ka beddelo caddeynta ama shixnad kasta oo kalluun ah taas oo uu soo baaray soona hubiyey qof loo idmay; ama

c) Inuu furo ama ka jeexo sajalka sanduuqyada uu soo baaray sarkaalka idman ee kalluumeysiga.

2) Qof kasta oo ku xadgudba farqada (1) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysnayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba.Weliba kalluunka ama wax kasta oo kalluun ka yimaada waxaa lawareegaysa Dowladda.

**Qodobka 40**

**Mamnuucid Haysasho, Ka Ganacsi, Dhoofin Kalluun Ama Wax Soo Saar Kalluun Ee Lagu Helay Ama Lagu Qabtay Si Ka Hor Imanaysa Sharcigan Ama Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga Ah.**

1) Qofna ma soo gadan karo, iibin karo, haysan karo, dhoofin karo kalluun ama wax kasta oo kalluun ka yimaada oo lagu helay ama lagu qabtay si ka hor imanaysa sharcigan ama Hannaanka Maaraynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah marka laga reebo in kalluunkaas ama wax kasta oo kalluun ka yimaada uu noqday hanti dawladeed kadib markii ay la wareegtay.

2) Qof kasta oo ku xadgudba farqada (1aad) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysnayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba.Weliba kalluunka ama wax kasta oo kalluun ka yimaada waxaa lawareegaysa Dowladda.

3) Marka qof lagu soo oogo fal-dembiyeedka ku xusan faqrada (1aad), waxaa laga rabaa in uu soo caddeeyo sifada uu kalluunka ku soo gatay, ku iibiyey, ku haystay, ku dhoofiyey ama sidii kale ee ay ahaataba, in ay waafaqsan tahay sharcigan iyo Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ahba.

**Qodobka 41**

**Mamnuucid Ka Ganacsi Kalluun iyo Wax Soo Saar Kalluu oo ka Hor Imaaneya Sharci Dawlad Kale**

1) Awooddiisa ha ahaato ama awood kale ha ahaatee qofna:

a) Uma fududeyn karo umana fasixi karo qof wakiil ka ah inuu qaato, gado, iibiyo, soo dhoofsado, dhoofiyo, soo dejiyo, rar u kala wareejiyo, gaadiid ku daabulo, ka ganacsado, ama helo kalluun ama wax kasta oo kalluun ka yimaada oo lagu soo dabtay si ka hor imaanaysa sharciyada Dawlad kale ama Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga, laakiin kuma jiraan kalluunka laga soo dabto biyaha caalamiga ah, taas oo Soomaaliya aanay u aqoonsanayn in kalluunkaasi ay dowladdaasi leedahay;ama

b) ma adeegsan karo ama u oggolaan karo markab loo adeegsado kalluumeysi ama hawlaha la xiriira ujeeddada ku xusan xarafka (a).

2) Marka laga soo tago sida ku xusan qodobkan, marka kalluunka ama wax kasta oo kalluun ka yimaada ay sida ku xusan sharcigan uu noqdo hanti dawladeed, amar maxkamadeed ama nidaam sharci ah ayaa lagu iibin karaa, lagu dhoofin karaa ama haddii kale qofkii raba lagula macaamili karaa si la mid ah hantida kale ee dawladda, mana noqon doono wax soo saar sharci darro ah, ama kalluumeysi aan sharciyeysnayn,iwm.

3) Qof kasta oo ka hor yimaada shuruud kasta oo ku xusan faqrada (1aad) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysnayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba; weliba kalluunka iyo wax kasta oo kalluun ka yimaada waxaa la wareegaysa Dowladda.

4) Marka laga yimaado sharci kale oo Soomaaliyeed, faham khaldan laguma difaaci karo xadgudub ku xusan qodobka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 42

## Mamnuucid Maraakiibta Ku Jirta Liiska Maraakiibta Kalluumeysiga Sharci Darrada Ah (IUU), oo Ay Gacanta Ku Hayso Hay'adda Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga.

1) Ujeeddooyinka qodobkaan, "markab liis garaysan" waxaa loola jeedaa markab ku jira liiska maraakiibta sharci-darrada ah, aan la soo sheegin iyo kuwa aan xakameysneyn ee ay hayso Hay'adda Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga.

2) Qofna Hawlwadeen kama noqon karo, markab Soomaaliyeed, ha ahaado mid kalluumeysi, mid gargaar, mid shidaal (saad), markab weyn oo maraakiibta kale ka saad qaataan ama markab xamuul:

a) Si uu u siiyo, ugu fududeeyo ama loo gacan siiyo si kasta ha ahaatee "markab liis gareysan" marka laga reebo in ujeeddadu tahay gacan siinta markabka ama qof saaran, in uu khatar ama dhibaato ku sugan yahay mooyee;

b) Si uu gacan uga geysto hawlaha hagaajinta kalluumaysiga ee markab liis garaysan;

c) Si uu uga qeybqaato, ama u fududeeyo diyaarinta ka qeyb qaadashada kala wareejinta ama kalluumeysiga wadajirka ah ee "markab liis garaysan"

d) Si loo kireeyo ama qaab kasta oo loola xiriiro si loo kireysto "markab liis garaysan".

3) Qofna ma kontorooli karo, qabanqaabin karo, mana fududeyn karo in qof kale uu koontroolo ama habeeyo ama ka qayb qaato hawlaha soo dhoofinta, soo dejinta ama ka wareejinta rarka nooc kasta markab u liis gareysan Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga.

4) Qofna waa in aanu:

a) Iibin markab liis garaysan ama beddelin sharciga lahaanshahiisa, ama soo iibsanin markab kale iyada oo ujeeddada ugu weyn tahay sii wadidda gacan ku haynta markabka liiska ku jira ama markab cusub oo lagu sii socdo howlaha kaluumeysiga ee sharci darada ah; ama

b) ku shaqeyn markab liis garaysan oo la iibiyey ama haddii kale la beddelay sharciga lahaanshahiisa sida ku cad faqrada 4-aad ee qodobkan xarafka (a).

5) Markab liis gareysan;

a) looma oggolaanayo lagamana diiwaangelinayo Soomaaliya marka laga reebo in markabka la kala iibsaday oo milkiilaha cusub uu keeno macluumaad dhammeystiran oo muujinaya in milkiilahii ama hawlwadeen hore aanu ku lahayn sharciyad, faa'iido ama dan dhaqaale, ama aanu xukumin markabka, iyada oo la tixgelinayo dhammaan dukumiintiyada la keenay, waxaana la go'aaminayaa in markabka la siiyo calankiisa aanay ka dhalan doonin kalluumeysi sharci-darro ah; ama

b) looma fasaxi doono in uu ku soo xirto deked kasta oo Soomaaliyeed marka laga reebo in ay dhacdo in markabka, ama dad saaran ay khatar ama dhibaato ku sugan yahiin mooyee, taas oo ujeeddo gaar ah loogu oggolaaday inuu dekedda ku soo xirto iyada oo la baarayo lana fulinayo hawl ay tahay in la fuliyo.

6) Qof kasta oo ka hor yimaada shuruud kasta oo ku xusan faqradaha (2), (3) ama (4) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysnayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn shan sano, ama labadaba. Waliba markabka iyo waxa saaran sida qalabkiisa iyo kalluunka ama wax kasta oo kalluun ka yimaada waxaa la wareegaysa Dowladda, markabkaasna lama siin doono ruqsad ama oggolaansho sida uu qabo sharcigan muddo ugu yaraan shan sano ah; diiwaanka maraakiibta Soomaaliyeedna waa laga tiri doona.

## Qodobka 43

## Mamnuucidda Maraakiib Aan Dalna Ka Diiwaan Gashaneyn

1) Ujeeddooyinka Sharcigan, **"markab aan dalna ka diiwaan gashaneyn"** waa markab loo adeegsado kalluumeysi ama hawlo la xiriira oo aan dal gooni ahi laheyn, balse wata oo ku shaqeysta calamo ilaa labo dal iyo wax ka badan isaga oo isticmaalaya hadba kii la habboonaada,

2) Marka markab kasta oo aan dal ka diiwaan gashaneyn kuna hawlan kalluumeysi ama wax la xiriira meelaha uu ka hawlgalo Urur Goboleedka Maareynta Kaluumeysiga, kaasoo ansixiyey Hannaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamig a ah ee khuseeya kalluumeysiga ama hawlaha la xiriira; markabka noocaas ah waa sharci darro, waana:

a) In laga mamnuuco in uu ka soo dejiyo ama markab kale kalluunka ku wareejin ama wax soo saar kalluun gudaha biyaha Soomaaliya, ama meelaha ka baxsan xeer-xeyndaabka biyaha Soomaaliya isaga oo la xiriiraya markab Soomaaliyeed;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

b) In loo diido in uu ku xirto iyo in uu isticmaalo deked kasta oo Soomaaliyeed:

c) Marka laga soo tago faqrada (b), waxaa loo oggolaan karaa in uu biyaha dhex maro oo keliya, marka ay lagama maarmaan u tahay badbaadada iyo caafimaadka shaqaalaha markabka saaran, loomana oggolaan doono wax ka baxsan ujeeddadaas, sida hawlo kale iyo in uu isticmalo deked.

3) Hawlwadeen, qof ka shaqeeya ama qof kasta oo xiriir la leh ama gacan siinaya markab aan dal ka diiwaan gashaneyn oo ku soo xirta, xamuul ku dejiya ama isticmaala deked soomaaliyeed isla markaana jebiya faqrada (2) (a) ama (b) ee qodobkan wuxuu galayaa dembi waxa uuna mutaysnayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan, ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba. Iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigan, ruqsadda ama oggolaanshaha uu watana waa lagala noqonayaa, kalluunka ama wax kasta oo kalluunka ka yimaada ee uu sidana waa lala wareegi doonaa.

## CUTUBKA 4-AAD

## SHURUUDAHA GUUD EE KALLUUMEYSI, KALLUUN BEERIS IYO HAWLAHA KALE

### Qodobka 44

### Sharci U Hoggaansamidda Dadka Haysta Ruqsad, Ogolaansho Ama Fasax Kale

1) Qofka haysta ruqsad, ogolaansho ama fasax kale oo loo siiyay si sharcigan waafaqsan waa in uu:

a. u hoggaansamaa heshiiska iyo shuruudaha ruqsada, oggolaanshaha ama fasaxyada kale;

b. u hoggaansamaa Sharcigan, dhammaan sharciyada kale ee Soomaaliya, heshiis kasta oo caalami ah oo khuseeya, oo ay ku jiraan heshiiska oggolaanshaha kalluumeysiga iyo hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah;

c. ka qeyb gelin howl hoos timaada sharcigan isaga oo aan haysan ruqsad, oggolaansho ama fasaxyo kale.

2) Qof kasta oo ku xadgudba farqadda (1), xarfaha (a) (b) ama (c) wuxuu galay dembi, haddii isla dambigaas aanu sharcigani si kale u xukumin, waxa uu ku muteysanayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu xusay Jadwalka Koowaad ama xabsi aanay muddadiisu ka badneyn shan sano, ama labadaba, ruqsadana waa la hakin karaa ama lagala noqon karaa.

### Qodobka 45

### Shuruudaha warbixinada

1) Qof kasta, oo uu ku jiro hawlwadeenka markab kasta, oo looga baahan yahay inuu warbixin u diyaariyo si waafaqsan sharcigan ama waafaqsan hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga, warbixinnada noocaan ahi waa in:

a) ay ahaadaan kuwo run ah, sax ah oo dhinac kasta ka dhammaystiran;

b) uu si sharcigan waafaqsan u diyaariyey qof ama Markab haysta ruqsad ama oggolaansho; ama wakiil la aqoonsan yahay;

c) Loo soo gudbiyay sidii iyo qaabkii loo baahnaa;

d) Lagu soo gudbiyey waqtigii loo baahnaa;

e) Loo gudbiyey qofka ama hay'addii loogu talo galay;

f) La caddeeyay, la xaqiijiyay ama loo sharciyeeyay sidii looga baahnaa.

2) Qofna kama been sheegi karo, iskama allifi karo, ma leexin karo ama ma soo gudbin karo warbixin been ah, aan sax ahayn, marin habawsan ama aan dhan walba ka dhameystirneyn.

3) Qofna dukuminti ahaan uma soo gudbin karo rasiidyada iibka, halkii laga rabey warbixinta kalluunkii uu jillaabtay, sida sharcigani dhigayo.

4) Haddii si sharcigan waafaqsan qiyaas loogu sameynayo caddadka kalluun ee la jillaabtay, qofna ma soo gudbin karo qiyaas haddii aanu adeegsan:

a) nidaam qiyaaseed rasmi ah oo ay Wasaaraddu aqoonsan tahay; iyo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

b) Halbeeg caddeyneed Wasaaradda u baahan tahay oo lagu qanco.

5) Qof kasta oo jebiya qodobbada ama farqadda (1) (a), (b), (c), (d), (e) ama (f), (2), (3) ama (4) ee qodobaban waxa uu galay dambi uu ku muteysanayo ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn seddex sano; ama labadaba, iyo wixii kale oo ciqaab ah ee sharciganí dhigayo, waxaana laga joojinayaa ruqsadaha, oggolaanshaha ama fasaxyada kale ee la xiriira.

## Qodobka 46
## Masuuliyadaha Dawlad Goboleedyada Ka Saaran Maaraynta Kalluun Beerista

Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, marka ay si sharcigan waafaqsan u fulinayaan waajibaadka ka saaran maaraynta, horumarinta iyo ruqsad bixinta kalluun beerista, waa in ay ilaa iyo intii suurtagal ah:

a) hubiyaan in horumarinta kalluun beeristu tahay mid deegaan ahaan waaraysa;

b) Dejiyaan qorshe lagu horumarinayo kalluun beerista.

c) Bixiyaan ruqsadaha ganacsiga kalluun beerista, kuwaas oo ku xiran nadaafadda, kormeerka iyo xaaladaha kale ee ku habboon hawlgalka.

d) Kobciyaan wadashaqeynta hay'adaha dowladda ee maxalliga ah iyo kuwa degmooyinka, oo ay ku jiraan ujeeddooyinka la socodka hawlaha ganacsiga iyo kuwa aan ganacsiga ahayn ee kalluun beerista.

e) Hubiyaan hab-nololeedka, dhaqanka iyo caadooyinka bulshada maxalliga ah iyo goobaha ay ka kallumeystaan aysan waxyeelo ka soo gaarin horumarinta kalluun beerista.

f) ka hortagaan baxsashada, oo ay dejiyaan talaabooyinka la qaadayo haddii baxsi dhaco;

g) Hubiyaan shaqaalaha kalluun beeristu qashinka ka dhasha kalluun beerista aanu waxyeelo ama halis u geysan goobta ruqsada loo siiyay, lana hubiyo in sidii loogu talagalay looga ilaaliyo in uu qashinku bido, biyaha ku milmo ama uu u daadraaco goobo kale.

h) Ka mamnuucaan in kalluun beerista loo isticmaalo daawo ama kiimikooyin kale oo loogu talagalay daweynta cudurrada kalluunka ama dedejinta korriimada kalluunka haddii aan oggolaansho qoraal ah laga helin wasaaradda dowlad Goboleedka ay khusayso iyadoo la tashi la sameyneysa xarunta cilmibaarista ee Wasaaradda Kalluumeysiga ee heer Fedaraal.

i) Mamnuucaan ku xadgudubka ama burburinta qalabka yaalla goobta kalluun beerista;

j) yeeshaan awood ay ku soo ururiyaan macluumaadka iyo xogta ku saabsan xayaawaanada aan rabbaayadoobin iyo sinjiyada la hidda dooriyay ayada oo ujeeddadu tahay in la daraaseeyo saameynta ay ku yeelanayaan kalluun beerista;

k) La shaqeeyaan Wasaaradda iyo maamul goboleedyada kale ee ay khuseyso, oo ay ku jiraan marka ay howlaha kalluun beeristu xuduud wadaaga saamayn ku yeelanayaan; iyo

l) Qaadaan tallaabooyin iyo ficilo kale oo lagama maarmaan u noqon kara gudashada waajibaadkooda.

## Qodobka 47
## Bandhigid, wareejin, dhoofin, soo dejin iyo sii deyn kalluun nool

1) Qofna ma qaban karo howlaha soo socda ee la xiriira ganacsi kalluun beeris iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Agaasimaha Guud sida in:

a) La dhigo meel, looga tago ama si kale loo sababo in la dhigo sinji kalluun oo nool meel ka mid ah Biyaha Kalluumeysiga, marka laga reebo haddii:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

I.sinjiyada kalluun ee halkaa la dhigayaa ay intaan lasoo jillaaban ka hor ku jireen biyo kuwa lagu ridayo kala mid ah dhan walba; ama

II.Kalluun beertuhu kalluunka uu baraaktiisa ku shubanayo uu kasoo qaatay kalluun beerte kale oo ay biyaha isku meel ka qaataan;.

b) la keeno ama la sababo in la keeno Dalka ama biyaha kalluumeysi wax sinji kalluun ah;

c) la Kala wareejiyo ukumaha, kalluunka aad u yaryar ama lulumo shisheeye ama sinjiyada hiddahooda la dooriyay ama hidde ahaan wax laga beddelay ama noocyada kalluunka qaan-gaarka ah oo laga qaadayo goob kalluun beeris Dalka ku taalla ee la geynayo meel kale oo Soomaaliya ah;

d) soo-dejinta ama dhoofinta kalluunka nool iyada oo ujeedadu tahay ka ganacsiga kalluun beerista; ama

e) In lagu sii daayo kalluun biyaha kalluumeysiga kalluun aan aheyn midka maxaliga ah ee laga qabtay biyaha Soomaaliya.

2) Qofkii ku xadgudba farqadda (1) carfaha (a), (b), (c), (d) ama (e) wuxuu galay dembi uu ku muteysanayo ganaax lacageed oo aan ka badneyn qadarka ugu badan ee lagu xusay Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn shan sano ama labadaba.

**Qodobka 48**
**Awood Baaritaan Iyo Qabasho Kalluun Jirran Ama Qaba Cudur Faafa, Kaas Oo Loogu Talagalay Soo-Dejin Ama Dhoofin**

1) Agaasimaha Guud wuxuu kormeeri karaa ama amri karaa in la baaro kalluun kasta oo la keeno ka hor ama ka dib marka la soo dajiyo ujeedadana tahay in lagu beero berked kalluumeed, ama uu kormeero ama amro in la baaro kalluun kasta oo lagu soo saaro hawlo kalluun beeris kaas oo loogu talo-galay dhoofin.

2) Agaasimaha Guud wuxuu amri karaa qabashada, heynta, karantiilka, jeermis dilka ama baabi'inta kalluun nool oo la soo dhoofiyay ama la doonayo in la soo dhoofiyo ama la sii dhoofiyo ayada oo ujeedadu tahay in la beerto, wuxuuna tallaabooyinkaas qaadayaa haddii la caddeeyo in kalluunka ama sinjiyada kalluunku jirran yihiin ama cudurrada faafa qabaan.

**Qodobka 49**
**Keydinta Agabka**

1) Hawlwadeenka;

a) markab ku sugan biyaha Soomaaliya meel ka mid ah, ama meel kasta iyo goor kasta, oo aan heysan ruqsad ama oggolaansho kalluumeysi ama howlo la xiriira.

b) Markab Soomaaliyeed oo ku sugan goob ka baxsan biyaha Soomaaliya ka taliso, halkaas oo aan si sharcigan waafaqsan loogu idman in uu ka sameeyo kalluumeysi ama howlo la xiriira;

Waa inuu hubiyaa in la xareeyay dhammaan agabka kulluumaysiga ee markabka saaran, laguna xafidaa meel aan si fudud looga soo qaadan karin si loogu kalluumeysto.

2) Hawlwadeenka markab ee ku xadgudba farqadda (1) (a) ama (b) ee qodobkan wuxuu galay dembi uu markii lagu helo uu ku mutaysan doono ganaaxa lacageed ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn saddex sano ama labadaba, iyo wixii kale ee ciqaab ah oo uu sharcigani dhigayo, ruqsada ama oggolaanshaha markab kana waa laga noqonayaa.

**Qodobka 50**
**Shuruudaha Looga Baahan Yahay Muwaadiniin Soomaliyeed Iyo Maraakiibtooda Ee Ku Sugan Meelaha Ka Baxsan Xeer-Xeyndaabka Qaranka**

1) Qofna kuma isticmaali karo markab Soomaali leedahay:

a. Meelaha uu ka taliyo waddan kale marka laga reebo inuu raaco sharciyada waddan kaas; ama

b. Inuu ka qeyb qaato howlo ka socda biyaha caalamiga ah ama meelaha ay maamusho Dowlad kale taas oo:

I.aanan waafaqsaneyn heshiis la adeegsan karo; ama

II.wiiqaysa dhaqan galka Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah.

2) Dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo hawlwadeenada maraakiibta Soomaaliyeed ee ku sugan goobaha ka baxsan talada dalka waa inay u hoggaansamaan:

a. Hannaanka Maareeynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ee la adeegsado; iyo

b. Shuruucda waddamada kale, marka ay ku sugan yihiin meelaha ay ka taliyaan wadamadaasi.

3) Haddiii markab Soomaaliyeed loo isticmaalo howlo ku xadgudbaya shuruudaha ku qoran farqadda (1) ama (2), hawlwadeenka markabkaasi wuxuu galay dembi, wuxuuna muteysanayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu xusay Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn Shan sano, ama labadaba.

4) Haddii muwaadin soomaaliyeed uu ku xadgudbo farqada (2) wuxuu galay dambi uu ku muteysanayo ganaax lacageed oo aan ka badnayn lacagta ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn shan sano, ama labadaba.

## Qodobka 51
## Shuruudaha Xaaladaha Shaqada Ee Shaqalaha saaran maraakiibta qaarkood

1) Hawlwadeenka:

a) Markab Soomaaliyeed oo jooga gudaha ama meel ka baxsan biyaha Soomaaliya:

i. Oo dherekiisu yahay afar iyo labaatan mitir (24m) guud ahaan ama ka badan; ama

ii. Oo dhererkiisu ka yar yahay afar iyo labaatan mitir guud ahaan oo badda ku jiray muddo saddex maalmood ah ama ka badan ama u gudbay meel ka baxsan biyaha Soomaaliya; iyo

b) Markab shisheeye oo haysta ruqsad ansax ah oo la adeegsan karo, oggolaansho ama ruqsad kale loo siiyay howl kasta oo ka mid ah sharcigan,

Waa inay u hogaansamaan dhammaan shuruudaha la dabaqikaro ee ku cad shuruucda Soomaaliyeed, heshiisyada kalluumaysi lagu gaaray iyo kuwa Heerarka caalamiga ah xadidayaan ama shuruudaha Wasaaraddu Dalbanayso ee la xiriira shaqalysiinta ayadoo ogaysiis guud bixinaya, ayadoo ay ku jirto Heerarka Shaqada kalluumaysi ee lagu sheegay Axdiga Caalamiga ah ee Shaqaalaha Aduunka, 2007 (Lr. 188).

2) Shaqsi kasta ee jabiya qodobka ama ku gala dambi wuxuu mutaysanayaa ganaax aan ka badnayn sida ku cad Jadwalka Labaad ama Xabsi aan ka badnayn 10 sano ama labadaba, waxaana laga joojin karaa Ruqsada iyo oggolaanshiyaha kale, xalaada uu ku dhaco xadgudub keena dhaawac qofeed ama khasaaro nafeed waxaa loo diidikaraa ruqsada iyo oggolaanshaha kale ee ku gudanayo howlo sharcigan gudihiisa, ama inuusan sifa kale uga shaqayn wixii la xiriira kalluumaysiga Soomaaliyeed muddo aan ka yarayn Shan sano laga soo bilaabo waqtiga dhacdada.

## Qodobka 52
## Mamnuucidda Shakhsiyaad Ka Tirsan Ama Xiriir La Leh Koox Dambiilayaal Caalami Ah Oo Ku Howlan Jabinta Xeyndaabka Sharcigaan

1) Qofna, asagoo xubin ka ah ama xiriir la leh koox dambiilayaal caalami ah, looma oggolaan doono inuu ka shaqeeyo howl ku lug leh sharcigaan, wixii ruqsad, oggolaansho ama fasax kale ah ee la siiyay ayada oo aan laga warqabin ka mid ahaanshihiisa kooxda, waa lagala noqonayaa markii la helo caddeyn macquul ah oo xubinnimadiisa ku saabsan.

2) Qofkii ku xadgudba farqadda (1) wuxu galay dambi uu ku muteysanayo ganaax lacageed oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu xusay Jadwalka Koowaad ama muddo xabsi ah oo aan ka badnayn 10 sano, ama labadaba, qofkaasna lama siin doono ruqsad, oggolaansho ama fasax kale oo ku saabsan sharcigan ugu yaraan muddo toban sano ah laga soo billaabo markii sharcigan lagu heshiiyay.

## Qodobka 53
## Badeecad Ku Kala Wareejin Maraakiib Dekadaha Soomaaliya, Biyaha Soomaaliya Iyo Meelaha Ka Baxsan Biyaha Soomaaliya Ka Taliso

1) Qofna kuma lug yeelan karo, ma taageeri karo lamana xiriiri karo howlo rar kala wareejin ah:

a) Wixii la xiriira markab shisheeye oo ku sugan biyaha Soomaaliya meel aan aheyn dekaddii loogu talagalay howlaha noocaas ah oo uu oggolaaday Wasiirka Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah, marka laga reebo haddii:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

i.Uu Agaasimaha Guud cadeeyo inaan lagu tegi karin dekaddii loo socday muddo macquul ah, iyadoo lagu saleynayo talo bixinta Xafiiska maareeyaha dekedda;

ii.Hawlaha kala wareejinta waxaa kormeeraya sarkaalka kalluumeysiga ee idman ama kor joogaha hadba kii loo baahdo; ama

b) Markuu yahay markab Soomaaliya, oo ku sugan biyaha Soomaaliya; oo uusan joogin dekad loogu talagalay howlaha noocaas ah oo uu oggolaaday Wasiirka Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah, marka laga reebo;

i.In Markabku uu haysto oggolaansho ansax ah oo loo soo saaray si uu rar ugu kala wareejiyo biyaha Soomaaliya ama deked kale si sharcigan waafaqsan;

ii.In uu joogo meel ka baxsan meelaha uu ka taliyo sharciga dalka, iyadoo loo eegayo Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ee khuseeya.

2) Qof kasta oo ku xadgudba faqrada (1) (a) ama (b) ee qodobkan waxa uu galay dembi wuxuuna mutaysanayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba.

## CUTUBKA 5-AAD
## SHURUUDAHA OGGOLAANSHAHA KALLUUMEYSIGA

### Qodobka 54
### Shuruudaha Laga Doonayo Dhammaan Maraakiibta Shisheeye Ee Kalluumeysiga Si Ay U Soo Galaan Una Joogaan Biyaha Soomaaliya

1) Hawlwadeenka markab kalluumeysi ma soo geli karo biyaha Soomaaliya haddii uusan:

a) Markabku haysan ruqsad ansax ah oo ku habboon oo lagu soo saaray Sharcigan; ama

b) Markabku u soo gelin ujeedo ah inuu helo ruqsad, uuna heysto ogolaansho soo gelitaan oo ay bixsay Wasaaraddu.

2) Hawlwadeen markab kalluumaysi oo shisheeye, kaas oo haysta ruqsad ama oggolaansho soo gelitaan ee looga baahan yahay sida ku xusan faqradda (1), iyo maraakiibta kale ee kalluumaysi shisheeye ee wasiirku ku soo saaray bayaan cad, waana inay si toos ah uga soo war geliyaan wasaaradda aaga markabka iyo macluumaadka kale ee ay uga baahan tahay, iyada oo la adeegsanayo Nidaamka Dabagalka Maraakiibta iyo Nidaamka Macluumaadka Tooska ah ama hadba sida loogu baahdo in lagu soo diro aaladda isgaarsiinta tooska ah ( e-mail).

a) 24 saac ka hor soo gelitaanka ama ka bixidda biyaha Soomaaliya; iyo

b) si joogta ah markasta oo ay ku sugan yihiin biyaha soomaaliya xiliyada u cayintey Wasaaradda.

3) Hawlwadeenka markab kasta oo shisheeye waa inuu hubiyaa in markabku uusan ka kaluumeysaneynin badda Soomaaliya ama aag kale oo lagu mamnuucay sharcigan ama sharciyada Soomaaliya.

4) Hawlwadeenka markab kalluumeysi oo shisheeye oo ku xadgudba farqadaha (1) (a) ama (b), (2) (a) ama (b) ama (3) ee qodobkan waxa uu galay dembi wuxuuna muteysan doonaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad, iyo in wixii ruqsado ah la hakiyo muddo la'eg intii Wasaaraddu u arakto inay ku habboon tahay laakiin aan ka yarayn hal bil.

### Qodobka 55
### Oggolaansho Kalluumeysi

1) Iyadoo la tixracayo tilmaamaha sharcigan, lana dabaqayo qorshaha maareynta kalluumeysiga, heshiisyada caalamiga ah iyo sharciyada kale ee caalamiga ah, iyo qorshaha horumarinta qaranka, islamarkaana la txigalinayo tilmaamaha caalamiga ah, ee khuseeya in ay wasaaraddu gali karto heshiisyo u ogolaanayo in maraakiibta shisheeye soo gali karaan biyaha Soomaaliya si ay uga kalluumeystaan.

2) Heshiiska qoraalka ah ee ku xusan farqada (1) ee qodobkan waxa uu noqon karaa qaab heshiis caalami ah, heshiis wada lahaansho ah, heshiis kiro ama heshiis qoran oo lala galay:

a) Dawlad;

b) Ururka isdhexgalka dhaqaalaha gobolka;

c) Urur kalluumeysato ama urur doonley ama hay'ad la mid ah;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d) Shirkad saamiley ah;

3) Wasaaraddu, kahor inta aysan galin heshiiska oggolaanshaha kalluumeysiga, waa in ay hubisaa in:

a) Qodobbada heshiisku ay waafaqsan yihiin Sharcigan iyo heshiis kasta oo caalami ah iyo heshiiska maareynta kalluumeysiga ama hannaan Soomaaliya qeyb ka tahay;

b) Markab kasta oo qeyb ka ah heshiiska iyo hawlwadeenkiisa, kabtankiisa iyo Milkiilihiisa:

i.Uunu Ku lug lahaanin ama lagu tuhmin ku lug lahaanshaha hawlo kalluumaysi oo sharci-darro ah, meel ka mid biyaha Soomaaliya shantii sano ee ugu danbaysay heshiiska ka hor; iyo

ii.Haddii garsoore maxkamadeed ama maamul ay go'aamiyaan in hawlo kalluumaysi oo sharci-darro ah ay dheceen, waa in loo hoggaansamaa xukunka maxkamada iyo go`aamada ka soo baxa.

c) Kalluumeysiga ama howlaha la xiriira ee markabku aysan ku reebin saameyn xun oo toos ah ama dadban aayaha kheyraadka kalluumeysiga Soomaaliya ama hab-wadanoolaanshaha Badda; iyo

d) Ay jiraan faa'iidooyin cad oo gelitaanka heshiiska u leeyahay Soomaaliya.

4) Wasaaraddu ma geli doonto heshiis, mana fasixi doonto in la adeegsado ruqsad, oggolaansho ama fasax kale oo la bixiyay, ilaa heshiisku uu waafaqsan yahay shuruudaha ku xusan qodobkan mooyaane.

5) Wasaaradda iyadoo tixgelinaysa sharciga waxay go'aan ka qaadanaysaa heshiis kasta oo la xiriira ogolaanshaha gelitaanka;

a) Qiyaas ahaan Qiimaha dhaqaale ee soogelitaanku uu u leeyahay dhinaca kale; iyo

b) Qiimaha khidmadda la gooyay iyo faa'iidoonyinka kale ee loo baahan yahay ay u leeyihiin Soomaaliya, marka laga reebo kaalmada horumarinta ama dheefaha aan la xiriirin qiimaha oggolaanshaha soo gelitaanka.

6) Soo gelitaanka waxaa loo oggolaan karaa oo keliya haddii laga leeyahay ujeeddooyin kalluumeysi ama howlo la xiriira oo laga sameynayo biyaha Soomaaliya ama deked loo asteeyey.

7) Sida ugu habboon, Wasaaraddu waxay la tashanaysaa hay'adaha ay khuseyso ee Dowladda Federaalka, Dowladaha xubnaha ka ah DFS iyo Daneeyayaasha ay khuseyso arrimaha ku saabsan horumarinta, gunaanadka iyo hirgelinta heshiiska.

8) Lama siin karo ruqsad ama wax oggolaansho kalluumeysi ah ama hawlo la xiriira markab kasta oo shisheeye ilaa fasax ogalaansho kalluumeysi la gudoonsiiyo si waafaqsan sharcigan, oo ay ansax tahay inta uu laalan yahay ruqsada ama oggolaanshaha, taas oo sharcinimadeedu **ku** egtahay xiliga dhamaadka ruqsada, ruqsaduna **waxay** dhacayaa isla waqtigaas.

9) Heshiis kasta oo la xiriira arrimaha kalluumeysiga iyo dhaqaalaha buluugga ah ee ay wasaaraddu la gasho dal ama shirkad shisheeye waa inay Golaha shacabka horkeenaan mudo bil gudaheed ah.

## Qodobka *56*

## Shuruudaha Oggolaanshaha Kalluumaysi

Waxaa intaa dheer, shuruudo ama xaalado kasta oo oggolaansho kaluumeysi ah, kaas oo uu qorayo ama dalbanayo heshiis kasta oo Wasaaraddu gasho waxaa looga baahan doonaa:

a. In dhinaca kale ee heshiiska iyo naaquudaha dhammaan maraakiibta heshiisku khuseeyo ay u hoggaansamaan Sharcigan iyo dhammaan sharciyada kale ee Soomaaliya ee khuseeya;

b. Hawlwadeenka markab kasta oo heshiiskan ku jira waa inuu ruqsad ama fasax ansax ah ka haysata dalka uu markabku ka diiwaan gashan yahay si uu uga sameeyo kalluumeysi ama howlo la xiriira meelo ka baxsan biyaha Soomaaliya;

c. Dhamaan maraakiibta heshiiska ku jirta waa in ay meel wanaagsan kaga jiraan liiska Urur Goboleedka Maareytan Kalluumeysi ama diiwaan lamid ah Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga, heshiiskuna si toos ah ayuu u burayaa hadii markabka laga saaro diiwaanka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d. Markab qeyb ka ah heshiiskan oo ku jira liiska maraakiibta sharci darrada ah, oo ay gacanta ku hayso hay'ada maareynta kalluumaysiga Gobolka, heshiiska iyo ruqsada lagu soo saaray toos ayaa loo joojinayaa haddiiba markabku uu ku jiro liis noocaas ah;

e. Dhinaca kale ee heshiiska iyo dhammaan hawlwadeenada maraakiibta heshiiska ku jira waa inay qaadaan dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee looga baahan yahay si loo hubiyo u hoggaansanaanta heshiiska iyo Sharcigan;

f. Markab ama hawlwadeen kasta oo aan si buuxda ugu hogaansamin heshiiska, sharcigan ama hannaanka Maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah waa loo diidayaa cusboonaysiinta ama siinta ruqsada, oggolaanshaha ama fasaxa kale oo hoos yimaada heshiiska oggolaanshaha gelitaanka illaa toban sano;

g. Marka laga hadlayo heshiis lala galay shirkad, urur ama hay'ad oo ay matalayaan xubnaheeda ama dad kale, in shirkadda, ururka ama hay'ada ay mas'uul ka tahay deymaha aan la bixin ee xubnaheeda ama dadka kale ee ka soo baxa wixii hawlgallada ku xusan heshiiska iyo heshiiska laftiisa, oo ay ku jiraan khidmadaha;

h. Ajuurada, canshuuraha iyo khidmadaha kale waa in si buuxda loo bixiyaa waqtiga loo cayimey , heshiiskuna si toos ah ayuu u joogsanayaa haddii aan lacagaha la bixin wakhtigii loogu talagalay ama la daahiyo;

i. Dhinaca kale ee heshiiska lala galay waa in uu bixiyaa faa'iidooyinka heshiiska ugu jira dhaqaalaha iyo muwaadiniinta soomaaliyeed sida maalgashiga, soo iibinta alaabada iyo adeegyada, tababarka, shaqaalaynta muwaadiniinta aqoonta u leh in ay noqdaan shaqaale markab iyo faa'iidooyin kale ee Wasaaraddu tilmaantey;

j. Marka muddada heshiisku ka badan tahay hal sano, heshiiska waxaa lagu saleynayaa in sannadkiiba mar dib-u-eegis lagu sameeyo, joojintiisa iyo hakintiisana waxaa la waafajinaya sida uu qabo qodobka 61aad; iyo

k. Siyaabaha iyo shuruudaha ugu yar ee la xiriira oggolaanshaha kalluumaysiga ee ku habboon waa in lagu daraa heshiiska maaraynta kalluumeysiga.

## Qodobka 57
## Shuruudaha Wada Lahaansho Iyo Heshiisyo Kiro

1) Dhaqan gal ma noqon karo heshiis Wada lahaansho ama kireyn Markab shisheeye oo biyaha Soomaaliya ama meel ka baxsan ka samayn kara kalluumeysi ama hawlo la xariira, iyadoo aan ogolaansho laga haysan Wasaaradda.

2) Heshiis Wada lahaansho ama heshiis kiro waxaa la oggolaanayaa ama la aqoonsan karaa marka shuruudaha soo socda si dhammeystiran loo buuxiyo:

a) heshiiska Wada lahaansho ama kirada marka uu keenayo faa'iidooyin muuqda oo aan saameyn taban ku yeelanayn kalluumeysiga, ama bii'ada baddeeda, sida;

i.Horumarinta warshadaha kalluumeysiga Dalka;
ii.Tababarka muwaadiniinta;
iii.Dakhliga ka yimaada sarrifka lacagaha qalaad;
iv.Maalgashiga Dalka;
v.Howlaha soo dejinta iyo gaarsiinta gudaha; iyo
vi.Horumarinta howlaha dhoofinta;

b) Aasaasid shirkad milkiyaddeeda, maamulkeeda iyo saamigeedaba ay leeyihiin muwaadiniin soomaaliyeed si waafaqsan sharciga Dalka,

c) Heshiiska Wada lahaanshaha ama heshiiska kirada ee lagu ansixiyay sharcigan waa in;

i.Laga diiwaangaliyo Dalka;

ii.Uu u hoggaansamo dhammaan sharciyada Dalka;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d) Iyadoo sharciga lagu salaynayo waa in la soo gudbiyaa dhammaan shuruudaha maaliyadeed ee laga doonayo markab shisheeye, oo ay ku jiraan bixinta dhammaan canshuuraha, khidmadaha, ganaaxa ama go'aan kale oo ka dhalan kara howlaha markabka; iyo

e) Marka uu heshiisku kiro ku saabsan yahay, uuna markabku ku sugan yahay meel ka baxsan biyaha Soomaaliya, dalka uu markabku calankiisa sito ayaa mas'uul ka ah in uu si buuxda ula socdo oo koontaroolo markabka.

3) Markab kasta oo kalluumaysanaya sida ku xusan heshiiska wada lahaanshaha ama kirada ee la ansixiyey waa inuu ku dhaqmaa dhammaan shuruudaha sharcigan ee la xiriira maraakiibta shisheeye.

## Qodobka 58

## Kireynta Maraakiib Si Waafaqsan Hannaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamiga Ah

1) Ujeeddada Qodobkan,

a) "Kireyn maraakiib" waxaa loola jeedaa heshiis ama qorshe uu dhinac xubin ka ah Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga, markab calankiisa wata uga kireynayo dhinaca kale oo aan ka mid aheyn ururka, markaas oo heshiiska lagula galayo wakhti cayiman, heshiiska waxaa galaya mulkiilaha markabka ama wakiilkiisa iyaga oo aan calanka beddelin.

b) "xubin kireyste" waxaa loola jeedaa xubin ka tirsan Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga, taas oo haysata qoondo ama fursado kalluumeysi; iyo

c) "Dalka Calanka leh" waxaa loola jeedaa dalaka uu ka diiwaan gashan tahay markabka la kireystay.

2) Maraakiib kasta oo la kireysto waa in ay u hoggaansamaan qodobbada Sharcigan iyo hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah.

3) Heshiiska kireynta waa inay ku jiraan shuruudaha soo socda, marka lagu daro shuruudaha kale ee looga baahdo sharcigan:

a) Dalka calanka leh waa in ay qoraal ku oggolaato heshiiska Kireynta;

b) Muddada hawlaha kalluumeysiga ee ku xusan heshiiska kireynta markabka wadar ahaan waa inaysan ka badnaan 12 bilood;

c) Maraakiibta la kireeyo waa in laga diiwaangeliyaa xubnaha mas'uulka ka ah iyo kuwa ay wada shaqeeyaan ee aan xubnaha ka aheyn Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga, kuwaas oo:

I. Si cad u oggolaaday in lagu dabaqo hanaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga, languna fuliyo maraakiibtooda; iyo

II. Si wax ku ool ah u gutay waajibaadkooda si ay u xakameeyaan maraakiibtooda una hubiyaan u hoggaansanaanta hanaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah;

d) Maraakiibta la kireeyey waxa lagu daraayaa diiwaanka maraakiibta ogolaanshaha heysta ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga.

e) Iyada oo aan wax loo dhimeyn waajibaadka xubinta kireystaha markabka, dalka calanka waa inay hubisaa in markabka la kireystay u hoggaansamay xubinta kireystaha iyo dalka calanka labadaba ama kuwa ay wada shaqeeyaan ee aan xubnaha ka aheyn Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah;

f) Marka xubinta kireystuhu oggolaado markabka la kiraystay inuu ka kalluumeysto biyaha caalamiga ah, dalka calanka ayaa mas'uul ka ah la socodka kalluumeysiga ka dhacaya biyaha caalamiga ah sida ku cad heshiiska kirada, markabka la kiraystayna waa inuu warbixinta Hannaanka Dabagalka Markabka iyo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

xogta kalluunka la qabtay u soo diraa xubinta kireeystaha, dalka calanka labadaba, iyo Xoghaynta Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga;

g) Dhammaan kalluunka la qabto (hore loo qabtay ama la qaban doono), oo ay ku jiraan kalluunka aan loo qasdin iyo kuwa la tuuro, sida uu qabo heshiiska kireynta markabka, iyo sidoo kale warbixinta kormeeraha waxaa lagu xisaabinayaa saamiga ama fursadaha kalluumeysiga ee xubinta kireystaha;

h) Xubinta kireystaha waa inuu warbixinta dhammaan kalluunka la qabtay oo ay ku jiraan kalluunka aan loo qasdin iyo kuwa la tuuraba ee laga qabtay Biyaha Soomaaliya iyo warbixinada kale u gudbiyaa Xoghaynta Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga, isagoo u marinaya warbixinta habka adeegsiga Mobilka, Sida uu qabo Qorsha Wargelineed ee Heshiiska, ee uu ansixiyey Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga.

i) Hannaanka dabagalka maraakiibta iyo, aaladaha loogu talagalay kala soocida goobaha kalluumeysiga, sida sumad ama calaamad kalluun waa in loo isticmaalaa maareynta kalluumeysiga si wax ku ool ah iyadoo la raacayo Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah;

j) Dhammaan maraakiibta la kireystay waa in ay maraan kormeer ugu yaraan 5% awoodda kalluumeysiga ay isticmaaleen, iyada oo lagu cabbirayo sida ku haboon Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga.

k) Dhammaan maraakiibta la kireystay waa in ay haystaan ruqsad kalluumeysi oo uu soo saaray kireystuhu, maraakiibtaasi waa in aysan ku jirin liiska maraakiibta ku diiwaangashan kuwa sharci daro ku kalluumeysta oo ku jira liiska Urur Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga.

l) Marka lagu howlgalayo heshiisyada kireynta, maraakiibta la kireystay ilaa intii suurtagal ah waa inaan loo ogolaaan inay isticmaalaan qoondada dalka calanka ama kuwa ay wada shaqeeyaan ee aan xubnaha ka aheyn

m) Markab kireysan looma oggola inuu ku kalluumeysto wax ka badan hal heshiis kireysi isku mar

n) Haddii si gaar ah loogu cadeyn heshiiska kireynta, isla markaana waafaqsan sharciga iyo qanuunka dalka, kalluunka uu soo dabto markab kireysan waxaa si gaar ah looga soo dejinayaa dekedaha kireestaha ama si toos ah ula socdo si loo hubiyo in howlaha maraakiibta la kireystay aysan wax u dhimeyn Hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah;

o) Markabka kireysan waxaa marwalba looga baahan yahay inuu sito nuqul ka mid ah dukumiintiyada soo socda:

i. Magaca (xarfaha alifbeetada dalka iyo kuwa Latinka ah) iyo diiwaangelinta markabka la kiraystay, iyo lambarka aqoonsiga markabka ee Hay'adda Caalamiga ee Badaha (IMO) (haddii ay macquul tahay)

ii. Magaca iyo cinwaanka la gala xiriirayo milkiilaha/milkiilayaasha markabka;

iii. Faahfaahinta markabka, oo ay ku jirto dhererkiisa guud ahaan, nooca markabka iyo nooca kaluumeysiga ee loo adeegsan doono heshiiska;

iv. Nuqul ka mid ah heshiiska kireynta iyo ruqsad kasta ama ruqsad kalluumeysi oo la siisay markabka, oo ay ku jiraan gaar ahaan saamiga qoondada, ama suurtagalnimada kalluumeysiga ee loo qoondeeyey markabka; iyo muddada heshiiska;

v. ogolaanshaha heshiiska markabka; iyo

vi. Tallaabooyinka la qaaday si loo hirgeliyo qodobadan.

4) kireynta markab ama heshiiska kireysiga maraakiibta ee aan u hoggaansamin faqradaha (2) ama (3) waxaa laga soo qaadayaa in aanay heysan sharciyad sax ah ama waxba kama jiraan.

**Qodobka 59**

**Dib-U-Eegis Ogolaansho Kalluumeysi**

1) Marka qodobbada heshiiska ogolaanshiyaha uu ka badan yahay hal sano, Wasaaraddu waxay dib u eegis ku sameynaya heshiiska sannad kasta si loo qiimeeyo u hoggaansanaanta shuruudaha iyo xaaladaha heshiiska oo ay ka mid yihiin;

a) u hogaansanaanta ciddа heshiiska lala galay shuruucda Soomaaliya iyo qodobada heshiiska;

b) Faa'iidooyinka ay heshiiska ka heshay Soomaaliya sanadkii tegay;

c) qiimaha lagu qiyaasay fursadaha kalluumeysiga ee socda ee heshiiska ku jira; iyo

d) Arrimaha kale ee uu jideeyo ama uu dalbado wasaaraddu si waafaqsan Xeerkan.

2) Ka dib markay aragto ciidda heshiiska lala galay aysan ka soo bixin sharuudihii heshiiska lagula galay una hogaansamin sharcigan waxay tirtireysaa ama hakinaysaa dhammaan heshiiskii la Wasaaraddu waxay siinaysaa ogeysiis loo qaateen ah tirtiridda ama hakinta dhinaca kale si loo xaqiijiyo joojinta ama tirtiradda kalluumeysiga iyo dhaqdhaqaaqyada kale ee la xiriira.

3) Wasaaraddu waxay joojinaysaa ama haddii kale waxay xaddideysaa heshiis:

a) ka dib soo jeedinta Agaasimaha Guud in sii socoshada kalluumeysiga ay khatar ku tahay sii jiritaanka kaydka kalluunka taxaddar ahaan;

b) Sababo kale oo lagu qeexi karo sharcigan.

4) Hakinta heshiiska sida ku xusan farqadaha (2) ama (3) waxay noqon kartaa waqti cayiman ama ilaa shuruudaha laga buuxiyo, maadaama uu u baahan karo Wasiirku kuna saleyn karo soo jeedinta Agaasimaha Guud;

5) Marka heshiis la hakiyo ama lagu xaddido faqrada (3) xaraf (a) ee qodobkan, Wasiirku marka tixgeliyo soojeedinta Agaasimaha Guud; waxa uu go'aamin karaa dib-u-celinta qayb ka mid ah lacagihii khidmada si raata-raato ah, fursadaha kalluumeysiga ee la hakiyay awgeed.

**Qodobka 60**

**Heshiiska Maareynta kalluumeysiga**

Soo jedinta Agaasimaha guud kadib, Wasiirku waxa uu heshiis maareyn kalluumaysi la gali karaa dawlado, ururada Gobolka ama ururada caalamiga ah ee aan dawliga ahayn iyada oo ay ujeeddadu tahay iskaashiga ama iskuduwidda arrimaha maaraynta kalluumaysiga ama arrimaha la xiriira ee ku xusan Xeerkan.

**Qodobka 61**

**Wakiilada**

1) Hawlwadeenka markab kalluumeysi oo shisheeye oo soo codsada ruqsad si waafaqsan sharcigan waa in uu soo magacawdaa shirkad ama qof wakiil uga noqda Soomaaliya oo loo oggol yahay inuu u matalo markabkaas adeegga geedi socodka iyo ogeysiis kasta oo loo baahan yahay in la siiyo Markabka iyo keenidda macluumaadka loo baahan yahay sida ku xusan Xeerkan ayada oo loo eegayo markabka iyo howlahiisa, naaaquudaha, kabtanka iyo xubnaha shaqaalaha.

2) Qof shirkad ka socda kaliya ayaa noqon kara wakiil iyadoo la raacayo sharciyada Soomaaliya iyadoo macluumaadkiisa oo buuxa loo dirayo Agaasimaha Guud; kuwaas oo ka mid yihiin arrimaha soo socda:

a) Waddada iyo cinwaanka rasmiga ah ee xafiiska guud ee shirkadda iyo xarunta ganacsiga ay ku leeyihiin Soomaaliya;

b) magaca hadda jira iyo magac kasta oo hore, cinwaanka waddada, taleefanka tooska ah, iimaylka iyo shaqada qofka loo idmay inuu maamulo shirkadda ee Soomaaliya;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

c) Liiska Agaasimayaasha Guud ee shirkadda, faahfaahinno la xiriira Agaasimayaasha Guud sida ay ugu qoran yihin diiwaanka shirkadda; iyo

d) Magacyada iyo cinwaanada waddada, taleefanka tooska ah iyo iimaylka ee qof ama in ka badan oo si joogto ah u deggan Soomaaliya isla markaana ay waajib ku tahay inay bixiyaan canshuurta ay Soomaaliya ku aqbashay wakiilnamada adeegga shirkadda iyo ogeysiis kasta oo looga baahan yahay adeegga shirkadda iyo inuu bixiyo macluumaadka kale ee uu uga baahan karo sharcigaan marka loo eego markabka iyo howlihiisa, hawlwadeenka, maamulka iyo xubnaha shaqaalaha;

e) lambarka diiwaangelinta shirkada iyo Lambarka Aqoonsiga Canshuuraha Soomaaliya, iyo haddii ay dhacdo in wax laga beddelo cinwaanka ama Agaasimayaasha Guud, maareeyayaasha, magacyada, cinwaanada, telefoonka tooska ah iyo cinwaanka iimaylka ee dadka noocaas ah, shirkaddu waa inay si dhakhso leh ugu gudbisaa Agaasimaha Guud ogeysiis isbeddel oo qoraal ah.

3) qof kasta oo loo xilsaaray iyada oo la raacayo qodob hoosaadka (1), qof kasta oo loo xilsaaray iyadoo la raacaayo qodob hoosaadka (2) (d) iyo, marka la eego cutubyada (c) illaa (i) shirkad kasta oo loo xilsaaray iyadoo la raacayo farqada (2) waa inuu:

a) inuu Soomaaliya si rasmi ah ugu nool yahay.

b) masuul ka yahay canshuuraha dakhliga ka soo gala Soomaaliya oo ay soo gudbiyaan Lambarka Aqoonsiga Canshuuraha;

c) uusan horey xukun maxkamadeed ugu dhicin;

d) aanu laheyn wax diiwaan ah oo xiriir la leh howlo kalluumeysi oo sharci-darro ah oo ka dhaca gudaha ama banaankan aagagga ay maamusho dawladda Soomaaliya;

e) u fuliyo waajibaadka sida loo baahan yahay iyadoo la raacayo sharciyada khuseeya ee ku habboon dalka ee la xiriira wakiillada iyo, sida ugu habboon, shirkadaha;

f) Bixiyaa macluumaadka kale ee loo baahan karo iyadoo la raacayo qodobbada xeerkan ee khuseeya markabka shisheeye;

g) ku shaqeeyo, una hoggaansamo nidaamka sharciga ah marka loo eego markabka iyo howlihiisa, hawl wadeenka, maamulka iyo xubnaha shaqaalaha;

h) qaado mas'uuliyadda ficillada markabka oo buuxa sida ku xusan Sharcigan;

i) u hoggaansan dhammaan sharciyada Soomaaliya;

j) aanu dhaafin/aysan dhaafin Wasaaraddiisa ka wakiil ahaan, oo ay ka mid tahay macaamilka iyo wajibbaadkiisa; ama

k) In aanu ku lug yeelan howl kasta oo keeni karta ama uu ka dhalan karo khilaaf daneed sida ku xusan Xeerkan.

4) Wakiil kasta oo loo xilsaaray sida ku cad farqada (1) iyo shirkad kasta oo loo aasaasay sida ku cad farqada (2) ma lahaanayaan sharciyad wakiilnimo ama matalaad la xiriirta markab kasta oo ajnabi ah ilaa uu soo codsado lana siiyo aqoonsi ansax ah ee ay bixisay Wasaaraddu.

5) Hawlwadeenka markab kasta oo ajnabi ah waa inuu hubiyaa wakiilkiisa la aqoonsan yahay in uu:

a) Waa inuu ka haystaa sharciyad buuxda Wasaaradda, isla markaana Wasaaradda soo wargaliyo si uu u fuliyo howlihiisa si markastana helo ogeysiiyada si waafaqsan Xeerkan oo ay ku jiraan shuruudaha ku xusan farqada (3); iyo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

b) U hoggaansan yahay dhammaan shuruudaha ku xusan farqada (3).

6) Ruqsad lama siinayo markab ajnabi ah ilaa loo xilsaaro wakiil, kaas oo haysta aqoonsi ansax ah si waafaqsan Xeerkan uuna buuxiyo dhammaan shuruudaha qodobkan;
7) Marka ay jirto caddeyn waafi ah oo ku saabsan ku xad gudubka qodobbada (1), (2) ama (3), aqoonsiga wakiilka waa la hakin doonaa ama waa lagala noqon doonaa, ogeysiisna waa in la siiyaa hawlwadeenka markabka ajnabiga ah, wakiilkana hakinta iyo ka noqoshadaba waa lagu wargalinayaa.
8) Marka ogeysiiska kala noqoshada aqoonsiga la siiyo sida ku cad farqada (7), wakiilka noocan ah ama shirkadaas waxaa si joogto ah looga mamnuucayaa inay matalaan ama wakiil u noqdaan markab shisheeye kaluumeysiga ama howlo la xiriira gudaha Soomaaliya.
9) Hawl wadeenka markab shisheeye waa in uu magacaabo wakiil cusub muddada cayiman ee ku xusan ogeysiiska la siiyay sida ku xusan farqada (7), ilaa inta magacaabidaas la sameynayo, hawlwadeenku wuxuu si toos ah mas'uul uga noqonayaa inuu la xiriiro dowladda una hoggaansamo shuruudaha hoos yimaada Xeerkan iyo shuruucda kale ee Dalka.
10) Qofka ka hor yimaada shuruud kasta oo lagu qeexay qodob hoosaadyada (1), (2), (3) ama (9) wuxuu galayaa dambi wuxuuna mutaysanayaa ciqaab ganaax ah oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sharaxay Jadwalka Koowaad ama muddo xabsi aan ka badnayn shan sano ama labadaba.
11) Qof naftiisa u matalaya wakiil ama u haya hawlo la xiriira markab shisheeye wakiil ahaan isagoo aan haysan aqoonsi ansax ah sida ku cad qodob hoosaadka (4) wuxuu galayaa dambi, waxa uuna mutaysanayaa ganaax aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sharraxay Jadwalka Koowaad ama muddo xarig ah oo aan ka badnayn shan sano ama labadaba, waxaana si joogto ah looga mamnuucayaa helitaanka aqoonsi wakiilnimo gudaha Soomaaliya oo la xiriira markab shisheeye.
12) Marka hawlwadeen kasta uusan u hogaansamin farqada (5), wuxuu galayaa dambi wuxuuna mudan doonaa ciqaab ganaax ah oo aan ka badnayn xaddiga ugu badan ee lagu sharaxay Jadwalka Koowaad iyo weliba:
a) Ruqsada waa laga hakinayaa muddada uu Agaasimaha Guud u arko taasoo aan ka yarayn hal bil; ama

b) Ruqsada waa lagala noqon karaa;

Hawlwadeenka noocan ahi waa inuu si buuxda u soo bandhigaa macluumaadka ku saabsan heshiiska u dhexeeya hawlwadeenka iyo wakiilka marka lagu daro wixii kale oo looga baahan yahay sharcigan.

**Qodobka 62**
**Mudnaanta Wax Soo Saarka Soomaaliya**

1) Qofka Hayste shati, ruqsad ama fasax kale oo loo soo saaray ujeedada ogolaansho kalluumaysi iyada oo la raacayo Qaybtan waa inuu mudnaanta siiyaa:
a) agabyada iyo alaabooyinka lagu sameeyo Dalka;

b) hay'adaha adeegga ay leeyihiin

I.muwaadiniin somaliyeed;

II.shirkado ama iskaashiyo ka mid ah ama ka diiwaangashan Soomaaliya; iyo

III.shirkadaha dadweynaha

2) Dib u eegis kasta oo ku saabsan waxqabadka dadka ruqsada haysta ee lagu qeexay Qeybtan waxaa laga eegayaa heerka doorbididda ee la siiyay agabka, badeecadaha iyo adeegga hay'adaha Soomaaliyeed, qiimeyntana waxaa la tixgelinayaa marka laga tala bixinayo dib usoo-saarista ama cusboonaysiinta ruqsada.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 63
## Damaanad Qaadis

1) Wasiirku wuxuu soo saari karaa shuruudo hor dhac ah, oo la xiriira bixinta ruqsada markab kasta oo ajnabi ah, ama wakhti kasta inta lagu jiro muddada ruqsad bixinta, in codsaduhu ama qofka ruqsada la siiyey uu bixiyo damaanad si waafaqsan habraacyada noocan oo kale ah ama qaabka uu u qeexo Wasiirku, isagoo la tashanaya Xeer Ilaaliyaha Guud, iyadoo la tixgelinayo:

a. heerka u hoggaansamida markabka, hawlwadeenkiisa iyo sida ugu habboon ee la xidhiidha maraakiibta oo leh shuruudaha dalka Calanka, Waddamada kale ee xeebta leh, ururrada maaraynta kalluumaysiga ee gobolka iyo sharciga caalamiga ah;

b. khatar kasta oo ka dhalan karta u hogaansanaan la'aanta sharcigan ama shuruucda kale ee Soomaaliya; iyo / ama

c. Shuruudo kale oo uu cadeeyay Wasiirka.

2) Damaanadda ku xusan faqradda (1) waxay u adeegi doontaa sidii damaanad qaad lacageed oo loogu talagalay fulinta dhammaan waajibaadka ka soo baxa ruqsada iyo sharcigan, oo ay ku jiraan kharashaadka suurtagalka ah ee la xiriira samatabbixinta, soo kabista kharashaadka kale iyo ganaaxyada, ama magdhawga xadgudubyada ka dhanka ah xeerkan, laguna soo saari doono sida uu dhigayo Xeerkan.

3) Qadarka damaanad qaadka lacageed ee ku xusan qodobkan waxaa go'aaminaya Wasiirka kadib soo jeedinta Agaasimaha Guud iyo iyadoo la tixgelinayo qorshe kasta oo ku haboon maareynta kalluumeysiga, qiimaha kalluumeysiga la xiriira iyo xaddiga ganaaxa ugu badan sida ku xusan Sharcigan, oo ku saabsan wixii dambi ah ee dhici kara iyo khatarta lagu xusay faqradda (1).

4) Foomamka damaanad qaadka lacageed ee la aqbali karo sida ku xusan qaybtaan waxay noqon karaan mid uun ama wadarta kuwa soo socda:

a) Dammaanad qaad;
b) Warqadda Deynta (LC);
c) Aaminaad Lacageed oo leh xilli lacag-bixin;
d) Siyaasadda Caymiska;
e) Lacag dhigasho;
f) Sanadle.

5) Halka qofka heesta shatiga ay waajib ku tahay inuu bixiyo dammaanad-qaad lacageed sida ku cad qaybtan oo hadii uu ku guul-darraysto inuu sidaas sameeyo muddada loo baahan yahay, ruqsad lama siin doono, ama haddii la siiyeyna waa lagala noqonayaa doonaa.

6) Shuruudo dheeri ah iyo habraacyo soo saarid iyo sawir ku saabsan dammaanada waxqabadka ayaa la qori karaa.

# CUTUBKA 6-AAD
# Macluumaad, Xog Iyo Tirakoob
## Qodobka 64
## Aasaasidda Nidaam Xog-Uruurin

1) Waa in Wasaaraddu hirgalisaa nidaam dhexe oo ilaalinaya xog ururinta iyo tirakoobka oo leh ujeedooyinka soo socda;

a) kor u qaadista xog ururinta lagama maarmaanka u ah dhowrista, maareynta iyo isticmaalka joogtada ah ee kheyraadka kalluumeysiga;

b) bixinta isku-xirnaanta heerarka kala duwan ee dowlada, bulshooyinka dagan xeebaha iyo iskaashatooyinka kaluumeysiga;

c) sameynta hab gorfeyn iyo saadaalin loogu talagalay qiimeynta keydka kalluunka iyadoo lala tashanayo wasaaradaha kalluumeysiga maamul goboleedyada;

d) buuxinta shuruudaha heer qaran, gobolka iyo caalami ee la xiriira macluumaadka, xog ururinta iyo isdhaafsiga; iyo

e) taageerida ujeeddooyinka iyo mabaadi'da Xeerkan.

2) Nidaamka macluumaadka, ama waxyaabaha uu ka kooban yahay ee uu cayimi karo Agaasimaha Guud, waxaa laga heli karaa bogga rasmiga ah ee Wasaaradda iyada oo la ilaalinayo dhawrsanaanta xuquuqda macluumaadka oo lagu go'aaminayo sida waafaqsan Xeerkan, iyadoo la tixgelinayo hababka caalamiga ah ee ugu wanaagsan ee daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka.

3) Nidaamka macluumaadka waa inuu ku jiraa macluumaad taageeraya hirgalinta sharcigan iyo tallaabooyinka ilaalinta iyo maaraynta caalamiga ah, oo ay ku jiraan macluumaadka sida Agaasimaha Guud u baahan karo ee la xiriira maareynta kalluumeysiga iyo howlaha la xiriira, kormeerka, xakamaynta iyo ilaalinta, arrimaha sharciga iyo maamulka, dhinacyada tirakoobka iyo dhaqaalaha iyo macluumaad kale oo la jaan qaadaya ujeeddada iyo mabaadi'da Xeerkan.

4) Agaasimaha Guud wuxuu hubinayaa in, sida ku habboon, macluumaadka laga baahiyo keydka macluumaadka lana gaarsiiyo hay'adaha kale ee qaranka, maamulada, ururada gobolka iyo kuwa caalamiga ah waqtiga loogu talagalay si loo hubiyo gudashada waajibaadka qaran, gobol iyo caalami ee Soomaaliya, oo ay ka mid tahay dawladda calanka bixisay iyo mid xubin ka mid ah urur kasta oo la xiriira maamulka kalluumeysiga gobolka.

## Qodobka 65
## Macluumaad Loo Baahan Karo, Lana Baari Karo

1) Qof kasta oo gudanaya hawlo sida uu qabo sharcigani; waa inuu hayaa oo ilaaliyaa diiwaanadaas iyo macluumaadkaas una soo gudbiyaa Wasaaradda qaabka uu ugu baahdo Wasiirku ama sida looga baahdo iyadoo la raacayo sharcigan, sharciyada kale ee Soomaaliya ama Hannaanka Ilaalinta iyo Maareynta Caalamiga ah ee ay khuseyso ama heshiis caalami ah.

2) Agaasimaha Guud waa inuu hubiyaa soo uruurinta iyo gorfeynta xogta tirakoobka iyo macluumaadka kale ee laxiriira shaqada iyo dadka ku hawlan sida ku cad sharcigaan; iyo u gudbinta xogta iyo macluumaadka hay'adda ay khuseyso ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga sida ay uu u baahan karo Hannaanka Ilaalinta iyo Maareynta Caalamiga ah ee ay khuseyso.

3) Agaasimaha Guud; ayada oo ay ujeeddadu tahay hubinta xisaabaadka, diiwaannada, dukumiintiyada iyo macluumaadka kale ee loo baahan yahay in la xafido, la baahiyo ee la xiriira farqada (1) wuxuu agaasimi karaa:

a) Xisaabinta ama kormeerka koonto kasta, diiwaanada, dukumiintiyada, xogta iyo macluumaad kale ama meesha macluumaadkaas oo kale lagu keydin karo;

b) xisaabinta ama kormeerka markab kasta, warshad wax soo saar ama xarun kale oo sharcigani khuseeyo; iyo

c) in qof kastaa bixiyo macluumaad dheeri ah oo laxiriira koonto kasta, diiwaanada, dukumiintiyada, xogta iyo macluumaadka kale ee la hayo, la baahiya ama lagu wargaliyay sida kù cad sharcigaan iyadoo la raacayo waqtiga loo xaddiday ama ee loo cayimay.

4) Qof kasta oo:

a) ku guuldareysta inuu hayo, keeno ama la xiriiro wixii xisaab ah, diiwaanno, dukumiintiyo, xog iyo macluumaad kale ah sida looga baahan yahay farqada (1); ama

b) aan fududeyn, kaalmayn ama u hoggaansamin shuruudaha hanti dhowrka ama kormeerka lagu sameeyay faqrada (3),

wuxuu galayaa dambi marka lagu helo kadibna wuxuu mutaysanayaa ganaax lacageed oo lagu soo saaray Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn seddex sano, ama labadaba, intaas waxaa sii dheer ruqsadda la adeegsan karo, oggolaanshaha ama diiwaangelinta waa lagala noqon karaa.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 66

## Macluumaad Run ah, Dhammaystiran Oo Sax ah, Ayna Reeban tahay in la Baabi'yo

1) Dhammaan shakhsiyaadka waa inay xafidaan oo ay gudbiyaan macluumaadka, xogta iyo tirakoobka sida looga baahan yahay iyadoo la raacayo Sharcigan; diiwaanadaas, macluumaadkaas, xogta iyo tirakoobyadu marwalba waa inay noqdaan kuwo run ah, dhameystiran oo sax ah oo aan noqon doonin been, marin habaabin ama aan sax ahayn.

2) Qofna ma beddeli karo, baabi'in karo, tirtiri karo ama burburin karo:

a) cadeyn, shahaado, ama dukumiintiyo kale, macluumaad, xog ama tirakoob la sameeyay ama loo baahan yahay in lagu sameeyo ama lagu soo saaro iyada oo la raacayo Xeerkan;

b) ku suntan sharcigan; ama

c) calaamadaha loo baahan yahay ee ku qoran maraakiibta ama agabka.

3) Qofna uma soo gudbin karo Wasaaradda, wasiirka ama qof kasta, maxkamad, hay'ad ama wasaarad dawladeed oo ka jirta Soomaaliya ama maamul goboleed kale ama hay'ada khuseeysa maamulka kalluumeysiga, hay'ad caalami ah ama hay'ad kale ama qof kale wax macluumaad ah ama dukumiinti khiyaano ah ama marka ay tahay macluumaad qoran ama dukumiinti, been abuur ah.

4) Shuruudaha qaybtani waxa ay khuseeyaan diiwaannada, macluumaadka, xogaha iyo tirakoobyada oo sharcigan ku cad; iyada oo aan loo eegin haddii loo gudbinayo Wasaaradda iyo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka, Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ama hay'ad ama qof kale.

5) qof kasta oo aan u hoggaansamin wax kasta oo looga baahan yahay faqrada (1), (2) ama (3) wuxuu galayaa dambi marka xukun lagu ridana wuxuu mutaysan doonaa ganaax lacageed oo ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn shan sano, ama labadaba, iyo ciqaab kasta oo hoos timaada xeerkan.

## Qodobka 67

## Isdhaafsiga Xogaha Laba-Geesood Ahaan, Gobol Ahaan, Caalami Ahaan

Agaasimaha Guud wuxuu la wadaagi karaa macluumaadka hoos yimaada sharcigan hay'ad kasta oo caalami ah ama goboleed oo ay Soomaaliya xubin ka tahay ama waafaqsan heshiis caalami ah, iyadoo la tixgelinay

o wixii shuruudo ah ee xog qarin ah, waana inuu sidaa sameeyaa marka loo baahdo heshiiska caalamiga ah ama Urur Goboleedka Maaraynta Kalluumeysiga.

## Qodobka 68

## Macluumaad Qarsoodi Ah

1) Ujeeddooyinka Sharcigan, "macluumaadka qarsoodiga ah" waxaa loola jeedaa:

a) macluumaadka Wasiirku uu caddeeyo in ay yihiin qarsoodi;

b) macluumaadka hoos taga faqrada soo socota (3); iyo

c) macluumaadka ku xusan faqrada soo socota (5)

2) Qofka gudanaya waajibaadka ama mas`uuliyadaha ku xusan Sharcigan, oo ay ku jiraan Wasiirka iyo Agaasimaha Guud, ilaa sharcigan u oglaado mooyee ama iyadoo la raacayo siyaasada iyo habraacyada nidaamka xog qarsoonida Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee ay khuseyso, ma muujin karo macluumaad qarsoodi ah oo ay ku kasbadeen waajibaadka iyo mas'uuliyada saaran.

3) Wasiirka waxaa laga yabaa inuu qoraal ogeysiis ah:

a) ku cadeeyoo macluumaad kasta inay yihiin macluumaad qarsoodi ah; iyo

b) ku cadeeyo in soo koobitaanka guud ee macluumaadkaas aysan ahayn macluumaad qarsoodi ah.

4) Wasiirka wuxuu qoraal ugu oggolaan karaa qof kasta inuu:

a) helo ama isticmaalo macluumaad qarsoodi ah;

b) gali karo goobaha ay yaalaan macluumaad sir ah asaga ama ayada oo loo magacaabi karo ama xaddidi karo gelitaanka goobahaas oo kale.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

5) Macluumaadka soo socdaa waa inay ahaadaan mid sir ah, ka hor inta aan Faafinta Rasmiga ah lagu soo saarin:

A) macluumaad kasta ama xog ganacsi kasta ee lagu gudbiyay diiwaan, ama dukumiintiyada kale ee loo baahan yahay in la kaydiyo, la bixiyo ama loo wadaago si waafaqsan sharcigan;

B) wixii macluumaad ah ama xog kale ah oo ay soo gudbiyaan Aaladda Dhaqdhaqaaq Tebinta sida ku cad sharcigan; iyo

C) Xog aan tifaftirneyn oo laga helay baaris cilmiyeed.

6) Macluumaadka qarsoodiga ah waa la shaacin karaa:

a) Ilaa xad:

i.in shaacinta la oggol yahay ama loo baahan yahay sida uu qabo Sharcigan ama sharci kale; ama

ii.in qofka bixiya macluumaadka qarsoodiga ah loo oggol yahay shaacinteeda; ama

b) Sida hadba loogu baahdo:

i.In Agaasimaha Guud uu daabaco macluumaadka tirakoobka ee la xiriira waaxda kalluumeysiga;

ii.In awood loo siiyo hay'adaha kale ee Dowladda inay fuliyaan sharcigan iyo sharciyada kale ee Soomaaliya;

iii.Kor u qaadista wadashaqeynta iyo isku dubaridka howlaha Wasaaradda iyo maamul goboleedyada xubinta ka ah DFS iyo Wasaaradaha kale ee Xukuumadda, heer gobol iyo heerka caalami ee la socodka, xakamaynta iyo dabagalka howlaha la xiriira kalluumeysiga iyo howlaha kale ee khuseeya; ama

iv.Awood u siinaya talo siinta Agaasimaha Guud ama Wasiirka si waafaqsan ujeeddada sharcigan.

7) Agaasimaha Guud ayaa oggolaan kara bixinta macluumaadka qarsoodiga ah ee:

a) la xiriirta waqtiga ama goobta markab kasta markii ay codsato Hay'ad kasta ayada oo ujeedku yahay gacan ka geysashada ilaalinta, raadinta iyo samata-bixinta iyo ka jawaabidda xaaladaha degdegga ah; iyo

b) la xiriira ujeeddooyinka uu u arko Agaasimaha Guud inay taageerayaan hirgelinta Sharcigan, oo ay ku jiraan daahfurnaanta macquulka ah ee go'aan qaadashada.

8) Macluumaadka qarsoodiga ah waa inay sidoodii u kala soocnaadaan muddo seddex sano ah laga bilaabo taariikhda lagu dhawaaqay inay tahay macluumaad qarsoodi ah sida ku xusan faqrada sadaxaad (3).

9) Wasiirku hadba sida uu u arko waxa uu ku kordhin karaa hal ilaa saddex sano muddada macluumaadka kala soocan ee qarsoodiga ah xilliga dhammaadka muddada saddexda sano ah ee ku xusan farqada (8).

10) Qof kasta oo hela macluumaad sir ah iyadoo la raacayo sharcigan ma isticmaali karo mana kashifi karo macluumaadkaas marka laga reebo ujeedooyinka sharcigan iyo iyadoo la raacayo Hannaanka Ilaalinta Iyo Maaraynta Caalamiga ah.

11) Dhamaan macluumaadka lagu helo si waafaqsan sharcigan ama xeer hoosaadyada la xiriira waxaa loo aqoonsadey inay tahay sir qaran, loomana bandhigi karo cid aan fasax u haysan marka laga reebo ujeedooyinka waafaqsan sharcigan ama amar maxkamadeed.

12) Qof kasta oo u hoggaansami waaya shuruud kasta oo ku xusan farqadda (2) ama (10) wuxuu galayaa dambi xukun kadibna wuxuu mutaysan doonaa ganaax lacageed oo ku xusan Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo hoos timaada sharcigan.

## Qodobka 69

## Qarinta Macluumaadka La Xiriira Xarunta La Socodkas Kalluumeysiga

1) Macluumaadka uu heley, uuna keydiyay qalabka ku xiran Xarunta La Socodka Kalluumeysiga waa inuu noqdaa mid sir ah, waxaana loo gudbin karaa oo keliya:

a) Qof loo idmay inuu xog ururiyo si uu go'aan uga gaaro in dacwad ciqaabeed lagu oogo qof;

b) dacwad-oogaha ama wakiil sharci oo idman oo u baahan macluumaadkaas ujeeddaduna tahay dacwad-qaadista ama difaaca dacwadaha ciqaabta;

c) qof awood loo siiyay inuu hubiyo u hogaansanaanta sharcigan, sharciyada kale ee Soomaaliya ama waajibaadka sharciga caalamiga ah;

d) Urur ku shaqo leh maaraynta kalluumeysiga, si waafaqsan tallaabooyinka Ilaalinta iyo Maaraynta Caalamiga ah iyo siyaasad kasta oo ku habboon qarinta sirta ay Wasaaraddu leedahay;

e) Hay'ad ama urur sida kuwa caalamiga ah oo ay Soomaaliya xubin ka tahay ama iskaashi kala leedahay ujeeddooyinka la socodka, xakamaynta iyo dabagalka kalluumeysiga; si waafaqsan shuruudaha qarinta sirta ay Wasaaraddu leedahay.

f) Marka bixinta macluumaadkaas ay lagama maarmaan tahay si loo sameeyo hawlgallo raadin ama samata bixin ah oo la xiriirta markab kasta;

g) Ujeeddooyin cilmi baariseed oo isku dhaf ah marka ay ogolaato Wasaaradda, ama

h) Iyadoo la raacayo siyaasadda Wasaaradda u degsan.

2) Qof kasta oo hela macluumaad ku saabsan ujeeddooyinka ku xusan faqradda (1) waa inuu u adeegsadaa ujeeddeeyinkaas oo kaliya wuxuuna u gudbin karaa macluumaadkaas qof kale oo isla ujeeddooyinkaas leh.

3) Qof kasta oo gudbiya ama u adeegsada macluumaadka si ka soo horjeedda farqadaha (1) ama (2) wuxu galayaa dambi marka ay ku caddaato wuxuu muteysan doonaa ganaax lacageed oo ku xusan Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu xusay Sharcigan.

**Qodobka 70**

**Lahaanshaha Macluumaadka**

Lahaanshaha dhammaan macluumaadka loo baahan yahay in la soo gudbiyo, la ogeysiiyo ama haddii kale la siiyo Dowladda iyo dhammaan macluumaadka ay soo diraan Aaladaha Dhaqdhaqaaq Tabinta oo qeyb ka ah nidaamka la socodka markabka ama Nidaamka Aqoonsiga Tooska ah ee ku xusan sharcigan waxaa iska leh dowladda.

**Qodobka 71**

**Gaarsiinta Dadweynaha Macluumaadka**

1. Dadweynuhu waa inay helaan macluumaadka aan loogu tala-gelin inuu ahaado qarsoodi sida ku cad sharcigan;

2. Wasaaradd ayaa qoraal ku go'aaminaysa iyadoo la tashanaysaa Hay'adaha maaliyadda ee dalka, qiimaha khidmad macluumaadka ku faafinaysa bogga rasmiga ah ee Wasaaradda, taas oo looga qaadayo dadweynaha si ay u helaan macluumaadkaas.

## CUTUBKA 7-AAD

## RUQSADO, OGGOLAANSHO, FASAXYO KALE IYO DIIWAANGELIN

## QEYBTA 1AAD

## SHURUUDAHA XAALADAHA LAGA RABO RUQSADAHA, OGGOLAANSHAHA, FASAXYADA KALE IYO DIIWAANGELINTA LAGU SOO SAARAYO WAAJIBAADKA WASAARADDA

**Qodobka 72**

**Ruqsadaha, Oggolaanshaha, Fasaxyada Kale Iyo Diiwaangelinta Loo Baahan Yahay**

1) Qofna kuma shaqeyn karo wax ka mid ah hawlaha soo socda isaga oo aan haysan ruqsad, Oggolaansho, Fasax ama **diiwaangelin** dhaqangal ah oo lagu soo saaray si waafaqsan sharcigan:

a) In uu isticmaalo markab Soomaaliyeed ama mid ajnabi oo kalluumaysi ama howlaha la xiriira biyaha Soomaaliya, marka laga reebo sida ku xusan farqada (3aad) ee qodobkan;

b) In uu isticmaalo markab Soomaaliyeed ama mid ajnabi oo kalluumaysi ama howlaha la xiriira meelaha ka baxsan biyaha Soomaaliya, oo ay ku jiraan biyaha sare ee badda iyo biyaha dowlad kale;

c) In markab Soomaaliyeed oo ku jira biyaha Soomaaliya ama meelaha ka baxsan dalka ee uu ka shaqeeyo Urur Goboleedka Maareynta kalluumeysiga uu sito, geeyo, habeeyo ama soo saaro gabbaad kalluumeedka;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d) in uu soo dejiyo ama dhoofiyo kalluunka ama wax kasta oo kalluun ka yimaada, sida ujeeddo kalluun-beeris;
e) In uu ka ganacsado oo uu iibiyo kalluunka ama wax kasta oo kalluun ka yimaada;
f) In uu kalluun habeeyuhu hubiyo taya-qabka cuntada badda;
g) In uu sameeyo tijaabo kalluumeysi oo ay ujeeddadu tahay cilmibaarista noocyada kalluunka, qaababka ama qalabka kalluumeysiga;
h) Cilmibaaris;
i) Baaris noole badeed;
j) Kala wareejin;
k) Ka ganacsiga kalluumaysi madadaalo
l) Wax yeellayn qar-badeed (shacaabi) iyo / ama ka ganacsigiisa;
m) Ururinta iyo ka ganacsiga bocoolaha badda;
n) Horumarinta ganacsiga dhul xeebeedka;
Hawlaha ama shuruudaha kale Wasiirka ayaa ku soo saari kara Faafinta Rasmiga ah ama bogga Wasaaradda, oo ay ka mid yihiin ujeedooyinka lagu xaddidayo:

i. Ruqsadaha, Oggolaanshaha, Fasaxyada ama Diiwaangelinta
ii. Ruqsadaha gaarka ah ama khidmadaha; iyo
iii. Ruqsadaha mudnaanta gaarka ah leh

2) Si ay Wasaaraddu u Diiwaan Geliso Waxaa loo Baahan Yahay:
a) In markabka Soomaaliyeed ama ruqsadda u haysta biyaha Soomaaliya ama markab Soomaali ah oo ka shaqeeya meelaha ka baxsan dalka uu leeyahay Aaladda Dhaqdhaqaaq Tebinta; iyo
b) In uu leeyahasy wakiil sharcigani oggol yahay.
3) Noocyada gaadiid badeedka kalluumeysi ee soo socda waa laga dhaafi doonaa shuruudaha ruqsad bixinta ee ku xusan farqada (1) haddii aan si kale loo qeexin:
a. Gaadiid badeed aan matoor lahayn;
b. Gaadiid badeed matooro leh, laakiin dhererkoodu guud ahaan aanu ka badnayn 4 mitir; iyo
c. Gaadiid badeed gaarka ah loogu isticmaalo kalluumeysiga madadaalada ee aan ganacsiga ahayn.
4) Hawlwadeen kasta oo u hogaansami waaya shuruudaha ku xusan farqada (1) ama (2) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba.

## Qodobka 73

## Xaaladaha Iyo Shuruudaha Laga Rabo Ruqsadaha, Oggolaanshaha, Fasaxyada Kale Iyo Diiwaangelinta

1) Ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxa ama diiwaangelinta ay Wasaaraddu ku bixisey sharcigan:
a. waxaa lagu salaynayaa tilmaamaha iyo shuruudaha ku xusan sharcigan ama sida ku qoran ku cad shuruudaha kale ee uu Wasiirku amro ama lagu sheegay Hannaanka Maareyn Iyo Ilaalinta Caalamiga ah;
b. Wasiirku waxa uu go'aamin karaa wax ku daridda, wax ka beddelka talaabooyinka iyo shuruudo dheerad ah oo waafaqsan ujeeddooyinka iyo mabaadi'da sharcigan ku xusan, taas oo noqon karta:

i. In uu amro; ama
ii. inuu ku baahiyo wasiirku Faafinta Rasmiga ah iyo bogga Rasmiga ah ee Wasaaradda halka ay kaga habboon tahay maaraynta kalluumeysiga;

c. Waxa uu dhaqan galayaa taariikhda ku xusan;iyo
d. Waxa uu ansax ahaanayaa ilaa taariikhda loo cayimyey ay dhamaato , iyada oo la raacayo muddadii uu Wasiirku u oggolaaday ruqsadda ay isku **nooc** yihiin, haddii aan si dhakhso ah loo hakin, loo joojin ama looga noqon si waafaqsan Sharcigan.
2) Hawlwadeen markab kasta oo shukaan leh, oo ay ku jiraan markab weyn ama yar, oo haysta ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin lagu soo saaray sharcigan waa inuu hubiyaa in dukumiintiga asalka ah ama nooc elektaroonig ah ama nuqul la hubiyey uu markasta markabka saaran yahay, inta lagu jiro muddada ay ruqsaddu shaqeynayso, marka laga reebo waqti uu markabku ku sugnaa badda markii dukumiintiga noocaas ah la soo saaray oo uusan weli dekedda soo gelin tan iyo markii la soo saaray, taas oo nuqul elektaroonig ahaan



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

loogu soo diro uu ku filnaan doono, kabtankuna waa inuu u soo saaro dukumintiga sarkaalka idman marka uu ka codsado.

3) Qofka haysta ruqsad ama oggolaansho hawl kasta oo lagu bixiyay si waafaqsan sharcigan marka laga reebo howlaha ku saabsan maraakiibta; waa inuu keenaa ruqsadda ama oggolaanshaha ama nuqul la hubiyey xafiiska diiwaangelinta ganacsiga , marka laga codsadana waa in uu u soo saaraa sarkaalka idman ee kalluumeysiga ama qof kale oo sharcigu u oggol yahay;

4) Hawlwadeenka markab Soomaaliyeed waa inuu:

a. Mar kasta markabka dushiisa ku haystaa dukumintiga Wasaaraddu bixisey sida wasiirku go'aamiyey ama sida waafaqsan nidaamka Hannaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah, marka laga codsadana waa in uu u soo saaraa sarkaalka idman ee kalluumeysiga ama qof kale oo sharcigani u oggol yahay, ama shuruucda kale ee la adeegsan karo kaas oo fulinaya waajibaadka Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga;

b. U hoggaansamaa dhammaan sharciyada Dowladda iyo sharciyada Dolwad-goboleedyada kale inta uu ku sugan yahay meelaha dawladdu ka taliso;iyo

c. U hoggaansamaa dhammaan Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah ee la adeegsan karo inta uu ku sugan yahay meelaha uu ka taliyo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga.

5) Hawlwadeen markab haysta ruqsad, oggolaansho ama fasax kale oo kalluumeysi ama howlaha la xiriira waa inuu sida shuruudaha ruqsadda ama oggolaanshuhu qabo si joogto ah u isticmaalaa buugga hawlmaalmeedka, soo gudbiyaa warbixinnada kalluumeysiga ama howlaha la xiriira iyo waqtiyadooda, warbixinnadaas oo ay ku jiraan macluumaadka iyo qaabka uu u baahan karto Wasaaradda sida uu qoraaladeeda hore tilmaamayso ama waafaqsan Hannaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah.

6) Qofka haysta ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin waa inuu Wasaaradda u soo gudbiyaa warbixinta:

a. Iibinta ama wareejinta markab shirkad ama shey kasta oo ka mid ah ama ku shaqeynaya ruqsadda, oggolaanshaha, fasax kale ama diiwaangelinta, sida iibinta ama wareejinta noocaas ah;

b. wixii iska beddela macluumaadka lagu sheegay foomka dalabka, foomka diiwaan gelinta ama habab kale ama shuruud ah, si loo helo ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin, afar iyo toban maalmood gudahood ka dib marka iibinta, wareejinta ama beddelka la sameeyo.

7) Qofkii haysta ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin waa inuu u gudbiyaa Agaasimaha Guud wixii isbeddel ah ee ku saabsan macluumaadka lagu soo gudbiyey foomka dalabka ugu badnaan 14 maalmood gudahood, ama haddii kale ruqsadda, oggolaanshaha, fasax kale ama diiwaangelinta waxaa loo arkayaa in ay dhacday marka la gaaro maalinta 15aad.

8) Dhammaan ruqsadda, oggolaanshaha iyo diiwaangelinta lagu bixiyey sharcigan la isma dhaafsan karo, qofna ma:

a. Wareejin karo, mana isku dayi karo in uu ku wareejiyo ruqsadda, oggolaanshaha ama diiwaan gelinta qof kale ama markab; ama

b. U adeegsan karo mana isku dayi karo in uu u adeegsado kalluumeysi ama hawlo la xiriira ruqsad ama oggolaansho la wareejiyey ee Wasaaradda.

9) Qof kasta oo jebiya shuruudaha ku xusan faqrada (1) (a) ama (b), ama faqradaha (2), (3), (4) (a) (b) ama (c), (5) ), (6) (a) ama (b), (7) ama (8) (a) ama (b) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba, ruqsaddana waa laga hakinayaa ama laga joojinaya, haddiise ay dhacdo in la jebiyo farqada (6) (a) ama (b) ee qodobkan ruqsadda la xiriira, oggolaanshaha, fasaxa kale ama diiwaangelinta waxaa loo arki doonaa mid aan ansax ahayn isla marka ay dhammaato muddada afar iyo tobanka maalmood.

## Qodobka 74
## Shuruudaha Rar isku Wareejinta (Transhipment)

1) Oggolaansho kasta oo shixnad kala wareejin ah waa inay ku jiraan shuruudaha soo socda:

a) Marka la joogo biyaha Soomaaliya, shixnad kala wareejinta, hawlwadeenka markabka waa inuu:

i. si elektaroonig ah codsi ugu gudbinayaa Agaasimaha Guud si loo soo dejiyo ama loo raro dhammaan kalluunka ama wax kasta oo kalluun ka yimaada ee saaran markabka, codsiga waa inuu ku jiraa macluumaadka looga baahan karo

ii. Shixnadda ku kala wareejiyo goobta uu Agaasimaha Guudu cayimay;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

iii.U hoggaansamo habraacyada la amray ama laga dalbaday;

iv.Si buuxda u bixiyo dhammaan kharashaadka gaadiidka, hoyga iyo masruufka la xiriira gudashada waajibaadka sarkaalka idman ee kalluumeysiga ama qofka kale oo loo xilsaaray inuu qabto kormeerka wareejinta kheyraadka kalluumeysiga ee ka baxsan dekedda Soomaaliya;

v.Soo gudbiyo caddeynta shixnad kala wareejinta ay dalbadeen Wasaaradda ama Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah;

vi.U hoggaansanaado dhammaan sharciyada la xiriira ilaalinta deegaanka badda inta lagu guda jiro kala wareejinta,

b) Shixnad kalluun oo laga jilaabtey biyaha Soomaaliya, laguna kala wareejinayo biyo sare oo ka mid ah meelaha uu maamulo Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ay khuseyso, hawlwadeenku waa inuu:

i.U hoggaansamo shuruudaha Hannaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah; iyo

ii.Si buuxda u bixiyo dhammaan kharashaadka kormeereyaasha ama qof kale oo loo xilsaarey inuu kormeero kala wareejinta kheyraadka kalluumeysiga;

c) Dhegaha libaax-badeedka ee darayga ah lama wareejin karo iyaga oo aan wadan hilibkoodii iyo taa bedelkeedba, marka libax-badeedka la dejinayo uu yahay mid la qaboojiyey, marsada ugu horreysa ee markabka lagu dejinayo waa in dhegaha libaax-badeedka ee saaran markabka aanay culyskiisu ka badneyn 5% marka loo eego miisaanka guud ee libaaax-badeedka.

2) Qof kasta oo ku xadgudba shuruud kasta oo ku xusan faqrada (1aa) xarfaha (a), (b) ama (c) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn shan sano, ama labadaba, iyo ciqaab kasta oo lagu soo saaro sharcigaan.

## Qodobka 75
## Shuruudaha Cilmibaarista

1) Ogolaansho kasta oo cilmibaaris lagu sameynayo biyaha Soomaaliya oo la xariirta arrin kasta oo waafaqsan sharcigaan, waa inay ku jiraan shuruudaha soo socda:

a) Codsiga lagu baarayo biyaha Soomaaliya waa in:

i.Loo soo qortaa wasaaradda ugu yaraan muddo bil ah ka hor waqtiga la filayo in ay bilaabato cilmibaaristu, ama waqtiga ka horreeya oo uu cayimay Agaasimaha Guud;

ii.Uu la socdaa qorshaha cilmibaarista;

b) Qofka haysta oggolaanshaha waa in:

i.Uu keenaa Wasaaradda xaq u lahaanshahiisa ka-qaybgalka ama wakiilkiisa mashruuca cilmibaarista, iyada oo aanay waajib ku ahayn waajibaadka ka qeyb qaadashada kharashaadka mashruuca;

ii.Uu keenaa Wasaaradda warbixinno hordhac ah sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah iyo natiijada ugu dambeysa marka la dhammeeyo cilmibaarista;

iii.Uu balanqaado in ay wasaaraddu heli karto marka ay codsato dhamaan xogta iyo muunadaha laga soo dhiraandhiriyey mashruuca cilmi baarista, sidoo kale in ay heli karto nuqulka macluumaadka kale iyo muunadaha la xiriira iyadoo wax u dhimeyn qiyamka cilmi ahaan.

iv.Marka uu ka codsado Agaasimaha Guud, waa inuu keenaa Wasaaradda qiimeyn ku saabsan xogtaas, muunadaha iyo natiijooyinka cilmibaarista ama gacan ka geysto qiimeyntooda ama tarjumaaddooda;

v.Uu isla markiiba ku wargeliyaa Agaasimaha Guud marka uu dhaco isbedel weyn ah ee ku yimaada barnaamijka cilmibaarista;

vi.Haddii aan si kale lagu heshiin, waa in uu ka saaraa ama ka qaadaa wixii qalab ah ee cilmibaarista awgeed loo rakibo marka ay cilmibaaristu dhammaato;

vii.Uu si dhakhso leh ugu wargeliyaa Wasaaradda natiijooyinka baaritaanka;

viii.Uu ku wargeliyaa Wasaaradda ka hor daabacaadda cilmibaarista.

2) Qof kasta oo aan u hoggaansamin farqada (1) xarfaha (a) ama (b), ee qodobkan ama shuruud kasta oo kale oo uu faray Agaasimaha Guud ama ku xusan sharcigan waxa uu galayaa dembi waxa uun mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba, iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigaan, oggolaanshaha cilmibaaristana qofkaas waa laga hakin karaa ama waa lagala noqon karaa ogolaanshaha.

## Qodobka 76
## Shuruudaha Aaladda Gabbaadka Kalluunka (AGK)

1) Howlgeliyaha markab kasta oo oggolaansho ansax ah u haysta adeegsiga (AGK) waa in:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

a) uu markasta markabka dushiisa ku hayaa buugga hawlmaalmeedka ee (AGK) oo ay ku cadyihiin macluumaadka iyo howlaha la xiriira (AGK) sida uu amray Agaasimaha Guud ama waafaqsan Hanaanka Maareynta iyo Daryeeelka Caalamiga;

b) aanu adeegsan wax (AGK) ilaa lagu sunto calaamaha ugaarka ah ama sida uu dalbaday Agaasimaha Guud, si waafaqsan sharcigan iyo Hnaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah;

c) Marwalba uu raadraaca meelaha la dhigay (AGK) iyo waxyaabaha la xiriira;

d) In aanu biyaha Soomaaliya ama berriga, qarar badeedka ama xeebta looga tegin AGK;

e) In loo soo gudbiyo Wasaaradda warbixin faahfaahin dhammaystiran oo ku saabsan dhammaan shirkadaha loo diiwaangeliyey (AGK).

f) Aanu qaadin, dhigin ama ururin, wax ka badan tirada (AGK) loo fasaxay;

g) Uu hubiyo in (AGK) loo qaabeeyey loona dhigay si waafaqsan shuruudaha soo socda:

i. Qaabdhismeedka dusha sare ee (AGK) aanu daboolanayn, ama kaliya lagu daboolay qalab aan shabaq ahayn ;

ii. Haddii qaybta hoose laga isticmaalo, aan lagu samayn shabaq, laakiin waxaa laga sameeyn karaa qalab aan shabaq aheyn sida xargo ama darbaallo iyo shiraacyo; iyo

iii. Haraadiga (AGK) waa in laga nadiifiyaa badda lana baabi'iyo iyada oo la raacayo tilmaamaha Agaasimaha Guud; lana isticmaalo qalab dabiiciga ah oo mudo kadib ku milmaya biyaha badda sida xaskusha, meeraxda iwm, lagana fogaadaa isticmaalka qalabka aan dabiica ahayn ee dadku sameeyaan kana sameysan maadada balaastika ah sida caagaga iwm.

h) Aan lagu xirxirin, dhisin, sababin ama la oggolaan in lagu xirxiro ama lagu dhiso wax (AGK) ah badda dusheeda;

i) Uu caddeeyaa wixii Aalad Isu Soo AGK ah oo la soo gado, uuna keenaa Wasaaradda dalabka iibka dhammaan AGK la soo gaday sannad kasta ama xilliga ruqsad bixinta hadba sida uu Agaasimaha Guud u dalbado;

j) U suurta geliyo Wasaaraddu in ay si joogto ah u hesho tebinta tooska ah ee satelayt-ka ay ku xiran yihiin AGK waqtigaa ku haboon.

k) Aan loo dhigin AGK qaab carqaladeyn kara ama xanibi kara isu socodka badda ama khatar ku ah bad-maaxidda;

l) Uu diyaariyo warbixinnada uu u baahan karo Agaasimaha Guud, si waafaqsan Sharcigan ama Hannaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah.

2) Agaasimaha Guud waxa uu oggolaanshaha ku soo lifaaqi karaa wixii shuruudo dheeraad ah ee uu u arko in ay ku habboon yihiin in loo isticmaalo AGK.

3) Qofka aan u hoggaansamin shuruudaha farqada (1aad) xarfaha (a), (b), (c), (d), (e), (f), (g), (h), (i) (j), (k) ama (l) ee qodobkan ama shuruudo kale oo looga baahdo kalluumaysiga ama hawlaha la xiriira iyada oo aanu haysan diiwaangelin ansax ah oo la adeegsan karo sida ku cad farqada (3) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uu na mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba,iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigaan, oggolaanshaha cilmibaaristana qofkaas waa laga hakin karaa ama lagala noqon karaa ogolaashaha.

## Qodobka 77

## Shuruudaha Diiwaangelinta Nidaamka La Socodka Maraakaiibta (NLM)

1) Hawlwadeen markab kasta oo ruqsad u haysta inuu ka sameeyo kalluumeysi ama howlaha la xiriira biyaha Soomaaliya ama markab kasta oo Soomaaliyeed oo loo ogolaaday inuu kalluumeysi ama howlo la xiriira ka sameeyo aagga uu ka shaqeeyo Urur Goboleedka maareynta kalluumeysiga, waa in uu u hoggaansamaa shuruudaha ruqsada ama oggolaanshaha sida ku xusan qodobka 117aad ee sharcigan,waa in laga helo markabka dushiisa Aaladda isgaarsiinta moobeelka ee wasaaradda sida uu qabo Sharcigan, waafaqsanna shuruudaha dheeriga ah ee uu faray ama dalbaday Wasiirku in lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ama lagu baahiyo bogga rasmiga ah ee Wasaaradda.

2) Qofka sameeya kalluumaysi ama hawlo la xiriira isagoo aan heysan diiwaangelin ansax ah oo la adeegsan karo sida ku xusan farqadda (1aad) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn hal sano, ama labadaba, iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigan, oggolaanshaha cilmibaaristana qofkaas waa laga hakin karaa ama lagala noqon karaa.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## QEYBTA 2[AAD]

## HANAANKA BIXINTA RUQSADAHA, OGGOLAANSHAHA, DIIWAANGELINTA IYO FASAXYADA KALE EE KU CAD WAAJIBAADKA WASAARADDA

### Qodobka 78

### Habraacyada, Masuuliyadaha iyo Hannaanka Ruqsad Bixinta

1) Wasiirka ayaa ansixin doona habraacyada iyo mas'uuliyadaha ku saabsan daahfurnaanta iyo hufnaanta bixinta ruqsadaha , oggolaanshaha, diiwaangelinta iyo fasaxyada kale, wuxuuna u xilsaari karaa saraakiil ka tirsan Wasaaradda oo mas'uul ka noqda qabashada iyo dib-u-eegista araajida iyo soo-jeedinta talooyinka ku aaddan go'aan qaadashada wasiirka, kuwaas oo ku saabsan bixinta, diididda, hakinta ama ka noqoshada ruqsadaha.

2) Agaasimaha Guud wuxuu mas'uul ka yahay dhaqan-gelinta habraacyada iyo mas'uuliyadaha uu ansixiyay Wasiirka, kadib wada-tashi sida ugu haboon, wuxuu wasiirka u soo jeedinayaa talooyin si uu go'aan uga gaaro.

3) Macluumaadka habraacyada bixinta ruqsadaha, liiska ruqsadaha la bixiyey, iyo khidmadaha waa in laga heli karaa bogga rasmiga ah ee Wasaaradda.

### Qodobka 79

### Codsasho Ruqsad, Oggolaansho, Diiwaangelin Iyo Fasax Kale

1) Codsi ruqsad, oggolaansho, diiwaangelin iyo fasax kale sida ku xusan Sharcigan waa inuu ahaadaa foom, ay ku jiraan macluumaad, la socdaan dokumiintiyo, loona soo gudbiyaa si waafaqsan shuruudaha iyo habraacyada uu jideeyey Wasiirku ee lagu faafiyey bogga rasmiga ah ee Wasaaradda.

2) sida uu qabo sharcigan codsiga lama tixgelin doono ilaa:

a) Codsigaasi uu soo qorto markab ka shaqeeya kalluumeysi iyo hawlaha la xiriira, kaas oo wata Cadeynta Diiwaan gelintaa, Cadeynta Bedqabka iyo inuu u qalmo badmaridda, badbaadada shaqaalaha iyo Cadeynta Caymiska;

b) Codsaduhu uu yahay qofka mulkiilaha ah ama sharci ahaan ku qoran Caddeynta Diiwaangelinta;

c) Khidmadda codsiga la jideeyey ama ay dalbatay Wasaaraddu si buuxda loo bixiyey;

d) Codsaduhu yahay shirkad ka diiwaan gashan Soomaaliya, taas oo milkiilaheeda ama saamilaydeeda aanay muwaadiniin Soomaaliyeed ahayn, codsigana ay la socoto Caddeynta Oggolaanshaha oo sheegaysa lahaanshaha sharciga ah iyo saamiga shirkaddaas, codsaduhuna uu yahay mid sax ah ama sharci ah oo ku qoran Caddeynta diiwaangelinta markabka;

e) Marka laga hadlayo markab shisheeye, waa in codsiga uu la socdaa nuqulka oggolaansho oo ansax ah oo waafaqsan nidaamka kalluumeysiga iyo howlaha la xiriira biyaha Soomaaliya ee ay soo saartay dawladda **calankeedu uu sito.**

f) marka laga hadlayo markab shisheeye, markab wada-lahaansho ah ama markab soomaaliyeed, codsaduhu waa in uu cadeeyaa in aysan qeyb ka aheyn, wax xiriir ahna la laheyn koox dambiilayaal heer caalami ah, isla markaana dammaanad qaadaa in aanay ka qeyb noqon doonin inta lagu guda jiro muddada shatigu ansaxa yahay.

3) Marka la joogo sharcigan codsiga lama tixgelin doono haddii:

a) Ay jiraan sababo macquul ah oo lagu aamini karo in milkiilaha, hawlwadeenka ama qof kale oo ku lug leh kalluumeysiga ama howlaha la xiriira; lala xiriiriyo koox dembiileyaal ah oo heer caalami ah;

b) Aan macluumaad run ah, sax ah oo dhammaystiran lagu buuxin foomka dalabka codsiga, ama macluumaadku uu noqdo mid been ah, mid marin habawsan, mid khaldan ama aan dhameystirnayn;

c) Shahaadada Diiwaangelinta ee markabka laga soo saaray Soomaaliya, laakiin Agaasimaha Guud aanu horay u ansixin diiwaangelinta si waafaqsan sharcigan iyo habraacyada loo dejiyey;

4) Wasaaraddu waxa ay sameyn kartaa baaritaan kasta si loo xaqiijiyo macluumaadka lagu soo gudbiyey qodobkaan; dhammaan dadka ku lugta leh codsiga ruqsadda, oggolaanshaha, fasax kale ama diiwaangelinta waa inay si buuxda ula shaqeeyaan baarayaasha iyo u hoggaansanaanta baaritaankaas.

5) Qofka aan laga helin wadashaqeyn buuxda ama u hogaansamin baaritaanka sida ku xusan farqada (4aad) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

ee sharcigan ama xarig aan ka badnayn saddex sano, ama labadaba, iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaray sharcigaan, qofkaasna looma soo saari doono ruqsad, ogolaansho, fasax kale ama diiwaangelin.

6) Ka dib marka la bixiyo ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin oo la ogaado in macluumaadka, caddeynta ama dukumiintiyadii looga baahanaa codsiga ee qodobkaan lagu sheegay ay ahaayeen been abuur ama marin habaawsanaayeen, ruqsadda, oggolaanshaha, fasax kale ama diiwaangelinta waxaa loo qaadan doonaa mid aan ansax ahayn isla markaasna waa lagala noqon doonaa.

## Qodobka 80

## Heerarka Lagu Ansixinayo Diiwaangelinta Maraakiibta

1) Codsi kasta oo uu diiwaan gelin ku dalbanayo markab kalluumeysi oo u habaysan howlo kalluumeysi ama howlo la xiriira kana howlgalaya biyaha Soomaaliya, oo ay ka mid yihiin maraakiib shisheeye, maraakiib kireysan iyo maraakiib wada-lahaanshaha ah; Wasaaradda Dekedaha iyo gaadiidka Baddu ma siin karto diiwaan gelin iyo calan ilaa marka hore Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah ay ka hesho oggolaansho.

2) Haddii uusan Agaasimaha Guud ogolaanin in la diiwaangaliyo mrkab shisheeye si ruqsad loo siiyo oo uga shaqeeyo biyaha Soomaaliya ama ogolaansho iyo fasaxyo kale waxaa loo aqoonsanayaa mid aan ansax ahayn sida ku xusan sharcigan qodobkiisa 82aad faqrada 1aad.

3) Marka uu oggolaanayo codsiyada maraakiibta kalluumeysiga, Agaasimaha Guud wuxuu eegayaa hawlaha markabka iyo heerkiisa, oo ay ka mid yihiin:

a) howlaha markabka iyo hawlwadeennadiisa, oo kamid yihiin:

i. In markabkani uu yahay ama uu ku jiray diiwaanka maraakiibta sharci darrada ah, oo ay gacanta ku hayaan Urur Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga ;

ii. In markabkaas ama hawlwadeenka markabku uu ku lug lahaa wax kasta oo aan waafaqsaneyn sharciyada kalluumeysiga ee qaranka ama Xeerka Maareynta Iyo Ilaalinta Calamiga ah tobankii sano ee la soo dhaafay;

iii. In markabkaas, hawlwadeenka markabka ama shaqaalihiisu ay ku lug lahaayeen falal dembiyeedyada caalamiga ah ama koox dembiileyaal abaabulan ah tobankii sano ee la soo dhaafay;

iv. Hawlo kasta oo kale oo laga yaabo oo ay suurta gal tahay mustaqbalka in aan loo hoggaansami doonin Sharcigan; iyo

b) La hubiyaa in loo hoggaasamay xeerarka caalamiga ah ee lagu heshiiyey, oo kala ah:

i. Heerarka caalamiga ah ee aqoonsiga iyo caalamadeynta markabka;

ii. Macluumaad buuxa oo ku saabsan milkiilayaasha markabka iyo Hawlwadeenada taas oo tilmaamaysa lahaanshaha iyo faa'iidada milkiilaha iyo Hawlwadeenada ay ku leeyihiin markabka; iyo

iii. Macluumaad buuxa oo ku saabsan taariikhda markabka oo la xaqiijiyay la keenay oo ay ku jiraan aqoonsiga calankii hore iyo magac beddelka;

iv. Astaamaha markabka iyo inuu ku habboon yahay arrimaha kalluumeysiga ama howlaha la xiriira iyo in uu u hoggaansamay Sharcigan;

v. In markabku uu ku jiro diiwaanka maraakiibta bedqaba oo ay gacanta ku hayso Urur Goboleedka Maaraynta Kalluumeysiga ;

vi. Iyo heerarka kale ee caalamiga ah ee lagu heshiiyay, oo ay ka mid yihiin midka Hay'adda Cuntada Adduunka 2014 Habraacyada Isxilqaan Hawl-fulineed ee Dalka Calanka (2014 FAO Voluntary Guidelines of Flag State Performance)

Lama ogolaanayo diiwaan gelinta markab ama hawlwadeen haddii ay ku caddaato in ay mar hore hoggaansami waayeen; ilaa laga beddelo mulkiyadda markabka oo mulkiilaha cusub xaqiijiyo in mulkiilihii hore uusan wax shaqo ah ku laheyn maamulka markabka.

4) Maraakiibta ka diiwaan gashan laba waddan ama ka badan lama ogolaanayo diiwaangelintooda; marka laga reebo xaaladaha diiwaangelin is-barbar socota muddo ku meel gaar ah, sharcigana waafaqsan.

5) Marka laga soo tago farqada (3aad) ee qodobkan, maraakiibta taariikhdoodu aanay waafaqsaneyn sharcigan lama diiwaangelinayo, marka laga reebo in lahaanshaha markabka uu si toos ah isu beddelay oo milkiilaha cusubna uu keenay caddeymo ku filan oo muujinaya in milkiilihii hore ama hawlwadeenkii hore aanay hadda wax sharciyad ah, naci ah ama dano dhaqaale ah ama awood ah ku laheyn markabka.

6) Ogolaanshaha diiwaangelintu waxa ay ansax noqonaysaa ilaa iyo laba sano.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

7) Haddii oggolaanshaha hore ee diiwaangelinta lagu saleeyo nidaamyada iyo habraacyada ku xusan faqradaha (1) iyo (2), ee qodobkan, oo ay dhacdo in ay wax iska beddelaan duruufihii jiray inta lagu guda jiro muddada ay laalan tahay diiwaangelinta u hoggaansamid la'aan nidaamyada darteed ama la ogaado in ansaxintii hore ay ku saleysneyd macluumaad been ah, khaldan ama aan dhameystirneyn, Agaasimaha Guud waxa uu ku wargelin doonaa Wasaaradda mas'uulka ka ah diiwaangelinta, markabkana isla markiiba waa lagala noqon doonaa diiwaangelinta, ruqsadda, oggolaanshaha, fasaxyada kale ama diiwaangelin kale oo lagu soo saaray Xeerkan, waxaana loo tixgelin doonaa mid aan ansax ahayn oo laga noqday.

## Qodobka 81

## Baaritaano lagu Hubinayo Markabka ka hor Diiwaangelinta Iyo Ruqsad siinta

1) Iyada oo la tixgelinayo codsiga Hawlwadeenka markabka ee uu ku codsanayo ruqsad, oggolaansho ama fasaxyo kale ama diiwaangelin markab si waafaqsan sharcigan ama ku xusan sharcuucda dalka, ka hor inta aan la bixin wax ruqsad, oggolaansho ama fasax kale ah ama oggolaanshaha diiwaangelinta waa in:

(a) uu ka caawiyaa Agaasimaha Guud, baaritaanka, sahaminta markabka loogu talagalay in loo adeegsado kalluumeysiga ama howlaha la xiriira iyo shuruudaha kale ee dekedda u degsan ee uu ansixiyay Agaasimaha Guud, hadba waqtiga iyo sida Agaasimaha Guud uu go'aamiyo; waana

(b) Inuu buuxiyo shuruudaha uu dhigayo sharcigan ee ka horeeya ruqsad siinta iyo diiwaangelinta oo uu jideeyey ama amray Wasiirku, laguna baahiyay bogga rasmiga ah ee Wasaaradda;

2) Sida uu qabo xarafka (a) ee faqrada (1aad) ee qodobkan howlgeliyuhu waa in waqti aan ka yareyn siddeed iyo afartan saacadood ka hor waqtiga la filaayo in markabku dekedda kusoo xirto uu Wasaaradda ku soo wargaliyaa culeyska kalluunka uu sido iyo noocyadiisa uuna ku soo xirtaa dekedda Wasaaraddu u cayintay.

3) Sarkaalka idman ee kalluumeysiga waa inuu sameeyaa hubinta iyo baaritaanka ka horreeya bixinta ruqsad ama diiwaangelinta markabka si waafaqsan xeerkan iyo shuruudaha uu ansixiyo Wasiirku, waxaa intaa dheer Agaasimaha Guud wuxuu u magacaabi karaa baare si uu u sameeyo baaritaankaan.

4) Wasaaraddu waxa ay dib u eegis ku sameynaysaa dhammaan dukumintiyada looga baahan yahay markabka si loogu soo saaro ruqsad,diiwaangelin, oggolaansho ama fasax kale.

5) Shuruudaha ku xusan qodobkan howlgeliyaha markabku waa inuu:

a) U oggolaado oo caawiyo sarkaal kasta oo idman oo kalluumaysi iyo baaraha sahminaya si ay u fuulaan una baaraan markabka ama haddii kale ay u gutaan waajibaadkooda ku xusan sharcigaan.

b) Waa in uu kenaa Wasaaradda dhammaan dokumentiyada iyo macluumaadka looga baahan yahay diiwaangelinta, ruqsadsiinta, oggolaanshaha ama fasaxyo kale.

6) Marka laga soo tago faqrada (1) ee qodobkan, waxaa laga yaabaa in Agaasimaha Guud uu qabto waqti lagu sameeynayo baaritaan ka dib marka ruqsad la siiyo, xaalado gaar ah oo jira awgeed, waqtigaas oo aan ka badnayn laba toddobaad.

7) Hawlwadeen kasta oo u hogaansami waaya shuruud kasta oo ku xusan farqadaha (1), (2), (3) ama (6) (a) ama (b) ee qodobkan waxa uu galayaa dembi, waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad iyo ciqaab kasta oo kale oo lagu soo saaro sharcigaan, waliba waxaa intaa dheer haddii howlgeliyuhu aanu buuxin shuruudaha ku xusan farqadaha (1) (a) ama (b) lamasiinayo ruqsad, oggolaansho ama fasax kale sida uu qabo sharcigan.

## Qodobka 82

## Hababka Bixinta , Cusboonaysiinta Ruqsadaha, Oggolaanshaha, Diiwaangelinno Iyo Fasaxyada Kale

1) Wasiirka oo tixgelinayaa talooyinka Agaasimaha Guud, waxaa uu oggolaanayaa ama diidayaa codsiyada ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxyada kale ama diiwaangelin kasta sida ku xusan sharcigaan, marka laga reebo in la diiday ruqsadda talo soo jeedin kadib.

2) Talo soo jeedinta Agaasimaha Guud ee bixinta ama cusbooneysiinta ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxyada kale ama diiwaangelinada ku xusan Sharcigan, Agaasimaha Guud waa inuu la socdaa xaaladaha, hawlwadeenka, milkiilala, markabka kireysan ama qof kale ama shirkad kale ee ay arrinta markabku khuseyso ama markabka, in:

a) Uu u hoggaansamay sharcigan, shuruucda kale ee Soomaaliya, shuruudaha kale ee looga baahan yahay in lagu siiyo ruqsadaha iyo heshiis kasta oo la geli karo;

b) Uu u hoggaansamay shuruudo kasta oo khuseeya magacaabista wakiilka/ wakiilada, wakiilkuna u hogaansamay sharcigan iyo Shuruucda kale ee Soomaaliya;

c) Uu u hoggaansamay shuruudaha badmaridda iyo badbaadada.

d) Uu keenay dhammaan xogta iyo macluumaadka looga baahan yahay iyo tilmaamaha markabka, si dhakhso leh oo sax ah, xogtaas oo ay ku jirto nidaamka la socodka markabka;

e) Uu u hoggaansamay dhamaan Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah iyo nidaamyada kale ee heer gobol iyo heer caalami ee ku habboon;

f) In uu ku jiro diiwaanka maraakiibta idman ee Urur Goboleedka Maaraynta Kalluumeysiga

g) In aanu aheyn ama xiriir la laheyn markab ku jira diiwaanka maraakiibta uu tilmaamay Urur Goboleedka Maareynta Kalluumaysiga , kuwaas oo ku calaamadeysan kalluumaysi ama howlo la xiriira oo sharci-darro ah;

h) In uu ku habboon yahay ujeeddada laga leeyahay codsiga; iy

i) In uu awoodo u hoggaansamida sharcigan.

3) Qodobkan, "sifooyinka markabka" waxaa ka mid ah nooca, dhismaha, awoodda, Matoorka iyo astaamaha kale ee markabka, iyo qeexitaanno iyo macluumaad kale oo la xiriira qalabkiisa, agabkiisa iyo diyaarado.

## Qodobka 83

### Sababaha Diidmada Cusboonaysiin La'aanta Ruqsadaha, Oggolanshaha Iyo Diiwaangelinta.

1) Bixinta ama cusboonaysiinta ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxyada kale ama diiwaangelinta ku xusan sharcigan waa uu diidayaa Agaasimaha Guud marka uu ogaado:

a) In nidaamyada u degsan ama lagu sheegay qodobka 84aad aan marnaba la buuxin;

b) In jilaabashada kalluunka looga baqo inuu yaraado ama hoos u dhaco;

c) In hawlwadeenka markabku u hogaansami waayey ama fulin waayey shuruudihii ka hor ruqsad siinta sida ku cad qodobka 83aad;

d) In hawlwadeenka markabka horey loogu xukumay dembi la xiriira daacad darro ama khayaano;

e) Marka laga soo tago qodob kale oo ku dhigan sharcigan, in hawlwadeenka markabka ama markabku uu ku jiro heshiis aanu si buuxda u fulin, Sharcigan ama wax kasta oo khuseeya Hannaanka Maareynta yo Ilaalinta Caalamiga ah ee la adeegsado;

f) In ay jirto caddeyn ku filan in hawlwadeenka ama qof kale oo xiriir la leh markabka uu ku kacay kalluumeysi sharci-darro ah ama howlo la xiriira ama waxyaalo kale oo sharci darro ah, isla markaana uusan ku qancin xukun kasta ama go'aan kasta oo isaga khuseeya ama uu ku lug lahaa koox dambiilayaal abaabulan ama dembi caalami ah;

g) In hawlwadeenka markabku uu dembi ku galay biyaha Soomaaliya, ama markabka loo adeegsaday fal-dambiyeed, kaas oo dacwaddiisu aan weli la soo gabagabeyn;

h) In hawlwadeenka markabka lala xiriiriyo markab ku jira diiwaanka maraakiibta ku howlan kalluumeysiga sharci darrada ah ee uu hayo Urur Goboleedka Maareynta Kaluumeysiga;

i) In markabku ka sito calan dal loo aqoonsaday in uu yahay "wadan ku can ah sumcad xumi u hogaansnaanta qawaaniinta caalamiga ah", sababtoo ah waxa uu ku guuldareystay masuuliyaddii uu lahaa Dalka Calanku, sida shuruudaha ku xusan cutubka 2aad. ee FAO Habraacyada Isxilqaan Hawl-Fulineed Ee Dalka Calanka;

j) In markabku aanu ku habbooneyn ujeeddada codsiga uu soo dalbaday;

k) In markabku ku xadgudbay heshiiska nidaamyada dekedda dalka ee waafaqsan hannaanka maareynta iyo ilaalinta, ayadoo la hayo caddeyn sax ah in markabku uu galay hawlo kalluumaysi sharcidarro ah oo hawlwadeenku ama markabku aanu soo gudbin sharciyada ama habraacyada kale ee ay ka dalbadeen Dalka Dekedda, Dalka Xeebta ama Dalka Calanka.

l) Mid ama dhammaan codsadaha, milkiilaha ama hawlwadeenku aanu:

i. U hogaansamin shuruudaha ruqsadda ee hadda jira ama kuwii hore ama wixii shuruudo kale ah ee ku xusan Sharcigan;

ii. U hoggaansamin sharci kasta oo Soomaaliyeed; iyo

iii. Soo gudbin sida sharcigani dhagayo, iyada oo la tixraacayo go'aamada ama xukunka loo adeegsanayo, qofkii u hoggaansami waaya ama si buuxda loogu qanci waayo.

2) Haddii macluumaadka ku jira codsiga ruqsad, oggolaansho, diiwaangelin ama cusbooneysiintiisa lagu helo in ay been tahay, marin habaabin ama khaldan tahay macno ahaan, Agaasimaha Guud wuxuu soo jeedin karaa in ruqsadda, oggolaanshaha ama diiwaangelinta aan la siin ama aan la cusbooneysiin.

3) Ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin lama siinayo, lamana cusbooneysiinayo ilaa laga bixiyo dhammaan khidmadaha, ujurooyinka ama canshuuraha uu farayo Sharcigan.

4) Ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin lama siinayo ama dib looguma cusbooneysiinayo markab shisheeye oo horey ruqsad kalluumeysi ama hawlo la xiriira looga siiyay dowlad shisheeye haddii markabkaasi uusan ixtiraamin Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah ee la adeegsado oo:

a) Dal Shisheeye ay joojisay ruqsaddii hore, oo joojintuna aanay dhammaan; ama

b) Dal Shisheeye, seddexdii sano ee la soo dhaafay ee ka horreysay soo codsashada ruqsadda ee sharcigan laga noqday ruqsaddiisii hore.

5) Xaddidaadda faqarada (4aad) ee qodobkan ma dhaqan galayso haddii:

a) lahaanshaha markabka la beddelay ka dib markii markabkaasi uu wiiqay sharci ahaanshaha hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee la adeegsan karo; iyo

b) Mulkiilaha cusub uu u keenay Agaasimaha Guud cadeymo uu ku muujinayo in milkiilihi hore uusan faa'iido, dhaqaale, dan dheeraada ama sharciyad ku lahayn markabka.

6) Agaasimaha Guud waxa uu qoraal ku ogeysiinayaa codsadaha in loo diiday ruqsadda siinta ama cusbooneysiinta, oggolaanshaha, fasaxa kale ama diiwaangelinta iyo sababaha loogu diiday.

## Qodobka 84

## Racfaan

1) Wasiirka oo la tashanaya Wasiirka Caddaaladda, waxa uu dhisayaa Guddi Rafcaan oo aan ka badneyn saddex qof oo aqoon u leh arrimaha kalluumeysiga ama sharciga kalluumeysiga, kuwaas oo ay ka mid noqonayaan haddii ay suurtagal tahay, ugu yaraan hal sarkaal dawladeed ah iyo hal qof oo bulshada rayid ah ka socda.

2) Guddiga racfaanku waxa uu yeelanayaa waajibaadka dhageysiga iyo go'aaminta rafcaannada ka yimaada go'aamada Wasiirka, kuwaas oo la xiriira ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxyada kale,diiwaangelinta, iyo shuruudaha lagu heshiiyey ee gudddiga loo aasaasay, Guddiga Racfaanka ayaana sheegaya in go'aannadoodu ay kama dambeys yihiin.

3) Guddiga Racfaanka ayaa go'aaminaya habraacyadooda, waxa ayna rafcaan qaatayaasha u gudbinayaan qoraal ogeysiis ah oo ay ugu sheegayaan go'aannadooda iyo sababaha.

## Qodobka 85

## Ujuuro, Kharashaad Iyo Canshuur

1) Dhammaan ujurooyinka, khidmadaha iyo canshuuraha uu jideeyey ama faray Wasiirka sida uu qabo qodobkan waxaa lagu soo bandhigayaa bogga rasmiga ah ee Wasaaradda ama waxaa lagu qeexayaa nidaamyada heshiiska kalluumeysiga.

2) Wasiirka ayaa jideyn kara ama qori kara ujurooyinka, khidmadaha iyo canshuuraha la xiriira shuruud kasta ama hawl kasta oo hoos imaanaysa sharcigan, oo ay ka mid yihiin

a. Ruqsadaha, ogolaanshaha diwaangakinta iyo fasaxyada kale;

b. Ogolaanshaha diiwaangelinta maraakiibta;

c. Wakiillada;

d. Kala wareejinta;

e. Dejinta;

f. Maaraynta xarunta la socodka maraakiibta habka warbixinta elektarooniga ah iyo habka kormeerka elektarooniga ah;

g. Kormeereyaasha; iyo

h. Kharashyada kale ee looga baahan karo arrimaha ku xusan Sharcigan.

3) Ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin la bixiyey ama lagu cusbooneysiiyay Sharcigan waxa ay ku xirnaaneysaa bixinta kharashyada soo socda, oo ah qaddarka uu jideeyey Wasiirku:

Khidmada codsiga;

khidmada soo saarista ruqsadda;

khidmadda cusboonaysiinta; iyo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Khidmadaha kale, ujurooyinka ama canshuuraha sida ku xusan Sharcigan ama sida uu faro ama oggolaado Wasiirku.

4) Lacag la bixiyey lama soo celin doono marka laga reebo lacag bixin saami gal ah si waafaqsan Sharcigan.

5) Marka ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin la siiyey qof iyada si waafaqsan Sharcigan, uuna lumo, burburo ama hallaabo oo Agaasimaha Guud uu ku qanco in uu lumay; Agaasimaha Guud waxa uu amrayaa in la bixiyo 30% qimahii hore ee ruqsadda ama wixii kale ee Wasiirku go'aamiyo, si loogu soo saaro nuqul kale oo ay ku jiraan wixii macluumaad ah ee la ansaxiyay ama la geliyay ruqsaddii hore, oggolaanshihii ama fasaxii burburay ama hallaabay, nuqulka la soo saarana wuxuu ahaanayaa ruqsad asal ahaa oo kale.

6) Ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin ay beddeshay wasaarad aan sharciyad u haysan ama la halleeyey ama la jeexjeexay waxaa loo qaadanayaa inay tahay ruqsad aan ansax ahayn marka loo eego ujeeddada Sharcigan.

## Qodobka 86

### Muddada ruqsadaha, oggolaanshaha, diiwaangelinta Iyo fasaxyada kale

Dhammaan ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxyada kale iyo diiwaangelinta la soo saaray iyada oo la raacayo Sharcigan, haddii aan la hakin, laga noqon ama si kale loo joojin; muddada ugu badan ee uu ansaxa yahay waa hal sano laga bilaabo taariikhda la soo saaray, Wasiirkuna waxa uu jideyn karaa waqti intaa ka yar.

## Qodobka 87

### Hakin, ka noqosho ruqsad,Baabi'in oggolaansho diiwaangelin Iyo fasaxyada

1) Wasiirku waxa uu hakin ama joojin karaa ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin si waafaqsan habraacyada la tilmaamay, sababaha soo socda awgeed;

a) Qofka ruqsadda haysta haddii uu ku xadgudbay;

Sharcigan ama shuruudaha lagu qeexay ruqsadda ama oggolaanshaha;

heshiis kasta oo khuseeya; ama

Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ee la adeegsado;

b) Qofka ruqsadda heysta haddii uu codsiga ku buuxiyay macluumaad been ah, marin habaabin ama aan dhameystirneyn;

c) Qofka ruqsadda haysta haddii uusan soo gudbin ama uusan bixin ganaaxa ama ciqaabta nidaam sharciga ah, garsoore ama maamul uu ka dalbaday, ama uu u hoggaansami waayey amar garsoor ama go'aan maamul;

d) Hadii dal kale ay ka hakiyaan ama ka joojiyaan ruqsadda ama oggolaanshaha markab Soomaaliyeed oo la siiyay ruqsad ama oggolaansho ah inuu ka kalluumeysto biyaha dalkaas sababo la xiriira kalluumeysi sharci dharro ah ama howlo la xiriira ama ku tumasho sharci;

e) Hadii ay jireen isbeddel ku yimid duruufo saamaynaya shuruudaha looga baahan yahay sharciyada ruqsadda, oggolaanshaha ama diiwaangelinta

f) Hadii ay dhaceen wax isbeddel ah tan iyo markii la bixiyay ruqsadda, oggolaanshaha ama diiwaangelinta oo ku saabsan shuruudahan, sida uu jideeyo ama uu go'aamiyo Wasiirku, isaga oo go'aankiisa ku salaynaya talooyinka uu soo jeediyo Agaasimaha Guud.

g) Haddii ay lagama maarmaan noqoto in sidaas la sameeyo si loo ilaaliyo sii jiritaanka ka faa'iideysiga kheyraadka kalluumeysiga ama loo hirgeliyo hannaan kasta oo Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga Ah;

h) Haddii u qalmidda bad maridda, badbadada iyo heerka nolosha shaqaaluhu aanay waqti kasta aheyn sidii la doonayey;

i) Haddii caddaymo ku filan loo hayo in milkiilaha, hawlwadeenka ama kabtanku uu ku kacay kalluumeysi kasta oo sharcidarro ah ama wax la xiriira, oo aan lagu sheegin qodobkan ama hawl kale oo sharci-darro ah ama lala xiriiriyo koox dambiilayaal abaabulan ama fal-dembiyeedyo heer caalami ah;

j) Haddii macluumaadka ku jira codsiga lagu siiyey ruqsadda ama cusboonaysiinta ruqsadda laga helo been abuur, marin habaabin ama aanu sax ahayn; ama

k) Haddii ay jiraan sababo kale oo la sheegi karo.

2) Wasiirku waxa uu hakinayaa ama baabi'inayaa ruqsad ama fasax, iyadoo la raacayo habraacyada la jideeyey, marka:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

a) Sidaa Sharcigan ku xusan ama heshiis oggolaansho kasta ama Hannaanka Maareynta Iyo Ilaalinta Caalamiga ah;

b) loo baahdo in lagu qaado dacwad maamul ama caddaalad qofka haysta ruqsadda si waafaqsan Sharcigan;

c) haddii uu yahay markab shisheeye oo ruqsad uu siiyey dalka calanku laga hakiyey ama lagala noqday.

3) Hakinta ama baabi'inta ruqsadda ama oggolaanshaha si dhaqso ah ayuu Agaasimaha guud qoraal ogeysiis ah ugu gudbinayaa qofka haysta ruqsadda.

4) Marka waqtiga heshiiska soo-gelitaanka khuseeya uu dhammaado iyadoo ay weli ruqsadu ansax tahay, ruqsadaasi isla waqtigaas ayey dhacaysaa oo ansax ma sii ahaanayso.

5) Qofka ruqsaddiisa ama ogolaanshihiisa laga hakiyey ama baabi'iyey sida ku xusan faqrada (1aad) ama (2aad) ee qodobkan, xaq uma laha in loo celiyo wixii khidmad ah, canshuuro, ama lacag kale oo laga bixiyay ruqsada.

6) Iyadoo la tixraacayo farqada (4aad) ee qodobkaan, waa in laga qaado lacag loogu cusboonaysiiyo ogolaanshaha soo galidda iyo ruqsadda, iyadoo la waafajinayo faqrada (1aad) xarafka (g) ee qodobkan.

7) Qof kasta oo haysta ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin lagu soo saaray sharcigan oo laga joojiyey ama laga hakiyey waa inuu dukumiintiyada ku wareejiyaa Wasaaradda marka uu sidaas dalbado Agaasimaha Guud, iyadoo aan wax waajibaad ah la saareyn ilaa laga cadeynayo ama laga hubinayo inuu mutaystay ganaaxyo ka hor taariikhda dhiibista ruqsada.

8) Qof kasta oo meel ka hela ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelin lagu soo saaray sharcigan waa inuu u ku wareejiyaa Wasaaradda ama saldhigga booliiska ee ugu dhow

9) Qof kasta oo;

Ku hawlgala ruqsada, ogolaanshah, fasaxa kale ama diiwaangelinta la siiyay ka dib markii uu helay ogeysiiska hakinta ama kala noqoshada sida uu qabo Sharcigan; ama

Lagu helo isaga oo isticmaalaya ruqsad, oggolaansho ama diiwaangelin lagu soo saaray sharcigan, oo uusan isagu lahayn mulkiyaddeeda;

Waxa uu galayaa dembi marka ay ku cadaato, waxa uuna mutaysanayaa ganaaxa lagu sheegay Jadwalka Koowaad ee sharcign ama xarig aan ka badnayn shan sano ama labadaba, iyo ciqaab kasta oo lagu soo saaro sharcigan.

## CUTUBKA 8-AAD
## KORMEER, XAKAMEYN IYO IIAALIN
## QEYBTA 1^AAD
## MAAMULKA

### Qodobka 88
### Iskaashiga Mas'uuliyadaha ilaalinta Iyo Xakamaynta

1) Wasiirku wuxuu magacaabayaa Waax mas'uul uga noqon doonta Soomaaliya kormeerka, xakamaynta, ilaalinta iyo dhaqangelinta sharcigan iyada oo la raacayo tilmaamaha guud ee Wasiirka.

2) Waaxdu waxa ay fulinaysaa waajibaadka iyo mas'uuliyadaha Wasaaradda, waxa ay isku dubarid iyo wadashaqeyn wax ku ool ah la yeelaneysaa;

Dawladaha xubinta ka ah dawlada federaalka;

Wasaaradaha kale ee qaranka, wakaaladaha, iyo ururada ay khusayso; iyo

Urur goboleedyada ama kuwa caalamiga ah ee xiriirku shaqo kala dhexeeyo, iyada oo kormeeraysa, xakamaynaysa, ilaalinaysa oo fulinaysa hawlgalada iyo arrimaha ku xusan xeerkan.

## QEYBTA 2^AAD
## SARAAKIIL KALLUUMAYSI, BAARAYAAL IYO KORMEERAYAAL IDMAN

### Qodobka 89
### Magacaabista Saraakiisha Kalluumeysi Ee Idman

1) Agaasimaha Guud waxa uu soo jeedinaya saraakiil kalluumeysi oo idman, iyada oo la raacayo habraacyada, shuruudaha iyo heerka aqoontooda si uu u ansaxiyo Wasiirku.

2) Shakhsiyaadka soo socda ayaa loo arkaa inay yihiin saraakiil idman oo kalluumeysi, sida ku cad sharcigani:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Agaasimaha guud
Saraakiisha Wasaaradda, kuwaas oo Agaasimaha Guud soo jeediyey in ay yihiin saraakiil idman Wasiirkuna ansixiyo soo jeedinta Agaasimah Guud
Ciidanka Badda iyo difaaca xeebaha Soomaaliya, Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, Qeybta Booliska Xeebaha iyo saraakiisha kale ee khuseyso shaqada badda, ayadoo uu Wasiirka uu qoraal ku ansixiyo saraakiishaas.

## Qodobka 90
## Magacaabista Baarayaasha

1) Wasiirku waxa uu soo saari karaa xeerarka magacaabista, shaqooyinka, xilalka iyo shuruudaha kale ee baarayaasha hawl kasta oo waafaqsan sharcigan, oo ay ku jiraan baarayaasha kalluunka ujeedooyinka laga leeyahayna ay tahay baaritaanka tayada kalluunka iyo wax soo saarka kalluunka.

2) Agaasimaha Guud waxa uu qoraal ku magacaabayaa qof ama koox baarayaal kalluumeysi ah, iyada oo ujeedadu tahay baaritaannada iyo warbixinnada hawlaha si waafaqsan sharcigan iyo waajibaadka la xiriira sida ku xusan faqrada (1aad) waafaqsanna habraacyada, shuruudaha iyo tayada uu wasiirku oggolaado.

## Qodobka 91
## Magacaabista kormeereyaasha Iyo Shaqadooda

1) Agaasimaha Guud waxa uu qoraal ku magacaabi karaa qof ama koox kormeerayaal ah, iyada oo ay ujeeddadu tahay kormeeridda, aruurinta, qoridda iyo soo gudbinta warbixin la isku halleyn karo oo sax ah iyo xog cilmi ah, kormeerid, maamulid iyo u hogaansanaanta ujeeddooyinka hoos yimaada sharcigan, iyada oo la raacayo habraacyada, shuruudaha iyo tayada uu wasiirku oggolaado.
2) Agaasimaha Guud uma magacaabi karo kormeere qof kasta oo dano toos ah ama dadban ama xiriir la leh markabka, hawsha ama dadka la kormeerayo, sida hawlwadeenka, xubin ka tirsan shaqaalaha markabka ama qof kale oo xiriir la leh milkiilaha markabka ama hawlwadeenka, qofka noocaas ahna looma oggolaan karo inuu noqdo kormeere markab kasta ama hawl kasta si waafaqsan sharcigan.

## Qodobka 92
## Isticmaalka Awoodaha Iyo Howlaha Loo Idmay Saraakiisha Kalluumaysiga, Baarayaasha iyo Kormeerayaasha

1) Saraakiisha kalluumeysiga ee idman, baarayaasha iyo kormeereyaashu waa in ay sameeyaan kormeer, xakameyn, ilaalin iyo in loo hoggaansamay hawlaha si waafaqsan sharcigan meelaha uu khuseeyo, oo ay ka mid yihiin:
Meelaha Dawlada Soomaaliya ka taliso; iyo
Meelaha ka baxsan inta Dawladda Soomaaliya ka taliso ee sharcigan lagu dabaqi karo sida ku xusan qodobka 3aad, iyada oo la raacayo shuruudaha sharcigan iyo hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga, heshiiska ama sharuucda caalamiga ah, ee la xiriira markab kasta oo Soomaaliyeed, markab aan dal ka diiwaan gashanayn ama arrimo kale oo hoos imaanaya shuruudahaan.
2) Marka saraakiisha idman ee kalluumeysiga, baarayaasha iyo kormeereyaashu ay u gutaan howlahooda si waafaqsan faqrada (1aad) xarafka (b), qodobada ku xusan sharcigan ayaa lagu dabakhayaa haddii ay si ku haboon u gudan waayeen waajibaadkooda lagana fulinayey meelaha xeer xeyndaabka Soomaaliya.
3) Sarkaal kasta oo kalluumaysi oo idman, baare ama kormeere kasta, marka uu gudanayo waajibaadkiisa waxa uu wadan doonaa aqoonsi ay soo saartay ayna ansixisay wasaaradu, waxa ayna ku soo saari doontaa codsiga u jeedada aqoonsiga, aqoonsiga la soo saarana ilaa wax burinaya laga helo wuu ku filnaan doonaa u adeegsiga awoodaha iyo shaqooyinka ku xusan sharcigan

## Qodobka 93
## Awoodaha guud ee Saraakiisha Idman Ee Kalluumaysiga

1) Sarkaalka idman ee kalluumeysiga waxa uu qaadi karaa talaabooyin, bixin karaa awaamiir lagama maarmaan u ah fulinta ujeeddooyinka ama qabashada shaqooyinkiisa, awooddiisa iyo waajibaadkiisa sida ku xusan Sharcigan.
2) Sarkaalka idman ee kaluumeysiga waxa uu si macquul ah u isticmaali karaa awooddiisa iyo waajibdkiisa marka ay lagama maarmaan tahay sida ku xusan sharcigaan.
3) Sarkaalka idman ee kaluumeysiga wuxuu u baahan karaa qof caawiya;
In la keeno markab meel ka mid ah Soomaaliya si waafaqsan Xeerkan; ama



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Xaaladaha marka loo baahdo caawimaad ku saabsan in si degdeg ah loo dhaqangeliyo sharcigan.
Qofkaasna waxaa loo arkaa inuu leeyahay awoodda sarkaalka idman ee kalluumeysiga, markaas oo ah waqtiga looga baahan yahay sarkaalka inuu arrinta wax ka qabto, marka laga reebo in xoog la adeegsado ama qof la xiro.
4) Farqada (3) ayaa lagu dabakhayaa marka qof ama ka badan si sax ah ay u magacaawdo Dawlad kale oo awood u leh, Wasaaradduna sidoo kale ayey u magacaabaysaa sarkaalka idman ee kaluumeysiga sida uu qabo sharcigan. Agaasimaha guud isaga oo la tashanaya maamulka dalka kale, waxa uu caddeynayaa in qofka ama shakhsiyaadka ay wasaaraddu awoodda u siisay in uu noqdo sarkaalka idman ee kalluumeysiga sida uu qabo sharcigan, waxaa kale oo uu Agaasimuhu caddaynaya ujeeddada aagga ama waqtiga loo cayimay sarkaalka, marka laga reebo in xoog wax loo taxaabayo.

## Qodobka 94
## Awoodda Gelista Iyo baarista

1) Ku dhaqmidda qodobkan waxa uu gaarsiisan yahay dhammaan howlaha hoos yimaada sharcigan meelaha uu khuseeyo.
2) Sarkaalka idman ee kalluumeysiga, ujeeddooyinka iyo hawlaha hoos yimaada sharcigan dartii, waxa uu awoodaa digiin la'aan in uu:
joojiyo, fuulo, saarnaado, galo oo baaro markab kasta, gaadiid ama diyaarad kasta, oo ay ku jiraan:
Markab kasta oo uu u heysto sabab uu rumeysan yahay in la isticmaalay, la isticmaalayo ama la rabo in lagu isticmaalo loona adeegsado kalluumeysi ama wax la xiriira;
markab kasta oo Soomaaliyeed oo ka baxsan biyaha Soomaaliya;
markab kasta oo aan dal ka diiwaan gashnayn oo ku sugan badaha sare; iyo
markab kasta oo lagu dabakho sharcigan, sharci kasta oo caalami ah, heshiis caalami ah ama hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah, baaritaankana waxaa ka mid noqon kara in la jabiyo ama la furo meel kasta oo wax lagu hayn karo sida; qol, kuntuneer ama meel kale oo wax lagu ururiyo oo markab dushiis ah, kaas oo sarkaalka idman ee kalluumeysiga uu u haysto sababo macquul ah oo lagu aamini karo inay ku jiri karaan dembi cad sida uu qabo sharcigaan;
Galo, oo baaro dhisme ama goob kasta, marka laga reebo dhismeyaasha loo isticmaalo sida guryaha la deggan yahay oo keliya, oo ay ku jiraan dhismayaasha ka tirsan ama la xiriira guri la deggan yahay asaga oo si macquul ah uga shakisan in loo isticmaalo hawlaha hoos yimaada sharcigan:
in uu galo ama fuulo sarkaalku isaga oo haysta sabab uu uga shakiyo in la heli karo dembi cad oo ka dhan ah Sharcigan; ama
inay lagama maarmaan tahay ama ay habboon tahay in la galo ama la baaro si loo hubiyo in sharcigan la fulinayo ama la fuliyey;
Joojiyo qofkasta oo baaro diiwaan kasta, maqaal kasta, kuntuneer kasta agab ama qalab kasta, ama kalluun kasta oo uu haysto qofkaas;
Ka gudbo meel kasta;
Kormeero howlaha soo dejinta iyo rar kala wareejinta, oo uu ka qaado muunado, sawirro, muuqaallo iyo dukumentiyo kaleba;
Weydiiyo qof si toos ah ugu hawlan hawl kasta oo ruqsad, oggolaansho ama fasax kale looga baahan yahay sida ku xusan sharcigan ama heshiiska caalami ah ama hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah in uu:
bixiyo macluumaad ku saabsan hawlaha uu hayo;
sheego in qofkaasi uu haysto ruqsad, oggolaansho ama fasax kale oo waafaqsan sharcigan iyo, haddii ay sidaas tahayna, in uu tuso baaraha ruqsada, oggolaanshaha ama fasax kale,
sheego magaciisa, taariikhda dhalashadiisa iyo meesha uu ku nool yahay;
ku diiwaangaliyaa buugga howlaha markabka taariikhda soo gelitaan saxiixaana buugga , uuna weydiiyo kabtanka markabka inuu saxiixo soo gelitaanka, ama inuu ku muujiyo khariirad ama dukumiinti kale barta uu markabku taagan yahay wakhtigaas iyo khariiradda noocaan oo kale ah ama dukumiinti kale oo waafaqsan;
weydiiyo qof kasta oo si toos ah xiriir ula leh markabka, gaariga, diyaaradda, dhismaha, xarunta, ama meel kale ama hawl kasta oo hoos imaanaysa sharcigan, si loo helo macluumaadka looga baahan yahay dhaqangelinta sharcigan.
Baaro wixii agab kalluumeysi ah, qalab ah, diiwaan ah ama dukuminti kale oo laga helo ama saaran markab, gaari, diyaarad, dhisme, goob ama xarun kasta, taas oo sarkaalku uu u haysto sabab uu ku aamino in loo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

isticmaalay, loo isticmaalayo ama loogu tala galay in loo isticmaalo wixii ku saabsan ama la xiriira hawl kasta oo u baahan ruqsad ama oggolaansho sida ku xusan sharcigan;

Baaro, tijaabiyo ama sababo in la baaro iyo / ama la tijaabiyo qalab kasta oo elektaroonik ah oo loo baahan yahay in uu saarnaado markab kasta ama loo isticmaalo ujeeddo kasta oo hoos imanaysa sharcigan, waxa uuna baari karaa dukuminti, diiwaan, maqaal, alaab, qalab, kuntuneer kasta, kalluun iyo wax walba oo laga helo gaadiidka dhexdiisa ama dushiisa.

3) Marka la rabo in la baaro dhismayaasha loo isticmaalo guryaha la deggen yahay, si waafaqsan Sharcigan, Sarkaalka idman ee kalluumeysiga, waxa uu baaritaan ku sameyn karaa oo keliya marka uu sito waaran maxkamadeed oo awood u leh, qodobada ku xusan qodobkan waa lagu dabaqi karaa hadii laga maarmaan noqoto.

### Qodobka 95

### Awoodda Baaritaanka Ama Codsiga Baaritaan Ka dhan ah Shaqsiyaad ka Howlgala Aag ka Baxsan Xeer-xeyndaabka Qaranka

Sarkaalka idman ee kalluumeysiga waxa uu;

baari karaa qof kasta, marka ay jiraan sababo macquul ah oo lagu rumaysan karo in qofkaas, si caadi ah ama sharci ah, uu si toos ah ama si dadban ula xiriiro markab ama hawl kasta oo aan waafaqsaneyn sharcigan meelaha ka baxsan awoodda dalka,

Ka codsan karaa Dowlad kale inay fuliso baaritaanada markab ama qof kasta, si caadi ah ama sharci ah, marka ay jiraan sababo macquul ah oo la rumeysan karo in markabkaas ama qofkaas uu ku lug lahaa kalluumeysi sharci darro, oo uu ku xadgudbay sharcigan, Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ama heshiis caalami ah.

### Qodobka 96

### Awoodda Qabasho, Xiritaan, kala Wareegid Macluumaad Iyo Sugidda Cadeymaha

1) Sarkaalka kalluumeysi ee u idman hawlaha iyo ujeeddooyinka hoos yimaada sharcigan;waa in uu

Baaro, qaado, xiro, ilaaliyo muunadaha, dukumintiyada, buugaagta hawl-maalmeedka oo ay ku jiraan buugaagta elektiroonigga ama macluumaad kale, ama nuqulo laga helo, markab kasta, dhismayaal, xarumo ama meel kale, oo aan ka ahayn dhismayaasha loo isticmaalo sida guri lagu noolaado, laakiin ay ku jiraan dhismayaasha qayb ka ah guri la deggan yahay oo loo adeegsado hawlaha ku xusan sharcigaan;

qaato nuqullo ama sawiro ka qaato diiwaan kasta, ujeedadeeduna tahan in uu la wareegi karo kana qaadan karaa wixii diiwaanno ah oo meesha ku keydsan, muddada ugu macquulsan oo xaaladdu ay saamaxdo;

Hadii lagama maarmaan ay noqoto wuxuu codsan karaa inuu dib u soo saaro , ama ku caawiyo sarkaalka kalluumeysi ee idman inuu u soo saaro diiwaan aan la isticmaalin, macluumaadka lagu keydiyey ama dukuminti lagu keediyey diiwaankaas.

Weydiiyo shaqsi kasta oo xiriirka ama xiriir muuqda la leh markab, dhismooyin, xarumo ama goob kale ama hawl kasta oo ku xusan sharcigan si uu u bixiyo macluumaadka suuragalka ay tahay in loogu baahdo la socoshada ama lagu dhaqangelinta sharcigan.

2) Marka sarkaalka idman ee kaluumeysiga uu su'aalo weydiinayo shaqsi ujeedaduna ay la xiriirto faqrada (1aad) xarafka (d) ee qodobkan, sarkaalku waxa uu:

U baahanayaa shaqsiga su'aalaha la weydiiyay in uu ka bixiyo sharaxaad ama macluumaad ku saabsan markabka, meesha, waxyaalo, habka kaluumeysiga, agabka, diiwaanka, dukumiintiga, nuqulo, aaladdo, ama wax kasta oo laxariira qaadashada, soo iibsasho, sii iibin, ama haysasho wax kasta oo kalluun; iyo

Wuxuu weydiin karaa in qofkaas ama qof kasta oo kale uu tuso fasax kasta, oggolaansho Wasaarad, ruqsad, shati, shahaado ama dukumiinti kasta oo loo soo saaray markab ama qof.

### Qodobka 97

### Awoodda Lagu Xirayo Dadka, Maraakiibta, Qalabka, Iwm

1) Sarkaalka idman ee kalluumeysiga waxa uu xiri karaa qof, markab, baakad, kartoon, diiwaan, dukumiinti, maqaal, agab, qalab, alaab, shey, kuntuneer, kalluun ama wax kale muddada ugu macquulsan ee ay suurtagal tahay in lagu baaro sida uu qabo sharcigan.

2) Marka markab ama gaari la xiro ama la xannibo, oo ay saarantahay qalabka kalluumeysiga iyo agab kale , waxaa ogeysiiska xannibaadaas ama amarkaas bixinaya Agaasimaha Guud waxaana lagu wargelinayaa



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

howlgeliyaha markabka ama baabuurka, nuqulka xanibaadana waxa uu degdeg ugu gudbinayaa wasaaradda ku shaqada leh ee dowladda Soomaaliya.

3) Marka la xiro ama la xannibo markab shisheeye, Agaasimaha Guud ayaa hubinaya in xariga markabka la ogeysiiyey waddanka uu calanka ka sito.

## Qodobka 98
## Awoodda Soo Qabashada

1) Sarkaalka Kalluumeysi ee ku shaqada leh, kaas oo heysta awood sharci oo uu wax ku xiri karo, haddii, asaga oo cuskanaya sababo macquul ah, uu u arko in qofi uu dambi galay ama uu ku xadgudbay qodob ka mid ah sharcigan, wuxuu:

a) Ku amri karaa in qofkaas uu si degdeg ah u joojiyo falkaas, ugana waantoobo.

b) Wuxuu weydiin karaa qofkaas sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada leh u sheego magaciisa, taariikhda dhalashadiisa, cinwaan halka uu deggan yahay iyo shaqadiisa, wuxuu kaloo weydiin karaa inuu soo raaciyo caddeymo la xariira xogta uu soo gudbiyay, hadba intii xaaladdu ogolaato.

c) wuu xiri karaa qofkaas ruqsad la'aan.

2) Haddii qofka la xiray uu ka shaqeynayay Markab laga leeyahay dal shisheeye, Agaasimaha Guud waa inuu ogeysiiyaa waddanka uu markabku calankiisa wato.

## Qodobka 99
## Awoodda Bixinta Amarka Dekad Kusoo Xirashada Markabka

1) Sarkaalka Kalluumeysi ee ku shaqada lihi wuxuu markabka ku amri karaa inuu dekadda kusoo xirto si loogu sameeyo baaris la xiriirta u hoggaansamidda sharcigan, ama sharciga u dhigma ee Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ama heshiisyo kale oo calami ah.

2) Howlgeliye Markab kasta, kaasoo aan si dhaqsa ah ugu hoggaansamin amarka soo xirashada ama diida hannaanka baariseed ee dekaddaas ka jira wuxuu galay dambi, xukun ka dibna wuxuu muteysanayaa ganaaxa ku xusan Jadwalka ama xabsi aan ka badneyn shan sano; ama labadaba iyo wixii kale ee ciqaab ah oo uu sharcigani dhigayo.

## Qodobka 100
## Awoodda Tilmaan Bixinta

1) Sarkaalka kalluumeysiga ee ku Shaqada leh, kaas heysta sabab maangal oo uu ku rumeysan karo in markabkaas, iyo qalabka ama agabka kalluumeysi ee saaranba, loo adeegsanayo ama loo adeegsaday si ka soo horjeedda sharcigan, shuruudihii lagu siiyay ruqsad kalluumeysi, fasax ama oggolaansho kalaba, ama loo isticmaalay si ka soo horjeedda Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ama heshiis kale oo loo galay si waafaqsan sharcigaan:

a) Wuxuu sida ugu dhaqsiyaha badan oo suuragalka ah markabkan ugu kaxeyn karaa dekadda ugu dhow ee Soomaaliya si baaritaan loogu sameeyo ama wuxuu geyn karaa dekad ama meel kasta oo u fududeyn karta howlaha baariseed ee markabka lagu sameynayo, ayadoo muhiimad gaar ah la siinayo amniga markabka iyo shaqaalaha saaran.

b) Wuxuu markabkaas ku sii heyn karaa dekaddaas uu taagan yahay ilaa muddada suuralgalka ah ilaa uu sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi uga gudan karo waajibaadka uu sharcigani saarayo, markaas oo markabka loo oggolaanayo inuu ka furto dekadda.

2) Markabka waxaa loo oggolaan doono inuu dekadda ka dhaqaaqo waqti macquul ah guddihiis laga billaabo markii uu soo xirtay, kolkaas oo Wasiirku, ka dib markii uu la tashado Xeer-ilaaliyaha Guud iyo saraakiisha kalluumeysi ee ku shaqada leh iyo sidoo kale Hannaanka Maareynta Kalluumeysi ee heer gobal, uu go'aansanayo in uu meesha ka baxay tuhunkii ahaa inuu markabku galay xadgudbka ku xusan farqadda (1) ee qodobkan

## Qodobka 101
## Qabasho Maraakiibta, Diyaaradaha iyo Agab kale

1) Sida sharcigani qabo, qalabka markabka, agabka kalluumeysiga, alaabtiisa, weelasha, keydka iyo rarkiisaba waxaa loo aqoonsan yahay qeyb ka mid ah markabka.

2) Sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi wuxuu qaban karaa:

a) Markab kasta ama gaadiid kasta oo kale, agabka kalluumeysi, weelasha, yeyga markabka loo isticmaalo, alaab, kunteenarro, badeeco, qalab ama wax kale oo sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi uu u



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

hayo sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in waxyaabahaas lagu geystay ama lagu talagalay in lagu geysto dambi lagu jebinayo sharcigan.

b) Kalluun kasta ama waxsoosaar kasta oo kalluun, kaas oo sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi uu u hayo sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in la guranayo ama la gurtay, la dilay, la rartay, la soo gatay ama la iibiyay ama lagu helay qof u heysta si sharcigan baalmarsan ama la ogaaday inuu cudur qabo ama uunan ku habbooneyn in dadku quuto.

c) Xog walba, qoraal kasta, keyd walba ama walax kasta oo sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi uu u hayo sabab maangal ah oo uu rumeysto in ay caddeyn u noqon karto in lagu xad gudbay ama lagu gefay sharcigan ama sharci udhigma ee Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah

d) Baasaboorka ama buug diiwaanka badmaax walba:

i. Oo ay leeyihiin kabtanka iyo shaqaalaha saaran markabka la amray inuu ku leexdo ama ku sugnaado dekedda si waafaqsan sharcigan ilaa iyo inta markabka loo fasaxayo inuu baxo;

ii. Qof kasta oo la xiro, ilaa iyo intii maxkamad laga horgeynayo ama

iii. Ayada oo la fulinayo amar maxkamadeed iyo;

e) Walax kasta oo kale oo sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi uu u hayo sabab maangal ah oo uu ku rumeysto:

(i) in lagu galay ama imminka lagu howlan yahay in lagu galo dambi lagu jebinayo sharcigan;

(ii) loo la wareegay si sharcigan waafaqsan; ama

(iii) si sharci darro ah looga qaatay ciddii uu gacanteeda ugu jiray si sharcigan waafaqsan.

3) Sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi cid kasta iyo walax kasta oo uu u qabto si waafaqsan farac farqadeedyada kore ee qodobkan, wuxuu ku wareejinayaa; (2) Wasaaradda si ay ugu xafiddo si waafaqsan habraacyada sharciga ama ay ugu ilaaliso sida sharcigu qorayo ama hadba sida uu Agaasimaha Guudi tilmaamo.

4) Ogeysiis qoraal ah ayaa la siinayaa qofka laga qaaday qalabka ama sheyga la qabtay ama qofkii kale ee sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi uu aamin yahay inuu yahay milkiilaha alaabta ama uu sidiisa kale masuul uga yahay alaabta la qabtay, sababta qabashadana waa lagu caddeynayaa ogeysiiska.

5) Markii markabka la qabto, Agaasimaha Guud wuxuu hubinayaa in dalka markabka laga leeyahay si dhaqso loogu wargeliyo tallaabada la qaaday iyo ciqaabaha lagu soo rogay markabka.

## Qodobka 102

## Qeybo Ka Saaridda Qalabka Makabka La Qabtey

1) Sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi wuxuu awoodaa inuu ka saaro ama sababo in laga saaro qeybo ka mid ah markab loo qabtay si waafaqsan sharcigan, ayadoo loola jeedo in la dhaqdhaqaaq-tiro markabka.

2) Qeyb walba ama qeybo walba oo markabka looga saaro si waafaqsan farqadda (1) ee qodobkan waxaa loo heynayaa si bedqab leh, waxaana loo celinayaa markabka markii lasii deynayo.

3) Qofna, asagoo aan ku howlgaleyn amarka Agaasimaha Guud, looma oggola inuu;

a) hayo ama raadsado inuu hayo qeyb ama qeybo looga saaray markabka la qabtay si waafaqsan farqadda (1) ee qodobkan.

b) Haayo ama raadsado inuu hayo amaba uu beddel ku sameeyo ama uu walax kale ku doorsado qeyb ama qeybo ka mid ah kuwii markabka looga soo dejiyay si waafaqsan farqadda (1) ee qodobkan.

c) Ku xiro ama isku dayo inuu ku xiro markabka la xanibaad si waafaqsan qodobkan, qeyb ama qeybo ka mid ah kuwii laga saaray ama qeyb ama qeybo lagu beddelay kuwii laga saaray.

d) Qof kasta oo jebiya farqadda (3) ee qodobkan wuxuu galay dambi, wuxuuna xukun ka dib muteysanayaa ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn shan sano ama labadaba, iyo wixii kale ee ciqaab ah ee sharcigani qorayo.

## Qodobka 103

## Raacdeyn ama Ku-dabajir (Hot Pursuit)

1) Sarkaal kasta oo kalluumeysi oo ku shaqo leh, kaas oo tuhun euskan sababo maangal ah ka qaba in markab shisheeye uu ku xad gudbay sharcigan; sharciga u dhigma ee Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ama heshiis kale oo caalami ah, wuxuu sameyn karaa raad raacid oo uu ku soo qabanayo markabka shisheeye, ayadoo waafaqsan xaaladaha uu aqoonsan yahay sharciga caalamiga ahi, oo uu ku jiro xaaladaha uu tilmaamayo qodobka 111 ee Axdiga badaha ee Qaramada Midoobay (UNCLOS).



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2) Sarkaal kasta oo kalluumeysi ee ku shaqada leh oo fulinaya awoodaha ku xusan farqadda (1) ee qodobkan wuxuu wargelinayaa Agaasimaha Guud, kaasoo asagoo u maraya wasaaradda u qaabilsan Arrimaha Dibadda, wargelinaya waddanka uu markabku calankiisa sito.

3) howadeen markab kasta oo aanan u hoggaansami amarka lagu joojinayo ama diida awoodda sharci ee uu adeegsanayo kormeeraha kalluumeysi ama sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada leh, wuxuu gelayaa dambe uu xukun ka dib ku muteysan doono ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn shan sano ama labadaba iyo wixii kale ee ciqaab ah oo uu dhigayo sharcigani, wixii ruqsad ama fasax ah oo uu markabku heystayna waa la gala noqonayaa, dhammaan kalluunka iyo waxsoosaarka kalluun ee saaran markabkana waa lala wareegayaa.

## Qodobka 104
## Mas'uuliyadaha Kormeerayaasha

1) Mas'uuliyadaha kormeerayaasha waxaa ka mid ah:

a) U kuurgelidda, kormeeridda, ururinta, keydinta, qiimeynta iyo tebinta xogaha loogu baahan yahay sharcigan awggii oo ay ku jiraan, waxyaabo badan oo kale ka sokow, howl kasta oo loo qabtay si sharcigan waafaqsan, saameynta ay howsha noocaas ahi ku leedahay kalluumeysiga iyo kheyraad biyoodka kale iyo degaankooda iyo sharci ahaanshaha dhammaan wejiyada kala duwan ee howlahaas;

b) Muunad ama sawir ka qaadashada kalluunka la soo jillaabay ama waxyaabaha kale ee markabka saaran;

c) kormeeridda hirgelinta nidaamka maareynta iyo ilaalinta ee lagu dhaqaaqay ayadoo la fulinayo sharcigan, sharciga u dhigma ee xeerka maareynta iyo ilaalinta iyo heshiis kale oo caalami ah; iyo

d) Wixii kale oo mas'uuliyad ah ee sharcigani dhigayo, kuwaas oo loo baahan yahay si korjooguhu uu u guto waajibadkiisa.

2) Mas'uuliyadda kormeere waxaa kaloo ku jiri kara sameynta:

a) howlaha kale ee lagu hirgelinayo Hanaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ee Agaasimaaha Guud uu u xilsaaro kormeeraha;

b) Wixii kale ee howl ah oo Agaasimaaha Guud ka caawin kara helidda, daraaseynta ama hubinta xogta la xiriirta cilmiga kalluumeysiga, hadba intii Agaasimaha Guud uu u diro.

3) Waxaa lagu faafinaya Kormeerayaasha si waafaqsan tilmaamaha Agaasimaha Guud iyo Xeerkan ama heshiiskasta oo caalami ah ama Hanaanka Maaraynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ee la dabaqikaro wixii la xiriira markab kasta oo loo adeegsdo kalluumaysi ama badeeco isku wareejin ama rarid iyo dajin, ama wixii la xiriira howlokasta oo kale oo soo galaysa xeyndaabka Sharcigaan, gudaha iyo dibadda goobaha hoos yimaada xeer-xeyndaabka Qaranka Soomaaliyeed.

## Qodobka 105
## Kharashaadka Kormeeraha

1) kharashka ku baxaya kormeeraha qabanaya waajibaadka sharcigani saaray si gaar ah ayaa loo soo dallacayaa, waxayna ku dhacaysaa xisaab la yiraahdo "qidma kormeere", waxayna qeyb ka tahay kharashyada kale ee la soo dallaco, sida qidmada ruqsadda kalluumeysiga, qidmada fasaxa kalluumeysi, qidmada oggolaanshada iyo diiwaangelinta. Qidmada kormeeruhu inta ay noqoneyso iyo sida loo qaadayo waxaa go'aaminaya Wasiirka.

2) kharshka lagu xusay farqadda (1) ee qodobkan waxaa ku jiro, waxyaabo kale oo badan ka sokow:

a) Kharash caymiska kormeeraha oo dhammeystiran.

b) Mushaarka kormeeraha

c) Gunnada kormeeraha

d) Qalabka kormeeraha

e) Tabarka kormeeraha.

f) Dhammaan kharashyada la xiriira socdaalka lagu tegayo ama looga imaanayo markabka ama meeshii kale ee kormeeruhu uu ka howlgalo.

g) kharasyada ku baxa maamulka iyo maareynta kormeeraha, kaas oo u baahan in la horgeeyo oo ay ansaxiyaan Guddiga Maamulku.

h) Haddii aan la dhiibin kharashka ku xusan farqadda (1) ee qodobkan, la bixin maayo ruqsadda iyo fasaxa kalluumeysiga; haddii la bixiyayna waa la hakaniyaa ama malahaaneyso saameyn sharci ilaa si buuxa loo dhiibo qidmadii kormeeraha, isla markaasna Agaasimaha Guud loogu diro ogeysiis qoraal ah.

## Qodobka 106

## Waajibaadka Ka Saaran Howlgeliyaha iyo Xubnaha Shaqaalaha Gacan-siinta Kormeeraha

1) Howlgeliye walba iyo mid kasta oo ka mid ah shaqaalaha markab lagu qoray kormeere waxaa laga rabaa, mar walba ha la jooga biyaha soomaaliya ama meel ka baxsane, waa in uu u oggolaado, kuna caawiyo kormeeraha gudanaya waajibaadkiisa, inuu:

a) Fuulo markabkaas

b) Siiyo kormeeraha goobshaqo oo ku habboon, una sii daayo meeshii uu rabo, una oggolaado adeegsiga qalabka isgaarsiinta ee markabka.

c) Helo ama diro farriimo, uu la xiriiro xeebta iyo maraakiibta kale asagoo isticmaalaya qalabka isgaarsiinta ee markabka.

d) Hubiyo in jiifka, raashinka iyo xushmadda uu heysto kormeeruhu ay la heer tahay midda ay heystaan saraakiisha kale ee markabka saaran .

e) Ka qaato sawirro howlaha kalluumeysiga oo uu ku jiro kalluunka, agabka kalluumeysiga, qalabka, dukumiintiyada, jaantusyada iyo wixii duuban; iyo inuu markabka kala dego sawirrada iyo muuqalada uu kormeeruhu qaaday ama in uu ku isticmaalo markabka korkiisa.

f) Ururiyo xogaha ku saabsan kalluumeysiga kuwaas oo laga yaabo in loogu baahdo dano la xiriira fulinta sharcigan iyo shurruucda la midka ah ee Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta; iyo

g) Uga dego markabka meeshii iyo goortii uu hadba u tilmaamo Agaasimaha Guud.

2) Howlgeliye ama xubin kasta oo ka mid ah shaqaale Markab si sharcigan waafqasan loo saaray kormeere wuxuu gelayaa dambi haddii uu xadgudbo qeyb ka mid ah faracyaraha farqadda (1) ee qodobkan, qeyb kastana waxaa loo aqoonsanayaa dambi gaar ah, wuxuuna xukun ka dib muteysanayaa ganaaxa ku qoran jadwalka koowaad ama xabsi aaney muddadiisu ka badneyn shan sano, ama labadooda oo la isugu daray; ama wixii kale ee ciqaab ah oo uu sharcigani dhigayo.

## Qodobka 107

## Wargalin Kormeeraha Lagu qoray Markabka

1) Inta aanan kormeere la saarin markabka, Agaasimaha Guud wuxuu sida ugu macquulsan u markabka kormeere saarayo ku wargelinayaa howlgeliye markabka ama ciddii kale ee heysata ruqsadda kalluumeysiga, fasax ama oggolaansho kale oo macquul ah.

2) Howlgeliyekii ku guuldarreysta in uu kormeeraha ku saaro markabka goortii iyo goobtii uu Agaasimaha Guud u tilmaamay wuxuu galay dambi, uu ku muteysan doono ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad, ayada oo ay u dheer tahay in lagala noqonayo ruqsadda kalluumeysi, fasaxa iyo oggolaanshihii kale ee hore loo siiyay.

## Qodobka 108

## Kormeerayaal Iyo Baarayaal Ku Howlgalaya Qorshaha Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga

1) Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa howlaha la xiriira qorshaha kormeere ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee heer gobaleed iyo ururinta xogo hubban oo la xiriira wixii lasoo jillaabtay iyo xogo cilmiyeed kale oo ku saabsan kalluumeysiga sinjiyada qaar iyo meelaha sida weyn looga dhaqangeliyay nidaamka Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee heer gobaleed.

2) Farqaddan dhexdeeda, "Kormeere" waxaa loola jeedaa qofkii waajibaadkiisa shaqo uu yaallo markabka dushiisa; "baare" waxaa loola jeedaa qofkii xogta ka ururiya dhulka markii markabka wax laga dejinayo.

3) Kormeeruhu, waxyaabaha kale ka sokow, wuxuu:

a) Qoraa oo uu ka warbixiyaa howlaha kalluumeysiga, wuxuuna hubiyaa barta uu markabku ku sugan yahay.

b) U kuurgalaa oo qiimeeyaa caddadda kalluun ee lasoo jallaabtay, asagoo kala saaraya inta sinji oo ay kooban yihiin iyo inuu baaro wixii la qubayo, kalluunka aan loo qasdin iyo cabirka Kalluunka.

c) Diiwaangeliyaa nooca agabka kalluumeysiga, cabirka isha, waxyaabaha kale oo uu isticmaalaayo howlgeliyeka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

d) Ururiyaa xogta si ay raadraac ugu noqoto xogaha la geliyay diiwaanka markabka (sinjiyada kalluunka iyo caddadkiisa, miisaanka kalluunka nool iyo kan laga shaqeeyay iyo goobta, haddii ay suuragal tahay);

e) Qabanayaa howlaha kale ee saynis ee ay uga baahdaan Guddiga Sayniska ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee heer gobaleed.

4) Baaraha wuxuu xeebaha ku baarayaa kalluunka lasoo jillaablay, asagoo isu eegaya kalluunka la helay iyo baaxadda doonta, agabka kalluumeysiga iyo jinsiyada la helay ama wuxuu qabanayaa howlaha kale ee saynis ee ay uga baahdaan Guddiga Sayniska ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga ee heer gobaleed.

5) Soomaaliya way ka dhaqangelayaan, waana laga fulinayaa xeerarka sirheynta xogta, siyaasadda iyo habraacyada ay ku fadhido habka macluumaad ururinta ee lagu sheegay Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinkka Caalamiga ah.

## QEYBTA 3AAD

## ILAALINTA IYO CAQABADAHA DADKA SHAQADA U IDMAN

### Qodobka 109

### Qeexidda Qofka Shaqaada U Idman

Qeybtan gudaheeda, "qofka idman" waxaa ka mid ah sarkaalka kalluumeysiga, kormeerayaasha iyo Baarayaasha Idman ee lagu magacaabay si waafaqsan sharcigan ama Barnaamijka Kormeer ee hoos taga Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta heer gobal.

### Qodobka 110

### Qaan Ka Dhowrista Dadka Idman

1) Dadka idman ama qof kasta oo saraakiisha kalluumeysi ee idman ka caawinaya qodobka qodobka 95(3), looma eedeyn karo, looma qaameyn karo, laguma sheegan karo wax ka dhashay howl, awood ama waajibaad uu sharcigani farayo oo ay gudanayeen ama howl uu sharcigani ka reebay oo ay ka baaqsadeen;

2) Intii markabka loo soo wado meel ka mid ah xeebaha Soomaaliya ayadoo la raacayo amar waafaqsan sharciagan:

a) Haddii uu dalbado in loo daayo gacankuheynta markabka, kabtanku asaga ayaa mas'uul ka noqonaya amniga markabka iyo cid waba oo dushiisa saaran ilaa uu markabku ka gaarayo halkii loo waday;

b) Wixii dhibaato ah ee dhaca intii markabka loo soo wado meeshii la geyn rabay, ha ahaato dhimasho, dhaawac, baadi maqan ama khasaaro kale, ma jirto wax laga weydiinayo sarkaalka kalluumeysi ee idman.

### Qodobka 111

### Ishortaaga Iyo U Hogaansamid La'aanta Sarkaalka Idman

1) Sharcigan gudihiisa erayga "fashilmid" waxaa loola jeedaa dadaal kasta oo aan miro dhalin natiijadii loo baahnaa.

2) Dambi ayuu galayaa qofkii:

a) Ku farageliya, handada, cabsigeliya ama ka hor istaaga sarkaalka idman gudashada waajibaadkiisa;

b) Ku fashilma ama ka horyimaada

i. Inuu sarkaalka idmani shaqadiisa u guto si haboon oo nabad ah

ii. Inuu qaado talaabooyin suurtagal ah ee loo baahnaa si loo hubiyo in sarkaalka idmani uu haysto amni ku habboon gudashada waajibaadkiisa.

c) Haddii kabtanku ama shaqaalahu markabka ay ku fashilmaan ama ka horyimaaddaan in sarkaalka idman u oggolaadaan ama ku caawiyaan gudashada waajibaadkiisa, adeegsiga awooddiisa iyo mas'uuliyaddiisa, oo ay ka mid tahay:

i. Inuu si nabad ku joogaa markabka dushiisa,

ii. Inuu helo madaxbannaani buuxda oo uu ku galo meeshii uu doono markabka gudihiisa, kuna isticmaali karo, kalluunka, agabka kalluumeysiga iyo qalabka kale ee markabka saaran oo ay ku jiraan qalabka hagista markabka iyo ka isgaarsiintiisa.

iii. Iuu u madaxbannaanaado helidda qoraallada kambiyuutarrada ku qoran iyo kuwa buugaagta ku dhigan ee markabka saran, oo ay ka mid yihiin buug diiwaaneedka markabka, khariiradda, dukumiintiyada iyo xogaha kale ee la xiiira kalluumeysiga;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفيدرالية

iv. Inuu qaato, cabbiro, ku keydsado markabka dushiisa ama kala dego markabka ee uu ku heystay muunadda ama noocyada kalluunka mid walba ka qaato muunad ayadoo looga baahan karo dano cilmibaariseed awgeed; iyo

v. Inuu markabka uga dego si nabdoon.

d) Ishortaaga ama ka horyimaado inuu oggolaado hantidhowrka, kormeerka, baarista ama cilmibaarista loo idmay si waafaqsan sharcigan;

e) Ku fashilmo ama ka horyimaado inuu u hoggaansamo tilmaaha sharciga ah ama diido codsiyada uu usoo gudbiyo sarkaalka idman inta uu fulinayo waajibaadkiisa, awooddiisa iyo mas'uuliyadiisa, oo ay ku jirto in uu baaro;

i. Meel kasta oo ay ku jirto agab/kalluu lasoo dajiyey, la dhoofiyey, kalluun beerista ama xarun ka mid ah meel wax lagu keydiyo ama looga shakiyey inay wax ku keydsan yihiin.

ii. Kalluun kasta ama wax soo saar kalluun, qalab kalluumeysi, qalab ama diiwaanada.

f) Ku fashilmo ama is hortaago inuu u hogaansamo tilmaamaha uu sharcigu siinayo, ama diido codsiga uu soo jeediyey sarkaalka idman, isagoo adeegsanaya awooddiisa sharci iyo waajibaadkiisa uu ugu baahan yahay helidda warbixinada.

g) Marka sarkaalka idmani uu ka codsado howlwadeenka inuu siiyo macluumaadka uu u baahan yahay, howlwadeenku bixiyo xog been ah, qaldan ama marinhabaabin ah oo la xiriirta waxyaalihii la weydiiyey.

h) Ka hor imaansho qabasho qof sharciga ku xadgudbay;

i) Faragaliyo, dib dhigo ama diido qabashada qof uu arko sarkaalka idman ama rumeysan yahay inuu galay dambi kasoo horjeeda sharcigan.

j) Iska dhigo sarkaal idman oo ka socda Wasaaradda Kalluumeysiga ama si cad u sheegto inuu yahay sarkaalka idman ee wasaaradda Kalluumeysiga.

k) Inuu inkiro, isaga oo ah howlwadeenka ugu sareeya ee markabka.

l) Haddii uu ku fashilmo howlwadeenka markabka codsiga ka yimid sarkaalka idman ee Wasaaradda kalluumeysiga, ee ah in uu markabka u kaxeeyo meel Soomaaliya ka mid ah ee uu sarkaalka idmani tilmaamay, ama uu ku fashilmo hubinta ammiga dhammaan inta markabka saaran;

m) Haddii uu laaluusho ama uu isku dayo inuu laaluusho sarkaalka idman ee wasaaradda kalluumeysiga.

n) Afduubo, gaarsiiya waxyeello jireed ama weeraro:

i. Sarkaalka idman oo gudanaya waajibkiisa shaqo ama adeegsanaya awood uu sharcigani siinayo; ama cawaaqib xumo ka dhalatay falkiisaas gurracan; ama

ii. Sarkaal kasta oo si sharci ah ugu shaqeynaya tilmaamaha sarkaalka idman ee Wasaaradda kalluumeysiga, ama gacanyarhiisa; ama cawaaqib xumo ka dhalatay falkiisaas gurracan; ama ku caawiya ama ku dhiirrigeliya qof ama dad kale in ay sidaas oo kale sameeyaan.

3) Qof kasta oo gala dambiga lagu xusay:

a) Xarfaha (a) ilaa (m) ee faqrada(2) ee qodobkan, wuxuu xukun ka dib muteysanayaa ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badneyn seddax sano; ama labadaba, ama wixii kale ee ciqaab ah oo uu sharcigani dhigayo; ama

b) Xarafka (n) ee farqadda (2) ee isla qodobkan, wuxuu xukun ka dib muteysanayaa ganaaxa ku xusan Jadwalka Kowaad ama xabsi aan ka badneyn seddax sano; ama labadaba; ama wixii kale ee ciqaab ah ee sharcigani dhigayo.

## QEYBTA 4AAD
## HABRAACYADA BAARAHA
### Qodobka 112
### Habraacyada Baarista Ka Hor Ruqsad Siinta Iyo Dejinta

Sarkaalka kalluumaysiga idman ama Baaraha, wuxuu fulinayaa ka hor ruqsad siinta iyo dejinta Baaris owgeed kormeerada noocaan ah, iyo fulinta habraacyo noocaas ah iyo dabaqidda ee heerarka uu xadidayo mid ka mid ah hanaanka ilaalinta iyo maaraynta caalamiga ah ee hirgalay, ama Urur Goboleedka Maaraynta Kalluumaysiga ee xiriirka la leh.

## Qodobka 113
## Habraacyada Kormeerka Badda

Sarkaalka idman ee Wasaaradda Kalluumeysigu, asagoo leh ujeedo kormeer badeed, wuxuu sameynayaa kormeerro, fulinayaa habraacyo, wuxuuna hirgelinayaa nidaamka uu farayo habraaca si waafaqsan sharcigan, iyo sharciga la midka ah ee Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ama heshiisyo kale oo caalami ah.

# QEYBTA 5^AAD
# HABKA LA SOCOSHADA MARKABKA IYO HABKA AQOONSASHADA TOOSKA AH
## Qodobka 114
## Habka La Socoshada- Farsamada Laga Rabo

1) Wasaaraddu ayaa oggolaanaysa Aallaadda habka la socosho ee lagu xiro Markabka si howlihiisa loo gula socdo si waafaqsan sharcigan, waxaana ka mid ah:

a) Habka lasocoshada markabka;

b) Habka lasocodka Aaladda elektarooniga ah;

c) Habka warbixinta elektrooniga ah;

d) Hab kasta oo kale ama tiknoolojiyad kasta oo kale oo ay Wasaaraddu dhaqangeliso si wax loo gula socdo, waxna loogu hago ama wax lagu sahmiyo si waafaqsan sharcigan.

2) Baahida farsamo ee loo qabo Aalad warqabad oo guurguurta, oo lagu xirayo Aaladdaas, waxaa tilmaamaysa Wasaaradda.

3) Howlwadeen aan u hoggaansamin dalabyada faarsamo iyo kuwa tiknoolojiyadeed ay amartey Wasaaraddu, oo ay ku jirto qalabaynteedu, ayadoo waafaqsan faqradaha (1) iyo (2) ee qodobkan, ee ku saabsan Aalad warqabad ee guurguurta oo lagu xirayo markabka, taasoo ruqsad, fasax ama oggolaansho kale iyo diiwaangelinba:

a) Aan weli loo sameyn waa la joojinayaa dhammaantood soosaaristooda

b) haddii la siiyayna, wuxuu galay dambi uu muteysanayo ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badneyn hal sano; ama labadaba; oo ay u dheer tahay Wasiirka oo hakinaya, kala noqonaya shahaaddada diiwaangelinta, ruqsadda, fasaxa, ama oggolaanshada kale haddii uu Wasiirku heysto sabab maangal ah oo ku qancisa inuu howlwadeenku ku fashilmay u hoggaansamidda sharcigan.

## Qodobka 115
## Habka La Socodka Markabka- Waxa Laga rabo Howlwadeenada

1) Howlwadeen kasta oo markab oo raba in Wasaaraddu siiso ruqsad, asaga oo haysta ruqsad ku habboon oo aan dhicin ama oggolaansho kale oo sharcigan waafaqsan, haddii uusan marabkiisu ka hoos marin shuruudihii ay Wasaaraddu u dajisey ama aan si kale sharcigu u qeexin, Howlwadeenkaas wuxuu:

a) Markabka dushiisa ku rakibanayaa oo ku dayactiranayaa Aaladda warqabad oo guurguurta, asagoo waafajinaya shuruudaha sharcigani qorayo ama sidii kale ay Wasaaraddu fareyso ama ay dalbayso, waxaana la hubinayaa in qalabku si buuxda u shaqeynayo waqti walba;

b) U diiwaangelinayaa aaladda warqabadka ee guurguurta si waafaqsan qodobka (79), farqadiisa (1) ee sharcigan;

c) Hubinayaa in aaladda warqabadka ee guurguurta ay tahay mid aan tashwiish lagu furi karin, oo ay tahay nooc iska ilaalin karta oo ay qabato ama ay dirto warbixinada khaldan Meesha ay Aaladdaas ku sugan tahay, oo ay tahay mid aan wax laga beddeli karin shaqadeeda, ha la adeegsado gacan, hab elektaroonig ah ama si kalaba , ayada oo:

i. La dhigayo meel xafidan

ii. Lagu xirayo wax (ama loo yeelayo hab) sheegaya in la isticmaalay ama la isku dayay in la faragaliyey;

d) Si toos ah ugu gudbinayaa wasaaradda warbixinnada hoos ku sheeggan ugu yaraan sacaddiiba mar, ama waqtigii kale ee looga baahan yahay ama lagu amray markii la raaco ruqsad ama fasaxyada kale ee la siiyay;

i. Aqoonsiga markabka,

ii. Juquraafi ahaan barta uu markabka markaas taagan yahay (dhigaha, loolalka), khaladaadka bar tilmaameedku uusan ka badnayn 500 oo mitir, heerka kalsoonidu ay tahay 99%, ama wixii kale ee warbixin ah ee laga rabo marka la eego ruqsadda ama fasax shaqo ee la siiyay,



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

iii.Taariikhda iyo saacadda (oo lagu sheegay waqtiga UTC) oo waafaqsan barta la sheegay in markabku taagan yahay;

e) Hubinayaa in

i.Warbixinnada iyo farriimaha la socodka markabka aanan sinnaba loo beddelin;

ii.Anteennada aaladda warqabad ee guurguurta ayna sina u joogsan;

iii.Uuna sinnaba u kala go'in dabka uu helayo qalabka lasocodka ee dayax gacmeedka ku shaqeeya; iyo

iv.Aaladda warqabadka ee guurguurta aanan markabka laga furin.

2) Haddii ay cilad farsamo ku timaado ama ay shaqeyn weydo aaladda warqabad ee guurguurta, howlwadeenku wuxuu si dhaqso ah u soo wargelinayaa Wasaaradda, muddo saacad gudaheed ah oo ka billaabaneysa markii cilladu dhacday, oo:

a) haddii cilladu dhacday markabka oo weli dekadda taagan, Howlwadeenku waa in aanu markabka dekedda ka furan;

b) Haddii markabku uu badda ku jirana, howlwadeenku waa inuu afar iyo labaatan saac gudahood markabka ku geeya dekaddii Wasaaraddu amartay, muddadaas gudaheedana nus saac walba uu warbixin soo diraa, uuna u hoggaansamaa amarada la siiyey;

c) Uu bil gudaheed ku dayactiraa ama ku beddelaa aaladda, markaas ka dib howlwadeenka looma ogollaanayo inuu galo safar kalluumeysi, ayadoo aaladda aanan la dayactirin ama aanan la beddelin.

3) Howlwadeenku wuxuu u hoggaansamayaa, isla markaana hubinayaa in dhammaan shaqaalaha markabku ay u hoggaansameen shuruud walba ama faritaan walba oo uu soo jeediso ama ay dalbato Wasaaraddu ama ay u hoggaansamaan sharciga u dhigma ee Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah;

4) Howlwadeen walba oo aan kasoo bixin shuruudaha laga doonayo ee ku qoran xarfaha (a), (b), (c), (d) ama (e) ee faqradda (1) ee qodobkan, xarfaha (a), (b) ama (c) ee faqradda(2) ee qodobka iyo faqradda (3) ee qodobkan, wuxuu galay dambi uu ku muteysan doono ganaaxa ku qoran Jadwalba Koowaad ama xabsi aan ka badneyn seddax sano; ama labadaba; ama wixii kale ee ciqaab ah oo sharcigani uu dhigayo.

5) Qof kasta, asagoo aan heysan sabab sharci ah, aaladda warqabad ee guurguurta ka dhiga mid aan shaqeyneyn ama khalkhaliya ama ku fura shucaac, taas oo sababta in aaladdii ay si iskeed ah ama si sax ah u shaqeyn weydo ama si waafaqsan sharuudihi ruqsadda ama si kale u waafaqsan sharcigan, wuxuu galay dambi uu ku muteysanayo ganaaxa ku qoran Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badneyn seddax sano; ama labadaba; ama wixii kale oo ciqaab ah oo sharcigani dhigayo.

## Qodobka 116
## Habka Aqoonsiga Tooska Ah

1) Wasaaraddu waxay ka dalbaysaa howlwadeenka, ayadoo ka mid ah shuruudaha bixinta ruqsadda, fasaxyada ama oggolaansho kale, inuu markabka ugu xiro habka aqoonsiga tooska ah si waafaqsan tilmaamaha lagu sheegay cutubka 9, sidoo kalana xeerka 19 ee heshiishka caalamiga ah ee badbaadada nolosha badda korkeeda iyo in uu markabku si joogto ah warbixin u siiyo Xarunta Lasocodka Kalluumeysiga.

2) Qofkii ku xadgudba farqadda (1) ee qodobkani wuxuu galay dambi uu ku muteysan doono ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka yareyn hal sano; ama labadaba, ama wixii kale oo ciqaab ah ee sharcigani dhigayo.

## Qodobka 117
## Xarunta La Socodka Kalluumeysiga

1) Wasaaraddu waxay hirgalinaysaa Xarunta Lasocodka Kalluumeysiga, taas oo lagu qalabeynayo kambiyuutarro lagu shubayo barnaamijyo si toos ah xogaha u nidaaminaya iyo xog-dire elektaroonig ah iyo qalab kale oo loogu talagalay la socoshada dhaqdhaqaaqa markabka, kaas oo xogtu kusoo dhaceyso oo duubaya, asagoo, waxyaabo badan oo kale ka sokow, isticmaalaya:

a) Aaladda lasocodka markabka, oo ay ku jiraan aalad lasocodka oo elektaroonig ah iyo aalad warbixineed elektaroonig ah;

b) Habka aqoonsiga tooska ah.

2) Xarunta Lasocodka Kalluumeysiga waxaa laga dhigayaa qol sugan, xiran oo u gaar ah.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

3) Qolka Xarunta lasocodka Kalluumeysiga waxaa geli kara oo kaliya qolkii shaqaale ah ee Wasaaraddu u oggolaato;

4) Liiska magacyada shaqaalaha loo oggol yahay in ay galaan Xarunta waxaa lagu dhejinayaa iridda qolka.

5) Agaasimaha Guud wuxuu qoraal ugu oggolaan karaa ciddii kasta ee kale oo uu rabo in ay gasho Xarunta waqtiyo gaara ah.

## QEYBTA 6[AAD]

## HANAANKA DEKADDAHA DALKA

### Qodobka 118

### Hanaanka Dekadaha Dalka ; Codisga iyo Fulinta

1) Qeybtani waxaa lagu dabbaqayaa:

a) Maraakiibta shisheeye iyo maraakiibta aan sidan calanka Soomaaliya ee raadinaya dekad ay kusoo xirtaan ama joogaan dekad ka mid ah dekadaha Soomaaliya, marka laga reebo maraakiibta konteynarrada leh ee aan sidin kalluunka, ama haddii ay kalluun sidaanna uu yahay mid laga raray dekadaha dalka, isla markaana ayna jirin sabab lagu tuhmo in markaabkaasi uu ku lugyeeshay dhaqdhaqaaq kalluumysi oo ka mid ah kalluumeysi sharci darrada ah ee "IUU";

b) Dadka, maraakiibta, diyaaradaha, dhismooyinka dekadaha ama gaadiid ama goob ku howlan ama si uun ugu xiran dhaqdhaqaaqyo howleed oo hoos imaanaya sharcigan.

c) Dhammaan kalluumeysiga ama howlaha la xiriira kalluumeysiga ee lagu taageerayo kalluumeysiga laga sameynayo:

i. Goobo ka mid ah Soomaaliya oo uu ka shaqeynayo sharciga Soomaaliya ama ku jira xadka Soomaaliya ay xaqa u leedahay;

ii. Goobaha ka baxsan xukunka Soomaaliya:

a. Muwaadiniinta Soomaaliyeed, oo ay ku jiraan maraakiibta iyo dadka, iyo dhammaan dadka saaran maraakiibtaas ama la macaamilkooda ama xiriirrada dhex maraya ayaga ama xiriirrada ay la yeelanayaan dadka markabka saaran.

b. Wixii kale ee loo baahdo oo waafaqsan sharcigan, heshiis caalami ah, sharciyada u dhegma ee Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah.

c. Si kale loola xiriirinayo howlo kalluumeysi oo sharci darro ah, aan laga warbixin oo aanan laga heshiinin ama lala xiriirinayo dhaqdhaqaaq kalluumeysi oo lagu taageerayo kalluumeysiga waafaqsan sharciga caalamiga ah.

2) Qoddobada qeybtan waxaa dadka loogu xukumayaa si caddaalad ah.

3) Marka la dhaqangeliyo qodobbada qeybtan, Wasaaraddu waa inay hubiysaa in sida ugu haboon ee suurtagalka ah loo isticmaalay aaladda elektaroonig ah ee hannaanka dekadaha dalka oo loo adeegsanayo xeerka maareynta kalluumeysiga ee heer gobaleed.

### Qodobka 119

### Dekad U Cayimid

Wasaaradda ayaa hubinaysaa:

a) In dekadda ama dekadaha uu markabku soo codsaday in uu kusoo xirto loo ogolaadey, lana faafiyay;

b) in liiska magacyada dekadaha ee loo qoondeeyay si waafaqsan farqadda (a) ee qodobkan, la siiyay hay'addaha caalamiga ah ama hay'adda Goboleedka maareyn kalluumeysi, ayadoo la raacayo Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah.

### Qodobka 120

### Ogolaanshaha Ka Horeeya Soo Gelidda Iyo Isticmaalka Dekadda

Howlwadeenka Markab shisheeye kuma xiran karo ama ma adeegsan karo dekad Somomaaliyeedd ilaa:

a) Dekad loo qoondeeyay, loona faafiyay si waafaqsan qodobka 110, dekadda la qoondeeyo, lana faafiyo;

b) Uu Howlwadeenku dalbaday dekad ku xirasho, xogtaasna loo gudbiyey sida ay tilmaamtay ama ay codsatay wasaaradda 72 saac ka hor soo xirashada, markab haysta ruqsad ama fasax uu uga kalluumeysto biyaha Soomaaliya 96 saac ka hor soo xirashada ama muddo intaas ka yar haddii wasaaraddu oggolaato, oo ay ku jirto ujeeddooyin dejin, rar kalluun ama wax soosaar kalluun;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

c) Haddii Wasaaraddu oggolaato gelitaanka markabka ee dekadda, ayna hubiso in oggolaanshahaasi uu gaaray madaxa markabka ama wakiilka markabka ee Soomaaliya;

d) Markii markabku yimaado dekadda, oo madaxa markabka ama wakiilka markabku uu warqadda oggolaanshaha gelidda dekadda tuso qofkii wasaaraddu u wakiilatay in uu qabto warqadaas.

**Qodobka 121**

**Diidmada Gelidda Iyo Adeegsiga Dekadda**

1) Wasaaraddu, haddii caddeyn ku filan u hayso in markabka raadinaya in uu soo galo dekad ka mid ah dekadaha Soomaaliya uu ku lug yeeshay kalluumeysi sharci darro ah (IUU) ama uu ku howlanaa dhaqaaq kalluumeysi oo lagu taageerayo kalluumeysiga sharci darada ah, gaar ahaan marka markabka hore loogu daray liiska maraakiibta sameysa kalluumeysiga sharci darada ee IUU-ga;

a) Wuxuu markabkaas ka joojinayaa in la siiyo oggolaansho uu dekadda ku galo, wuxuuna u diidayaa inuu soo galo dekadda.

b) si ka duwan sida ku qoran xarafka (a) ee faqrada (1) ee qodobkan, wuxuu markabka noocaas ah u oggolaan karaa inuu galo dekadda kaliya markii lagu sameynayo baaritaan ama laga qaadayo tallaabooyin kale oo wafaaqsan sharciga caalamiga ah, kaas oo ugu yaraan la macno ah kan diidmada dekad soo gelidda, marka laga hadlayo ka hortagga, weecinta ama tirtiridda kalluumeysiga sharci darrada ah (IUU) iyo dhaqdhaqaaqyada kalluumeysi ee caawinaya kalluumeysiga sharci darada ah.;

c) Wuxuu wixii go'aan ah ee uu ku xusan xarfaha (a) ama (b) u gudbinayaa:

i. Howlwadeenka Markabka ama ciddii wakiil ka ah,

ii. Wasaaradda Dekadaha iyo Gadiidka Badda, kuwaas oo fulin doona go'aanka Wasaaradda.

2) Wasaaraddu waxay gelitaanka iyo adeegsiga dekadda u diidi kartaa Markab kasta oo ay u hayso sabab maangal ah oo loo qaadan karo inuu markaabkaasi ku xadgudbay sharcigan, waxayna go'aankeeda u gudbinaysaa dadka ku xusan xarafka (c) ee farqadda (1) ee qodobkan;

3) Haddii uu markab u diido gelitaanka iyo adeegsiga dekadda asagoo cuskanaya xarfaha (a) ama (b) ee faqradda (1) ama faqradda (2) ee qodobkan. Wasaaraddu waxay go'aankeeda u gudbinaysaa howlwadeenka markabka, dalka uu markabku calankiisa sito, maamul gobaleedka ay ku taallo xeebta dalka Soomaaliya ee markabka loo diiday, hay'ad Goboleedka Maareynta kalluumeysiga oo ay khuseyso ama hay'adaha kale ee caalamiga ah.

**Qodobka 122**

**Masiibo Dabiici Ah iyo Dhib Culus**

1) Sharcigani ka horjoogsan maayo markabna inuu kusoo xirto dekadda markii ay jirto wax sharciga Soomaaliya u aqoonsan yahay masiibo dabiici ah ama dhibaato culus, inkastoo aan:

a) La aqbaleyn sheegashada masiibo dabiici ah ama dhibaato culus, haddii:

i. Ay tahay masiibadu mid la buunbuuniyey/ laga badbadiyey, been ah ama si ula kac ah loo abuuray; ama:

ii. Ujeeddadeedu tahay in looga baxsado mas'uuliyad, qofkii la yimaada sheegasho aan raad laheynna wuxuu gelay dambi;

b) Culyska ah in la caddeeyo in sheegashada jiritaanka masiibo dabiici ah ama dhibaato culusi ay tahay mid sharci ah, oo ayna ka mid aheyn kuwa lagu diiday xarfaha (a) ee farqadda (1) ee qodobkan, wuxuu saaran yahay howlwadeenka markabka;

c) Sarkaalka kalluumeysi ee u idman ama sarkaal kale oo la awood ah ayaa kori kara markabka mar walba, si loo hubiyo sheegashada jiraanka masiibo dabiici ah ama dhibaato culus;

d) Markabkii sheegta jiritaanka masiibo dabiici ah ama dhibaato culus waxaa taladiisa la wareegaysa Wasaaradda.

2) Wasaaraddu waxay si waafaqsan sharcigan u siin kartaa fasaxa gelitaanka dekadda Markab ay qabsatay masiibo dabiici ah ama dhibaato culusi, haddii la helo in:

a) Markabka sheeganaya masiibo dabiici ah ama dhibaato culus uu soo gelayo dekadda, uuna sii joogayo kaliya ilaa laga xallinayo dhibaatada uu sheeganayo.

b) Markabka loo oggolaanayo gelitaan dekadda kaliya markii uu caawimaad u fidinayo dad ama Markab khatarta galay ama ay dhibaato qabsatay.

3) Howlwadeenka markabka loo oggolaado inuu dekadda ugu soo xirto si waafaqsan xarfaha (a) ama (b) ee faqradda (2) ee qodobkan, uma bannaana inuu oggolaado inuu markabkaasi ku lugyeesho adeegga dekadda.

4) Howlwadeenka Markabka ee soo gudbiyay cabashada ku xusan xarafka (a) ee faqradda (1) ee qodobkan ama aan u hoggaansamin shuruudaha ku qoran faqradda (3) ee qodobkan, wuxuu galay dambi uu ku muteysanayo ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badneyn seddax sano; ama labadaba; ama wixii kale ee ciqaab ah ee uu sharcigani dhigayo

## Qodobka 123
## U Diidid Adeegsiga Dekadda Soo Gelitaanka kadib

1) Markab loo oggolaaday soo gelitaanka dekadda si waafaqsan qodobka 111, xarfaha (c) iyo (d) uu kusoo xirto dekadda, Wasaaraddu waxay u diidi kartaa markabkaas inuu helo adeegga dekadda haddii:

a) Uusan markabkaas haysan oggolaansho ama ruqsad uu ku kalluumeysto ama uu qabto howlo la xirrira kalluumeysi oo uu bixiyay:

i. Dalka uu calankiisa sito;

ii. Maamulka uu sharcigiisu ka shaqeeyo xeebta uu ka kalluumeysanyo;

b) Ay caddaato in kalluunka markabka saaran la soo jillaabtay si baalmarsan sharciga waddanka ay ku taallo xeebta laga kulluumeysanayo;

c) Dalka markabka uu calankiisa sito uusan muddo kooban ku xaqiijin, sida Wasaaraddu codsatay, in kalluunka markabka saaran loo soo jilaabtay si waafaqsan shuruudaha Urur Goboleedka Maamulka Kalluumeysiga; ama

d) La hayo sababo maangal ah oo lagu rumeysan karo in markabkani uu ku lug lahaa kalluumeysi sharci darro ah (IUU) ama howlo kalluumeysi oo taageeraya kalluumeysi sharci darro ah (IUU), ilaa uu howlwadeenka ama kireystaha markabku ka caddeynayo in:

i. uu howlwadeenku si wafaaqsan sharciyada la xiriirta Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta caalamiga;

ii. Haddii uu badda ugu geynayay shaqaale, shidaal, agab kalluumeysi ama saad kale, uuna markabka loo geynayay saadku uusan, markii la siinayay, aheyn Markab ku howlan kalluumeysi sharci daro ah (IUU);

2) Ayadoo aan waafqasanayn faqradda (1), Wasaaradda:

a) Uma diidayso markabka inuu helo adeega dekadda:

i. Haddii adeeggaasi uu lama huraan u yahay samata bixinta shaqaalaha markabka ama badbaadada markabka, waa haddii si dhab ah loo hubiyey jiritaanka baahidaas; ama

ii. Haddii markabka laga bedelayo biro duugoobay;

b) Haddii uu u diido adeega dekadda, Wasaaraddu waxay go'aankeeda wargalinaysaa dalka uu markabku calankiisa sito, dalka uu markabku xeebtiisa joogo ama Urur Goboleedka Maareynta kalluumeysiga ee ay khuseyso ama hay'ad kale oo caalami ah.

3) Haddii adeegga dekadda loo diido si waafaqsan sharcigan, Wasaaraddu oo la tashanaysa xafiiska xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, wuxuu:

a) Ka noqonayaa diidmada uu markabka saaray kaliya haddii caddeyn ku filan loo helo in sababihii loo cuskaday diidmadu ay ahaayeen kuwa kala dhimman ama khalad ahaa ama ayna sababahaasi xilligan dhaqangal ahayn;

b) Ka noqoshada diidmada ayaa si degdeg ah lagu wargelinayaa cid kasta oo si sharcigan waafaqsan oo la wargaliyey markii hore.

## Qodobka 124
## Baaris Ku Sameynta Maraakiibta Dekadda Taagan

1) Wasaaraddu waxay hubinaysaa in baarista markabka loo sameeyay si ka jawaabeysa ujeeddooyinkii laga lahaa sharcigan ama ugu yaraan heer la isla oggolaan karo in ay waafaqsan tahay Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah.

2) Wasaaraddu waxay kala hormarinaysaa baarista maraakiibta, asagoo tixgelinaya arrimahan:

a) Maraakiibta soo gelitaanka iyo adeegsiga dekadda loogu diiday si waafaqsan Hannaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ah ee ayaga khuseeya;

b) Codsi ka yimid dal kale ama Urur Goboleedka Maareyn kalluumeysi, kaas oo lagu dalbanayo in la baaro Markab, gaar ahaan markii ay codsiga la jirto caddeyn muujineysa in markabka laga hadlayo uu ku lug yeeshay kalluumeysi sharci darro ah (IUU) ama howlo kalluumeysi la xiriira oo lagu taageerayo kalluumeysiga sharci darrada ah (IUU); iyo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

c) Haddii la hayo caddeyn buuxda oo lagu tuhmi karo in markabkani uu ku lug yeeshay kalluumeysi sharci darro ah ama dhaqdhaqaaq kale oo lagu taageerayo howlahaas.

3) Wasaaraddu waxay, intii suuragal ah, hubinaysaa in la baaro markabkii laga helo shuruudaha ugu yar ee keeni kara in la baaro ee uu dhigayo nidaam walba oo maamul iyo ilaalineed oo ku habboon.

4) Inta ay baaristu ku socoto markabka dekadda taagan, sarkaalka kalluumeysi ee ku shaqada lihi wuxuu hubinyaa in howlaha baaristu ay u socdaan sidii ay u soo qortay ama ay u tilmaamtay Wasaaraddu, wuxuuna warbixinta oo qoraal ah u dirayaa madaxda Wasaaradda.

5) Howlwadeenka markabka baaristu ku socoto wuxuu sarkaalka kalluuumeysi ee ku shaqada leh siinayaa wixii taageero iyo xog ah ee loo baahan yahay; uuna u soo gudbiyo wixii agab ama dukumiinti ah ee uu ka dalbado ama nuqullada wixii ruqsad ah oo uu haysto.

6) Wasaaraddu waxay hubinaysaa in natiijadii kasoo baxda baaritaanka la sameeyay oo sharcigan waafqsan loo gudbiyo:

a) Dalka uu markabka calankiisa sito;

b) Haddii ay ku habboon tahay, haya'addii lala galay heshiis caalami ah oo arrintan khuseeya;

c) Dalka xeebtaas ka taliya iyo dalka uu kabtanka markabku dhalashadiisa haysto;

d) Urur Goboleedka Maamulka kalluumeysiga ay khuseyso;

e) Iyo ururradii kale oo calami ah ee ay khuseyso.

7) Howlwadeenkii aan u hoggaansamin ama aan shaqaalihiisa farin in ay u hoggaansamaan faqradda (5) ee qodobkan, wuxuu galay dambi uu ku mutaysanayo ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badneyn seddax sano; ama labadaba; ama wixii kale oo ciqaab ah ee sharcigani dhigayo.

## Qodobka 125

## Baarista ka Dib,Diidmada Adeegsiga Dekadda

1) Haddii baarista ka dib, la helo sababo maangal ah oo lagu rumeysan karo in markab uu ku lug yeeshay kalluumeys sharci darro ah ama howlo lagu taageerayo kalluumeysiga sharci darada ah, Wasaaraddu waa in ay:

(a) Si degdeg ah caddeymaha lagu helay markabka u wargeliso Dalka Calanka, ama Dal-Xeebeedka, Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga , ururrada caalamiga ah ee kale ee ay khuseyso iyo dalka uu kabtanka markabku dhalashadiisa haysto;

(b) Sababeysaa diidmada isticmaalka dekad ee markabka hadii aan hore loogu fulin amar diidmo.

2) Iyada oo uu jiro xarfka (b) faqradda (1) ee qodobkan, Wasaaraddu, waa in aanu u diidin markabka adeegga dekadda haddii adeeggaasi uu lama huraan u yahay samata bixinta nolosha iyo caafimaadka shaqaalaha iyo badbaadada markabka; maraka la hubiyo jiritaanka baahidaas.

## Qodobka 126

## Mamnuucidda Adeegsiga ama Gacansiinta Adeegsiga Dekadda Diidmada kadib

1) Haddii Markab:

a) Uu dekadda u joogo si khilaafsan:

i.Shuruudaha lagu sheegay qodobka 122;

ii.Diidmo fasax dekad gelitaan oo waafaqsan xarafka (a) qodobka 123 ama faqradda (2);

b) Loogu oggolaaday inuu dekadda ugu soo xirto si gaar ah oo ujeeddadeedu ay tahay:

i.baaritaan waafaqsan xarafka (b) faqradda (1) ee qodobka 123;

ii.Gargaar u fidin dad ama marakab khatar ku jira ama dhibaato culus heysato sida uu qabo qodobka 124; ama

c) Aan weli loo oggolaan ama loogu diiday adeegsiga dekadda si waafaqsan xarafka (b) faqradda (1) ee qodobka 123; xarafka (b) faqradda (2) ee qodobka 124; faqrada (1) ee qodobka 125 ama xarafka (b) ee faqradda (1) qodobka 127;

Cidna, oo uu ku jiro hawlwadeenka markabka ama shaqaalaha markabka ama cid kasta oo kale oo si dadban ama si toos ah xiriir u leh markabkaasi, ma sameyn karto arrimahan soo socda:

d) Ma sababi karto ama uma oggolaan karto markabka inuu dekadda usoo galo si ka baxsan xarafka (a)(1);

e) Kuma lug yeelan karto, ma fududeyn karto, oo cidna kalama qeybgeli karto adeegsiga dekaddaas;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

f) Uma oggolaan karto, ugu mana caawin karto markabkaas, si dadban iyo si toos ahba, inuu helo adeegga dekaddaas;
Ilaa oggolaansho qoraal ah laga helo Wasaaradda ku shaqada leh adeegyada dekeda si loogu isticmaalo samata bixinta iyo caafimaadka shaqaalaha ama loo badbaadiyo markabka si waafaqsan sharcigan, dekaddana waxaa loo isticmaali karaa kaliya ujeddooyinkaas aan soo sheegnay.

2) Qof kasta oo jebiya xarfaha (d), (e) ama (f) ee faqradda (1) ee qodobkan, wuxuu galay dambi uu ku muteysan doono ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad, ama xabsi aan ka badnayn shan sano; ama labadaba; ama wixii kale oo ciqaab ah ee sharcigani dhigayo, haddii howlwadeenka markabku uu dambiga galayna waxaa lagala noqonayaa ruqsadda markabka.

## Qodobka 127
## Shuruudaha laga Rabo Maraakiibta Soomaaliyeed

1) Howlgeliyeka markabka Soomaaliyeed waxaa laga rabaa in:

a) Uuna gelin dekad shisheeye asagoo aan dekaddaas codsi usii diran 72 saacadod ka hor gelitaankiisa, isla markaasna aan wadan oggolaansho rasmi ah oo uu bixisay wasaaraddau ama wasaarad awood u leh ee dekada dalka;

b) Uu si buuxda ula shaqeeyo baaritaannada ay sameynayaan dekadaha dalalka kale si waafaqsan sharcigooda iyo habrraacyadooda; iyo

c) Uuna ku lug yeelan wax ku saabsan adeegsiga dekaddaas, oo ay ka mid yihiin kusoo xirashadeeda, wax ka rariddeeda, wax ka baakadeynteeda ama kalluun ku habbeynteeda, haddii dekaddaasi ay tahay dekad dal; taas oo Ururka Maareynta Kalluumeysi ee Gobalka oo ku shaqo leh u aqoonsaday mid aan u hoggaansamin ama aan u dhaqmin si waafaqsan nidaamyada caalamiga ah iyo kuwa goboleedyada ee ayada khuseeya iyo Hanaanka Daaryeelka iyo Maareynta caalamiga ee la xiriira hanaanaka dekadaha dal.

2) Haddii ay jirto sabab cad oo lagu rumeysto in markabka Soomaaliyeed uu ku lugyeeshay kalluumeysi sharci darro ah (IUU) ama uu galay howlo kalluumeysi la xirira oo lagu caawinayo kalluumeysiga noocaas ah, Agaasima Guud wuxuu sida ugu habboon uga codsanayaa dalkaasi in uu baaro markabkaas ama ay ka qaadaan tallaabooyin waafqasan nidaamyada caalamiga ah iyo kuwa gobaleed ee ku habboon.

3) Haddii baaritaanka ay sameysay dekadda dalka kale ay kasoo baxdo sabab cad oo lagu rumeysto in markabka Soomaaliyeed uu ka qeybgalay kalluumeysi sharci darro ah (IUU) ama uu sameeyay howlo kalluumeysi la xiriira oo lagu taageeray kalluumeysiga noocaas ah (IUU), Agaasimha Guud wuxuu sababeynayaa in arrinta si degdeg ah oo buuxda loo baaro, haddii caddeyn ku filan loo helana wuxuu sababeyanyaa in si degdeg ah loo qaado tallaabooyin fulineed oo waafaqsan sharcigan.

4) Howlwadeeka markab Soomaaliyeed oo kasta ee jebiya tuducyaraha (a), (b), ama (c) ee farqadda (1) ee qodobkan wuxuu galay dambi uu ku muteysan doono ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badnayn shan (5) sano; ama labadaba, ama wixii kale ee ciqaab ah oo sharcigani dhigayo, ruqsadaha markabkana waa la laalayaa.

# QEYBTA 7^AAD
# QODOBBO KALA DUWAN

## Qodobka 128
## U Qaadashada Kalluumaysiga Sharcidarrada Ah Mid Ka Hor Imaanaya Hanaanka Maaraynta Iyo Ilaalinta Caalamiga Ah

1) Howlwadeenka markabka waxaa loo qaadanayaa inuu sameynayo kalluumeysi sharci darro ah ama howlo la xiriira, oo ka hor imanaya Hanaanka Maareynta iyo Ilaalinta Caalamiga ee Urur Goboleedka Maareynta Kalluumeysiga , haddii markabku uu:

a) ku howlanaa kalluumeysi ama howlo kalluumeysi la xiriira, asagoo aan ku qorneyn diiwaanka maraakiibta loo oggol yahay in ay jillaabtaan noocyo ka mid ah kalluunkaas ama aan lagu diiwaan gelin Liiska Maraakiibta Ka-howlgala;

b) Ku lug yeeshay kalluumeysi ama howlo la xiriira kalluumeysi ayadoo dalka uu calankiisa sito uusan ka mid ahayn dalalka saamiga ku leh, qoondo kalluumeysi oo uu siinayo hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee gobolkaas ka jira, ilaa uu qaato calanka dal xubin ka ah kuwa saxiixay xeerkaas ama iskaashi la yeeshay asagoon xubin ka aheyn heshiiskaas;

c) Ku guuldarreystay inuu qoro ama warbixin ka diyaariyo kalluunka uu ka jillaabtay si waafaqsan hannaanka maareynta iyo ilaalinta ee halkaa ka jira; ama uu diyaariyay warbixin been ah;

d) Qaatay ama dajiyey kalluunka aan gaarin heerka qabashada ;

e) Ku dhaqaaqay kalluumeysi ama howlo kalluumeysi la xiriiri xilli kalluumeysigu xiran yahay ama galay meelo uu kalluumeysigu ka xiran yahay;

f) Adeegsaday agab kalluumeysi oo mamnuuc ah;

g) Kalluun ku wareejiyey; ama si kale howlo wadajir ah ula qabtay, caawiyay ama sahay siiyay Markaakiib aan ku jirin liiska kuwa kalluumeysiga loo fasaxay ama aan ka mid aheyn kuwa loo oggol yahay in ay badda dusheeda kulluunka kula wareegaan;

h) Uga kalluumeystay ama uga fuliyay howlo kalluumeysi la xiriira meel ka mid ah biyaha Soomaaliya si khilaafsan sharcigan ama ka hor imanaya shuruucda dalka ay ku taallo xeebta uu ka kalluumeysanayo;

i) Ku dhaqaaqaya kalluumeysi ama howlo kalluumeysiga la xiriira asagoo aan dal ka diiwaan gashnayn;

j) Sameeyay kalluumeysi ama howlo la xiriira, asaga oo wata ruqsado si ula kac ah loo been-abuuray ama loo qariyay summadihii markabka, aqoonsigii diiwaangelinta; ama

k) Uu kalluumeystay ama ku dhaqaaqay howlo kalluumeysi la xiriira si ka soo horjeedda hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah ee ku habboon;

Wasaaaraddu waxay xog iyo caddeymo u gudbinaysaa Urur Goboleedka Maareynta Kulluumeysiga goobta uu markabku ka sameeyay ama uu hadda ka wado hawlo loo malaynayo in ay la xiriiraan kalluumeysi sharci darro ah ;

2) Ayadoo la tixraacayo faqrada (1) waxay qabaneysaa markab kasta oo biyaha Soomaaliya jooga ama markab kasta oo Soomaaliyeed oo jooga meel ka baxsan biyaha xeer xeyndaabka Soomaaliya ay maasmusho.

3) Ayadoo aan waafaqsaneyn faqradda (2), haddii loo qaato in markab ku sugan biyaha Soomaaliya uu si uun ugu lug yeeshay kalluumeysi sharci darro ah ama howlo la xiriira kalluumeysigaas ama uu ka galo howshaas meelo ka baxsan soohdin biyoodka Soomaaliya halkaas oo uu ka jiro Urur-Gobaleedka Maareynta Kalluumeysiga oo ay Soomaali xubin ka tahay, howlwadeenka markabkaas waxaa loo qaadanayaa inuu galay dambi sida uu qabo sharcigani.

4) Howlwadeen kasta ee markab, kaas oo loo aqoonsaday inuu ku lugyeeshay kalluumeysi sharci darro ah ama howlo la xiriira, wuxuu galay dambi uu ku muteysanayo ganaaxa ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka yareyn shan sano; ama labadaba, ama wixii kale oo ciqaab ah ee sharcigani dhigayo; sidoo kale wixii ruqsad, oggolaansho, fasax kale ama diiwaangelinta Markabka la siiyay waa la lagala noqonayaa.

## CUTUBKA 9-AAD

## AWOODDA GARSOORKA, HABRAACA IYO MASUULIYADAHA

### Qodobka 129

### Garsoorka Iyo Heerarkiisa

1) Eedeyn walba oo la xiriirta fal ama fulin la'aan ku saabsan sharcigan, taas oo ka kooban xadgudub lagu sameeyay sharcigan, oo lagu galay biyaha Soomaaliya ay maamusho ama ay ku leedahay xuquuq qaanuuni ah, waxaa dacwadiisa lagu qaadi karaa maxkamad degmo, maxkamad gobal ama maxkamaddii kale ee awood u leh, ayadoo la marayo habraacyada shuruucda Soomaaliya, dhammaan dacwadahaasna waxaa loo aqoonsanayaa in ay yihiin dacwado Madani ah:

2) Haddii eedeynta lagu xad-gudbay ama fulin la'aanta sharcigan khuseysa, oo sheegeysa in sharcigan lagu xad-gudbay ay ka dhacday meel ka baxsan soohdin biyoodka Soomaaliya, Maxkamadda Sare ayaa tilmaameysa halka lagu qaadayo dacwaddaas.

3) Haddii qofka shaqada loo idmaday oo loo soo magacaabay si waafaqsan sharcigan uu asagoo adeegsanayo awoodaha ama ku gudanayo waajibaadka sharcigan uu u siinayo in meel ka baxsan biyaha Soomaaliya uu la kulmo qof lagu eedeynayo fal ama gaabis uu ku xad-gudbay sharcigan, waxaa falkaas iyo ka gaabiskaas sharcigan loo qaadanayaa inuu ka dhacay gudaha soohdin biyoodka ay maamusho Maxkamadda Sare sida ku xusan faqrada (1).

4) Maxkamadda Sare ee Federaalku markay dacwada qaadeyso waxay ka dooneysaa sarkaalka kalluumeysi ee idman ama sarkaalkii kale ee gudanaya waajibaad ka dhashay sharcigan, ama heshiis kale oo calami ah oo la xiriira, ama Hanaanka Ilaalinta iyo Maareynta Caalamiga ah ama Hay'ad Goboleed Maareyn Kalluumeysi inuu bixiyo wixii caddeyn u ah fal dambiyeed ama ka gaabis fulin sharci ee:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

a) Ka dhaca meel ka mid ah soohdin biyoodka ay ka taliso maxkamadda Sare, sida ku cad faqradda (1) ee qodobkan;

b) Uu ku qaadi karo sharcigan ama sharcigii kale ee Soomaaliyeed; ama

c) Xadgudub ku ah heshiiskii ruqsadda lagu bixiyay, heshiis calaami ah ama Hanaanka Ilaalinta iyo Maareynta Caalamiga ah oo ay degsatay Urur Goboleedka Maareyn Kalluumeysi oo uu ka howlgelayo sarkaalka kalluumeysi ee idman ama qofkii kale ee loo diro .

Hasa yeeshee sarkaal idmani aanu haysan dhalasho ama degganaansho goobta shaqada loogu direy

## Qodobka 130
## Masuuliyadda ka Dhalanaysa Bixin La'aanta Ganaaxyada Lacageed

Ayadoo la raacayo xadiga la isku dacweyn karo, lagu go'aaminayo, lagu meelmarinayo ama lagu soo celinayo xukun maxkamadeed ama dacwad madani ah oo ay qaadeyso maxkamadda awoodda u leh ee Dalkaas ka jirta; dacwadaha noocaas ah oo dhamma waa dacwado madani ah;

a) Ganaax lacageed oo aan markii hore ganaax ahaan loogu talagelin;

b) La wareegay ku dhacday ama lagu soo rogay si sharcigan waafaqsan; iyo Wasaaradda oo wixii ay qabato ula wareegeysa sida sharcigani qabo;

c) Dhammaan kirooyinka, biilasha, kharashyada iyo khidmadaha; iyo

d) Dhammaan wadarta lacageed ee bixintooda sharcigani farayo.

## Qodobka 131
## Masuuliyadda Ka Dhalanaysa Khassaaro Ama Waxyeello

Qofkii ku kaca fal dambiyeed ka dhan ah sharcigan, waxa ay, xukun maxkamadeed ka dib ama go'aan maamulku ka gaaray ka dib, dowladda Soomaaliya ku yeelaneysaa:

a) Wax kasta oo khasaare ah ama dhaawac ah ee ka dhashay fal dambiyeedka;

b) Wax kasta oo kharash ah ee ku baxay raadintii, qabashadii, baaristii iyo dacwo oogistii fal dambiyeedkaas; iyo

c) Kharashkii ku baxay haynta ama qabashada hantidaas, kalluunkaas, nuquladaas ama wixii kale ee la xiriira fal dambiyeedkaas;

Inta uu la'eg yahay magdhawga laga bixinayo khasaarahaas, dhaawacaas ama kharashkaas waxaa xukun ka gaari karta maxkamadda, isla markaana maamulka ay khuseyso
ayaa isku daraya wadarta ganaaxa lacageed ee khasaaraha iyo fal dambiyeedka dhacay.

## Qodobka 132
## Masuuliyadda Lagu Qaadayo Shirkadaha Iyo Howlwadeenada Shirkadaha

1) Haddii uuna sharcigani si kale tilmaamin, qofkii shaqaale, sarkaal ama wakiil shirkadeed ah ee ku Xadgudba sharcigan, Shirkadda uu ka tirsan yahayna waxaa loo qaadanayaa in ay ayaduna ku xadgudubtay sharciga, haddii:

a) Shaqqalahaas, sarkaalkaas ama wakiilkaasi uu ka shaqeynayay howl ka mid ah waajibaadkiisa ama shaqo muuqata ama Wasaaradda; iyo

b) Wada lahaanshaha, shirkadaha ay;

i.Si cad ama si maldahan ugu idmatay falka ama ka baaqsashada fulinta sharciga ee sababay fal dambiyeedka;

ii.Si toos ah ama si dadbadan uga warqabtay falka ama ka baaqsiga fulinta sharciga ee sababay fal dambiyeedka.

2) Marka laga reebo sida ku qoran farqadda (3), Agaasimha shirkadda ama qof kasta oo madax ka ah shirkad noocii ay doonto ha ahaate, taas oo ka shaqeysa howlo sharcigan khuseeya wuxuu galay dambi haddii qof xubin ka ah, shaqaale ka ah ama wakiil ka ah shirkadda uu madaxda ka yahay uu ku xadgudbo sharcigan.

3) Agaasimaha shirkadda ama ciddii kale ee madax ka ah shirkadda waxaa dambiga qodobkani dhigayo ka difaaci kara:

a) In uu qaaday dhammaan tallaabooyinkii loo baahnaa si loo hubiyo in sharcigan loo hoggaansamay;

b) In dambiga la galay asaga oo aan ka warqabin, oggolaan, lagala heshiin ama aan lala kaashan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

**Qodobka 133**
**Masuuliyadaha lagu qaadayo Howlwadeenada**

1) Dacwad kasta oo sharcigan la xiriirta, falkii ama ka gaabinta fulinta ee uu geysto qof ka mid shaqaalaha markabka ama qof kale oo la shaqeynaya marka waxaa loo qaadanayaa inuu geystay Howlwadeenka markabku, haddii aan si cad looga beri yeelin.

2) Arrimaha ku xusan faqradda (1), dambiga ka baajin maayo qof ka mid ah shaqaalaha Markab ama qof kale toona dambi uu isagu iskii u galay oo uu ku xadgudbay sharcigan.

**Qodobka 134**
**Masuuliyadaha Maamulaha Kasoo Gaaraya Falalka Wakiilkiisa**

1) Haddii arrin uu sharcigani faray ama uu ka reebay qof "maamulaha" uu fullin waayo ama uu ka reebtoomi waayo qof wakiil u ah maamulaha, waxaa loo qaadanayaa in fal dambiyeedkaas uu geystay isla maamulaha naftiisu, ilaa uu maamuluhu ka caddeeyo in qofkaas sheeganaya wakiilnimada maamuluhu uuna heysan idan uu ku metelo maamuha markii uu dambigaas gelayay.

2) Arrinta ku qoran farqadda (1) ka reebi meyso maamulaha dambi uu isagu iskii u galay oo kasoo horjeeda sharcigan.

**Qodobka 135**
**Racfaanada Laga Qaadanayo Go'aanada Lagu Gaaray Sharcigan**

Wasiirka oo la tashanaya Wasaaradda Caddaalada ayaa dhisaya Guddi Racfaan oo ka kooban ugu yaraan seddax qof oo aqoon iyo waaya -aragnimo u leh maamulka kalluumeysiga, sharciga iyo howlaha kalluumeysiga si ay u dhegeystaan racfaanka laga qaadanayo xukunada u dhacay si sharcigan waafaqsan, una qoraan oo usoo saaraan habraacyo la faafiyay oo ku saabsan awoodda xulasho, shaqo iyo go'aan qaadasho ee uu leeyahay Guddigan Racfaanku.

## CUTUBKA 10-AAD
## SOO KOOBIDDA DACWADAHA MAAMUL EE ISA SAARAN

**Qodobka 136**
**Dacwadaha Maamulka Oo Kooban**

1) Wasaaradda, oo la tashanaya Wasaaradda Cadaaladda, ayaa dejinaya nidaam oggolaanayo in dacwado maamul la qabto oo go'aanno laga gaaro dambiyada lagu xadgudbay sharcigan, inta aan ka aheyn kuwa ku saabsan:

a) Fal dambiyeedyada ka hor imaanaya shuruucda Soomaaliya, xataa haddii ayna falalkaasi dambi ku aheyn sharcigan dhexdiisa;

b) Dambiyada la xiriira fal dambiyeedyo calami ah oo abaabulan ama uu galay dabiile ka tirsan koox abaabulan oo dambiilayaal ah oo dalalka isaga gudba;

c) Dambiyo la xiriira naf go'day, xayiraad, handadaad ama rabshado ama goodin loo geystay qof kasta oo uu ku jiro sarkaalka kalluumeysi ee idman ama kormeere kale.

2) Marka la diyaarinayo nidaam dacwo qaadista maamul ee xeerkan sida ku qoran faqradda (1) ee qodobkan, waa in maanka lagu hayaa arrimahan soo socda:

a) Heerka aqoonta iyo habka magacaabista qofka iyo awoodda sharci ee qof kasta oo loo idmanayo in uu go'aan ka gaaro dacwadaha maamulka;

b) Habraaca dhegeysiga dacwadaha maamulka;

c) Waxaa looga baahan yahay in la ogeysiiyo shaqsi lagu eedeyey dacwo maamul si uu u ogolaado ama uu u diido dacwadaha maamul.

d) haddii qofka lagu soo eedeeyay inuu sharcigan ku xadgudbay uu oggolaado in dacwadda aan maxkamad la geyn uu maamulku u qaado si sharcigana waafaqsan, maamulka ayaa dacwadiisa qaadaya; waa haddii Wasaaradda Caddaaladdu aysan go'aamin in ay danta guud ay ku jirto in dacwadan uu qaado dacwad-ooge maxkamadeed, dadkuna ay dhegeystaan;

e) haddii la oggolaado in qofka lagu soo eedeeyay dacwad maamul lagu qaado, wixii alaab ah ee si sharcigan waafqasan loola soo qabtay waxay marayaan isla dacwaddaas madaniga ah.

f) qofka la soo eedeeyey waxaa ka reebban inuu qabto howlo la mid ah kuwii lagu soo eedeeyey ilaa uu ka bixiyo wixii maamulku ku ganaaxay.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

3) Heshiis isku dhaf ah ayaa la qorayaa si loo qaabeeyo qodobbada iyo shuruudaha ay Wasaaraddu ogolaato ayadoo metalaysa Soomaaliya si loogu qaado qofka uu ku dhacay ganaaxa maamul, caddaddaas oo inta ay la ekaaneyso:

a) Oo go'aaminayso si waafaqsan sharcigan, warbixinna uu ka diyaarinayso Wasaaradda oo la tashanaysa Wasaaradda Caddaaladda, warbixintaas oo ku saabsan faahfaahinta dambigii dhacay iyo heerka ciqaabta ama ganaaxa la saarayo qofka galay;

b) Haddii uusan sharcigan si kale u tilmaamin, ciqaabtaasi kama badan karto heerka ugu hooseeya, ka mana sare mari karto ciqaabta ugu sarreysa ee lagu qaado dambiga midkan la midka ah; intaas waxaa dheer kalluunkii uu sharci darrada ku jilaabtay oo lagu qiimeeyay sicirka macquulka ah ee uu suuqa uu ka joogo;

c) Waxaa ka mid noqonaya lacagtii uu ka faa'iiday ama uu qofka u keydsaday ayadoo ka timid dambigii uu horey u galay, caddaddaas oo ku salaysan qiimeyn uu soo sameeyay qof khabiir ah, taas oo ah mid ay aqbali karto maxkamad sharci ah;

d) Waxaa xisaabta lagu darsanayaa haddii markabka dambiga galay uu yahay mid aan ruqsad haysan ama yahy markab shisheeye; in uu kordho heerka ganaaxu;

e) Haddii dambigu mar labaad dhaco, ama uu fal dambiyeedku soo noqnoqdo, mar walba ganaaxu wuu ka sii badanayaa ganaaxii la saaray dambigii hore;

f) Waxaa kaloo ku jira kharashkii dawladda uga baxay howshaan darteed.

4) Dedejinta dacwad maamuleed oo la gaaray si waafaqsan farqadda (1), waxa ay noqonaysaa waxba ka jiraan haddii aan ganaaxii la xukumay oo dhammeystiran lagu bixin muddo 14 cisho gudahood ah oo ka billaabaneysa maalintii go'aanka xukunka la ogeysiisyey qofka xukuman; waxaana dacwada loo gudbinayaa Xeer Ilaaliyaha Guud si uu dacwad ugu soo oogo.

5) Haddii qofka la xukumay uuna aheyn Soomaali, lacag bixintuna ay ka soo billaabatay dalka kale, safaaradda dalkaas meteleysa ayaa xaqiijineysa bixinta ganaaxaas lagu soo rogay si waafaqsan farqadda (1).

6) Haddii ganaaxa la wada bixiyo ama safaaraddu caddeyso bixintiisa sida ku xusan farqadda (3), Wasaaraddu waxay amraysaa sii deynta alaabtii la qabtay ama in loo iibiyo sida qofkaas go'aansado.

7) Heshiiska isku dhafka ahi wuxuu qori karaa in wax kasta oo loo adeegsaday ama ka qeybgalay fal dambiyeedka lala wareegayo.

8) Lacagta lagu helo heshiiskan isku dhafka ah wuxuu la mid yahay ganaax maxkamadi go'aamisay.

9) Qofkii ku dhaqaaqa kalluumeysi, ama howlo la xiriira ama howlo kale oo ku keeni kara dacwa qaadis maamul ayadoo hore looga mabnuucay howlaha noocaas ah wuxuu gelayaa dambi, wuxuuna muteysanayaa ganaax aan ka badneyn midka ugu sarreeya ee uu qorayo jadwalka koowaad, oo ay u dheer tahay wixi kharash ah ee dawladda ka galay howshaas darteed.

## CUTUBKA 11-AAD

## CADDEYN

### Qodobka 137

### Caddeymaha Aaladda La Socoshada Markabka

1) Dhammaan macluumaadka iyo xogaha laga helo ama lagu ogaaday adeegsiga aaladda dhaqdhaqaaq tebinta mobeelka ee markabka sida sharcigani qabo, oo ay ka mid yihiin kaamerooyin markabka dushiisa ku xiran oo loogu talagalay la socoshada, xogtaas waxaa loo qaadanayaa, haddii aan si ka duwan la soo caddeyn, in:

a) Ay ka timid markabka la tilmaamay;

b) Si sax loo soo tebiyay ama loo soo diray;

c) Uu xogtan bixiyay hawlwadeenka markabku, ha ahaado kabtanka, milkiilaha ama kireystaha markabka

e,

Waxaana la kala caddeynayaa in xogta ama warbixinta sidaan lagu helay ama lagu ogaaday ay ku timid qoraal ahaan ama muuqaal ahaan loo soo diray;

2) U qaadashada uu dhigayo qodobkan faqraddiisa (1) way dhaqangeleysaa haddii xogtan la keydiyay soo tebinta/dirista ka hor ama ka dib.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

3) Aaladda dhaqdhaqaaq tebinta mobeelka ama aalad kale ee wax lagula socdo oo loo rakibay si waafaqsan sharcigan waxaa qaanuun ahaan loo qaadanayaa in ay bixiyaan xog sax ah.

4) Sarkaalka kalluumeysi ee idman ama qofkii kale ee Wasaaraddu si qoraal ah ugu idmaday howshan, wuxuu dhiibi karaa caddeyn ama shahaaddo qoreysa;

a) Magaciisa, cinwaankiisa iyo darajadiisa;

b) Inuu awood u leeyahay inuu akhriyo qoraallada ama muqaaladda ay mashiinnada awoodda u heli ka qabtaan ama ka helaan aaladda dhaqdhaqaaq tebinta mobeelka;

c) Taariikhda ama saacadda xogta laga qabtay ama laga helay aaladda dhaqdhaqaaq tebinta mobeelka iyo faahfaahinta xogta;

d) Magaca iyo summad af-garashada wicitaanka markabka ay saaran tahay aaladda dhaqdhaqaaq tebinta mobeelka, kaas oo uu asagu yaqaan ama laga xaqiijiya buug diiwaan ah, wax duuban ama dukumiintiyo kale oo rasmi ah; iyo

e) Caddeyn ah in ay muuqato in aysan jirin wax cillad ah oo haysata aaladda dhaqdhaqaaq tebinta mobeelkas, habka war-tebinteeda, ama makiinadaha kale ee xogta lagu qabto ama lagu helo;

## Qodobka 138
## Caddeynta Laga Helay Dayax-gacmeed

Caddeyntii laga helo dayaxgacmeed awood u leh inuu bixiyo farriimo sax ah iyo xogo kale oo ku saabsan markabka waxaa loo qaadanayaa mid la aqbali karo oo sax ah, haddii markabku si ku talagal ah farriintaas ugu diray dayaxgacmeedka iyo haddii kaleba.

## Qodobka 139
## UQAADASHO

1) Dhammaan kalluunka la helo asagoo dul saaran Markab lagu gelay dambi sida sharcigan uu qabo, waxaa loo qaadanayaa in la qabtay ayadoo fal dambiyeedkii faraha lagula jiro.

2) Markii la qaadayo dacwad la xiriirta sharcigan:

a) Waxaa muhiim ah in la caddeeyo meesha la sheegay in falku ka dhacay, Meesha ku qoran buugga diiwaanka ama qoraallada kale oo rasmiga ah ee ay diiwaan geliyeen markab ama diyaaradd sharci fulin ayna sheegaan in ay tahay goobtii falku ka dhacay; ayaa loo aqoonsanayaa in ay tahay meesha uu falku ka dhacay;

b) Keenidda nuqul qoraal ah ama caddeyn muujinaya soo gelitaan oo sarkaal kalluumeysi oo idmani uu caddeeyay inuu yahay nuqulkii saxda ahaa ayaa caddeynta koowaad u ah waxyaabaha ku qoran buugga diiwaanka ama qoraallada kale oo rasmiga oo ay helaan markab ama diyaadrad sharciga fulinaysa.

3) Marka la qaadayo dacwad sharciyeed ku saabsan ku xadgudub sharcigan;

a) Sarkaalka kalluumeysi ee idman ama kormeere ayaa keenaya caddeyn ku fadhida sababo maangal ah oo lagu rumeysto in kalluunka ay dacwadu la xiriirto laga jillaabtey meel cayiman oo ka mid ah biyaha Soomaaliya ama ay maamusho Urur Goboleedka Maareynta kalluumeysiga ee Soomaaliya ay xubin ka tahay; oo

b) Maxkamadduna, ka dib markey tixgeliso caddeyntaas, ay garowsato in ay caddeyntu tahay mid maangal ah,

Kalluunka oo dhanna waxaa laga soo qaadayaa in loo jillaabatay sida loo sheegay, haddii aanan la keenin caddeyn middaas ka duwan.

4) Markii la qaadayo dacwad sharciyeed ku saabsan ku xadgudub sharcigan:

a) Sarkaal kalluumeysi ee idmani wuxuu keenayaa caddeyn ku fadhida sabab maangal ah oo lagu rumeysto in kalluunka ay dacwaddu la xiriirto la jillaabtay ayadoo la isticmaalayo shabaqyada sabbeeya; oo

b) Maxkamadduna, markii ay tixgelisay caddeyntaas, ay garowsatay in ay caddeyntu sax tahay, dhammaan kalluunka waxaa loo qaadanayaa in loo jillaabtay qaabka dacwada lagu sheegay; haddii aan la keenin caddeyn middaas ka duwan.

5) Haddii la soo gudbiyo xog ku saabsan howlo kalluumeysi ama hawlo la xiriira oo markab sameeyay, waxaa loo qaadanayaa in uu xogtaas bixiyay hawlwadeenka markabku, ha ahaado kabtanka, milkiilaha ama kireystaha markabka, ilaa laga caddeeyo in uuna dhiibin ama uuna amrin qof ayaga ka mid ahi

6) Qoraal kasta ama summad walba oo la geliyo buugga, khariiradda ama dukumiintiga kale ee markabka, kaas oo sharcigani dhigayo in la heysto ama loo adeegsado diiwaangelinta howlaha markabka, waxaa loo qaadanayaa inuu qoray hawlwadeenka markabku, ha ahaado kabtanka, milkiilaha ama kireystaha markabka.
7) Aalad kasta oo sheegta goobta walaxi ku sugan tahay ee lagu xiray markab ama diyaarad si sharcigan loogu fuliyo waxaa loo qaadanayaa mid sax ah.

### Qodobka 140
### Mas'uuliyad Adag

Marka ay Xeer-ilaalintu soo oogayso dambi ku xusan Sharcigaan, waxaa waajib ah in dacwad ooguhu cadeeyo in eedeysunuhu ku talagal u galay dambi ama inuu sameeyay fal dambigaas ka dhalanaya

### Qodobka 141
### Culeyska Cadeymaha

1. Marka la qaadayo dacwad sharcigan la xiriirta, qof ku eedeysan inuu galay dambi ku saabsan howl ruqsad u baahan, qofka ayaa laga rabaa inuu caddeeyo inuu ruqsad u heystay shaqada uu qabanayay.
2. Marka qof lagu soo eedeeyo inuu jebiyay Qodobka 68aad ee sharcigan, qofka ayaa laga rabaa inuu caddeeyo in xogta la bixiyay ay aheyd mid run ah, dhammeystiran oo sax ah

### Qodobka 142
### Carqaladeynta Caddeynta

1) Cidna ma carqaladeyn karto caddeyn la xiriirta fal dambiyeed xadgudub ku ah sharcigan.
2) Ayadoo aanu xaddidneyn baahsanaanta faqrsadda (1), qofna:
a) asagoo saaran Markab la ceyrsanayo, la kori doono, markaas la korayo ama loo sheegay in uu soo korayo sarkaal kalluumeysi oo idman, kama tuuri karo markabka dushiisa, mana burburin karo kalluun, waxsoosaar kalluun, qalab, dukumiinti, walxo qarxa, waxyaabo sun ah ama wax kale, ayadoo ujeeddadu tahay in laga badbaadiyo qabasho ama la qariyo faldambiyeed lagu jebiyay sharcigan;
b) lama sii deyn karo markab la xayirey, kalluun, waxsoosaar kalluun ama wax kale oo loo haysto si sharcigan waafaqsan ama uu ku dhaqaaqo ama ka baaqsado inuu ka hortago fal lagu sii dayn karo markab, kalluun, waxsoosaar kalluun, qalab ama wax kale oo loo hayay si sharcigan waafaqsan, haddii uu ogaa in markabka, kalluunka, waxsoosaarka kalluunka, qalabka ama walax kaleba loo hayay si sharci ah iyo haddii kalaba;
c) Ma burburin karo, waxyeello uma geysan karo; ma howl-gabsiin karo ama si kale uma carqaladeyn karo dhisme kasta ama qalab kasta oo uu ruqsad loo siiyay si sharcigan waafaqsan; ama
d) Haddii sharcigani farayo in markabka lagu xiro aaladda dhaqdhaqaaq tebinta mobeelka, ha joogo biyaha Soomaaliya ama meel ka baxsan, ma burburin karo, waxyeello uma geysan karo, ma howl-gabsiin karo ama si kale uma carqaladeyn karo aaladdaas dhaqdhaqaaq tebinta ee markabka saaran, ma gelin karo ama kuma shubi karo aalad dhaqdhaqaaq tebinta ama aaladda la socoshada markabk xog iyo warbixin macnadarro ah ama aan rasmi ahaan loogu baahneyn.
3) Qof kasta oo jebiya faqradaha (1) ama (2) wuxuu galay dambi, wuxuuna muteysanayaa ganaax aan ka badneyn midka ku xusan Jadwalka Koowaad ama xabsi aan ka badneyn seddax sano; ama labadaba.

## CUTUBKA 12-AAD
## DAMBIYO, GANAAXYO IYO CIQAABYO

### Qodobka 143
### Dambiyo, Ganaaxyo Iyo Ciqaabyo

1) Haddii uuna sharcigani si kale u tilmaamin, ganaaxa ugu badan ee la saari karo qofkii sharcigan jebiya waxaa lagu xusay qeybta A ee Jadwalka Koowaad; ganaaxa ugu hooseeyana waxaa lagu cayimay qeybta B ee Jadwalka Koowaad.
2) Jadwalka Koowaad waxaa wax looga beddeli karaa Xeer.
3) Haddii fal-dambiyeedka lagu sheegay sharcigan ama Jadwalka Koowaad uu ku saabsan yahay faqrad ama xaraf, kaas oo sii leh qeybo, jebinta lagu sameeyo mid kasta oo ka mid ah faqraddaas ama xar afkaas waxaa loo qaadanayaa inuu yahay fal-dambiyeed gaar ah.
4) Marka la cayimayo ama la go'aaminayo xaddiga ganaaxa waxaa la raacayaa tilmaamaha ku xusan qodobka 146.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE ... HOUSE

5) Dhammaan ganaaxyada lacageed waxaa lagu qaadayaa shilin Soomaali, ayadoo la raacayo heerka rasmiga ah ee sarifka uu jaan gooyo Bankiga dhexe ee Soomaaliya markа la soo saaray Sharcigan.
FG; Sarifka maanta inta uu marayo waa $1= 27.000 Sh.so

## Qodobka 144
## Tilmaamaha Lagu Caddeynayo Ganaaxyada ama Go'aannada

1) Ganaax ama go'aan maxkamadeed ama maamul uu go'aamiyo si waafaqsan sharcigan waa inuu lahaadaa saameyn ciqaabeed adag oo keeni karta in loo hoggaansamo sharcigan ama looga waantoobo fal-dambiyeedyada meel kastoo ay ka dhacaan, loogana xayuubiyo dambiilayaasha faa'iidadii ay ka heleen falalkooda sharci darrada ah.

2) Gaar ahaan, markii xukun la gaarayo ama go'aan maamul la qaadanayo waxaa lagu saleynayaa arrimo badan oo ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

a) Inta ay gaarsiisan tahay waxyeellada fal-dambiyeedku, ayadoo la tixgelinayo:

i. Heerka ugu sarreeya ee ganaaxa;
ii. habraacyada caalamiga ah iyo kuwa dalka iyo habdhaqanka wanaagsan markii loo eego culeys fal-dambiyeedka, oo ay ku jiraan fasiraadaha ay ku leeyihiin shuruucda caalamiga ah ee kalluumeysiga;
iii. Heerka saameynta uu fal-dambiyeedku ku leeyahay kheyraadka kalluumeysiga, deegaanka, dhaqaalaha iyo horumarka bulsho ee muwaadiniinta Soomaaliyeed;
iv. Baaxadda fal-dambiyeedka;
v. Inta ay la' egtahay muddada uu fal-dambiyeedku soo socday;
vi. Haddii ay jirto dhimasho ama dhaawac dad;
vii. Fal-dambiyeedyada is leh, haddii fal-dambiyeedyo badan oo isku mid ah la galay;

b) Xaaladda dambiilaha, ayadoo la eegayo:

i. Alaabta iyo faa'iidooyinka uu ka helay fal-dambiyeedyadii uu gelay;
ii. Haddii ay tahay markii ugu horreysay ee fal-dambiyeedkan la sameeyay;
iii. Haddii fal-dambiyeedyo badan oo kala duwani ay dhaceen;
iv. Haddii dambiiluhu uu kaligii fal-dambiyeedka sameeyay ama haddii uu dad kale la kaashaday;
v. Suurtagalnimada inuu dambiiluhu fal-dambiyeedkii mar kale ku laabto;
vi. Saameynta uu heerka ganaaxu ku yeelanayo dambiilaha;

c) Ganaax culus ama go'aan maamul oo adag ayaa lagu soo rogayaa fal-dambiyeedyada la xiriira weerar, is-hortaagid ama laaluushid kormeere idman, baare idman ama sarkaal kale oo kalluumeysi oo idman ama qof kasta oo gudanaya amarrada iyo masuuliyadaha uu sharcigani saarayo, waxyeello loo geystay agab kalluumeysi ama maraakiib, dhaawac qofeed, dhimasho, kalluumeeysi sharci darro ah, been abuur, ku guul-darreysi u hoggaasimadda Qodobka 54 ee Sharciga, ama haddii waxyeello loo geysto degaanka, waxaa markabkiiba ugu yaraan muddo seddex bilood ah laga joojinayaa ruqsadda, fasaxa ama oggolaashaha kale, ama waaba la gala noqonayaa dhammaan.

d) Hadddi ay muuqato in xadgudubka sharcigan uu ku saabsan yahay dhaqdhaqaaqyo dambi oo dalalka isaga tallowsan ama dambiga la galay ayadoo la kaashanayo kooxo dambiilayaal ah oo dalalka isaga tallaaba, waxaa lagu soo rogayaa ganaax culus ama go'aan maamul oo adag oo aan ka yareyn boqolkiiba sagaashan ka mid ah ganaaxa ugu badan ee uu Jadwalka Koowaadi qorayo oo la saaro dambiyada la midka ah;

## Qodobka 145
## Dambiyo Guud

Qof kasta oo ku xadgudba qodob ka mid ah Sharcigan oo aanu qorneyn ganaax ama ciqaab lagu muteysanayo jebintiisa, qofkaasi wuxuu galay dambi uu haddii lagu xukumo ku muteysanayo ganaaxa ugu badan ee uu qorayo Jadwalka Koowaad ama laba laab faa'iidadii dhaqaale ee ka soo gashay xadgudubkaas, hadba tii labadooda badan, ama xabsi aysan muddadiisu ka badneyn seddax (3) sano; waxyeelladii soo gaartay kalluunka iyo Dhaqaalaha Buluugga ah waxaa lagu xukumayaa ganaax aan ka yareyn isu geynta kharashka ku baxaya dib uga soo kabashada waxyeelladii uu u geystay khayraadka badda ama degaanka, ama labadooda oo la isugu daray.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE ... HOUSE

## Qodobka 146
## La Wareegid

1) Haddii maxkamadi ay qof ku xukunto inuu Sharcigan ku xadgudbay, waxay amri kartaa la wareegidda walaxda ama walxahan soo socda:

a) Kalluun, wax kasta oo kalluun ka yimaada, markab (oo ay ku jiraan agabkiisa kalluumeysi, alaab, keyd, shixnad iyo diyaarad) agab kalluumeysi, qalab, walxo qarxa iyo waxyaabo sun ah oo dhammaantood loo adeegsaday fal-dambiyeedka;

b) Haddii fal-dambiyeedka lagu fuliyay markab, wixii kalluun ah ee markabka saarnaa xilligii fal-dambiyeedku dhacayay;

c) Haddii la iibiyay kalluun laga baqay in uu xumaado, lacagtii laga helay iibka kalluunkaas;

d) Shaygii kale ee loo qaatay, loo isticmaalay ama si kale uga qeybqaatay dhicidda fal-dambiyeedka ama si kale oo sharcigani sheegi doono.

2) Haddii kalluun ama wax kasta oo kalluun ka yimaada oo Sharcigani reebay ka kalluumeysigiisa la qabto, loona hayo si sharcigan waafaqsan, waa lala wareegayaa, wuxuuna ka mid noqonaya hantida Qaranka.

## Qodobka 147
## Bixin iyo Qaadasho Laaluushka

1) Qofna si toos ah ama si dadban iskuguma dayi karo in uu laaluusho sarkaalka fulinaya awoodaha iyo mas'uuliyaddaha uu u xilsaaray Sharcigani; ujeeddadii laaluushka laga lahaa hala gaaro ama yaan la gaarin.

2) Ma jiro qof fulinaya awoodaha iyo masuuliyadaha sharcigan farayo ama la xiriira sharcigan oo aqbali kara, qaadan kara ama naftiisa u raadsan kara laaluush ama qof kale u raadin kara, haddii ujeeddadii laaluushku fushay iyo haddii kalaba;

3) Qof kasta oo ku fashilma u hoggaansamidda faqradaha (1) ama (2), wuxuu galay dambi uu haddii la xukumo ku muteysanayo ganaax lacageed oo aan ka badneyn gaanaaxa ugu badan ee lagu xusay Jadwalka Koowaad; ama xabsi aan ka badneyn shan sano; ama labadaba; intaas waxaa dheer in lala wareegayo wixii faa'iido ah ee qofkaas kusoo galay laaluushkii uu qaatay darteed, isla markaasna qofkii ku xadgudbay faqradda (2) ee qodobkan shaqada waa laga saarayaas; mar dambana looma oggolaanayo inuu ka shaqeeyo xafiis dadweyne oo dambe, waajibaad dambe ama howl dambe oo Sharcigan la xiriirta.

## Qodobka 148
## Ka Xayuubinta Faa'idooyinka Lacageed

Haddii maxkamad ay qof ku hesho inuu ku xadgudbay Sharcigan, maxkamadduna ay ku qanacdo in qofkaas uu sameynta fal-daambiyeedka ka helay ama ay u ururtay faa'iido lacageed, maxkamaddu, ayada oo aan tixgelinaysa ganaaxa ugu sarreeya ee sharcigani uu ku soo rogi lahaa dambigaas oo kale, waxay qofka ku amri kartaa inuu bixiyo ganaax dheeraad ah oo u dhigma xaddigii lacageed ee ay maxkamaddu ogaatay inuu qofkani ka helay fal-dambiyeed, xaddigaas oo ku saleysan qiyaas ay Wasaaraddu sameysay.

## Qodobka 149
## Maxkamaddu Waxay Soo Rogi Kartaa Magdhawyo Iyo Ganaaxyo Dheeraad Ah

Ayadoo ka dheeri ah ganaaxyadii iyo muddo xabsiyeedkii uu sharcigani dhigayay, haddii aanan sidaas si ka duwan la caddeyn, maxkamaddu waxay amri kartaa:

a) In la xiro muddo aan ka badnayn 12 bilood, iyo marka aan ganaaxa maxkamadda lagu bixin si waafaqsan shuruudihi looga baahna waxay amrikarta xarig u dhigma ganaaxa lacageed ee la bixin waayay.

b) La wareegidda markabka, kalluunka saaran iyo/ama agabka kalluumeysi ee saaran;

c) Laalidda ama hakinta wixii ruqsad ah ee la xiriira fasax, oggalaansho ama diiwaangelin;

d) Magdhaw la siinayo milkiilihii ay hantidiisu si toos ah ugu waxyeelowday, uguna burburtay fal-dambiyeedkii dhacay;

e) Magdhaw lagu gudayo kharashka ku baxaya nadiifinta wasakhoobiddii ka dhalatay fal-dambiyeedka ama ku baxaya fogeynta qalab si joogta ah u sababaya wasakhoowidda degaan badeedka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

### Qodobka 150

### Qodobka 151

### Xaddiga Ugu Sarreeya Ee Lagu Kordhin Karo Ganaaxa Shirkadaha

Haddii shirkad weyn lagu helo in ay ku xadgudubtay Sharcigan; waxaa lagu seddax laabayaa inta uga badan ee lagu ganaaxi jiray dambigan oo kale.

### Qodobka 152

### Dambiyo Soo Laalaabta Iyo Dambiilayaal Soo Noqnoqda

1) Dambiyada maalin walba iska socda, maalin walba dambigaas waxaa loo qaadanayaa dambi cusub.

2) Ganaax iyo ciqaab walba oo lagu xukumo ama la go'aanmiyo in la saaro qof galay isla hal dambi wax ka badan hal jeer, mar walba ganaaxiisu/ciqaabtiisu way ka badnaaneysaa middii hore, mararka qaarkooda waxaa suuragal ah in ay noqoto tii hore laba laabkeed; waxaa kaloo intaas dheer in laga xayirayo ama lagala laabanayo ruqsadda ama ogalaashiyaha uu ku howgalayo, sidoo kale qofka waxaa laga joojinayaa inuu qabto shaqo sharcigan la xiriirta ilaa muddo la cayimay.

### Qodobka 153

### Amar Xayiraad

1) Wax kasta oo ganaax ama ciqaab ah oo uu sharcigani sheegay, maxkamaddu ama lagu maamulayo xaalad xeer maamul, Wasaaradda oo la tashanaysa xafiiska Garyaqaanka Guud ayaa waxay amri kartaa in qof caadi ah laga mamnuuco inuu ku howlanaado kalluumeysi ama dhaqdhaqaaq laxiriira biyaha Soomaaliya muddo ku eg shan sano, haddii qofkaas lagu helo inuu galay ama uu qirtay inuu galay:

a) Dambi ku saabsan kalluumeysi aan ruqsad loo heysan;

b) Ama dambiyo dhowr ah oo sharcigaan kasoo horjeeda.

2) Qof kasta oo laga mamnuucay inuu ku howlanaado howlo kalluumeysi ama dhaqdhaqaaq la xiriira, si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan, ama mulkiilihii, howlwadeenkii ama kabtankii si ula kac ah ugu oggolaada qof looga mamnuucay shaqada si wafaqsan faqradda (1) inuu markab fuulo ama uu ku saarnaado amarkiisa iyo maamulkiisa, wuxuu galay dambi uu xukun ka dib ku muteysan doono ganaax la mid ah midka ugu sarreeya ee uu qorayo Jadwalba Koowaad; ama xabsi aan ka badneyn seddax san; ama labadaba.

### Qodobka 154

### Xariga Dadka Aan Dalka U Dhalan

Haddi dambi kasoo horjeeda sharcigan lagu galo meel ka mid ah Aagga Dhaqaale ee Gaarka ah, dambigaasna uu galay muwaadin dal kale ama la shaqeeya markab aan ka diiwaangashaneyn Soomaaliya, ciqaabta lagu xukumayo qofkaas kuma jiri karto xabsi, haddii uuna jirin heshiis sidaa ka duwan oo dhex maray Soomaliya iyo dalka muwaadinintooda arrintu khuseyso, kumana jiri karto wax ciqaab jireed ahi.

## CUTUBKA 13-AAD

## QODOBBO GUUD

### Qodobka 155

### Xiriirka Kala Dhexeeye Shuruucda Kale Ee Soomaaliya

Haddii ay dhacdo in ay iska hor yimaadaan ama ay meelo isku khilaafaan sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka, marka laga reebo Dastuurka, sharcigan ayaa la raacayaa.

### Qodobka 156

### Wargalinada

1) Wixii wargalin ah ee uu sharcigan dalbanayo in la diro waa in ay ahaadaan qoraal.

2) wargalin ama dukumiinti walba oo lagu diray boosto sharci ah ama loo diray qaab elektaroonig ah waxaa loo qaadannayaa in la diray, wax laga qabtay ama la helay seddax maalmood oo ah maalmo shaqo ka dib taariikhdii warqadda la helay ama la diray, waase markii qofka warqadda boostada ama hab elektaroonig ah loogu diray uu caddeeyo in usan gaarin wargalintu ayadoo aysan ahayn khaladkiisa awgeed.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 157
## Xeer-hoosaadyo

1) Wasiirku wuxuu sameyn karaa xeerar lagu socodsiinayo ama lagu hirgelinayo sharcigan, oo ay ka mid tahay, haddi aan wax xadidaya jirin:

a) Maareynta, qaabeynta ama maamulidda ka kalluumeysiga ama howlaha la xiriira ka kalluumeysiga dhammaan noocyada kalluunka iyo degaamada kalluunku ku nool yahay iyo wixii kale ee howl ah oo sharcigan soo hoos gelaya.

b) Hirgelinta ama meelmarinta qodob kasta oo ka mid ah heshiis caalami ah, heshiis maamul iyo hannaanka maareynta iyo ilaalinta caalamiga ah.

c) Hirgelinta nidaam iskaashi iyo wada-shaqeyneed oo u dhexeeya hay'adaha dowladda, maamul gobaleedyada iyo hay'adaha kale ee ay khuseyso.

d) U Sameynta aas-aas, xeerar iyo habraacyo habka loo dedejinayo dacwadaha maamul ee heshiisayada is dulsaaran ;

e) Dajinta shuruudaha, nidaamyada iyo arrimaha kale ee la xiriira heshiisyada oggolaanshaha, ruqsadaha, fasaxyada kale iyo diiwaangelinta sida sharcigani uu qabo;

f) Dajinta khidmadaha, kharashka adeegga, xaddiga lacagaha la soo rogayo, khidmada kirada ama lacag kasta oo loo bixiyo si waafaqsan sharcigan ;

g) Kala xadeynta aagagga, goobaha maamulka iyo xilliyada kalluumeysiga;

h) Caddeynta iyo ilaalinta noocyada kalluun ee halista ku sugan;

i) Diyaarinta foomamka, jadwallada iyo dukumiinti kasta oo sharcigani u baahan yahay;

j) Hirgelinta habraacyo iyo shuruudo loogu talagalay la socoshada, xakameynta iyo howlaha dabagalka ee la xiriira sharcigan;

k) Waajibaadka, aqoonta iyo magacaabista saraakiisha kalluumeysi ee idman, baarayaasha iyo shaqaalaha kale ee loo idmay in ay qabtaan howlaha la socoshada, xakameynta, dabagalka iyo hirgelinta waajibaadka sharcigani dhigayo;

l) Nidaamınta ama Mamnuucidda howlaha saameynta taban ku yeelan kara kheyraadka kalluumeysiga iyo degaan badeedka ay ka dhacaan;

m) Nidaamınta, xakameynta iyo maareynta howlaha cilmibaarisyada, sahamada, waxbarashada iyo tababarrada la xiriira kalluunka, kheyraadka kalluumeysiga iyo xaaladaha degaan badeedka la xiriira maareynta kalluumeysiga;

n) Dejinta shuruudaha isticmaalka iyo summadeynta markabka, agabka kalluumeysiga, qalabka oo ay ku jiraan aaladda la socoshada markabka iyo qalabka gabbaadka kalluunka iyo waxyaabaha kale ee ay tahay in xeer lagu soo saaro si sharcigan waafaqsan;

o) Nidaamınta kala soocidda kalluunka aan loo qasdin, haynta, habbeynta iyo maareynta kalluunka ama wax soosaarka kalluunka;

p) Habeynta, suuq qeynta, fayadhowrka, iyo nadaafadda guud ee kalluunka;

q) Soodejinta iyo dhoofinta kalluunka iyo waxsoosaarka kalluunka;

r) Dejinta wixii ku saabsan xisaabta socota, diiwaan, dukumiinti ama xog qof ama koox looga baahan yahay in ay hayaan ama u dhiibaan si sharcigan waafaqsan, oo ay ka mid yihiin:

i. Foomka xisaabta socota, diiwaanka, dukumiintiga ama xogta ay tahay in la keydiyo, la dhiibo ama la wadaago;
ii. Muddada xisaabta socota, diiwaanka, dukumintiga ama xogta la heynayo, la dhiibayo ama la wadaagayo;
iii. Qofka xisaabta socota, diiwaankaas, dukumiintigaas ama xogtaas keydinaya, dhiibaya ama wadaajinaya; iyo
iv. Goobta xisaabta socota, diiwaankaas, dukumiintigaas ama xogtaas la dhigayo, laga dhiibayo ama lagu wadaagayo;

s) Qaadista tallaabooyinka laga ma maarmaanka ah ee lagu la dagaalamayo kalluumeysiga sharci darrada ah iyo howlaha la xiriira

t) Hirgelinta iyo ka qeyb qaadashada, la shaqeynta samafalka dhaqaale iskaashiga ee loo qoondeeyay heshiisyada caalamiga ah ee ka hortaga iyo ilaalinta noole biyoodka;

u) Wax ka beddelka Jadwalba Koowaad, qoridda ganaaxyada ka dhalanaya dacwadaha maamul ee bixinta magdhawyada ama wixii kale ee lacag bixin ah oo sharcigan lagu go'aamiyo;

v) Nidaam u yeelidda arrimaha kale ee loo baahan yahay ee sharcigan khuseeya ama sidooda kale u waafaqsan ujeeddoooyinka iyo mabaadii'da sharcigan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

2) Wasiirku wuxuu, asagoo kala tashanaya hadba Wasaaradaha Xukuumadda Soomaaliya oo ay khuseyso, xeer u sameynayaa arrimahan soo socda:

a) dhisadda iyo keenista maraakiib kalluumeysiga iyo halbeeg u yeelidda sameynta maraakiibta noocaas ah;

b) Qeexidda shuruudaha ka horreeya bixinta diiwaangelinta maraakiibta kalluumeysi ee ka howgelaya Soomaaliya;

c) Dajinta heerarka badbaadada iyo shuruudaha looga bahan yahay maraakiibta loo isticmaalayo kalluumeysiga;

d) Dajinta shuruudaha loo baahan yahay si looga shaqeeyo markab kalluumeysi, ayadoo la tixgelinayo heshiisyada heer caalamiga ah; iyo

e) Dajinta shuruudaha shaqaalaha iyo aqoonta laga rabo si ay uga shaqeeyaan markab kalluumeysi oo Soomaaliya ka diiwaangashan.

**Qodobka 158**
**Burin Iyo badalid**

1) Sharcigan ayaa meesha ka saaraya, islamarkaasna beddelay Sharcigii Kalluumeysiga Soomaaliya ee Lr.29 2014

2) Sharci kale oo kasta, wareegto ama xeer aan la jaan-qaadeynin Sharcigan waa uu burinayaa

**Qodobka 159**
**Awoodda Fullinta Sharcigaan**

Waxaa iska leh awoodda fulinta sharcigaan Ciidanka badda iyo difaaca Xeebaha Soomaaliyeed oo kaashanaya Ciidanka ilaalada Xeebaha

**Qodobka 160**
**Dhaqangal**

Sharcigan Kalluumeysigu waxa uu dhaqan gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

**Lifaaqa Koowaad**

JADWALKA KOOWAAD

**DAMBIYADA, GANAAXYADA IYO CIQAABAHA:**

**QEYBTA A**
**JADWALKA HEERARKA UGU SARREEYA EE GANAAXYADA.**

1) Heerka ugu sarreeya ee ganaax oo ku dhacaya fal-dambiyeed kasta oo gaar ah, kaas oo ku xusan faqradda ama xarfaha la xiriira Jadwalka Heerarka ugu Sarreeya ee ganaaxyada hoos ku qoran; lacagta lagu ganaaxayna waxaa lagu cayimay qeybta B ee Jadwalkan Koowaad.

2) Haddii Huuri ama markab yar dambiga lagu galay lagu qaadi maayo heerarka ganaax ee ku xusan Jadwalka hoose, ganaaxa lagaceed ee la saarayaana kama badan karo hal melyan oo shillin Soomaali ah.

3) Shuruudaha lagu mudanayo ganaaxa ugu yarina waxay ku qoran yihiin qeybta C ee Jadwalkan.

| Qodobada iyo Faqradaha | Cinwaanka Qodobka | Heerka ugu Sareeya Ee Ganaaxa |
|---|---|---|
| 12 (5) | Dano isdiidan | 3 |



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

| | | |
|---|---|---|
| 13 (6) | Hannaanka ilaalinta iyo maareynta | 5 |
| 15 (4) | Hirgelinta Hanaanka Maareynta iyo ilaalinta Caalamiga ah | 3 |
| 18 (5) | Cilmibaaris ku saabsan ilaalinta iyo maaraynta wax ku oolka ah | 3 |
| 19 (4) | Soo saarista digniino ku saabsan noocyada kalluun ee u baahan ilaalinta ama khatar ugu jira inay dabar go'aan | 4 |
| 20 (3) | Cayimidda goobo ama aaggagga | 4 |
| 21 (6) marka laga reebo xarafka iyo farqada (1) (a) | Bedqabka deegaan badeedka | 6 |
| 21 (6) marka laga reebo xarafka iyo farqada (1) (a) | Bedqabka deegaan badeedka warshadaha iyo wasaqda nukliyeerka | 7 |
| 23 (2) | Mamnuucista Burburinta shacaabiga (Qara-dhagaxeed), bocoolaha badda si loo ilaaliyo deegaan xeebeedka kheyraadka kalluumaysiga | 5 |
| 23 (3) | Mamnuucista Burburinta shacaabiga (Qara-dhagaxeed), bocoolaha badda si loo ilaaliyo deegaan xeebeedka kheyraadka kalluumaysiga | 5 |
| 24 (5) | Maareynta Kalluumaysiga Aan Loo Qasdin | 3 |
| 26 (3) | calaamadeynta agabka | 3 |
| 27 (7) | aaladda gabbaadka kalluunka | 4 |
| 28 (2) | Mamnuucidda ka kalluumaysiga aagga booyadda xog-uruurinta | 3 |
| 29 (8) | Macnuucidda jillabashada iyo ka ganacsiga nibiriga iyo ilaalinta carjowleyda iwm | 4 |
| 30 (6) | Mabnuucidda la xiriirta qubo badeedda | 3 |
| 31 (5) | Mabnuucidda goynta dhegaha libaax badeedka iyo ka ganacsiga dhegihii lagu soo jaray sifo sharcidarro ah | 5 |
| 32 (3) | Mamnuucidda hababka kalluumaysiga loo adeegsado qaraxyo iwm, iyo ganacsiga kalluunka lagu soo jilaabto hababkaas | 3 |
| 33 (2) | Mamnuucidda Hababka kalluumeysiga jiriifka ah | 3 |
| 34 (4) | Hababka kalluumeysi ee la mamnuucay- cabirka ugu yar agabka kalluumaysiga | 3 |
| 35 (5) | Hababka kalluumeysi ee la mamnuucay- shabaagta waaf-qabadka sabaysa ee masaafada dheer | 5 |
| 36 (3) | Mamnuucidda isticmaalka diyaaradaha iyo kuwa aan duuliyaha lahayn | 3 |
| 37 (3) | Mamuucidda isticmaalka nalalka macmalka ah si loogu soo jiito kaluunka masaafooyin dhaadheer | 3 |
| 38 (4) | Mamnuucidda faragalin ama burbrurin hanti qofkale oo dhextaal biyaha soomaaliya | 3 |
| 39 (4) | isticmaalka, markab ku haysashada, soo dejin, soo gadasho, sii iibin qalab la mamnuucay | 4 |



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

| | | |
|---|---|---|
| 40 (2) | Mamnuucidda bad uga tagista ama ku tuuridda qalab, kalluun ama wax soo-saar kalluun | 4 |
| 41 (2) | Mamnuucidda wax ka badelka cadeymaha kalluunka iyo wax soo saar kalluun ee la soo baaray | 3 |
| 42 (2) | Mamnuucid haysasho, ka ganacsi, dhoofin kalluun ama wax soo saar kalluun ee lagu helay ama lagu qabtay si ka hor imaanaysa sharcigaan ama hanaanka maaraynta iyo ilaalinta caalamiga ah. | 4 |
| 43 (3) | Mamnuucid ka ganacsi kalluun iyo wax soo saar kalluun oo ka hor imaanaya sharci dowlad kale | 5 |
| 44 (6) | Mamnuucid maraakiibta ku jirta liiska maraakiibta kallluumaysiga sharcidarrada ah (IUU) oo ay gacanta ku hayso Hay'ad Goboleedka Maaraynta Kalluumaysiga Gobalka | 5 |
| 45 (3) | Mamnuucid maraakiib aan dalna ka diiwaangashanayn | 6 |
| 46 (2) | Sharci u hoggaansamidda dadka heysta ruqsad, oggolaansho ama fasax kale | 5 |
| 47 (5) | Shuruudaha warbixinada | 4 |
| 49 (2) | Bandhig, wareejin, dhoofin, soo dejin iyo sii deynta kalluun nool | 4 |
| 52 (3) iyo (4) | Shuruudaha looga baahan yahay muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo maraakiibtooda ee ku sugan meelaha ka baxsan xeer-xeyndaabka qaranka | 6 |
| 53 (4) | Shuruudaha xaaladaha shaqada ee shaqaalaha saran maraakiibta qaarkood | 6 |
| 54 (2) | Maabnuucnimada shaqsiyaad ka tirsan ama xiriir la leh koox dambiilayaal caalami ah oo ku howlan jebinta xeyndaabka sharcigaan | 6 |
| 55 (2) | Badeecad ku kala wareejin maraakiib dekadaha Soomaaliya, biyaha Soomaaliya iyo meelaha ka baxsan biyaha Soomaaliya ka taliso | 4 |
| 56 (4) | Shuruudaha laga doonayo dhammaan maraakiibta shisheeye ee kalluumaysiga si ay usoo galaan una joogaan biyaha Soomaaliya | 4 |
| 63 (10), (11), (12) | Wakiillada | 5 |
| 67 (4) | Macluumaad loo baahankaro lana baarikaro | 4 |
| 68 (5) | Macluumadku run ah, dhamaystiran oo sax ah, ayna reeban tahay in la baabi'iyo | 5 |
| 70 (11) | Macluumaad qarsoodi ah | 2 |
| 71 (3) | Qarinta macluumaadka la xiriira xarunta la socodka kalluumaysiga | 2 |



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

| | | |
|---|---|---|
| 74 (4) | Ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxyada kale iyo diiwaangelinta loo baahan yahay | 5 |
| 75 (9) | Xaaladaha iyo shuruudaha laga rabo ruqsadaha, oggolaanshaha, fasaxyada kale iyo diiwaangelinta | 4 |
| 76 (2) | Shuruudaha rar isku wareejinta | 4 |
| 77 (2) | Shuruudaha cilmibaarista | 3 |
| 78 (3) | Shuruudaha Aaladda gabbaadka Kalluunka | 4 |
| 79 (2) | Shuruudaha diiwaangelinta Nidaamka la socodka maraakiibta | 2 |
| 81 (5) | Codsasho ruqsad, oggolaanho, diiwaangelin iyo fasax kale | 2 |
| 83 (7) | Baaritaanno lagu hubinayo markabka ka hor diiwaan galinta iyo ruqsad siinta | 3 |
| 89 (9) | Hakin, ka noqosho ruqsad, baabi'in ogolaansho diiwaan galin iyo fasax-yada | 5 |
| 101 (2) | Awoodda bixinta amarka dekad ku soo xirashada markabka | 5 |
| 104 (4) | Qeybo ka saaridda qalabka markabka la qabtay | 4 |
| 105 (3) | Raacdayn ama ku dabajir | 5 |
| 108 (2) | Waajibaadka ka saran howlgeliyaha iyo xubnaha shqaalaha gacan-siinta kormeeraha | 5 |
| 109 (2) | Wargalin kormeeraha lagu qoray Markabka | 1 |
| 113 (3) | Ishortaaga iyo u hogaansamid la'aanta sarkaalka idman | 5 |
| 116 (3) | Aaladda la socoshada – shuruudaha farsamo ee laga rabo | 2 |
| 117 (4) | Habka lasocoshada – farsamada laga rabo | 3 |
| 118 (2) | Habka aqoonsiga tooska ah | 3 |
| 124 (4) | Musuubo dabiici ah iyo dhib culus | 4 |
| 126 (7) | Baaris ku samaynta maraakiibta dekadda taagan | 4 |
| 128 (2) | Mabnuucidda adeegsiga ama gacansiinta adeegsiga dekadda diidmada kaddib | 5 |
| 129 (4) | Shuruudaha laga rabo marakiibta Soomaaliyeed | 5 |
| 130 (40) | Qaadashada kalluumaysiga sharcidarrada ah ee ka hor imaanaya hanaanka maaraynta iyo ilaalinta caalamiga ah | 5 |
| 138 (9) | Dacwadaha maamulka oo kooban | 5 |
| 144 (3) | Carqaladeynta caddeynta | 5 |
| 147 (1) | Dambi guud | 4 |
| 149 (30 | bixin iyo qaadasho laaluush | 5 |
| 154 (2) | Amar xayiraad | 5 |
| | | |



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## QEYBTA B

## QIIMAHA LACAGEED EE HEERARKA GANAAXYADA

| Heerka | Ganaaxa ugu badan oo shilin soomaali ah melyanno |
|---|---|
| 1 | 110 |
| 2 | 140 |
| 3 | 270 |
| 4 | 420 |
| 5 | 560 |
| 6 | 3,000 |
| | 280, 000 |

## QEYBTA C

## TILMAAMAHA LOO RAACAYO GANAAXYADA UGU YAR.

Tilmaamaha soo socda ee u dhigan ganaaxa ugu yar ayaa la tixgelinayaa markii la dejinayo ganaaxyada iyo go'aannada maamul ee laga qaadayo dambi dhacay markiisii koowaad:

1) Kalluumeysiga iyo howlaha la xiriira ee ku saabsan ganacsiga Tuunnada iyo kalluumada ku nooca ah, 60% ganaaxa ugu badan;

2) Si ka duwan farqadda (1); fal dambiyeed fudud oo dhacay markii ugu horreysay, kaas oo aan saameyn muuqata ku laheyn kheyraad kalluumeysiga iyo degaanka, 5% ganaaxa ugu badan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA